# WAAN KU SALAAMAY SAAXIIB

## السلام عليك يا صاحبي

Ad'ham Sharqaawi
(Qis Ibnu Saacida)

Turjumiddii
Aadan Khadar Cali
(Aadan–Sahan)

©Xuquuqda buuggan oo dhammi way dhawran tahay. Dhiganahan qayb ka mid ah iyo isaga oo dhan midna, waxba lagama doorin karo, loo ma adeegsan karo ujeeddo ganacsi, si ay ahaataba laguma tagri fali karo mudnaantiisa, iyada oo aan oggolaanshiiyo qoran laga haysan turjumaanka.

Daabacadda 1aad, 2023.

Hargeysa, Somaliland.

Waxa daabacday: Qalinmaal Publishing.

Hargeisa +252—63 3333755
www.qalinmaalpublishing.com
qalinmaalpublishing@gmail.com

# 001 – Waan ku salaamay saaxiib

Waayaha ayaa midkeenba meel ka tuuray oo ina kala fogeeyay.

Waan u hammuun qabaa in aan nuugo neef hore sanbabadaada u soo mushaaxday, oo aan carfisto neecaw hore jidhkaaga u soo jiidhay oo uduggaagii sidda, illeen dadka isjeceli urinta ayay niyadda ku dhistaan oo horeba waa kii uu Yacquub u lahaa: "waxa sankayga soo gaadhaysa caraftii Yuusuf'e!"

Yuusufkayga debecsanida iyo dadnimada leh ee qurxoonow; haddii aan awood u lahaan lahaa agtayda kama aanad durugteen, oo labadeennaba kadeedanka kala–fogaanshaha iyo kala–dheeraanshaha waan i nooga dhib yarayn lahaa.

Haddii aan kari lahaa kama aanan yeeleen in ay dhulka kugu xooraan, degaan kasta oo aadan jooginina aniga waa ii qurbe iyo dal shisheeye.

Haddii ay talo gacan iigu jiri lahayd, markii ay ceelka gunta kuu dhigeen, safarleydii waan ka soo hormari lahaa, aniga ayaana dawliska kuu soo laalaadin lahaa oo kaa saari lahaa, qiime liita oo aan kuu qalminna kuguma aanan gadeen, adduunka oo dhammina waa wax liita oo faro guudkood ah, marka adiga lagu barbardhigo saaxiibkayow.

Inta aan ceelkaas kaa soo badbaadsado ayaan laabta ku gashan lahaa oo aan ku odhan lahaa: "ha u bixin. Waan kula joogaa!"

Waxa aan qallajin lahaa ruuxdaada ay qooyeen biyaha kala–fogaanshuhu, oo inta aan ku soo qabto ayaan ku odhan lahaa:

Aniga ayaa ah walaalahaa oo dhan, oo kuu buuxinaya kaalintoodii ay banneeyeen markii ay kaa tageen!

Aniga ayaa ah hooyadaada aad aadka ugu xiistay.

Aniga ayaa ah aabbahaaga la il daran waayitaankaaga.

Aniga ayaa ah dhammidoodba, maadaama aan in ka badan inta ay ku jecel yihiin ku jecelahay!

Haddii ay talo gacan iigu jirto, kama aanan yeeleen in ay xabsi ku dhigaan oo ay albaabada dusha kaaga xidhaan, kamana aanan yeeleen in ay ku tuhmaan, oo aniga tuhunka waad igala sarraysaa, dhankaagana shaki igama gelayo, si kasta oo farta laguugu godo.

Haddii ay talo gacan iigu jirto, xabsiga inta aan kuugu imaaddo ayaan niyadda kuu dhisi lahaa.

Qurbaha iyo qariibnimadu waa jeel saaxiibkayow… wallaahay waa jeel!

Waxa aan kuu noqon lahaa rucubaha midhaha ah ee kuu laalaada adiga, abaaraha iyo qallaylkuna kuguma ay saameeyeen agtayda.

Saaxiib; i rumayso marka aan ku leeyahay, qof keliya oo noloshaada ka baxa ama kaa dheeraada, ayaa kuugu filan in ay noloshu kuu soo urto, oo ay arrini kaa qasanto.

Waayitaankiisaas ayaa kuugu filan, in aad dareento in ay bohol weyni afka kugu soo kala qaadday, amaba aad adigu noqotay Bohol Madow (Black Hole), oo

haddii aad meere dhammays tiran liqdo aanu baahidaadaas waxba ka taraynin!

Waxa jirta gaajo uu hal qof uun haqab tiri karayaa, aniguna adiga ayaan kuu gaajaysanahay!

Nabaadiino saaxiib.

# 002 – Waan ku salaamay saaxiib

Haddii aad i weydiiso dareenka ugu wanaagsan adduunka, waxa aan ku leeyahay, waa in aad dareento in aan lagu dhayalsanayn.

In aad meel aamin ah ku jirto xataa haddii aad gefto.

In lagu fahmay xataa haddii erayada aad sheegaysaa ay isku dhexyaacsan yihiin oo aadan si qumman u odhanin.

In aanay wax lagugu doorsanayaa jirin, xataa haddii xaalku uu kugu xumaado oo gudaha aad xasillooni darro ka dareemayso.

Iyo in aan lagaa tegaynin, xataa haddii aad dareemayso in aad u baahan tahay naftaada in aad ka tagto!

Saaxiib; ma jiraan wax ka wanaagsan in aad ogaato, in mar walba laabtaada la xasilinayo, ilmadaadana la masaxayo si kasta oo ay duruufuhu noqdaanba, gacantaadana aan la sii deyneyn si kasta oo xaalku uu u qadhaadhaado.

Saaxiib; ma jiraan wax ka wanaagsan in aad hesho qofkii ku odhan lahaa: "adiga ayaa mar walba kaalinta koowaad ii jooga, wax walbana adiga ayaa agtayda kaga mudan, xataa naftaydana ku dheh oo!"

Oo waliba aan ku ekaynin hadal uun, ee aad habdhaqankiisa iyo ficilladiisana ka aragto, oo uu raaxadaada tiisa ka hormariyo, badhaadhahaagana uu kiisa ka horraysiiyo, xataa haddii uu ogaado arrin adiga

kuu roon, isagana u daran, dooranaya in uu adiga kaa farxiyo, haba murugoodo isaguye!

Saaxiib; ha ii malayn in aan ka badbadiyay, dadka jaadkaas ahi waa dhif iyo naadir, laakiin way joogaan'e!

Ha ii malayn in aan kaaga sheekaynayo saddexdii lama'arkaan ee ay Carabtu isku maaweelin jirtay, ee kala ahaa: Qorismariska (Quul), shinbirtii Canqaa' iyo saaxiibka oofinta leh.

Haddii aad qofka shakhsiyaddaas leh weydo, noqo adigu qofkaas!

Nabaadiino saaxiib.

# 003 – Waan ku salaamay saaxiib

Imaam Axmed Ibnu Xanbal ayaa la weydiiyay: "sidee ayaa dadka looga ammaan heli karaa?!"

Waxa uu ku war celiyay: "sii iyaga oo ha ka qaadan. Iyagu ha ku dhibaan oo adigu waxba ha u geysan. Hawlahooda la qabo oo ha ku cadaadin in ay adiga hawlahaaga kula qabtaan."

Markaas ayaa haddana lagu yidhi: "way adag tahay waayahan in aad sidaas samaysaa!"

Markaasuu yidhi: "roonaan lahaydee haddii aad weliba sidaas kaga nabad gelayso!"

Waxa wax laga xumaado ah saaxiibow, in aynaan imminka dadka ka raadinaynin in aynnu wax ka dheefno, ee aynnu ka doonaynno in aynnu ka nabad galno uun!

In aynnu ka helno xuquuqdeenna ugu yar.

Yacnii; in ay faraha kaa la baxaan oo aad ka nabad hesho, balse waa madhacaan in aad ka badbaadaa!

Noloshaada ayay ku nool yihiin in ka badan inta aad adigu ku nooshahay, waxa ayba hilmaansan yihiin in meesha ugu mudan ee afkoodu uu ku habboon yahay ay tahay wejigoodaas uu Ilaahay ugu talo galay, ee aanay ahayn nolosheenna ay afka la soo gelayaan!

Wallaahay mararka qaar waxa aad doonaysaa keliya in aad ogaato waxa ka farxinaya iyaga, si aad ugu samayso oo aad uga nabad hesho!

Balse saaxiibow waad ku fashilmaysaa!

Haddii aad masaajidka ku badato waxa ay ku odhanayaan xagjir, haddii aad maqaaxiyaha ku badatidna xadhig–ka–furad!

Haddii aad xaaskaaga la tashato waxa ay ku odhanayaan waa dameer loo taliyo, haddii aadan la tashanna waxa ay ku odhanayaan kelitalis aanay xaaskiisu agtiisa miisaan ku lahayn!

Haddii aad hadalka ninkaaga maqasho waxa ay ku odhanayaan shakhsiyaddeeda ayaa daciif ah, haddii aadan dhegaysanna waxa ay ku odhanayaan waa faraha–laga–qaad dhego adag!

Haddii aad buugaagtaada iska dhexfadhido waxa ay ku odhanayaan waa mid xidhxidhan, haddii aad ciyaaraha daawatana waxa ay ku odhanayaan waa qof maalaayacni ah!

Haddii aad shaqayso waxa ay ku odhanayaan gurigeedii ayay dayacday, haddii aadan shaqaynna waxa ay ku odhanayaan shahaadooyinkeedii way khasaarisay!

Sarkhaanka iyo midka cibaadada badan midina dadka ma qanciyo, ka ay ceeb u waayaanna, iyaga ayaa mid u sameeya, ka dibna ku caaya!

Miyaadan maqal nebi Luud nkh'e tolkii waxa ay ka sheegayeen:

(أَخْرِجُوٓاْ ءَالَ لُوطٍ مِّن قَرْيَتِكُمْ إِنَّهُمْ أُنَاسٌ يَتَطَهَّرُونَ) النمل ٥٦

"Ka saara qoyska Luud degmadiinna, waaba dad isdaahirinaya'e!"

Markii ay gef ku waayeen ayay nadiifnimadoodii iyo ceeb–ka–saliimnimadoodii ku caayeen!

Markaasaad adiguna isweydiinaysaa sidii aad dadka u raalli gelin lahayd!

Ma jiro qaab aad u raalligelinaysaa saaxiibow!
Ha ka yaabin taas!
Nabaadiino saaxiib.

# 004 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa uu odhanayaa Zorba–ha riwaayadda ku jiraa, dadka qaar waa xor madax bannaan, in badanina waxa ay isu maleeyaan in ay xor yihiin, maadaama ay arkeen qoolkii oo qoortooda ka yara debcay!

I rumayso haddii aan ku idhaahdo, qofku waxa uu helaa xorriyad u dhiganta hadba inta uu Ilaahay addoon u noqdo!

Mar kasta oo uu qofku hal jaranjar kor u fuulo addoonnimada uu Rabbigii isu dhul dhigayo, ruuxdiisa ayaa kor u fanata jaranjarta xornimada.

Liddiguna waa sidoo kale, oo mar kasta oo uu qofku ka fogaado addoonnimada Rabbigii, wax kale ayuu addoon u noqdaa!

khasab ma aha in aad wax u sujuuddo si aad addoon ugu noqoto, ee waxa ku filan in aad maxbuus waxaas u xidhxidhan u noqoto uun.

Xilku mar ayuu qofka macbuud u noqonayaa, hantiduna mar ayay qofka Ilaah u noqonaysaa, yaanu uba sujuudin'e!

Caadooyinka iyo dhaqannadana sidoo kale way dhacdaa in ay dadku Ilaah ka dhigtaan!

Saaxiib; dadka waxa ugu xorriyad badnaa nebiyadii, maadaama ay ahaayeen dadka ugu badan dhanka addoonnimada Rabbigood.

Innaguna mar kasta oo aynnu ka ag dhowaanno heerkaas iimaankii nebiyada, waynnu xoroobaynaa.

Marka aan u fiirsado sooyaalka Bilaal Ibnu Rabaax, waxa aan dareemaa in uu dhaaday dhadhanka xorriyadda, ka hor intii aanu Abu Bakar gadan ee aanu xoraynin.

Isla markii uu Bilaal iimaanka la yimiba, ruuxdiisa wuu ka furfuray dabarkii addoonnimada ahaa, waxana uu noqday xor madax bannaan!

Markii uu Umaya Ibnu Khalaf inta uu dharka ka feyday duljiifiyay ciidda kulul ee Maka, ee uu karbaashka iyo jeedalka la dhacay, si uu uga soo laabto diinta nebi Maxamed ﷺ, isaguna uu sida cariigsiga iyo qaneecada leh u lahaa: "Axad! Axad!" Markaas Umaya jidhkiisa ayuun buu lahaa, ee ruuxdiisa Bilaal isaga ayaa lahaa.

Xorriyadduba waa in uu qofku ruuxdiisa hantiyo.

Abu Bakar waxa keliya ee uu sameeyay, waa uun in uu siiyay Bilaal rasiidh uu jidhkiisa kaga xoreeyay addoonnimada.

Ruuxda se Bilaal iimaankiisa ayuu ku xoreeyay in badan ka hor xornimada jidhkiisa.

Nabaadiino saaxiib.

# 005 – Waan ku salaamay saaxiib

Qofku waxa uu ugu bixinta badan yahay, waa wax uu isagu hore u soo waayay oo aanu soo helin, dadka jaadkaas ah ee wax ay u baahnaayeen laga xarrimay, si deeqsinimo leh oo daba–ka–werwer la' ayay u bixiyaan waxaas, maadaama ay garanayaan qadhaadhka ay leedahay wax–waayiddu!

Ama qofkaas sida saayidka ah wax kuugu quudhayaa waxa uu doonayaa in uu naftiisa uga mag dhabo wixii uu hore u soo waayay.

Laga yaabee qofka sida waallida ah kuu jeclaaday in uu doonay in uu ku yidhaahdo: "in badan ayaan ku taamayay in uu qof ii jeclaado sida aan kuu jecelahay!"

Saaxiib; qof kasta oo marka ay dhibi ku haleesho garab ku siiyaa, murugo kama madhna, laga yaabaa in uu garanayo qadhaadhka ay leedahay in uu qofku murugoodo, oo aanu helin cid isgarab taagta oo murugtiisaas la wadaagta!

Qof kasta oo wax ku siiyaa ma aha hantiile, laga yaabaa in uu si dhab ah u dhaaddan yahay, xanuunka ay leedahay in uu qofku wax u baahdo oo aanu helini!

Qof kasta oo madaxa kuu salaaxa micneheedu ma aha in uu welwel iyo walbahaar ka madhan yahay, laga yaabaa in uu doonay in uu hab kale Ilaahay u baryo, oo isaga oo aamusan oo *adiga madaxa kuu salaaxaya uu* qalbiga ka leeyahay: "Ilaahayow; waanigaas dadka kale werwerka la qaybsanaya ee madaxa u salaaxaya, ee anigana adigu madaxa ii salaax oo werwerka i weydaari!"

Noloshani way adag tahay saaxiib, qof kastaana waxa uu dhankiisa ula daalaa dhacayaa dagaal aanay cidina war ka haynin!

Qosolkaas ilaa gawsaha la qaawinayo waxa ku qarsoon dhaawacyo aan bogsoon.

Muuqaalladaas nimcada ah ee aad arkayso waxa ka danbeeya waayitaan adhaxjebis ah.

Xitaa qoraallada jacaylka ahi aalaaba waa tebid iyo xiise loo qabo mid la jecel yahay oo la sugayo.

Dadku waxa ay wax ka qoraan waxa ay waayaan, in ka badan inta ay wax ka qoraan waxa ay haystaan, ee si dhib yar dadka ku dhaaf oo rafaadkaas kadeed ha ugu sii darin, hana noqon mid dadka ka arka uun muuqaalkaas guud ee ay muujinayaan

Nabaadiino saaxiib.

# 006 – Waan ku salaamay saaxiib

Ilaahay waxa uu hadyadaha i noogu soo diraa hab aynaan fahmaynin, maadaama uu habfekerkeennu kooban yahay, aragtideennuna ay xaddidan tahay.

Badhaadhuhu waxa uu i noogu yimaaddaa hab balanbal u muuqda, deeqduna hab diidmo u muuqata, niyad'dhiskuna hab niyadjebin u muuqda!

Se marka habfahanku uu kuu tooso ayaad si dhab ah u fahmaysaa, in uu Ilaahay xataa naftaada kaaga naxariis badnaa, Rabbiga samuhuna aanu wax aan samo ahayn kuu hagaynin!

Cabdillaahi Ibnu Cabbaas ayaa ku yidhi ardaygiisii Cadaa' Ibnu Abii Rabaax: "ma ku tusaa gabadh ehlu janno ah?!"

Cadaa' "Haa!" Ayuu ku yidhi.

Cabdillaahi ayaa ku yidhi: "gabadhaasi nebiga ﷺ ayay u timi oo ay ku tidhi: 'rasuulkii Allow; waan suuxaa oo dharka ayaa iga feydma, ee Ilaahay ii bari!'

Markaasuu nebigu ﷺ ku yidhi: 'haddii aad doonto u samir oo janno ku hel, haddii aad doontana Ilaahay waan kaaga baryayaa in uu kaa shaafiyo.'

Markaasay ku tidhi: 'iska daa waan u samrayaaye, ee in aanay maryuhu iga feydmin uun Ilaahay iiga bari.' Markaasuu nebigu ﷺ ugu duceeyay."

Xanuunku waa mid ka mid ah hadyadaha Ilaahay saaxiib!

Wuu kugu imtixaamayaa si uu kuugu dhaafo denbiyo aanay addeecistaadu gaadhaynin heer uu kaaga dhaafo.

Wuu kugu imtixaamayaa si uu qalbigaaga u jilciyo, oo qalbiga waxa ugu waxtar badan oo uu ku waayo arkaa marka uu xaalad taag darro ah dareemo, ee adduunkuna uu xaqiiqadiisa tuso!

Hadduu dibqalooc yar yahay,
Naftuu damqanayaan isbixin

Hadraawi

Bal u fiirso bilicda muuqaalkaasi uu leeyahay, in uu Ilaahay qalbigaaga kaaga hinaaso!

Nabaadiino saaxiib.

# 007 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa aan kaaga digayaa in aad imtixaanka ku qabsada u aragto in uu kugu dabo dheeraaday oo aad u xanaaqdo, ama aad furdaaminta Rabbigaa raagsato oo aad quusato, aadna noqoto sida kuwa Ilaahay u caabuda habka labalabaynta iyo tuhunka leh, ee haddii ay kala kulmaan waxa ay jecel yihiin oo raalli gelinayana kaga raalli noqda, haddii ay kala kulmaan wax ay karhaan oo dhibana ka cadhooda!

Saaxiib; wax waliba waxa ay ku socdaan qadderka Rabbi, si xilliyaysan oo xaddidan oo aynaan innagu waxba ka garanaynna way u socdaan.

Haddii ay wiilashii agoonta ahaa la soo bixi lahaayeen kaydkii aabbohood uu uga dhintay ka hor inta aanay qaan gaadhin, hantidaasi way ka dayacmi lahayd oo kuma aanay intifaaceen!

Wax kasta oo inaga soo habsaama waxa uu leeyahay samo aynaan innagu dhaadaynin!

Adduunkani waa degaan imtixaan saaxiib, Ilaahayna qalbigaaga ayuu daalacanayaa, oo haddii ay ku haleelaan wax aad neceb tahay, ama wixii aad jeclayd ay kaa dibdhacaan, qalbigaagu marleyba raalli ahaansho iyo qaneeco ha lahaado, ma jiraan wax uu Ilaahay ka neceb yahay in uu arko addoonkiisa oo qadderkiisa ka cadhaysan'e!

Mararka qaar ayay riyooyinka la naawilaa soo daahaan saaxiib, maadaama aanad wali u bislaanin in aad ilaashato nimcadaas.

Way kaa soo daahaan maadaama diyaar garowga hagaagsan ee qalbigaagu aanu wali dhammays tirmin.

Way soo daahaan maadaama aad wali denbi ku dhex jirto.

Ilaahayna waxa uu kaa doonayaa in aad isaga arrimahaas oo dhan marka hore u hurto, si uu isaguna riyadaada aad naawilayso kuugu deeqo!

Way soo daahaan maadaama aanad sababihii keensanayay si buuxda uga soo bixin.

Laga yaabaa in aanay waligoodba imanin, maadaama maqnaanshiiyahoodaas uu khayrku ku jiro, ee malaha aad Ilaahay ka leedahay wanaaji.

Nabaadiino saaxiib.

# 008 – Waan ku salaamay saaxiib

Ayeeyaday Ilaahay ha u raxmado'e madaxa ayay ii salaaxi jirtay ilaa inta aan gam'ayo, habeen kastana waxa ay iiga sheekayn jirtay sheeko macaan.

Habeen ayay iiga sheekaysay nin saaxiibkii deyn ka doontay, saaxiibkiina uu ka cudur daartay maadaama oo baahida haysay ay isagana ku habsatay.

Se waxa uu saaxiibkiisaasi u tilmaamay nin uu ku yidhi: "ninkaas aad, isaga ayaad muraadkaaga ka helaysaaye."

Ninkii waxa uu u anbabaxay dhanka gurigii ninkii loo tilmaamay, si uu adduun uga soo amaahdo.

Markaasuu arkay isaga oo daweynaya lax bukta!

Waxa uu hoos isugula shawray, in uu ninkaasi dhabcaal (bakhayl) yahay oo isaga oo waxaas oo adhi ah haysta, uu ka hadhi waayay laxdaas bukta, ninka noocaas ahina aanu isagana waxba siinaynin.

Inta uu ninkii saaxiibkii ku laabtay ayuu arrintii u sheegay, markaasuu haddana saaxiibkii ku yidhi: "ku laabo, kuma hungoobaysid'e!"

Markii uu soo laabtay ee uu gurigiisa soo gaadhay ayuu haddana maqlay isaga oo ku waaninaya ubadkiisii, in ay soo qaadaan xabbad kasta oo hadhuudh ah oo dhulka kaga dhacda marka ay ridqinta (meesha cuntada lagu shiido) ku sii socdaan!

Markaasuu haddana si hoose isu yidhi, ninka bakhaylnimo darteed xabbad hadhuudh ah ka hadhi waayay wallaanu adiga hanti ku deyminayn ee ha ku lug

go'in, saaxiibkii ayuuna ku soo laabtay oo uu uga qisooday wixii uu la soo kulmay.

Haddana saaxiibkii mar kale ayuu ku cadaadiyay in uu ninkaas ku laabto oo uu ka dalbado deynkaas, in uu ku hungoobana aanu ka biqin.

Mar saddexaadkii ayuu ninkii soo laabtay, markii uu gurigiisii soo gaadhayna waxa uu maqlay ninkii oo hablihiisii kula dardaarmaya, in ay iftiinka faynuuska hoos u dhigaan, si ay gaasta u dhawraan oo in badan ay gaastaasi u hayso!

Isaga oo ninkii isla sheekaysanaya oo isku leh, ninkani waa dhabcaal aan naf soo biday oo waan ku ceeboobayaa kollayba, ayuu ninkii furay irriddii, markii uu arkay ninka illinka taaganna, waxa uu weydiiyay waxa uu doonayo.

Waxa uu ku yidhi: "run ayaan kuu sheegayaa oo beenawaas ma ihiye, waxa aan ahay nin tabaalaysan, saaxiibkay oo aan tuhmayayna aniga ayuuba iga sii miciin liitaa, se adiga ayuu ii kaa soo tilmaamay.

Imminka waa markii saddexaad ee aan gurigaaga isa soo hortaagay.

Markii koowaad adiga oo lax bugta daweynaya ayaan ku arkay, markaasaan ku fekeray adiga oo waxaas oo adhi ah haysta in aad laxdaas ka samri weydaa in ay muujinayso bakhaylnimadaada!

Markii labaadna waxa aan maqlay adiga oo carruurtaada kula dardaarmaya in ay ururiyaan hadhuudhka jidka kaga daata inta ay ridqinta ku sii socdaan, markaasaan is'idhi, ninka xabbadahaas

hadhuudhka ah ee jidka ku dhacaa ay ka fakan waayeen waa ka dhabcaalnimo ee ha ku walaacin!

Imminkana waadigaa hablahaaga kula dardaarmaya in ay faynuuska naaqusaan, si ay gaasta u dhawraan, waxana sii xoogaysatay bakhaylnimadii aan kaa aaminay!"

Ninkii inta uu dhoollo caddeeyay ayuu yidhi: "laxda marka ay noqoto, way xoogganayd yaraanteedii, muddo dheerna caaneheeda ayaannu soo cabbaynay, markii ay bukootay haddii aannu xanuunka ku eeganno ama aannu kaga tagno, taasi waa danaysi.

Hadhuudhka marka ay noqotana, waxa aan ugula dardaarmay yaryarkaygu in ay midhadhka ka dhaca uruuriyaan, si ay u bartaan ixtiraamka nimcada, maadaama aanu qofna garanayn cuntada ay barakadu ugu jirto!

Dardaarankan aan hablahayga in ay faynuuska naaqusaan ku waaniyayna, waxa aan ku barayaa dhawrista iyo lexejeclada.

Waa run oo anigu hantiile waan ahay, se iyaga dhowaan waa la iga guursan doonaa, mid ka mid ahna ninkeedu in uu sabool noqdo la arkee, waxana aan doonayay in aan nolosha u sii diyaariyo!"

Ninkii ninkaas uu deynka ka rabay wuu ka raalli geliyay malihii xumaa ee uu ka qaatay, ninkaasina baahidiisii wuu kafeeyay, sidaas ayayna ku kala tageen.

Saaxiib; beri hore ayaan qisadan ka bartay, in dunwanaagga qaarkii aan dhayal lagu helin, iyo in aanan waxna dushaas sare ka xukumin, dadka qaarna ay wax ka

eegayaan meel in badan ka durugsan halka ay dadka kale wax ka arkayaan.

Bal u fiirso oofintaas saaxiib; xataa ma aanu dayicin lax ay waqti tegay soo wada qaateen, ma kula tahay ninkaas oo kale qof aadame ah in uu dayacayo oo uu cidla' kaga dhaqaaqayo?!

Saaxiib; arrimaha yaryari waxa ay kaaga warramayaan arrimaha waaweyn.

Waxyaabo aad u yasiran iyo arrimo aadan ahmiyadba siinayn oo aan macne buuran lahayn, ayaa haddii aad si dhab ah ugu daymo badiso, il indheergarad oo waaya'aragnimana aad ku eegto, aad kaga baaqsan lahayd dhibta aad ka marto in aad dadka si dhow u barato oo aad u yool baadho.

Nabaadiino saaxiib.

# 009 – Waan ku salaamay saaxiib

Ha u malaynin iswaayidda iyo kala–taggu in uu sahalo yahay, haddii aad dhayal u haysatidna, gugii ay Khadiiji dhimatay loo ma bixiyeen Sannadkii Murugada!

Qofna uma dulqaadan karo waayidda dadka uu jecel yahay, xataa nebiyadana ku dheh oo!

Ku darso oo, ma aanay ahayn murugo hal sano socotay oo idlaatay, ee nebigu ﷺ ilaa dabayaaqadii noloshiisa afka ayuu ku hayay hadal haynteeda!

Dadka qaar marka aad weydo, inta aad nooshahayba qayb bannaan oo ka dhiman ayay ahaanayaan!

Waxa aynnu nahay aadame cad ka samaysan, "Ilaahayow ha ii qaban wixii aan gacan iigu jirin!" Nebiga ﷺ ayaa yidhi isaga oo ujeeda qalbigiisa, markaasay noqotay odhaah uu isku samir siiyo qofka ay xaaladi la soo gudboonaataa.

Caawa keligaa ayaad tahay saaxiib.

Sidii guri madhan oo ay dadkiisii ka hayaameen oo haawanaya ayaad keli u tahay!

Sidii boosteejo tareen oo guun ah oo laga guuray ayaad keli u tahay!

Sidii damal buur fiiqeed ka baxay oo aanay cidina hoostiisa hadhsanaynin ayaad keli u tahay!

Weyseyso, laba rakcadood tuko, gacantaadana laabtaada saar oo dheh: "Ilaahayow qalbigayga!"

Yaanay maankaaga ku soo dhicin wax aan ahayn hadalkii Rabbigaa ee ahaa:

(قُلْنَا لَا تَخَفْ) طه ٦٨

"Waxa aannu ku nidhi: ha biqin!"

Ka dibna wax walba Ilaahay u daa, adiga oo si yaqiin ah u og wax kasta oo uu kaa qaaday in ay murtiyi ku jirto, inta aad isu tudhaysana uu isagu kaaga naxariis badan yahay, dhammaanba qadderrada Rabbigaana ay wanaag uun yihiin, xataa haddii ay ku xanuunjiyaan!

Dulqaad iyo dhabar'adayg muuji saaxiib oo ha liicin, ma tihid qof u hogta waayaha oo madixiisa hoos geeya'e.

Laga yaabaa in aad cid kale u tahay tiir ay ku tiirsan yihiin adiga oo aan ogayn!

Laga yaabaa dad badani in ay ku hammiyeen in ay madaxa hoos u dhigaan oo ay waayaha u liicaan, se markii ay ku arkeen adiga oo aan liicaynin ay is'adkeeyeen oo ay kugu daydeen!

Maanka ku hay kuwa kuu arka garabkooda iyo gaashaankooda, iyo kuwa aad agtooda ku weyn tahay ee indhaha ka haybadaysiga leh kugu eegaya, iyo kuwa kugu aaminay ruuxdooda ee jidkaas adag ee nolosha aad ku rafiiqdeen.

Dhammaantood xasuuso, dhibta ayaa dhayal kuu noqonaysa xataa haddii aanay dhibaato yasiran ahayn'e!

Nabaadiino saaxiib.

# 010 – Waan ku salaamay saaxiib

Ha isku adkayn nolosha, wax waliba qadderka Rabbi ayay ku socdaan, dhammaanba qadderrada Ilaahayna waa wanaag uun, xataa haddii ay ku xanuujiyaan!

Ilaahay ayaad wax si xoog ah uga baryaysaa, markaasuu ku siin waayayaa oo aad ka murugoonaysaa.

Ma garanaysid in aad tahay sidii cunugga dhallaanka ah ee u ooyaya marka uu arko kiniinka midabbada qurxoon ee doonaya, hooyadiina ay u diidayso, maadaama ay og tahay in uu doonayo wax u daran oo ay dhibaato ugu jirto.

Ilaahay ayuu u sugnaaday tusaalaha ugu heerka sarreeyaa, waxa uu kuu diidana deeq aadan dareemayn ayaa kuugu jirta!

Waxa aad waayaysaa wax kugu qaali ahaa oo aad u murugoonaysaa, adiga oo aan dhaaddanayn in Ilaahay wax kasta oo uu kaa qaadaba uu ku siinayo.

Markii Khadar uu wiilka yar dilay, markii koowaadba waxa ay dhacdadaasi u muuqatay dil xadgudub ah, sidaas ayuu Muusena nkh'e u maleeyay, waana muran–ma–doon in qalbiyada waalidkii ay qarracmeen markii ay maqleen in cunuggoodii la dilay, ka dib ayuu Ilaahay xogtii qarsoonayd ee qaybka ahayd daaha ka feyday, oo ay caddaatay in naxariista heerkeeda ugu sarreeya ay ahayd dilka ilmahaasi!

Ilaahay adduunkaaga ayuu kaa qaadayaa, si uu kuugu dhawro diintaada!

Saaxiib, Ilaahay waxa uu wax ku debberaa murti iyo naxariis aan innaga maankeenna kooban ku soo dhacayn, maadaama aynnu aragti gaaban nahay, habfekerkeennuna uu xaddidan yahay, dhacdadana aynnu ka aragno dhinac yar oo kooban uun.

Ilaahay se dhacdada oo dhan ayuu wada koobay oo waxna ma seeggana!

Haddii aad ka mid ahaan lahayd masaakiintii laashkooda uu Khadar dalooliyay, laga yaabaa in aad odhan lahayd: "miyaanu nagu filnayn faqriga aannu la daalaa dhacaynaa, maxaa haddana ishii keli ahayd ee aannu haysannay na looga jebinayaa?!"

Se marka aad aragto ciidan–badeedkii boqorka gabbood falaha (daalimka) ah oo dadka doonyahooda xoog kaga urursanaya, ayaad garanaysaa naxariista Ilaahay, oo aad fahmaysaa, in dalool yar oo laashkaaga lagu sameeyaa uu ka sahlan yahay, in aad gebigiisaba weydo!

Xumo wuu ka nasahan yahay Allaha waxa yar inagu imtixaamaya, si uu waxa weyn i noogu badbaadiyo!

Saaxiib; haddii uu arrinku la xidhiidho Ilaahay, ka edebso!

Miyaad hilmaantay Allaha irsaaqaddaada kuugu keeni jiray makaanka hooyadaa markii aad uurjiifka ahayd?!

Miyaad illawday Allaha qalbiga hooyadaa kuu debciyay markii aad naasnuugga ahayd, ee ay habeen kasta kuu kacaysay iyada oo aan ku dhibsanaynin, sidii in ay tahay adeegto boqorkeedii u shaqaynaysa?!

Miyaad illawday aabbahaa sidii uu quudkaaga kaaga soo faro maroojinayay nolosha, si aad u weynaato, u kobocdo, una awoodaysto?!

Ma isweydiisay, yaa kaa dhigay qayb ka mid ah qalbigiisa, ee kuugu beeray dareenka ah, in uu diyaar u ahaado in uu xataa hilibka jidhkiisa qayb kuu soo jaro si uu kuu quudiyo oo aanu boggaagu baahi u dareemin?!

Waa Ilaahay!

Waa Allaha adiga kaa deeqtoon, se aan faraha kaa qaadin ee kor iyo kalba kula socda!

Waa Allaha awoodda leh ee aan waxba kaaga baahnayn, haddana kuu baaqaya ee aan ku deyneyn!

Miyaad illawday waxaas oo dhan, oo marka qadderkiisa ay kaa soo gaadhaan wax aadan jeclaysanayni, ayaad cagaha dhulka ku garaacaysaa oo aad dhibsi iyo karahsi bilaabaysaa?!

Sug meertada maalmaha, waxa ay kuu daah feydayaan xog maqan oo kaa dednayd'e, waxana aad fahmaysaa in uu Ilaahay wax kaaga qaaday si uu wax kale kuu siiyo, wax kasta oo ku haleelayna ay dibuhabayn kuu yihiin, wax kasta oo uu ku dhaafiyayna uu wax kaaga wanaagsan kuugu beddelay!

Nabaadiino saaxiib.

# 011 – Waan ku salaamay saaxiib

Si dhab ah ayaan u garanayaa dareenka macaan ee ay leedahay in ugu danbaynta aad hesho qofkii qalbigaagu uu raadinayay ee ku habboonaa.

Qof kuu noqda saaxiib, marka aad u baahato saaxiib.

Kuu noqda garab iyo gaashaan, marka aad u baahato cid iskaa garab taagta.

Kuu noqda bakoorad, marka aad u baahato wax aad ku tiirsato.

Qof aad agtiisa ku dareento ammaan buuxa oo aadan hore u dhadhaminin.

Saaxiib; ma naqaanno qiimaha dhabta ah ee waxa aynnu u jeellan nahay (u xiise qabno) ilaa aynnu helno.

Qof aanu marna tuhun kaa gelin in uu yahay abaalmarinta cimrigii dheeraa ee aad soo qaadatay gebagebadiisa.

Qof magdhaw u noqda wax kasta oo aad hore u soo weyday.

Dadka qaar ayaa kuugu imanaya sidii in ay yihiin dhanbaal cudur daarasho ah oo ay noloshu kaaga raalli gelinayso wax kasta oo ay hore kuugu soo samaysay!

Balse haddana saaxiib waan dareemi karaa sida ay u xanuunka badan tahay, in qofkaasi uu qofkaagii noqon waayayaa!

Iyada oo unug kastaa oo jidhkaaga ahi uu dhankiisa aadayo!

Garaac kasta oo wadnahaagu uu sameeyaana uu isaga ku aaddan yahay!

Atom kasta oo hawo ah oo sanbabkaaga galaana uu isaga raadinayo!

Intaas oo dhan ka dibna, aad ogaato in aadan sinaba qofkaas u heli karaynin, maadaama uu jiro qof kaaga dheereeyay!

Oo aad ogaato qofka soo dibdhacay in uu mar walba safka gadaal ka gelayo, si kasta oo uu isugu dayo in uu soo hormaro!

Iyo in uu yahay cidda ugu horraysa ee laga kaaftoomayo!

Aad ayay u xanuun badan tahay in aad boos ku yeelato qof qalbigiisa, laakiin aadan ku yeelanin noloshiisu!

Saaxiib, mid ka mid ah imtixaannada ugu adag ayaa ah, qof kugu dhex nool, se aadan calfanaynin!

Adiguna aad dhaqaaq–joogsi ka dhammaan weydo, oo aad horena u socon kari weydo, halkaasna aad ku sii negaan kari weydo!

Mararka qaarna, wixii aad awood lahayd oo dhanba aad isugu geyso in aad isaga ku dhegto oo aad haysato, sidii in aad tahay qof qarqoomay oo gacan loo fidiyay, isaga oo khiikhdii u danbaysay ku jira!

Mararka qaarna aad go'aansato in aad gacantiisa sii deyso oo aad ka mudhuxsato, maadaama aad garanayso in kuwa ay mahuraanka tahay in uu qofkaasi badbaadiyaa ay adiga kaa hormarayaan oo ay kaa mudan yihiin!

Ka dibna aad gacantiisaas ku sii dhegganaan kari weydo, siina deyn kari weydo!

Oo aad dhexda ku goosato, dhinacna aad u dhaqaaqi kari weydo!

Oo aad mar naftaada uga baqdo in aad la sii wadi kari weydo qofkaas intaas wax ka badan!

Haddana aad naftaada uga baqdo in aad sii noolaato adiga oo aan isaga haysanin!

Saaxiib; waxa ku soo maraya marar aad u malaynayso in uu qofkaasi jidhkaaga kaaga dhow yahay.

Haddana waxa ku soo maraya marar kale oo aad dareemayso in aad meere ku nooshahay, isaguna uu meere kale ku nool yahay, badnaanta dalka iyo dadka idiin dhexeeya awgood!

Si dhab ah ayaad u dareemaysaa in aanu qofna kaaga farxinaynin sidii uu kaaga farxin jiray isagu.

Sidoo kalena; aanu qofna kuu dhibi karin sidii uu kuu hagardaamayn jiray isagu!

Ilbidhiqsiga aad la qaadataa waa janno, ka uu kaa maqan yahayna waa jaxiima!

Balse waa janno aanay mar walba irrideheedu kuu furnayn.

Haddii albaabadeeda lagaa xidhana waxa keliya ee ku sugayaa waa cadaabtaas uun!

Si aad macaanka taas u dhadhamisana, waa in aad qadhaadhka taas kale horta soo dhadhamisaa!

Mar kasta oo aad ka tallawdo teed (moos) si aad u gaadhana, waxa kaa hor'imanaya kun teed oo cusub!

Aad ayay u xanuun badan tahay saaxiib, in cimrigaagaba aad la tartanto teedadkaas!

Waxa aad u ordaysaa ilaa dabayaaqada marinkaas, mar kasta oo aad gebagebada ku sii dhowaatana, waxa aad ogaanaysaa in uu ahaa marin hummaag iyo dhalanteed ah, marinkii dhabta ahaana uu aad u dheer yahay, waliba uu aad u fog yahay!

Weyseyso, laba rakcadoodna tuko saaxiib, gacantaadana laabtaada saar oo dheh: "Ilaahayow; qalbigani gacantaada ayuu ku jiraa, ee ha badin jahawareer xasillooni la'aan ah oo uu saldhigan waayo, go'aanna uu qaadan kari waayo. Ilaahayow; calaamado wax ku tusi, oo ishaarooyin wax ku fahansii, oo hanuuni, adiga ayaa ah Rabbiga habawsanayaasha'e!"

Nabaadiino saaxiib.

# 012 – Waan ku salaamay saaxiib

Haddii aad i weydiiso waxa kaa dhiman ee kuu diidaya in aad dadka kale la tartanto, waxa aan ku leeyahay: "oo horta yaa kugu yidhi waa in aad dadka kale la tartantaa?!"

Noloshu waa hayaan ee ma aha tartan wiilow, ee ku raaxayso oo ha u rogin goob dagaal!

Jidka qudha ee u qalma in aad beretanka (tartanka) u gashaa, waa ka jannada.

Wixii isaga aan ahayninna waa dagaallo lagu guul darraysanayo, iyo tartan aan abbaar iyo ujeed lahayn.

Diinka iyo bakaylaha tartamay labadooduba waa doqomo!

Dhadhan noocma ah ayay u yeelanaysaa bakayluhu in uu tartan kaga adkaado noolaha ugu gaabiya caalamka?!

Diinku se muxuu u galayaa tartan uu og yahay qaabka qudha ee uu ku guuleysanayaa in uu yahay in uu bakayluhu seexdo?!

Qalbigaaga nadiifi saaxiib.

Dadka kale guushooda ugu farax sidii in ay guushaada tahay.

Ugu sacabbi dadka libinta gaadha sidii aad naftaada ugu sacabin lahayd.

Ku farax heshiiska faa'idada leh ee uu ganacsade sameeyo, sidii in aad heshiiskaas adigu gashay.

Shaqada marka uu helo deriskaagu ugu farax sidii in aad adigu heshay.

In aad u fiirfiirsato waxa ay dadka kale haystaan waa fallaadh (leeb) sumaysan oo qalbigaaga ku dhacaysa, ka hor inta aanay dadka kale haleelin!

Saaxiib; badiba waxyaabaha aynnu ugu yeedhno tartanku waa xaasidnimo la asturayo, oo aynnu u bixinnay magacan ah "tartan" si aynnu isugu qancinno in aynnu ku jirno dagaal loollan ah oo u qalma in la galo!

Si wacan u xasuusnow; in xaasidnimadu ay tahay denbigii ugu horreeyay ee Ilaahay lagu caasiyay samada intii la joogayba, oo waa kii Ibliis diiday in uu Aadan u sujuudo, cudurdaarka keliya ee uu diidmadaas u haystayna waxa uu ahaa "aniga ayaa ka wanaagsan!"

Xaasidnimadu sidoo kale waa denbigii koowaad ee Ilaahay lagu caasiyay markii dhulka la yimi, oo Qaabiil walaalkii Haabiil waxa uu u dilay gabadh gabadhiisa ka qurux badan darteed!

Ha yeelan sifooyinkaas ay ku astaysnaayeen Ibliis iyo Qaabiil, ka dibna ha i odhan waxa aan ku jiraa tartan!

Maya saaxiibow; gudaha ayaad ka gubtahanyoonaysaa, maadaama ay qayrkaa badhaadhe heleen, adiguna aad ka qatan tahay!

Qalbigaaga si wanaagsan u daryeel,

Si wanaagsan u nadiifi,

Si wanaagsan u daahiri,

Bisinka u qabo wax kasta oo wanaagsan oo aad dhiggaa ka aragto,

Dheh Maasha Allaah irsaaqad kasta oo qayrkaa ay helaan,

Kuna raalli noqo waxa uu Rabbigaa kuu qoondeeyay,

Wax ka baxsan ma soo helaysid, xataa haddii aad noloshaada oo dhanba tartan ugu jirtid'e.

Nabaadiino saaxiib.

# 013 – Waan ku salaamay saaxiib

Dhallaannimadaydii, mar ayaan waayay kubbaddaydii casayd, si kasta oo aan u baadhayna ma aanan helin.

Ayeeyaday ahun ayaa igu tidhi: "dheh, Ilaaha maalinka aan muranka lahayn ee qiyaame dadka kulminayow, baadidayda ila kulansii!"

Waan idhi, markaasaan helay kubbaddaydii!

Saaxiib; imminka waan weynaaday, waxana aan ogaaday in ay jiraan waxyaabo waayitaankoodu uu qalbiga kala dhanbalayo in ka badan intii uu qalbigayga xanuunjiyay waayitaanka kubbaddaas casayd!

Waanigaas caawa qalbiga gacanta ku haya ee leh: "Ilaaha maalinka aan muranka lahayn ee qiyaame dadka kulminayow, baadidayda ila kulansii!"

Qurbanimada aan dareemayo darteed, waayitaanka dadkii aan jeclaa qariibnimada aan ka dareemayo darteed ayaan leeyahay: "Ilaahayow naftayda ila kulansii!"

Jacaylka aynnu kasha ku sidno weynidiisa darteed, qof ayaa noqonaya innaga... noqonaya qudheenna!

Isdeji saaxiib;

Ka maqani idam Alle maalin ayuun buu soo laabanayaa.

Maanka ku hay sidii uu Muuseba nkh'e hooyadii ugu soo laabtay, iyo sidii uu Ilaahay dhacdooyinka caalamka isugu habeeyay ee uu ugu diyaariyay sidii uu hooyadaas wiilkeeda ugu celin lahaa.

Webigii soconayay ayuu Ilaahay ka dhigay dhanbaalsidaha Muuse gaadhsiiya Fircoon,

Qalbiga Aasiya ayuu u debciyay si ay gawraca uga horjoogsato, naas kale in uu nuugana wuu ka xarrimay.

Waanigaas imminka aniguna adiga aadka kuugu xiisay, sidii nebi Muuse nkh'e hooyadii ayaan ku sii siqayaa in la igu kaa imtixaamo, se Ilaahay ayaa qalbigayga quweynaya oo waan is'adkaynayaa, si buuxdana waan u yaqiinsanahay in aad maalin uun idam Alle ii soo laaban doontid.

Ha quusan saaxiib,

Ugu danbaynta dadka isjeceli way kulmaan.

Ha illaawin kala–dheeraanshihii Yacquub iyo Yuusuf nkh'e, koox gardarro wadda ayaa kala–fogayntaas ka shaqeeyay, walaalo qalbi adag oo aan digiigixanaynin ayaa ka arrimiyay, socoto xorta addoon ahaan uga gadaya suuquna way heleen, boqorkii Masarna wuu iibsaday, xaaskiisiina xabsiga ayay gunta u dhigtay, ka dibna rogaal–celiska dhacdooyinkaasi waxa uu ka soo bilaabmay riyadii boqorka, Yuusufna xabsigii wuu ka soo baxay, waxana uu noqday madaxda sarsare ee Masar, Ilaahayna kulan barkhadeed ayuu isaga iyo ehelkiisii isugu keenay.

Hal riyo ayaa wax walba daba geddiday oo dhanka wanaagsan u weecisay!

Ha dhayalsan riyada aan kaa leeyahay,

Mar walbana xasuusnow, madaxaaga ayaan masaxayaa, waaqicana waxa aan u akhriyayaa sidii in uu yahay riyo!

Ha u bixin saaxiib,

Masaafadu dadka ma kala fogeyso, isumana dhoweyso, ee qalbiyada ayaa doorkaas iska leh!

Adiguna xawlalmariidkayga (garka wadnahayga) waad iiga dhowdahay, haba ina kala dheereeyaan masaafooyinkuye.

Yaqiin badan oo Ilaahay lagu qabo saaxiib,

Iyo dedaal yar oo mahuraan ah ayaa arrinkaas kaafiyaya,

Haddii dedaalkaas yar laga maarmi karana, Maryan ayaa ka fursan lahayd markii ay taagdarro halkii u danbaysay ka maraysay, se waxa lagu yidhi:

(وَهُزِّىٓ إِلَيۡكِ بِجِذۡعِ ٱلنَّخۡلَةِ تُسَٰقِطۡ عَلَيۡكِ رُطَبٗا جَنِيّٗا) مريم ٢٥

“Gilgil jirridda geed–timireedka, midho bislaaday oo curdin ah ayay kugu soo daadinaysaaye!”

Nabaadiino saaxiib.

# 014 – Waan ku salaamay saaxiib

Waan ogahay in dhammaanba hadallada samirsiiska iyo niyad'dhiska ahi aanay dalool yar oo qalbiga dhacdadaas ka soo gaadhay gufaynayn, bal ka warran qalbigaaga wada daloolka ah ee la moodo shaandho–miiradana?!

Dalool kastaba qof aad jeclayd ayaa ka dusay oo sidaas ku tegay!

Waxa aad ku xukuman tahay in aad weydo dadka aad jeceshahay,

Isku day bal marka soo aaddan ee aad qof jeclaato in aadan jeclaanin, laga yaabaa in uu negaado'e!

Waxa jira marar dhammaan erayada samirsiiska ahi aanay wax dhadhan iyo dheef ah lahayn, giddigoodna ay yihiin hadal af laga yidhi oo aan meelna wax ka taraynin!

Markii ay Khadiiji geeriyootay, nebiga ﷺ nolosha ayaa cidhiidhi ku noqotay, maadaama uu Ilaahay og yahay xanuunka ay leedahay ninku gabadh uu jeclaa in uu waayaana, waxa timi dhacdadii dheelminta; Rabbigii ayaana samada kore u qaaday si uu u soo samir siiyo.

Mararka qaar dhulka oo dhammi kuma filnaanayo in uu ku samir siiyo!

Saaxiib; nebigu ﷺ asxaabtiisa jannada ayuu ku samirsiin jiray!

Ha hilmaamin markii ay saxaabadu arkeen maryo xariir ah ee ay la dhaceen, in uu ku yidhi nebigu ﷺ: "tuwaalladda Sacad Ibnu Mucaad ee jannada u yaalla ayaa si kastaba uga wanaagsan!"

Jacfar Ibnu Abii Daalib ayaa labadiisii gacmoodba dagaalkii Ma'uta lagaga jaray, markaasuu yidhi nebigu ﷺ: "Ilaahay ayaa ugu beddelay laba garab oo uu jannada ku duulo!"

Haddii uu qof waayo ilmo dhallaan ah oo uu dhalay, waxa uu ku samir siiyay, in uu jannada ku gelayo kafaalo–qaadka Ibraahin nkh'e iyo Saara.

Jannadu samirsiis ha kuu noqoto saaxiib.

Jannada ayaa ah guusha khasaare kasta oo hore kuu soo marayba waxba–kama–jiraanka ka dhigta.

Cadaabtuna waa khasaaraha guul kasta oo aad hore u soo heshayba waxba–kama–jiraanka ka dhigaya.

Haddii aad loollanka adduun ku guul darraysato, dhabar'adayg oo ha baasaysan, jannada waxa yaalla samirsiis nabar kasta oo qalbigaaga soo gaadhay dhayaya'e!

Jannada gudeheeda,

Ma jiraan dad aad jeceshahay oo kaa tegayaa,

Gacallayaashaadu way kula joogayaan, adiga ayay kuu joogayaan, agtaada ayayna joogayaan.

Kuma qasbanaanaysid in awood kasta oo aad leedahay aad isugu geyso oo unug kasta oo kaa mid ahi uu u dagaallamo sidii uu u sii haysan lahaa!

Jannada gudeheeda,

Qofna noloshaada ma soo gelayo, oo inta aad jacayl mug iyo miisaan leh oo aad mooddo in uu ruux cusub ku gashaday aad u qaaddo, aad gaclooto, la haasawdo, ku hammido oo aad u waalato, aakhirka haddana inta uu kaa tago ku macasalaamaynaya, adiga oo ah jidh bilaa

ruux ah oo isaga cid aan ahayn aan la jaan qaadi karinna kaa tegayaa!

Jannada gudeheeda,

Ma ooyaysid oo ma hinaasaysid, madaxana derbiga kuma garaacaysid marka aad sinaba u gaadhi weydo wax aad si walba u doontay!

Wax kasta oo aad ku hammido waad helaysaa!

Jannada gudeheeda,

Ma jiraan xeerar ku xakamaynaya, damiir ku xisaabinaya, wax lagaa xarrimay iyo caqabado toona, ee sida aad tahay ayuun baad ahaanaysaa, wax kasta oo aad doonto in aad fashana toos ayaad ugu dhaqaaqaysaa adiga oo aan kaba fekerin, sidii ilmo dhallaan ah oo hadda uun indhaha nolosha u kala qaaday, oo wax kasta oo uu doonaba falaya, isaga oo aan cidna waxba iskaga tirinayn!

Jannada gudeheeda,

Ma sakaraadaysid oo ma saamalaylaysid, holac laabtaada kama hugmayo, qabowna lafahaaga dhuuxa ma gororinayo, ee bedqab iyo fayoobaan aanay dhibi nooc ay tahayba ku daarayn ayaad ku daanshoonaysaa!

Jannada gudeheeda,

Ma jiraan indho kula casaanaya oohin darteed, oo kabbo dhiig ah kuu ekaanaya.

Kama jiraan indho daal dartii isku dhacaya, saamalaylka ay soo mareen iyo soo–jeedka ay la soo daalaa dhaceen dartii.

Kama jiro weji duuduubmaya iyo cirro ay da'i keensanaysaa.

Adhaxdu kuma godanayso, lafuhuna kuma wiiqmayaan.

Bal suurayso heerka ay le'eg tahay naxariista halkaas taallaa.

Intaas samirsiis ka dhigo saaxiib.

Jannada gudeheeda,

Waxa aad kula kulmaysaa dad aad isjeclaydeen oo wadku uu idin kala geeyay,

Iyo dad aad jeclaatay oo ay adduunyadu jacaylkaas kaala bakhayshay (aad iswaydeen),

Iyaguna jannada wax kasta oo ay ku hammiyaanba way ka helayaan!

Jannada gudeheeda,

Waxa aad ka helaysaa rafiiq toolmoon, nebiyo, siddiiqiin, Abu Bakar iyo Cumar, Aasiya Bintu Musaaxim iyo Maryama Bintu Cimraan,

Dhammaanba dadyawgaas aynnu isku samir siinno, idamka Alle halkaas ayaynnu kula kulmaynaa!

Jannada gudeheeda,

Waxa lagu arkayaa wejiga Ilaahay ee maamuusan.

Bal yara suurayso muuqaalkaas saaxiib,

In aad suuraysato oo qudha ayay wax badan oo aad la kadeedan tahay kaaga kala degayaan!

Ilaahayow; jannadaada nagu maamuus!

Nabaadiino saaxiib.

# 015 – Waan ku salaamay saaxiib

Xalay waxa aan akhriyayay buugga سير أعلام النبلاء,

Wali waxa dhegahayga ka sii yeedhaya dhawaqa erayadii Cabdillaahi Ibnu Mubaarak uu ka yidhi Imaam Maalik.

Waxa uu yidhi: "ma aanan arag nin gaadhay heerka uu gaadhay Imaam Maalik Ibnu Anas, kumana aanu gaadhin soon iyo salaad badnaan, ee waxa uu ku gaadhay in uu Ilaahay wax la siraystay!"

Saaxiib; markii uu Maalik qoray kitaabkiisa الموطأ, ayaa lagu yidhi: "maxay dadku uga baahan yihiin iyada oo ay kutubta Xadiisku aad u badan yihiin?!"

Markaasuu yidhi: "wixii Ilaahay dartii loo qabtaa way waaraan!"

Maalik noloshiisa oo dhammina Ilaahay dartii ayay ahayd, kitaabkaasina sidaas ayuu ku waaray!

Saaxiib; Ilaahay waxa uu ugu jecel yahay sir wanaagsan oo aad ku qarsatay, addoonkuna uu Ilaahay ku siraysto oo ay isaga uun kala dhexayso, indhaha aadamuhuna aanay qabanin oo aanay ku ammaanin, dhegaha dadkuna aanay maqal oo aanay ku bogaadin, oo uu qofku sameeyo isaga oo ay niyaddiisu tahay, keliya Ilaahay dartii, isaga oo ku kalsoon in aanay Ilaahay agtiisa waxba ku dayacmin!

Ha ahaato sadaqad joogto ah oo aanay kamaraduhu qabanin,

Rakcado habeenbadhka aad tukato, iyada oo ay ehelkaagu kuu malaynayaan in aad huruddo,

Deyn aad ka guddo qof uu qarqiyay oo meheradaha soo hormari kari la'aa, adiga oo aan isaga garanayn, isaguna aanu adiga ku garanayn,

Agoon aad kafaalo qaadday oo aan waligii ogaanayn cidda kafaalo qaadday!

Saaxiib; maanka ku hay hadalkaas Maalik: "wixii Ilaahay dartii loo qabtaa way waaraan!"

Qormo aad u faafiso maxabbo aad Ilaahay u hayso darteed iyo difaacista diintiisa, ayuu Ilaahay kuugu sakhirayaa kumannaan qof oo adiga kaa sii xanbaaraya, uunkana gaadhsiinaya, afarta baynajiho ee arladana u kala tallaabinaya, adiga oo gurigaaga fadhiya!

Buug aad qortay adiga oo aan ka lahayn niyo aan ka ahayn Ilaahay dartii, iyo in uu Ilaahay sabab uga dhigo qof in uu toobad keeno oo uu soo laabto, iyo in uu samirsiis u noqdo qof murugaysan, uu niyad'dhis u noqdo qof niyad jabsan, uuna hanuun u noqdo qof habawsan, adigu waad dhimanaysaa, se kaas Ilaahay ayaa kuu waarinaya!

Geed aad Ilaahay dartii u beertay, oo uu Ilaahay kaaga dhigo mid kuu qotoma sida buurta, uuna barako kuu geliyo, dadkana uu dhankiisa u soo hago, si uu adiga ajar kuugu siiyo, oo shalay ahaa iniin yar oo soo biqishay, se uu Ilaahay kuu waariyay!

Ceel aad Ilaahay dartii u qodday, oo abaalmarintiisu ay noqon karto nebiga ﷺ oo gacmihiisa kugu waraabiya!

Ma jirto cid Ilaahay ka oofin badani!

Ha ahaato waxaas aad ku siraysatay dhisme aad xifdinta Quraanka u qoondaysay, maadaama aadan soo helin adigu fursad aad Quraanka ku xifdido, oo uu

Ilaahay kuu sakhiro kuwo ku xifdiya Quraanka, malaa'igtuna ay ajarkooda oo dhanba boggaaga kuugu qorto!

Wixii Ilaahay dartii ahi way waarayaan!

Yaa filanayay in Riyaadu Saalixiinka lagu gadi doono maktabadaha Paris iyo London.

Se Ilaahay ayaa daalacday qalbiga Imaam Nawawi, kuna raalli noqday ikhlaaskii uu muujiyay, ka dibna kitaabkiisii nooleeyay!

Wax iska dhacay ma aha in qalbiyadu ay la dhacaan kitaabka مدارج السالكين,

Oo hore ayuu qalbiga Ibnul Qayim isugu dhiibay Ilaahay!

Layaab ma laha in uu dhinto Ibnul Jawsi, oo uu waaro kitaabkiisii صيد الخاطر, oo waxa Ilaahay dartii loo sameeyo, ayuu Ilaahayna la jiraa!

Imaam Axmed waxa uu ku ducaysan jiray: "Ilaahayow i dil oo yaanay i baran cid uunkaagaas ahi!"

Ilaahay qalbigiisa ayuu daalacday, ee uu ka bogtay in aanu caannimo dan iyo heello ka lahayn, ayuu dhimashadiisii ka dib uunka wada baray!

Saaxiib; mar walba maanka ku hay, wixii Ilaahay dartii loo falaa, way waaraan!

Nabaadiino saaxiib!

# 016 – Waan ku salaamay saaxiib

Haddii aad i weydiinayso waxa uu samaynayo ninka gacalisadiisii nin kale loo gelbiyay?

Waxa aan ku leeyahay:

Ugu horrayn; Ilaahay qalbiga ha kuu samato bixiyo,

Ma jiro ifka oo dhan qalliin ka xanuun kulul in ninka qalbigiisa qayb ka mid ah oo ku dhex nool laga jaraa, isaga oo indho quuseed ku eegaya oo aan ax iyo iga daaya midna lahayn, nuuxsi iyo nafdhawrashana dhan isaga duway!

Saaxiib; waxa uu ku leeyahay Imaam Qashiiri tafsiirka Quraanka aayadda uu nebi Saleebaan nkh'e ku leeyahay:

(لَأُعَذِّبَنَّهُۥ عَذَابًا شَدِيدًا أَوْ لَأَاْذْبَحَنَّهُۥ) النمل ٢١

"Waxa aan u cadaabayaa [guuguulahaas] si daran, ama waan gawracayaaba!":

"Cadaabkaas darani waa in uu kala geeyo isaga iyo cidda uu jecel yahay, oo waayitaanka cidda aynnu jecel nahay waa qurbajoognimo!"

Waxa aad u baahan tahay in aad dareennadaada kala fududayso saaxiib, ee soo afuuf folkaanaha laabtaada ka hugmaya, dabkaas qalbigaaga ka ooganna dami.

Bartootan, Ilaahay bari, u tasbiixso, oo denbidhaaf weydiiso!

Hab cusub oo aad naftaada nafis ku dareensiiso hal'abuur, sida in aad ninkeedaas loo sii gelbinayo dhambaal u qorto, adiga oo aan dhab ahaan u diraynin!

I rumayso saaxiib, habkaasi waxa uu kaa caawinayaa wax uun, haba yaraato'e!

Ku dheh:

Ha u horseedin habeenna in ay dhabanka dhigto, iyada oo ay isheeda illini ku taagan tahay, aad ayay ula kadeedmaysaaye.

Marka ay murugooto caloosha ayaa xanuunta, kaarka qabtana way la lababoglaysaa oo ay la rafaaddaa, oontana way isdaayaan!

Samee xeelado aad kaga qoslinayso!

Xataa haddii ay kellifayso in aad raalligelin bixiso iyada oo kaa khaldan, ha ka labalabayn, muhimaddu waa in aad ka horjoogsato uun, in ay la hoyato murugo laabteeda holcinaysa!

Ku dheh:

Ad'adaygga kaaga muuqdaa yaanu kuu been sheegin, gudaha ayay ka dun wanaagsan tahay, shakhsiyad lagu ag xasilayana ay ku leedahay, aadna ay uga debecsan tahay'e!

Qofka aan aqooni waxa uu u malaynayaa in ay madax adag tahay oo kariwaa aan dhanna loo dhaqaajinayn ay tahay, se qofka sida dhabta ah u yaqaanaa waxa uu garanayaa, in ay tahay carruur cag weyn, gabadh yar oo guudka sare ka weyn, oo dhadhanka nolosha oo dhan kuu gacan gelinaysa, haddii aad danayn iyo daryeel tusto, oo qalbigeeda in loo sii maro uun lagu hanto... qalbigeeda uun!

Jooji is'adkaynta iyo qallafsanaanta aad isu gelinayso, in aad isu qallafiso waxba kagama dheefaysid'e!

In aad ku ad'adkaataa waxa ay carinaysaa dagaalyahanaddaas madaxa adag ee gudeheeda hurudda!

Haddii se aad u debecsanaato dhibirsamaanna aad kula dhaqanto, waxa ay si dhab ah kuugu noqonaysaa mid ka debecsan caleemaha ubaxa!

U sheeg ninkaas in ay jeceshahay in la daneeyo, uuna dhankeeda aad ugu il dheeraado, daryeel badanna uu siiyo.

In koobka shaaha aad ugu shubtaa way farax gelisaa, gaar ahaan fujaanka labaad!

In aad hudhmada cuntada ah afka u gelisaa way farax gelisaa, xagtimaha yaryar ee hawsha guriga gacmaheeda ka soo gaadhana in aad dareento oo aad xaalkooda weydiisaa aad ayay u cajebisaa.

Iska jir iyada oo kula hadlaysa in aad dhabarka u jeediso, aad ayay u dhibsataaye!

Marka ay kula sheekaysanayso si danayn leh u eeg oo dhegaha u raarici, waxa jira erayo aad u badan oo ay indhaha ka sheegto oo aanay afka ka odhan'e!

Marka aad si wanaagsan u barato ayaad qodobkan si toos ah u fahmi doontaa!

Weydii sida uu maalinkeedu ahaa?

Waxa ay quudatay?

Halka aadday?

Iyo maalinka inta hadhay waxa ay doonayso in ay fasho?

Marka ay dhibaatooyinka shaqadeeda kaaga warramayso dhegahaaga wada sii, kulama soo doonanayso adiga culayska mushkiladeheeda'e!

I rumayso nin yohow, aniga iyo adigaba way inaga karti badan tahay, ee dhibaatooyinka shaqadeeda in ay

kaaga sheekaysaa waa uun hab ay culayskooda iskaga khafiifinayso!

U sheeg marka uu la dhaqmayo iyada in uu garaad badnaado oo uu feejignaado.

U fiirso waxyaabaha ka dhiman oo u keen iyada oo aan kaa dalbanin, aad ayay isula hanweyn tahay oo qab heer sare ah ayay leedahay, oo haddii ay harraad la oomman tahay kaa ma dalbanayso koob biyo ah in aad ka waraabiso'e!

Se aad ayay ugu farxaysaa haddii aad fahanto adigu oo aad ka waraabiso.

Inta ay danayso waxyaabaha ay helayso, ka badan waxa ay aad u danaysaa habka ay u helayso!

Ku dheh:

Marka aad aragto iyada oo murugaysan, ha la hadlin, niyaddana ha u dhisin, waxa ay ku jirtaa markaa xaalad xataa haddii aad dhegaha kaga qayliso aanay maqlaynin, ee laabta uun geli, iyada oo ilmada saydhaysa ayaad arkaysaaye, haddii ay dhacdo oo ay oydana, ogow in ay kugu kalsoon tahay, aad ayay u dhibtaa in ay qof taag daran u muuqataaye.

Balse marka ay ku jeclaato, ilmadeeda iyo oohinteeda oo dhan ayay kaydinaysaa, ilaa inta ay ku arkayso ee inta ay laabtaada soo gasho ay sidii ilmo dhallaan ah dhabannadeeda ilmadu u qoynayso!

Ku dheh:

Aad ugu kalsoonow, waa garab iyo gaashaan aad si buuxda ugu tiirsan karto, iyo xoghaye kaydinta sirahaaga aad ku aamini karto'e.

Cayaayir iyo dhayal waxba kuma dhaafaan, xog lagu aaminayna afkaas ugama juuqdo, xaasha in ay soo hadal qaaddaa!

Dhankaas waa ka diblomaasiyad baarka sare ah, waana gabadh u hufan sidii in ay tahay dhigane ku saabsan dad–la–dhaqanka wanaagsan.

Dareennada way dhawrtaa, laabahana way dejisaa, xilliyada ay ugu masayrka badan tahayna way dhoollo caddaysaa, maadaama aanay kula doonayn in aad murugooto.

Gobanimadeedu waxa ay gaadhsiisan tahay, heer qofka ay jeceshahay ay ka hormariso qudheeda.

Alla nasiib badanaa ninka ay jeclaataa!

Ku dheh:

Isdiiddooyinkeedaas aad marka koowaadba ka arkayso ha ku dagmin, oo haddii debecsanaanteeda aad ka hesho, ha illaawin kakanaanta iyo ficilloonaanta gudeheeda ku kaydsan!

Haddii ficilloonideedaasi ay ku baqe gelisana, ha hilmaamin qofka debecsan ee ay noqoto marka ay raallida tahay.

Waxa aan illaaway in aan kuu sheego, in aanay hore si fudud raalli ugu noqon, waana dabcigeeda, ee waa in aad marar iyo marar badan isku daydaa in aad raalli geliso, Ilaahay ayaana aan ku dhaartay'e way istaahishaa!

Haddii aad aragto iyada oo shaqadeeda ku mashquulsan, ha odhan qalbi ma laha, in ay guuleysato aad ayay u jeceshahay, in ay nafteeda ku faanto oo ay meel iska soo saartana aad ayay u jeceshahay'e.

Way neceb tahay in ay cid kale ku tiirsato, wayna dhibtaa in ay cid u baahataa, se marka ay wax jeclaato... marka ay si dhab ah wax u jeclaato, ma jirto gabadh kale oo caalamkan ku dhaqan oo qalbigeeda oo kale lihi!

Isku day saaxiib in aad sidaas samayso, laga yaabaa in ay ku anfacdo'e, haddii ay ku anfici weydana, dee waxba kuma aadan waayin oo waxna kaa ma aanay hallaabin.

Waxa jira khasaare weyn oo khasaare kasta oo kaaga danbeeyaa uu noqonayo jallaafo yar oo ku suul daartay oo aan wax–ka–sooqaad sidaas ah lahayn, mana jiro khasaare kaga weyn ninku in uu waayo gabadhii uu jeclaaday!

Waa qadderka Ilaahay saaxiib ee ka edebso!

Xanuunkaaga mahadinta Ilaahay ku dabiib, samirkaagana saatirka weyn u kaasho, oo dheh: "Ilaahay ayaa igu filan, cid la wakiishana isaga ayaa ugu mudan."

Waa qadder dhacay, iyo qoraal hore loo dhigay'e.

(لَا تَدْرِي لَعَلَّ اللَّهَ يُحْدِثُ بَعْدَ ذَٰلِكَ أَمْرًا) الطّلاق ١

"Ma ogid in Ilaahay intaas dabadeed uu wax fulin doono'e!"

Nabaadiino saaxiib.

# 017 – Waan ku salaamay saaxiib

Haddii aad i weydiiso: "qofku qacda koowaad ee ay masiibo qabsataba yuu u qayshadaa ee dhankeeda uu miciin bidaa?!"

Waxa aan ku leeyahay: "hadba cidda uu jecel yahay!"

Miyaadan arag nebiga ﷺ markii waxyiga lagu soo dejiyay ee uu baqaha iyo cabsida qaaday, in aanu miciin bidin dhanka saaxiibkiisii uu isku hallaynayay ee Abu Bakar, adeerkiisii halyeyga ahaa ee Xamse iyo xataa adeerkiisii murtiilaha ahaa ee Abu Daalib, ee uu u cararay oo uu gabbaad ka doontay dhanka Khadiija!

Saaxiib; hadba cidda aad in badan jeceshahay, ayuun baad xaggeeda miciin bidaysaa marka koowaadba.

Jacaylku waa gabbaadkeenna aaminka ah, dhabta yar ee cidhiidhiga ah ee qofka aad jeceshahay ayaana kuu ah halka dhulka oo dhan ugu waasacsan!

Macnaha ammaanka iyo xasilloonida laba meelood ayuun baad ku dhadhaminaysaa: waana sijaayadda aad ku tukanayso iyo laabta qofka aad jeceshahay!

Si aanan cid hore u jeclaanin, cid danbena aanan u jeclaan doonin, ayaan gabadh u jeclaaday.

Mar ayaan aniga oo la kaftamaya ku idhi: waxa aad tahay qaybta ugu quruxda badan ee iga midka ah aniga, sida uu dhagaxa madoobi (xajarul aswadku) kabcada uga mid yahay.

Mar kasta oo aan murugoodo dhankeeda ayaan u ordi jiray, markaasay timahayga fareheeda dhex gelin jirtay, wax kasta oo aan dareemayayna ay i deyn jireen!

I rumayso; shan farood ayaa ku filan in ay ku dabiibaan!

Qofka aad jeceshahay madaxaaga gacantiisa kuma salaaxayo, ee qalbigiisa ayuu ku salaaxayaa!

Mar kasta oo aan farxana iyada ayaan u iman jiray, farxaddana maba aanan dareemi jirin farxadnimadeeda iyo dhadhankeeda, ilaa aan iyada u imaaddo!

Mar kasta oo aan arko iyada oo murugaysan, waan u xeeladayn jiray, u farshaxamayn jiray, oo haasaawin jiray ilaa aan ka qosliyo!

Marka ay qososho ayaan ku odhan jiray: tushka (daloolka) yar ee dhabankaaga ka godma marka aad dhoollo caddaynaysaa, waa sida labada calaamadood ee kolmaha hadalka dhigmada (naska) ah lagu qaydo, dhoollacaddayntaada iyo dhabankaaga tushka lihina waa weedha ugu qurxoon ee la soo dheegto!

Waxa aan ka illaaway in aan u sheego, in labadeedaas tush aanay ahayn duuduub yar oo wejigu uu mar sameeyay oo dhammaaday, ee ay yihiin labada dhinac ee dayaxa!

Nabaadiino saaxiib.

# 018 – Waan ku salaamay saaxiib

Waadigaas haddana mar kale daallan, xataa adiga oo uu diihaal kuu dhan yahay waadigaa seexan kari la', madaxaagana waxa ka guuxaya kun feker, xataa waxaba aad mooddaa in caalamka madaxaaga ku dhex hirdamayaa uu ka weyn yahay caalamka uu madaxaagu dhex joogo!

Iyada oo waxaas oo dad iyo saxmad ahi ay kugu xeeran yihiin, haddana kelinimo ayaad dareemaysaa.

Dhammaantood way arkayaan ad'adayggaaga, way arkayaan korkaagaas qallafsan ee aad isku dahaadhayso sida qunbaha oo kale, dusha aad ayaad uga adag tahay, se gudahaagu waa jileec!

Qofna ma arko gudahaagaas debecsan ee sidii qori xar galay oo kale ah!

Dhammaantood way arkayaan dhoollacaddayntaada mar kastaba dhabankaaga ku sawiran, qofna ma oga in aad sugayso inta aad gaar noqonayso ee ilmada dhaayahaaga ka da'aysaa ay dhabankaaga qoynayso!

Dhammaantood adiga ayay kugu tiirsan yihiin, adiga ayaana baray in ay dhabarkooda kugu tiiriyaan, oo aad garabkooda iyo gaashaankooda tahay.

Laakiin se tolow; sidee ayaad uga dhaadhicin in xataa dadka ad'adag ay soo maraan xilliyo wiiqa oo daciifnimo ah, iyaga laftooduna ay u baahdaan garab iyo gabbaad?!

Balse kuma dhacdid in aad taagdarradaada muujiso, oo geedku ma odhan karo: "waan ka daalay taagnaanta ee in aan yara jiifsado ayaan rabaa!"

Ha u bixin saaxiib! Ha u bixin!

Waa qadderkaaga in aad noqoto sida shamaca isagu gubanaya, si uu inta kale wax ugu ifiyo!

Adkayso, laga yaabee adkaysigaagaas in ay in badani bidhaansanayaan oo ay iyaguna ad'adkaanshiiyo ka sii korodhsanayaan, haddii aad liicdana ay kula liicayaan'e!

Waan ogahay in aad daashay, se ma haysatid badhaadhe iyo barwaaqasooran kuu saamaxaya in aad yara nasato, oo askartuba ma nastaan inta ay dagaalka ku jiraan, si kasta oo ay u daalaan!

Bal hadda in yar yara hako, qalbigaagana i yara amaahi saaxiib.

Miyaadan maalin igu odhanin: "adduunkan dadku waxa ay raacayaan keliya dhabbooyinka qadderkooda!"

Ha ku dilin naftaada feker xadkabax ah, qalbigaagana ha ku mashquulin wax aanu waxba ka qaban karaynin!

Amarka Ilaahay wuu fulayaa oo waa muran–ma–doon, si kasta oo dhabbooyinku ay u dhib bataan, irridaha suuragalka ahina ay u xidhmaan!

Adiga waajibkaagu waa in aadan guclada deynin uun, keliya waa in aad socotid uun, se xilliga aad gaadhayso, sida aad u gaadhayso iyo halka aad gaadhaysaa, waa qayb maqan oo Ilaahay cid aan ahayni aanay ogayn!

Arrin qudha uun ha illaawin ee maanka ku hay, masuuliyadaha qaar waa kuwo cidda sidda loo doortay!

Ilaahay jidkiisa uma adeegsado qof aan daahir badhax tiran ahayn!

Innaga oo aadame ah ayaan agab wasakhaysan u adeegsan in aynnu hawleheenna ku qabsanno!

Waa innaga oo bashar ah, bal ka warran Ilaahayna, isaga oo Ilaahay ah!

Marba haddii Ilaahay uu jidkiisa dartii kuu adeegsaday, qalbigaaga ayuu og yahay, uuna raalli ku yahay.

Intaas ka dib ma jiro wax ay suure tahay in uu caqabad iyo kadeed kugu noqdaa!

Halganku wuu adag yahay saaxiib, si wanaagsan ayaan u ogahay, se miyaanay kugu soo dhicinba, xataa madaxbuuxisna ha ahaato'e, in aanu Ilaahay halgannada ugu ad'adag u dirin cid aan ahayn halyeeyada ad'adag?!

Nabaadiino saaxiib.

# 019 – Waan ku salaamay saaxiib

Wax gudahaaga ku jira ayaa kugu leh ma fiicnid, dawana waad u baahan tahay, se ma aha daawooyinka lagu gado farmasiiyada.

Waxa aad dareemaysaa in laabgelintu ay kugu yar tahay, oo aad u baahan tahay in laabta lagu geliyo, habtana wali quraarado dhakhtarradu kuma aanay shubin oo farmasiiyada lama dhigin!

Waxa aad u jeellan tahay in aad udugsato carafta qofka aad jeceshahay ee kaa durugsan, xataa urtiisa ayaa kuugu filan in aad dareento fayoobi iyo bedqab, in aad farmasiilayaasha u sheegto oo ay qof waalan ku moodaanna waad ka baqaysaa!

Amaba waxa aad ka baqaysaa in ay ku yidhaahdaan beddelkiisa ayaannu haynaa!

Oo aad adiguna ku tidhaahdo: waad ku beddel la'dihiin, oo wax gacallahayga beddel u noqon karaaba ma jiraan!

Waxa aad u baahan tahay wax qalbigaaga maydha, oo adduunkani wuu ina wasakhaynayaa saaxiib.

Si kasta oo aynnu ugu dedaalno saafi ahaanshaha qalbiyadeenna, wax ayuun baa duulduul ku soo gaadhaya, oo marada cadi way ka uskagoobi og tahay dharka kale, qalbiyada cadcad ee saafiga ahina waa sidaas, oo dabci kasta oo silloon oo ka soo ag dhowaadaa bar madow ayuu ku reebaa!

Waxa aad tebaysaa garab aad ku tiirsato, ammaankaas aanay dhakhaatiirtu awoodin noociisa iyo sifooyinkiisa in ay qoraan, farmasiilayaashuna aanay ka

heli karin marfashka dawooyinkooda, si kasta oo farta lagu qoray ay u caddahay oo ay u muuqato!

GARAB!

Waa eray keliya, ka kooban shan xaraf, far la arki karayana ku qoran, balse waa dhif iyo naadir marla'arag ah, garbaha u qalma in lagu tiirsado oo la cuskadaa, waxa aad mooddaa in aad baadigoobayso calaacal timo leh, ama tuke baal cad!

Waxa aad raadcaysaa cabbitaan wax ku illawsiiya, waxa aad maalin oo dhan naftaada ku mashquulinaysaa hawl adduun, si aanay u xiisin oo daltabyo iyo jeelitaan aanay u dareemin!

Haddana marka uu gabbalku kuu dumo ee habeenka haafkiisa dambe la gaadho, qalbigaaga iyo qudhaaduna ay qol ku keliyaystaan, xiisayaashaadiina ay soo burqadaan, boholyowgaaguna uu dardar la soo kaco, ayaad hal malqacad ka kabban lahayd oo aad ledi lahayd!

Habeenku qofka xiisuhu hayo aad ayuu ugu dheer yahay saaxiib.

Ma gam'o qofka ay laabtiisa ka bannaan tahay bohol, bohol qof uu tebayo oo madaxiisa saara mooyaane aan buuxsamaynin!

Waxa aad u baahan tahay quraarad yar oo illini ay ka buuxdo, oo aad indhaha ku shubato marka aad oohin damacdo ee aad awoodi weydo!

Waxa suure ah saaxiib, in unug kasta oo jidhkaaga ah ay ilmadu ka burqato, indhahaaga mooyaane!

Nafiska ugu badan waxa qofka siiyaa waa oohinta, laakiin mararka qaar ma awoodo!

Waxa aad u baahan tahay balastar (baandhays) aad ku duubto dhammaanba dhaawacyadaada aanay cidina arkaynin, dhaawacyadaas dhiigga saydhaya ee furan, ee aad marba taabanayso bal sida ay yihiin!

Mararka qaar waxaba aad niyaysanaysaa in aad ka bogsatay, maadaama aad in muddo ah illawsanayd, ama aad is'illawsiinaysay, se isla marka aad keligaa noqoto, waxa aad arkaysaa dhaawacaagii oo wali qoyan oo dhiig baxaya!

Dhaawacyada ugu xanuunka badani saaxiib, waa kuwa ruuxda!

Nabaadiino saaxiib!

# 020 – Waan ku salaamay saaxiib

11 gu' ayuu baaderigii Faransiiska ahaa ee Charles De Foucauld ku qaatay saxaraha weyn dhexdiisa, isaga oo qabiillada Dawaariqda ah Kiristanka ku faafinaya, iskuna deyaya in uu diintooda ka leexiyo.

Muddadaas waxa uu u geeyay kaalooyin iyo taakulayn badan dadkaas, balse hal qof oo Dawaariqdaas ah diintiisii wuu ka kaxayn kari waayay!

Xataa islaan weyn oo u adeegi jirtay, xoogaa mushahar ahna ka qaadan jirtay ayaa maalin ku tidhi: "Mudane Charles, waxa aad tahay nin wanaagsan, waana khasaare in aad gaalnimo ku dhimataa!"

Saaxiib sheekaba sheeko ayay keentaaye,

Koox baaderiyo diin–faafiyayaal ah ayaa yimi tuulooyinka gobolka Saciid ee Masar middood, halkaasna muddo laba sannadood ah degganayd, xannaanno iyo dugsina dadkaas u dhistay, dhar badanna u gadday, hadyado door ahna siisay, dabcan waxaas ay samaynayeen oo dhammina hoosaasin ayay ahaayeen oo timirta laf ayaa ku jirtay!

Ka dib baaderigii watay ayay la gudboonaatay in uu dadka xaflad weyn isugu yeedho, laga yaabaa in uu dadkaba hal mar afka u wada dhigto oo waxa uu doonayo uu ka dhaadhiciyo'e.

Haddii uu minbarka fuulay oo uu isku deyayo in uu hadalka furfurto, ayay mushkilad ku noqotay dhaqanka reer–baadiyaha ee dhuranka badan ah marka ay sheekaysanayaan, haddii uu isku deyay in uu soo jeediyo oo uu aamusiiyana, dheg uma aanay jalaq siinin.

Ka dib guddoomiyihii tuuladaas ayaa isaga oo lahjaddii Saciid ku hadlaya ku yidhi: "oday, sidaas dadkan laguma aamusiiyo!"

Ka dib kor ayuu u yidhi: "ku salliya rasuulkii Ilaahay!"

Hal mar ayay hal cod ku wada yidhaahdeen: "ﷺ."

Wayna wada aamuseen oo juuqda ayay gabeen.

Markaasuu baaderigii iskaga soo degay minbarkii, isaga oo yaqiinsaday in hadalka uu soo wadaa aanu wax macne ah duulkan la yeelanayn!

Saaxiib, diintani waa cajiib!

Wallaahay waa cajiib!

Marka ay dhexgasho ruuxda qofka, qalbigiisa ayay xasillooni ka buuxinaysaa, garaadkiisana raaxo ayay dareensiinaysaa, heer xataa agnaanka aan waxna akhriyin waxna qorin ee aan laba xaraf isku toosin karin, faylasoofyada oo dhammi aanay awoodin in ay iimaankiisa ka gilgilaan ciddi uskaggeed in le'eg!

Halka dhanka kale, faylasoofyada caalamka, doodyahannadiisa iyo maanmaalladiisaba ay shakiyada iyo tuhunnadu hadheeyeen, heer uu midkood subixiina iimaan ku waa beriisto, iimaan la'aanna uu gabbalku ugu dhaco!

Iyaga ayaaba noqday sidii qof indho la' oo jidka ul ku baadhbaadhaya, oo marna kufaya, marna kacaya!

Sababtu; waa in uu iimaanku arrin gaar ah yahay, aqoontuna ay arrin gaar ah tahay!

Saaxiib; nebigu ﷺ waxa uu abuuray iniin qalbiga gudihiisa ka biqlaysa, oo inta ay xididaysato qofkaas ka buuxinaysa iimaan layaab leh iyo isdhiibitaan amankaag

leh oo uu Ilaahay isu gacan gelinayo, iyo sidoo kale xasillooni aanu qof ifkan ku guud uumani haysanin, aan ka ahayn inta diintan haysata!

Waxa aad arkaysaa oday duq ah oo tukube sita, haddana u sii tukubaya dhanka masjidka, isaga oo socodkiisa laga dhadhansanayo sidii qof ku waajahan meesha keliya ee uu ammaanka ku dareemo!

Socodkaasi lugaha ma aha saaxiib, ee waa qalbiga!

Innaga cid aan ahayninna ma laha socodkaas tookha (faanka) leh!

Waxa aad arkaysaa islaan cad ah oo sijaayaddeeda dulfadhida, gacmahana kor u haysa oo duco yaqiin ah oo ay ku uursan tahay ku fooggan, una ducaysanaysa sidii qof ku qanacsan in Ilaahay cid aan ahayn oo wax la weydiistaa aanay jirin!

Waxa aad arkaysaa qof waayay gacallihiisii uu jeclaa, oo ilmo kululi ay ka socoto, se qalbiga qabow ka dareemaya, isaga oo og in waxa haleelay aanay sinaba u gafeen, markaasaad ku hammiyaysaa in aad u niyad'dhis u muujiso oo aad u tacsiyadayso, mise waaba qof dhisan oo aan niyad'dhis u baahnayn, inta ay dadku isku weheshadaan mooyaane!

Waxa aad arkaysaa muumin aan quutalyoomkiisa helin oo qadaa–ma–dherge ah, marka aad xaalkiisa weydiisidna kuugu jawaabaya erayada mahadinta Rabbi kuwooda ugu xeesha dheer, haddii aadan dhab u garanaynna waxaba aad u malaynaysaa in uu hantidii Qaaruun ku fadhiyo!

Iimaanka oo keliya ayuun baa dadka dad ka dhiga!

Saaxiib, qofka hal mar iimaanka dhadhansha, tuhunnada adduun iimaankiisaas ma gilgilaan!

Shiikh fiqiga ii dhigi jiray ayaa iiga warramay, qiso dhab ah oo xoogaa qosol leh, se yaqiin aad u xooggani ay ku duugan tahay!

70maadkii qarnigii idlaaday ayuu arday ku soo laabtay tuuladiisii, isaga oo ka yimi dhanka Midawgii Soofiyeedka, oo uu muddo dheer caafimaad ku soo baranayay, isaga oo soo bartay sida uu jidhka aadamuhu qaabkaas dhammayska tiran ugu shaqeeyo, se noqday Shuuci Alle–kood (Mulxid) ah oo diiddan in uu jidhkaas amankaagga lihi khaaliq abuuray leeyahay!

Markii uu yimi maalmo ka dib, isaga oo tuulada dhex socsocda, ayuu la kulmay oday xooladhaqato ah oo weyn, haddii uu xaalkiisa weydiiyayna waxa uu odaygaasi ugu jawaabay: "waa Ilaahay mahaddii!"

— "Wax Ilaah la yidhaahdaa ma jiro, ee waa khuraafaad ay garaadkeenna ka buuxiyeen intii aynnu dhallaanka ahayn!"

Odaygii ma aanu helin wax uu ugu jawaabo oo aan ka ahayn: "Ilaahay ninow! Ilaahay!"

Dhakhtarkaasi waxa uu ku yidhi: "Ilaahay jiritaankiisa ma iigu xaqiijin kartaa hab i tus oo i taabsii ah?!"

Ninkii xoolaleyda ahaa inta uu ku kacay ayuu budh dabada u qabtay dhakhtarkii, xanuunkii ayuu dhakhtarkii ku cabaaday: "Ilaahay ayaan kugu dhaariyee iga daa!"

Markaasuu ku yidhi odaygii xoolaleyda ahaa: "Ilaahay baan kugu dhaariyay miyaad i tidhi?! i tus oo i

taabsii ayaad rabtay Ilaahay in aan kuugu xaqiijiyo, waanigaa ficil ahaan kuugu xaqiijiyay jiritaankiisa!"

Nabaadiino saaxiib.

# 021 – Waan ku salaamay saaxiib

Haddii aad i weydiiso: "waa maxay dareenka ugu wanaagsan ee jacaylka laga helaa?!"

Waxa aan ku leeyahay: waa ammaanka!

Waa in aad dareento in uu qof qalbigaaga ku hayo ee aanu gacanta ku haynin!

Ammaanku waa in aad qof siiso awood uu kugu burburin karo, adiga oo si buuxda u yaqiinsan in aanu xataa ubax kugu soo tuuri doonin!

Si kasta oo aad isugu xanaaqdaanna uu kaaga cabsoonayo xataa laydhu in ay wax ku yeesho!

Si kasta oo aad isu dagaashaanna aadan agtiisa dhayal ku noqonayn oo aadan hoosayn ku dareemi doonin!

Ammaanku waa in aad qof gacanta u geliso xogahaaga kuwa ugu qotada dheer ee lama–taabtaanka kuu ah, oo aad isugu bandhigto sidii buug kala furan oo horyaalla oo uu akhriyayo, adiga oo haddana kalsooni buuxda ku qaba in uu sirahaagaas u Ilaalinayo sida indhihiisa oo kale!

Ammaanku waa in aad qof wada tusto goljilicyadaada iyo dhinacyada aad ka taagta daran tahay, aadna iska furto gaashaanka adag ee aad kaga lebbisatay waayaha adduun, si aanay taagdarrooyinkaagaas kuugu soo marin oo aanay kuu dilin, isagana aadan wax difaac ah ka samaysan, adiga oo aaminsan in aanu marnaba goljilicdaas ku qaban doonin, nabarkaas ku dhaawacanna aannu marnaba kaa damqi doonin, taagdarrooyinkaaga oo dhanna inta uu asturo uu waliba dhawrayo!

Ammaanku waa in aad qof xogtaada wada siiso, adiga oo aan baqe ka qabin in uu maalin uun xogahaas dib kuugu soo adeegsan doono!

Waa in aad gacantaada u dhiibto, adiga oo aan sinaba uga welwelsanayn in uu mar uun sii deyn doono!

Waa in aad ula hadasho sida aad naftaada ula hadasho oo kale, ee aadan isku hawlin in aad u cudur daarato, ama sababaha waxyaabaha aad samayso aad u fasho aadan u faahfaahinin, sharrax dheerna aadan isku hawlin, maadaama aad og tahay in uu si sax ah kuu fahmayo, oo xataa haddii cabbiraaddaadu ay ku khiyaanto, isaga fahankiisu aanu ku khiyaamayn!

Oo haddii erayadaadu ay arlada qasaan oo wax daran ay sheegaan, isaga niyaddiisu ay hagaajinayso oo hadal wanaagsan ay ka dhigayso!

Oo aad garabkiisa ku oydo adiga oo aan qab dhawranayn, taagdarradaasna aan wejigabax ku dareemayn!

Oo aad laabtiisa u eerato marka aad kala daadsan tahay, iyada oo si walba aad u yaqiinsan tahay in uu kabis iyo dhaymo kuu samaynayo.

Ammaanku, waa in aad qofkaas agtiisa dareennadaadu sida ay yihiin ugu noolaato, aad wax dhibsato, xanaaqdo, hinaasto, marmarna aad goonninimada jeclaysato, adiga oo og dhammaanba xaaladahaaga iyo dareennadaada in uu kugu jeclaanayo!

Nabaadiino saaxiib.

## 022 – Waan ku salaamay saaxiib

Mar kale ayay adiga hawsha tuurta kuu saareen oo ay ku yidhaahdeen: "waa kugu adiga!"

Hadda waa adiga oo og in aad naftaada uun dirqi ku hoggaamin kartid!

Waxa aad isweydiinaysaa hadda, sidee ayaan dadka u hoggaaminayaa?!

Ilaahay waa kaaga markhaati in aadan adigu raadsanin, oo aadan nafsad u haynin, masuuliyaddana aad waligaaba u arkaysay kellifaad ee aadan u arkaynin maamuusid, hoggaamiyuhuna uu yahay adeege ee aanu ahayn mudane!

Balse sida ay u muuqato, qadderka aadamuhu waa in qofka lagu xidho dabarrada uu doonayaba in uu ka firdhado!

Saaxiib; waxa aad ka roortaaba way ku raadsanayaan!

Dadka oo dhammi way kuu hanbalyaynayaan, halka aad adiguna doonayso qof kuu tacsiyadeeya!

Ammaanadu way culus tahay saaxiib.

Ilaahay samooyinka, dhulka iyo buuraha ayuu u bandhigay, markaasay wada diideen in ay qaataan, adiguna waadigaas imminka tuurta u ritay!

Alla maxay dulmi iyo aqoondarro isu kaa bahaysteen!

In aad adigu isa samir siiso ayaad isku deyaysaa, markaasaad haddana xasuusanaysaa odhaahdaadii guunka ahayd ee ahayd, in aanu Ilaahay ku rarin laanna, midho aanay sidi karaynin.

Maadaama uu Ilaahay masuuliyaddan kuu xanbaariyay, waad awooddaa gudashadeeda.

Ma garanayo samirsiis aan ka ahayn, Ilaahay haddii uu xil cid ku kellifo, wuu ugu gargaaraa.

Ducadii Cumar Ibnu Khaddaabna sidoo kale samirsiis ayaad ka helaysaa: "Ilaahayow; kuma weydiisanayo rarka in aad ii fududayso, ee waxa aan kaa baryayaa dhabarkayga in aad quweyso!"

Waxa samirsiis kuu noqonaysa sidaas qalbi–ka–hadalka leh ee Cumar uu u ducaystay in aad u baryootanto.

Ilaahayow; adiga ayay talo oo dhammi gacantaada ku jirtaa, anigana waxba gacanta iiguma jiraan, tab iyo taag midna ma lihi, ee adiga ayaan tabtaada iyo taagtaada miciinsanayaa.

Waan lunsanahay ilaa inta aad i hagayso.

Waan jaho wareersanahay ilaa inta aad i hanuuninayso.

Waan qallafsanahay ilaa inta aad i debcinayso.

Ilaahayow ila jir, oo ilbidhiqsina ha ahaato'e qudhayda ha igu hallayn.

Haddii aad naftayda ii deyso, iyadana waan gubayaa, dadka kalena waan galaafanayaaye!

Ka dib ii kaalay.

Fadhiiso oo i dhegayso aan kuu warramo'e.

Maxay nolosheennu taraysaa qaddiyad la'aan *saaxiib*?!

Qiimigeenna dhabta ahi waxa uu ku xidhan yahay waxa aynnu ku dhegno ee aynnu joogtaynno, ee kuma xidhna waxa aynnu ka tagno ee aynnu faraha ka qaadno!

Ka–tegitaanka arrini waa sahalo, cid walibana si xirfadaysan ayay u taqaanaa, xataa fulayda ayaa xariifyo ku ah.

Ku–dhegitaanka arrinina way adag tahay, se adaygga ayuu qiimigaagu ku jiraa.

Maxaadba arrinka isugu adkayn, waxa lagaa doonayaaba waa uun in aad hore u socotid'e!

Haddii aad dhimato Ilaahay ayaad cudurdaar u sii dhigatay, mana jiraan wax ka milgo iyo meeqaam weyn in uu qofku u dhinto qaddiyad uu aaminsan yahay darteed!

Haddii aad noolaatana macaansiga ka–dhabaynta qaddiyaddaas ayaa daal kastaba kaa daweynaya, ee guntiga dhiisha iskaga dhig, taag iyo tamar waxa aad haysana isugu gee gudashada waajibkaaga.

Nabaadiino saaxiib.

# 023 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa aad i leedahay: "cimrigu wuu soconayaa, waxqabadyo sheeggan oo la tilmaamana ma aanan samaynin."

Aniguna waxa aan ku leeyahay: oo yaa kugu yidhi waxqabadyadu waa in ay noqdaan kuwo amankaag leh oo waaweyn, isla markaana sheeggan?!

Waxqabadyadu saaxiib ma aha keliya kuwayawga dhiganayaasha sooyaalka lagu xuso, dadkuna ay ka–warrankooda isla dhex maraan!

Yaa yidhi waa in aynnu dhammaanteen noqonaa ikhtiraacyahanno, fiqiyahanno, suugaanyahanno, hoggaamiyayaal, hantiilayaal ama dad caan ah, si aynnu u noqonno dad waxqabad sameeya.

Waar in uu qofku noqdo aadame... insaan... lafteeda ayaa ah waxqabad weyn oo aan dhayal ahayn!

Waxa aynnu nahay halyeeyo saaxiib, xataa haddii aynaan ciidamo hoggaamin oo aynaan guulo goob dagaal ka soo hoynin, ama aynaan ikhtiraacin dawooyin, ama aynaan daah feydin qaanuun Fiisigis ah, ama aynaan helin iskudhis cusub oo Kimistari ah, ama aynaan dejin xeer Xisaabeed, ama bad hor leh oo gabaygu uu leeyahay, amaba aynaan abaalmarinta Noble ku guuleysanin!

Halyeeyo ayaynnu nahay marka aynnu ugala halgamaynno nafaheenna sida maalinlaha ah in aanay Ilaahay caasiyin!

Sidoo kale; halyeeyo ayaynnu nahay marka aynu caasino ee haddana aynnu dib ugu soo noqonno Ilaahay innaga oo taag daran oo toobad–raadis ah!

Halyeeyo ayaynnu nahay marka aynnu dadka niyadda u dhisaynno, iyo marka aynnu erayadeenna sida ka–fiirsiga leh u xulanaynno, si aynaan dadka kale dareemayaashooda u durin oo aanay odhaahaheenna ugu merganin!

Halyeeyo ayaynnu nahay marka aynnu soo marno miskiin wareegaaleysi wax ku gadaya, ee aynnu wax ka iibsanno, sicirka uu ku gadayana aynnu uga yara badinno, ee haddana aynnu sadaqo Ilaahay dartii ah oo dahsoon u niyaysanno!

Halyeeyo ayaynnu nahay marka aynnu bisha dabayaaqadeeda gaadhno, ee waxa aynnu faraha ku haynaa ay yaraadaan, haddana aynnu baahideenna dadka ka asturanno!

Halyeeyo ayaynnu nahay marka aynnu ubadkeenna ku tarbiyadaynaynno in ay Ilaahay ka cabsadaan, ee aynnu ugu ilaalinno in ay xifdiyaan jus Cammo, sida aynnu ugu ilaalinno in ay xifdiyaan jadwalka isku–dhufashada!

Halyeeyo ayaynnu nahay saaxiib marka aynnu hooyooyinkeen iyo aabbayaasheen u samo falaynno, marka aynnu deriskeenna samo kula dhaqmaynno, lammaanayaasheenna aynnu caawinaynno, qaraabadana aynnu xidhiidhinaynno!

Halyeeyo ayaynnu nahay marka aynnu waxbarashada dedaalkaas oo dhan ku bixinaynno, iyo marka aynnu quudka ubadkeenna dhidid iyo tacab ugu keenaynno!

Bogga waxqabadyadaada ku darso saaxiib in aad salaaddii subax u kacday!

Oo ku darso wax kasta oo kaa soo gaadhayba in aadan dadka aad jeceshahay garabkooda ka bixin, illeen qofka qalbigiisa ku siiyay wuu isku kaa halleeyay oo uu isku kaa aaminay, Ilaahayna wuu jecel yahay in ammaanada cidda leh loo gudo'e!

Bogga waxqabadyadaada ku xardho marka aad ku faraxday waxqabad uu qof kale ka dhabeeyay, waxa ay ku tusinaysaa in aad leedahay qalbi wanaagsan'e!

Oo ku qoro in qof kasta oo nimco haysta oo aad aragtay aad ugu ducaysay in uu Ilaahay u barakeeyo, waxa ay ku tusaysaa in tarbiyaddaadu ay hagaagsan tahay oo aad edboon tahay, wixii uu weynuhu kuu qoondeeyayna aad ku qanacsan tahay'e!

Ku darso bogagga waxqabadyadaada, qof kasta oo murugaysan oo aad illinta ka tirtay, eray kasta oo wanaagsan oo aad qof niyad jabsan mooraalka ugu dhistay iyo gacan–qabad kasta oo aad qof ay waayuhu ciileen u fidisay!

Ku diwaan gasho bogagga waxqabadkaaga, hinaase kasta oo aad la gubtahanyootay oo aad qarsatay, si aydinaan isu seegin ciddaas kula jirta idinka oo safarka nololeed dhexda kaga jira!

Nabaadiino saaxiib.

## 024 – Waan ku salaamay saaxiib

Mar ayuu Imaam Maalik ka dhex baxay dadka, heer aanu xataa salaadaha jamaca ah iyo jimceyaasha iman jirin, bukaanna aanu booqan jirin, aasna aanu raaci jirin.

Markii la weydiiyayna waxa uu ku war celiyay: "qof kastaaba ma awoodo in uu sheegsheego cudurdaarkiisa!"

Adiguna waadiga waddada Imaamkaas weynaa haya, ee naftaada ku keliyaystay.

Cudurdaarrada qaarkood, saaxiib ma aqbalo, cadawguna wuuba kugu wiirsanayaa!

Alla qalbiyadu maxay kadeedmaan marka gacaltooyadoodu ay kala fogaato!

Waxa ay ku tusayaan in masaafada ugu dheer ifkuba ay tahay ta u dhexaysa laba qof oo maalin hal qof uun isku ahaa!

Alla weheshi fiicanidaa saaxiib; Kitaab Quraan ah, dhiganihii Madaariju Saalikiin ee Ibnul Qayim iyo tafsiirkii Ibnu Kasiir ayaad la saaxiibtay!

Waxa aad imminka akhriyaysaa hadalkii Rabbigaa ee ahaa:

"Qofka Ilaahay rumeeya qalbigiisa ayuu hanuuniyaa."

Alla samaa oo suubanaa!

Ka haqab beel (dhereg) saaxiib!

Ku kabkab aayadaha Rabbigaa daldaloollada aad qalbigaaga u geysatay!

Waxa suure ah in inta aad aayad Quraan ah akhrido ay laabta kuu geliso si aanu qofna awoodin in uu hab kuu siiyo!

Oo aad ugu tiirsato si aanay bakooradina awoodin in ay kuu tukubiso!

Oo ay kuu samir siiso qaab aanay odhaahina awoodayn in ay kuu samir siiso!

Oo ay niyadda kuugu dhisto qaab aanu hadalna karin in uu niyadda kuugu kaabo!

Quraankani waa laabgelin, bakoorad, samirsiis iyo niyad'dhis!

Marar badanna waxa uu baandhays (balastar) u noqdaa dhaawacyo aanay cidina arki karaynin!

Waxa aad ka akhriyaysaa buuggaas Madaarijka: "haddii uu qalbigu lababogleeyo oo werwer uu saaqo, arrinka keliya ee uu ku xasili karaa waa xuska Ilaahay uun!"

Alla Ibnul Qayim cajiibsanaayaa!

Bal day sida uu kuu soo gaadhsiinayo dhanbaallo dhanka Rabbigaa ka socda, si uu qalbigaaga u hagaajiyo, uuna kuugu gacan geliyo khariidaddii aad Rabbigaa ku gaadhi lahayd!

Haddii aad Rabbigaa gaadho, waxba kaa dhibi maayaan waayaha adduun wixii kugu seegay!

Waxa aad ka akhriyaysaa tafsiirka Ibnu Kasiir, hadalka uu Cabdillaahi Ibnu Mascuud ka soo werinayo nebiga ﷺ ee ah: "Ilaahay dheeraadkiisa (fadligiisa) wax ka weydiista, wuu jecel yahay Weynuhu in wax la weydiisto, cibaadadana waxa ugu door roon sugitaanka samatabaxa'e (farajka'e)!"

Markaasad arrimahaaga oo dhanba Ilaahay u talo saaranaysaa, aadna sida ay tahay u caabudaysaa adiga oo

ka naawilaya samatabax dhow in uu kugu mannaysanayo!

Waxa aad soo xasuusanaysaa adiga oo akhriyaya tafsiirkaas Ibnu Kasiir, sida ay barbaartii aqalka Arqam ku shiri jirtay ugu gureen meydadkii madaxyaweyntii Quraysheed goof Badar ku yaalla!

Markaasaad dhaadaysaa in Ilaahay agtiisa wax madhacaan ahi aanay ka jirin, waayuhuna ay wareegayaan, iyada oo Ilaahay uu qalbiga muuminka kadeedan u debcayo oo uu dabiibayo.

Adigana waan ku arkaa saaxiib in aad kadeedan tahay, ee samir!

Marka ay noqoto dhanka dadka, waxa kaaga filan odhaahdii Cumar Ibnu Khaddaab ee ahayd: "ka dheerow waxa ku dhibaya!"

Qofka aan kaa cafiyin gef kaa dhacay adiga oo in badan gefafkiisa u dhaafayay, ogow; in uu gefkaas kula sugayay si uu cudurdaar uga dhigto oo uu kaaga agab urursado (tago)!

Qofka aad u taagtay gacanta ee in uu ku qabto diiday, adiga oo weligaaba gacan hagar la'aaneed u fidinayay, waxa uu damacsanaa in aad markan sii deyso si uu kaaga hayaamo!

Ka ku dheeraada canaanashadaadu, waxa uu maagganaa in uu iska xayuubiyo denbiga uu galay ee uu dareemayo, adigana uu kuu xanbaariyo, si uu isugu qanciyo in uu yahay qof dulman oo laga gar daran yahay, oo uu u tago!

Waxba albaabadooda ha sii gargaraacin, hana fanan oo ha uga dhicin derbiga qof aan doonayn in aad soo gaadho!

Waxa bogaadin kuugu filan in aad isku dayday!

Imminka ka dib, tegitaanka tegitaan ku gud, illawga illaw ku gud, irridda lagaa xidhayna irrid aad xidhato ku gud!

Ku dheh: haddii aad hadda ka dib na aragtaanba annaga ayaa eedda leh!

Haddii aannu mar danbe gacantayada idiin soo fidinana nagaba gooya!

Nabaadiino saaxiib.

## 025 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa aad imminka la gunuusaysaa gubtahanyo aad naftaada canaananayso, sidii in aad tahay askari keligii ka soo hadhay hurintiisii, oo aadan kala garanayn in aad ku faraxdo maadaama aad nooshahay, iyo in aad murugooto, illeen qofku in uu waayo gacallayaashiisu waa geeri kale'e?!

Way dhacdaa saaxiib in waayaha adduun ay ina beddelaan, xataa qofku uu isagu isla yaabo sida uu isu geddiyay, ka hor inta aanay dadka kale la yaabin, isaga oo shanta dhabanka ku hayana uu isweydiiyo: "muxuu ahaa qofkan aan ii ekayni?!"

Noloshan adduun way qallafsan tahay saaxiib!

Sida ay u kadeedayso qofka waxa ay gaadhsiisaa heer uu dareemo in uu ku fadhiyo irbad caaradeed!

Maxay ku taraysaa weynida kawnkani, haddii ay adiga nafta isugu kaa keento noloshu?!

Isaga oo dayaysan (wareersan) ayuu dhaqaaqayaa marka uu kadeedmo, heer uu kala garan waayo dhanka uu u jeedo iyo dhanka uu ka jeedo!

Caasha ayaa nebiga ﷺ weydiisay, bal in ay soo martay maalin kaga xumayd maalinkii Uxud iyo in kale?

Waxa uu uga warramay maalinkii ay ku shiideen Daa'if.

Waxa uu yidhi: "waan dhaqaaqay uun aniga oo aan garanayn halka aan u socdo, waxana aan soo miiraabay aniga oo jooga Geeska Dawacyada (tuulo yar magaceed).

Waa nebigii Ilaahay qofka sidaas lihi, ee ka warran qof kalena, innaga oo dhammaanteenba isaga ka waabsan (sokayna)!

Waxa jira arrimo aanay maangalnimada iyo garaadku cudurdaar u samayn karaynin!

Waxa jirta murugo inaga koodh weyn!

Waxa jira dareenno aanay buuruhu qaadi karin, iyaga oo dhadhaab ka samaysan.

Sidee ayaynnu u xamili karnaa innaga oo laf iyo lud (hilib) ahi?!

Adiguna waadigaa imminka wareersan, mana jiro Gees Dawacooyin oo aad ku miiraabto, iyo saaxiib garabkaaga taagan oo hiil kuu muujiya midina!

Waa kugu keligaa, sidii Aadan nkh'e markii dhulka loo soo dejiyay iyada oo Xaawina ay ka fog tahay.

Alla kelinimo weynaa!

Muxuu qof keligii ka dhex qabanayaa meeraha sidan oo dhan u weyn, isaga oo ka soo baxay jannadiisii, gacalisadiisiina waayay?!

Hoos ayaad isula gurxamaysaa, oohin qadhaadh oo aadan abid ooyinna waad la ilmaynaysaa, adiga oo aan garanayn sababta aad u ooyayso?!

Ma in aad khajilsan tahay baa?!

Mise waa in ay ku xanuunjisay noloshan ku gelisay dagaalkan lafo–jebiska ahi?!

Mise waa qof in aad niyadda ka jebiso ay kaa la sahlanayd in aad adigu lafahaaga jebiso, oo aad haddana qalbiga ka jebisay?!

Haddana waadigaas go'aansaday in aad dibudejin u samayso naftaada, qalbigaaga dhibaatada qabana aad

kabkabato, Ilaahayna aad niyad'dhis, denbidhaaf iyo samir weydiisato!

Ilaahayow samirka noo adkee.

Nabaadiino saaxiib.

## 026 – Waan ku salaamay saaxiib

Haddii aad i weydiiso: "sababta uu waqtigu sidan oo dhan ugu midabbeeyo ee uu isugu gedgeddiyo, ee aad u mooddaba in aanu aaminaad iyo isku–hallayn lahayn?"

Waxa aan ku leeyahay: maalmuhu waa askar ka mid ah ciidanka Ilaahay saaxiib, dadkana uu meerto ugu kala gudgudbiyo, si uu uunkiisa u tuso in wax sida uu yahay ku waarayaa aanu jirin Ilaahay mooyaane!

Saaxiib, Fircoon wuu gabbood fali jiray oo waxa uu odhan jiray: "miyaanan anigu lahayn Masar, webiyadanina aanay aniga i hoos maraynin?!"

Ka dib Ilaahay ayaa waayaha soo wareejiyay oo biyihii hoos marayay isaga dusha ka mariyay!

Haddii aad arki lahayd sida uu Jibriil dhoobada afka ugaga awday, iyada oo uu arkayo cunuggii yaraa ee maalin madaxtooyadiisa ka dhex ooyayay, isaga oo doonaya naas uu jiqo!

Saaxiib; Namruud waxa uu odhan jiray: "anigu waxna waan nooleeyaa waxna waan dilaa!"

Ilaahay ayaa waayaha soo wareejiyay oo u soo diray kaneeco noloshiisii oo dhanba qarribtay, mana aanu xasili jirin ilaa ay madixiisa kabo ku garaacaan kuwii shalay isaga u sujuudayay!

Saaxiib; nebigu ﷺ Maka ayuu habeen mugdi ah ka baxay, ka dib markii ay Qurayshi qabiil walba ka soo kaxaysay hal nin, si ay hal mar u wada dilaan oo hadhow dhiiggiisa cid loo raaco loo waayo!

Ilaahay ayaa waayaha soo wareejiyay, oo nebigiisii Maka ku soo celiyay isaga oo furtay dharaar cad!

Saaxiib; haddii aad arki lahayd Bilaal Ibnu Rabaax oo bacaadka Maka ee raranka kulul ah uu Umaya Ibnu Khalaf duljiifiyay, waxa aad odhan lahayd, tolow; cadaabista noocaas ah cadaabi ma uga dambaynaysaa?!

Ka dib aad aragto Ilaahay oo waayaha soo wareejiyay, labadii kooxoodna Beder ay isku muteen, Bilaalna uu seeftiisii haanka ugu riday Umaya, waxa aad ogaan lahayd murtida Rabbaaniga ah ee ku jirta gedgeddoonka waayaha!

Saaxiib; waayuhu waa kuwa noocaas ah, Ilaahii uumay ayaana abuurtiisa dhex gedgeddiyay.

Mar waa bukaan marna waa bedqab.

Maalin waa xoolo buuxa maalinna waa xantiirnimo (faro–madhnaan) caydh ah.

Dharaar waa badhaadhe farxadeed dharaar kalena waa balanbal murugeed.

Waa si aanu ka awoodda lihina isu qaadan, ka taagta daranina u quusan!

Waa si aanu hantiiluhu u tacaddiyin, faqiirkuna aanu u faquuqmin oo aanu u niyad jabin!

Waxa uu Ilaahay ku ganayaa dadka leebabka qadderkiisa, ee ku dedaal mar kastaba in aad gabooyahaas (ganahaas) la jirto, waad badbaadaysaaye!

Nabaadiino saaxiib.

# 027 – Waan ku salaamay saaxiib

Haddii aad i weydiiso sida uu ku yimaaddo jacaylku?

Waxa aan ku leeyahay: ma laha hal jid oo uu ku yimaaddo, se marka uu yimaaddo, waa shaki la'aan in aad garan doonto!

Mararka qaar ayuu ku yimaaddaa aragtida koowaad, oo uu kugu noqdaa sidii hillaac bilig yidhi oo kaaga tegay saamayn kaa dhigtay tabcaan aan awoodin in uu waxnaba iska caabbiyo.

Waa ka ay ku sheegaan jacaylka aragtida koowaad saaxiib.

In kasta oo aan aaminsanahay jiritaankiisa, haddana wali ma aanan soo tijaabinin, oo aniga iyo jacayl qiso kale ayaa na dhex taalla!

Mararka qaar waxa uu ku yimaaddaa jacaylku wada dhaqanka wanaagsan, habdhaqan suubban oo joogto ah iyo muddo dheer oo la wada qaato, inta jacaylka noocaas ah la isjecel yahayna waxa ka badan inta la isla dhacsan yahay.

Ku darso oo saaxiib, ka–helitaanka iyo isla–dhicitaanku marar badan ayay yimaaddaan, halka jacaylku uu hal mar yimaaddo, ee yaanay labadaasi iskaga kaa qasmin.

Aniga aragtidayda jacaylka ku aaddan marka ay noqoto, waa nooca jacaylka ah ee kuu imanaya isaga oo saaxiibtinimo ah, ee unug unugga jidhkaaga u degaya adiga oo aan dareensanayn, saamayntiisuna ay ku dhex

jibaaxayso, ee aad ku baraarugayso goor ay xeedho iyo fandhaal kala dhaceen oo aanu wax–ka–qabasho lahayn!

Waxaba uu dhankaas ka shaabbahaa xanuunnada xunxun, ee marka shaybaadhka lagu ogaadaa ay tahay goor ay boqortooyada jidhka iyagu ka talinayaan, dawo iyo dabiibna aan waxba lagaga dheefaynin!

Waxa ay ku kala taggan yihiin ee aadka muhimka u ahi, waa in uu jacaylku yahay xanuun macaan oo aadan doonayninba in aad ka bogsooto!

Nabaadiino saaxiib.

# 028 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa aad iiga cabanaysaa niyadxumo ku haleeshay, dhaawac qalbiga ku dhanbalay iyo taagdarro nafeed oo ku saaqday, waxa aadna i weydiinaysaa: "ma cadho Ilaahay baa?!"

Waxa aan ku leeyahay: maya'e wallaahay waa astaamaha jacaylkiisa, oo Ilaahay haddii uu qof jeclaado wuu imtixaamaa, jarribiddaas iyo imtixaankaasina kama hadho qofka muuminka ah, ilaa uu gaadho heer uu adduunka dul'lugeeyo isaga oo denbi gebi ahaanba ka madhan!

Waa imtixaan kuu sababaya in aad Ilaahay ula jihaysato qalbigaaga iyo xubnahaagaba, oo kuu dhaama nimco ku lumisa oo u–jihaysiga Rabbigaa kaa maahisa.

Laga yaabaa in uu Ilaahay doonay in uu wax ku siiyo oo uu wax kuu diiday, marka uu kuu furo fahanka in wax laguu diidana, garasho aadan dabadeed sagsaagayn ayuu kugu mannaystay!

Bal u fiirso siirooyinka dadkii wanaagsanaa saaxiib, waxa aad fahmaysaa in imtixaanku uu ahaa carbinta ka horraysa xulashada Ilaahay uu ku soo dhoweysto addoomihiisa wanaagsan.

Yacquub waayitaanka wiilkiisa sidii uu ugu ooyayay ayuu ku indho beelay, Ilaahayna kama aanu mashquulsanayn waxaas haleelay, ee dhan kale ayuu Yuusuf boqor kaga dhigayay!

Ha degdegsan waqtiga, saacadaha habeenka ugu madoobi waa kuwa ka soo yara horreeya waaberiga'e!

Muuse nkh'e isaga oo baqaya oo baalladaymoonaya ayuu ka baxay Masar, ee ha u fiirfiirsan qadhaadhka imtixaanka, macaansi uu maanku ku dakeeyo ayaa ka dambaynaya'e.

Ma baqdin ayay noqonaysaaba ta ay yeedhmada Rabbi ee maamuuska weyni ka danbaysaa: "waxa aan ahay Ilaahay"?!

Ka dibna qalbiga ayuu ugu dhayay Ilaahay hadalka ahaa:

(وَأَنَا اخْتَرْتُكَ) طه ١٣.

"Aniga ayaa ku doortay!"

Saaxiib; Sakariye nkh'e miinshaar ayaa lagu kala gooyay!

Mudanihii weynaa ee Yaxye nkh'e madaxiisa naag jidhkeeda ka ganacsata ayaa meher looga dhigay!

Yoonisna nkh'e nibiriga calooshiisa ayuu muddo ku negaa!

Kun sano ku dhowaad ayuu Nuux nkh'e qoomkiisa u baaqayay oo in faro–ku–tiris ahi uun ay ka rumaysay!

Guyaal daba dheeraaday ayuu Ayuub nkh'e cudur la daalaa dhacayay!

Markaasaad adiguna niyad xumaanaysaa oo aad imtixaanka raagsanaysaa?!

Dhaymaha qalbigu wuu soo dhowaaday saaxiib, daruur naruureed ayaa soo curanaysa idamka Alle, murugtaas aad la tiicaysana waxa ka hadhi doona uun war iyo sheeko ku xasuusiya, in qofka Ilaahay la jira, uu Ilaahayna isaga la jiro!

Nabaadiino saaxiib.

# 029 – Waan ku salaamay saaxiib

Waadigaa haddana mar kale diifta iyo diihaalku ay kaa muuqdaan ee aadan sarajoogga xejinayn, se waa in aad waajibkaaga gudataa oo hawshaada aad ka soo dhalaashaa, askarta loo ma oggola in ay yara nastaan xilliga dagaalka, si kasta oo ay daalka iyo diihaalku u taabtaan!

Isxeji saaxiib, marka aynnu daalno ma joojinno ee marka aynu hawsha dhammaynno ayaynnu nasanaa, waxana jira hawlo kala dhataalan iyo goldaloolooyin bannaan oo uu Weynuhu kuu wakiishay in aad ilaalo ka noqotid, ee goldaloolooyinkaas bannaan gufee xataa haddii aad hilibkaaga ku gufeyneyso, iskana jir in Islaamka dhankaaga looga soo dhaco!

Waa muran–ma–doon in aad garanayso halka aan ka soo dheegtay taladaydan.

Adiga ayaa maalin ii sheegay adiga oo niyadda ii kaabaya, maalmuhuna waa meerto oo bawdyo rag maalinba mid ayaa qaawan, niyad–isu–dhiskuna waa sida dhaawacyada oo waxa uu leeyahay qisaas, ee niyad'dhiskaygan kaagii ayaan iskaga gudayaa ee isu tuur.

Waxa aad iiga sheekaysay Saalim, Abu Xudayfa addoonkiisii uu xoreeyay ee debecsanaa, dunta wanaagsanaa ee Quraankana xifdisanaa, in loo xil saaray in dagaalka dhan laga tuhun qabay aan isaga la soo dhaafin ee uu awdo, waxana looga baqay in aanu lahayn adkaysiga dagaalyahannada oo kale, markaasuu yidhi: "waxa aan noqonayaa qofka ugu liita ee Quraanka xifdiya haddii dhankayga la idiinka soo dhaco!"

Waa in aad hore u socotaa xataa adiga oo dhiig baxaya saaxiib, muhim ma aha qaabka aad ujeedka u gaadhaysaa, muhimna ma aha in aad gaadho adiga oo dhiibsan ama dhiig baxaya, ee muhimaddu waa in aad gaadhaa, gaadhitaanka higsiyadu waxa uu samirsiis ka noqdaa wixii loo soo huray, ruuxdana waxa uu ka dabiibaa wixii hantaaqo soo gaadhay'e.

Xataa haddii aadan gaadhin, samirsiis ha kuu noqoto in aad Ilaahay dhankiisa u hayaantay adiga oo dhabbaha xaqa ah ku taagan oo ammaanada laguu xil saaray gudanaya, taas lafteeduna ay tahay gaadhitaanka higsiga!

Waxa la ina weydiinayaa waa sababaha saaxiib ee ma aha natiijooyinka, qiyaamahana waxa la soo xaadirinayaa nebi aanu hal qofna rumaynin!

Bal suurayso dhacdadaas, samirsiisna ka dhigo, waa nebi dhan oo aanu hal qofna ku qancin dacwaddiisii!

Waxa aad yara maraysaa tijaabo xoogaa qadhaadh oo aad ka dhammaanayso adiga oo bedqaba idam Alle, ka dibna inta aad raadadkii nabarrada eegto oo aad gacanta marmariso, aad dhoollo caddaynayso adiga oo dareensan naxariista Rabbiga aad u eeratay ee kaaga filnaaday wixii uu kugu imtixaamay!

Nabaadiino saaxiib.

# 030 – Waan ku salaamay saaxiib

Ilaahay ayaa ka marag ah in aadan agtayda dhayal ka ahayn, ayna i dhibtay in erayadaydii ay ku dhibeen, xataa haddii aanay kas iyo ulakac iga ahayn.

Sidaas ayaan uga xanuunsanayaa xanuunka aan kuu horseedo adiga, in ka badan ka aad adigu aniga ii sababto!

Dhammaan loollannadii qadhaadhaa ee ina dhexmaray kama aanan raadinayn guul, marka arrintu ay dhankaaga tahay, guusha iyo jabku waa isugu kay mid, oo heerkaas oo dhan ayaad waligaaba agtayda ka joogtay.

Si wacan ayaad u garanaysaa sida aad ii durtay xataa haddii aanay kas iyo ulakac kaa ahayn, amaba aadan rabitaankaaga ku soconayn ee lagaa xayuubiyay, ee ha illaawin uun in aan falka lagu halbeegin falcelinta ka dhalata!

Intaas oo dhan ka dib, haddana waanigaa kuu imi si aan niyadda kuugu kaabo, oo in lafahayga dhaadheer aad middood jebiso ayaa igala fudud, in aan qalbigaaga jebiyo!

Hore miyaad u aragtay saaxiib qof uu kansar googooyay oo aayar uga bogsaday sidii hargab helay oo kale?!

Way dhacdaa in uu qofku lababogleeyaa saaxiib, neefka la gawracayba wuu raftaa oo dhiiggiisa wuu kugu duulduuliyaa oo daw kale uma bannaana'e!

Ma aha in loo qabto qofka qalbigiisa uu folkaanuhu ka dhacayaa haddii uu yara neefsado wax haddii uu qarsan lahaa isaga oo dhanba gubi lahaa!

Oo muxuuba ka cadhoonayaa qofka folkaanaha shiday haddii ay dhimbiilihiisu soo gaadhaan?!

Quraaraddu saaxiib wax ma dhaawacdo haddii aan la jebinin!

Saaxiib; maalinna gacan taageero kuuguma aanan soo fidin in aan kuu dhibray awgeed, garabkaaga iyo gaashaankagana uma aanan noqon oo isku–hallayn iiguma aadan tiirsanin sadaqo aan kugu sadaqaysatay awgeed, ee waligayba wax qalbigayga ka soo go'ay ayaan kuu la iman jiray, sida aan haddaba erayadan qalbigayga kaaga soo qorayo.

Naftayda waan ka adkaa oo waxa aan waayo adduun dhex dabbaalanayo waan xamilaa, si aadan adiga oo murugaysan u seexanin!

Saaxiib; way dhacdaa in qofka ay arrimo door ahi hal mar ku kulmaan, oo ka uu jecel yahay aanu hanan, saaxiib uu isku halleeyo aanu haysan, cadawgiisuna aanu moogganaan, markaasuu noqdaa keli goonni–socod ah oo ay tahay in uu caalamka oo dhan keligii waajaho, isaga oo baadhaya irriddii uu meerahan dhulka kaga bixi lahaa se aanu helaynin!

Nabaadiino saaxiib.

# 031 – Waan ku salaamay saaxiib

Haddii aad i weydiiso: "maxay dhirbaaxadu markan aadka ugaga xanuunka kululayd dhirbaaxooyinkii aan uga bartay adduunyadu in ay ila dhacdo?!"

Waxa aan kuugu jawaabayaa: laga yaabaa waxa sidaas oo dhan kuu xanuunjiyay in aanay ahayn dhirbaaxada, ee ay tahay gacanta ku dhirbaaxday!

Way ku adkaataa qofka in uu aqbalo in ay dhirbaaxdo gacantii uu waligiiba soo dhunkanayay!

Ama waxa laga yaabaa in ay tahay xilliga ay dhirbaaxadaasi kugu soo aadday!

Mararka qaar qofka waxa mara duufaan oo aan haddana ciddi uskaggeed in le'eg liicinin, mararka qaarna laydha neecawda ah ayaa legedda!

Ama waxa laga yaabaa in ay tahay murugooyinka oo kaa tan batay saaxiib, marka uu qofku murugoodo, murugooyinkiisii hore ee uu nabnabayay ayaa ku soo wada kaca, oo waxaba aad mooddaa in aanay murugadaas qudhihi ku filnayn!

Dhaawacba dhaawac u dhigma ayuu u baaqaa saaxiib, niyadjabkuna waxa uu soo jiitaa niyadjab la mid ah.

Sidaas awgeed; ma aadan waajihin hal niyadjab uun, ee hungooyinkaagii nolosha oo dhan ayaad waajahaysay, mana aadan ogayn!

Ama laga yaabaa in ay tahay qurbaha iyo daltabyada saaxiib.

Waxa ugu badan ee qofka wiiqaa waa in uu keli noqdo.

Waxa uu dareemayaa in uu koonka oo dhammi dhinac ka safan yahay, isaguna uu dhinaca kale yahay oo ay tahay in uu waajaho, isaguna uu ka maagayo (aanu doonayn) in uu waajaho, oo uu baallo daymoonayo, isaga oo ka fiirfiirsanaya koonkan weyn irrid uu ka baxo oo uu sii xidho marka uu dhaafo!

Nabaadiino saaxiib.

# 032 – Waan ku salaamay saaxiib

Haddii aad igu tidhaahdo: "waan ku hungoobay saaxiibaday!"

Waxa aan ku leeyahay: saaxiibada laguma hungoobo, ee dhibta jirtaa waa in aad magaca saaxiib ugu yeedhaysay qof kasta oo ay aqoon guud kaa la dhexayso!

Goor iyo goob walba, dadku waa dadkii uun saaxiib.

Miyaadan akhriyin Saxiixul Bukhaariga oo aadan ka baran sida uu nebigu ﷺ u yidhi: "dadku waa sidii kadin (100) geel ah, oo ay adag tahay in aad ka weydo mid haldoor ah!"

Reer–miyiga ayaa hore i noo la taliyay markii ay yidhaahdeen, dadka aad aqoonta guud isu leedihiin badi, saaxiibadana yaree, ee innaga ayaa wax ku qaadan weynay!

Baro sidii aad isaga fududayn lahayd saaxiib, in badan oo dadka ka mid ahi waa rar saayid ah oo culays uun kugu biirinaya'e!

Baro sida wax loo xusho.

Inta xulka ah miidho oo isku xeer.

Dadka waxa kala hufa oo kala haadiya mawqifyada iyo dhacdooyinka.

Qofka gacantiisa kaaga tiray illintu, lama mid aha ka kugu yidhi ha ooyin!

Ka kuu yimi xilligii aad ugu niyadda xumayd, ee inta uu gacanta si xooggan kuu qabtay kugu yidhi: "aniga ayaa kula jira!" Lama mid aha ka kugu yidhi: "haddii aad wax u baahato aniga ii sheeg!"

Qofka marka uu xaalkaaga ku weydiiyo ee aad u sheegto in aad fiican tahay, ka fahma dhawaqa codkaaga iyo murugta indhahaaga in aadan fiicnayni, lama mid aha qofka kaa rumaysta ee u maleeya in aad fiican tahay!

Nabaadiino saaxiib.

# 033 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa aad i weydiinaysaa: "sidee tahay?"

Alla su'aashaasi qadhaadhaa oo kadeed badanaa!

Caalamka igu xeerani waa buuq iyo sawaxan miidhan, aniguna keli ayaan ahay!

Ma garanayo si aan kuugu sharraxo isburintaas, ee i rumayso, mararka qaar ayuu qofku noqdaa keligii, isaga oo caalam wada buuq iyo saxmad ah dhex jooga!

Mararka qaar ayaad la mid noqonaysaa sida waraabe–u–taagga quluxquluxda ah ee sanqadha ee beerta shinbiraha lagaga ilaaliyo, oo aad hawshaada si buuxda u gudanaysaa, shinbirahana aad bajinaysaa oo aanay ka soo ag dhowaanayn maxsuulka beerta, se aad gudaha ka dareemaysaa boholyow iyo kelinimo, oo aad jeclaysanaysaa in uu jiri lahaa shinbir dhiirran oo aan kaa biqin ee fahma in aadan hawshan aad hayso dooran, oo ku bariidiya!

Waxa dhacda saaxiib in diyaaradiba ay diyaarad kuu dhiibto, madaarba uu madaar kuu gudbiyo, haddana aad dareento in aadan haba yaraato'e safrin!

I rumayso saaxiib; si kasta oo uu qofku u socdaalo, waxa jirta meel aanay niyaddiisu marnaba ka socdaalin ee ay ku dhex xabbisan tahay!

Saaxiib; waan ka daalay waxyaabaha aniga i doortay, waxana aan u xiisay waxyaabaha aan anigu doortay.

Waxa aan u xiisay dhunkasho aan ku hubsado gacanta hooyaday,

Xaas aan dhudhumadayda u kala furo oo aan ku idhaahdo kaalay oo laabta soo gal,

Dareenka ammaanka ah ee ay faraha xaaskaagu ku siinayaan marka ay timahaaga dhex marmarinayso!

Saaxiib; ma garanayo si aan kuugu sheego, in raggu mar kasta oo ay kuwo halis badan sii noqdaan, ay sidoo kale aad u dhibir samaadaan oo ay u debecsanaadaan!

I rumayso; waa tabtaas aan kuugu sheegay!

Waxa ay yidhaahdeen saaxiib innaga horteen: "waxa aannu raacaynaa dhabbo na loo qoray, qofkii dhabbo loo xarriiqaana wuu raacaa."

Aniguna waxa aan raacayaa jid la ii jeexay, oo ii qornaa.

Kama laabanayo, mana daciifayo oo kama labaclabaclaynayo.

Ma ihi dadka nooca qaddiyad la'aan noolaada.

Se waxa aan ahay keli xiise weyn qaba!

Nabaadiino saaxiib.

# 034 – Waan ku salaamay saaxiib

Waan ogahay in aad daallan tahay saaxiib, inta ku haysataana ay kaa badan tahay, culays kalena aanad awoodi karayn in lagu saaro, oo aad la rafaadsan tahay hawlaha hore kuu haystay!

Waan ogahay in ay suure tahay in aad hoos isugula shawrtay: “maxaa loo eedaynayaa qofka daalaa haddii uu faraha ka qaado hawshaas daalisay?”

Maya saaxiib!

Qacda koowaad ee aad jallaafo la kulantaba in aad hawsha aad ku fooggan tahay faraha ka qaadaa waa ikhtiyaarkaaga ee ma aha wax ay dani ku badday, se haddii adiga oo dhabbaha ku kala badhan oo badigeedii soo gutay aad dhexda kaga hadho, waa denbi!

Bal yara hako, oo dib u xasuuso hadalkii aynnu hore u wadaagnay.

Yacnii; hadalkii aad hore iigu tidhi: “Ilaahay laanna kama soo saaro midho aanay culayskooda xejin karaynin!”

Ilaahay askartiisa ka ugu daacadsan, ayuu u igmadaa dagaalladiisa, dhiig aad u badanina wuu u daatay sidii uu calanka diintani u babban lahaa, ee qofkii doonaya in uu tusaale uu tilmaansado ka dhigtaa, ha ka dhigto taas oo ha isku samir siiyo, in qofka u dhintaa uu fitnada ka magan galay!

Inta aan ogahay *ka badan ayaad og tahay sababta ay* cibaadada dagaalku ula mid tahay sida hijradii nebiga ﷺ.

Oo waad og tahay in ay ku bilaabantay qariibnimo aan la garanayn, ayna ku laabatay qariibnimadii, ee ha ka qaadin faraha hawsha aad siddo.

Ama laga yaabaa in aadan naftaada waxyaabahaas oo dhan marnaba kula sheekaysanin, ee aan anigu doonayay in aan naftayda u caqli celiyo oo aan jidka qumman ku sugo, hadalkii aan u sheegayayna aan mid adiga kaa yimi uga dhigay.

Si wacan ayaan kuu aqaanaa.

Waan aqaanaa sida aad mar walba ugu habboonaato malaha wanaagsan ee lagaa fisho, sida aad u sii awoodaysato marka aannu ku nidhaahno waad taag darraynaysaa, iyo sida aad u debecsanaato marka aannu kuu malaynno in aad aar goosanayso!

Alla bal maan isu–dheellitirkaagaas wax ka ag dhow lahaado!

Intaas oo dhan ka dib, ha igaga eed sheegan in aanan garabkaaga ahayn markii aad tebaysay!

Saaxiib; qofku waa walaalihii uun, oo xiniinyuhu kuwa kugu jira ma aha ee waa kuwa lagula garab joogo,

Waa kaas qalbigaygii aan ku hoos dhigay, ee kabo aad xidhato ka dhigo waa kuu diyaar'e.

Kanina waa garabkaygii ee adiga oo ku uur san ku tiirso.

Nabaadiino saaxiib.

## 035 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa aad i weydiinaysaa: sababta aan u canaan waayay markan sidii caadada ii ahayd?

Waxa aan ku leeyahay: sababta aan u canaananayay markii hore waxa ay ahayd, in aan doonayay in aan sii joogo!

Se imminka way iga soo dhammaatay oo in aan iska tago ayaan rabaa, marka aan tegayana inta aan irridda si deggan u sii xidho ayaan dhaqaaqaa!

Mararka qaar ayuu qofku qaboobaa marka ay gubashadu ka tan badato!

Canaanashadu saaxiib dhaawaca ayay nadiifisaa, mana habboona in aad tosho dhaawacaaga adiga oo aan nadiifin, se markan sidii aynnu u barannay xaalku wuu ka geddisan yahay, oo dhaawacyada qaar aan la dhayi karin ayaa jira, oo mararka qaar ayay dhakhaatiirtu gooyaanba xubinka uu dhaawacaasi soo gaadhay, si ay u ilaaliyaan jidhka intiisa kale!

Isla tallaabadaas ayaan hadda qaadayaa, oo waxa aan kabkabanayaa inta ii bed qabta, horena waan u sii soconayaa!

Kama soo horjeedo in dareenka dadka la ilaaliyo, laakiin waxa shardi ah in aanu waxa lagu dhawrayaa noqon qalbi–jabkayga iyo ku–ciyaarista dareennadayda!

Kamana soo horjeedo in dadka niyadda loo dhiso, laakiin waxa shardi ah in aanu waxa lagu dhawrayaa noqon aniga niyad–jabkayga!

Hore ayaan ugu sheegay, in haddii ayba cid ila tartansiiyaan aanay aniga i dooranin!

Karaamo–dil ayay igu tahay aniga in cid la ila tartansiiyaa xataa haddii aniga la i doorto, oo anigu cid iskuma dhereriyo, cidna la iguma dhereriyo!

Haddana waxa jira waxaasba wax ka sii xun saaxiib, oo ah in ay ciddii kale doorteen!

Maxaan u sii joogaa ee markaas ii hadhay?!

Canaantaydu maxay taraysaa markan!

Qofka jabaa waxba ma canaanto, aniguna waan jabay!

Saaxiib; waxa aan leeyahay 360 lafood iyo hal qalbi, lafahaygaas oo dhan way ii nabad geliyeen, laakiin qalbigaygii ayay jebiyeen!

Bal may lafahayga bugaaxaan (burburiyaan) oo ay qalbiga ii daayaan aan sii jeclaado'e!

Nabaadiino saaxiib.

## 036 – Waan ku salaamay saaxiib

Ha ka xumaanin in ay kaa tageen xilligii aad ugu baahida badnayd garab–jooggooda.

I rumayso; mar kasta oo hungadu ay goor hore inala kulanto, ka–soo–kabashadeeda ayaa sahlanaata.

Haddii adiga oo kala–badhka maraya aad hungawdo, aad ayay u xanuun badan tahay.

Haddii se aad kama–danbaysta la kulanto dhabarjabka, waa dhimasho xataa haddiiba aanay naftu kaa bixin!

Saaxiib; ha iscanaanan, sababtana adigu ha iska raadin, khaayinku si uu dhabarka kaaga toogto uma baahanayo sabab, ee asalkii horeba khiyaamada wuu damacsanaa, fursad ku habboon ayuuna la sugayay, waana kaas imminka helay!

Marnaba ha isweydiin sababta ay isu beddeleen, asalkii horeba sidaas ayay ahaayeen, waayuhuna dadka ma beddelaan, ee xaqiiqadooda ayay daah feydaan'e!

Hore ayaa loo yidhi: agabka ugu mudan ee beenta kashifaa waa ayaamaha!

Waa kuwaas imminka indhashareerkii (niqaabkii) feyday, wejiyadii dugaaggana xaqiiqadoodii ay muuqatay!

Saaxiib; bal dhan kale iska taag.

*Markii ay kaa tageen waxa ay ku bareen sidii aad* keligaa u dagaallami lahayd ee aad u badbaadi lahayd.

Sidii aad Ilaahay ugu tiirsan lahayd, gacantaadana aad ugu ciil bixi lahayd!

I rumayso; ma aadan khasaarin, ee waxa aad u malaynaysay uun in ay kuu yihiin magangelinta aad u eeranayso, halka ay ahaayeen waraabe–u–taag aan waxba kuu taraynin.

Saaxiib; hungo kasta oo dadka kaaga timaaddaa Ilaahay ayay in badan kuu dhoweyneysaa.

Waxa aad ka korodhsanaysaa yaqiin ah, in uu yahay cidda qudha ee aad ammaanka ka helayso.

Dulqaado, is'adkee oo hore u soco.

Akhri Quraanka, goldaloolooyinkaagana adkee, kuwii kaa horreeyayna ku waxqaado oo isku samir sii.

Haddii ceelka murugada gunta laguu dhigay, Yuusufba hore ayay walaalihii ugu rideen!

Oy!

Ceeb ma aha in aad oydaa saaxiib.

Aadame ayaynnu nahay, oohintana raaxo iyo xasillooni ayaynnu ka helnaa, hortaana Yacquubba nkh'e wuu soo ooyay, haddana dadka garab kama aanu doonanin, ee murugadiisa iyo waxa haleelay Ilaahay ayuu uga dacwooday.

Maalmaha adagi way tegayaan saaxiib.

Xasuuso maalinkii ay Maryan ku calaacalaysay: "alla hoogaye bal maan beri hore dhinto!"

Ma aanay ogeyn in ay dhashay nebi go'aan–adkayaasha (ulul casmiga) ka mid ah!

Laga yaabee waxa hadda kaa murugaysiinayaa in uu noqdo wixii ugu wanaagsanaa ee noloshaada soo maray!

Saaxiib; geedku kama jibaado (taaho) faashka uu xaabooluhu ku garaacayo, ee isaga oo qotoma ayuu dusha ka daawadaa!

Iska jir in aad jibaaddo, qofka jidibka (gudinta) kugu garaacayaa wuu ku raaxaysanayaa taahaagaas'e, ee iska jir in aad maqashiiso wax farxad gelinaya!

Saaxiib; geedku uma ooyo laantiisa ay dabayshu jebisay, ee dhaawiciisa ayuu dhaydaa, gugana wuu sugaa si uu laan kale oo midho dhasha ula baxo!

Noloshuna waa sidaas.

Waxa aad khasaarto mahuraan ma aha in aad dib u soo ceshato, ee waxa aad helaysaaba wax ka sii wanaagsan!

Ee dhaawacaaga dhayo,
Gu'gaaga sug,
Laan cusubna la soo bax,
Si kuu qalantana midhadhal u yeelo!

Nabaadiino saaxiib.

# 037 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa aad i weydiinaysaa sababta uu Ilaahay ii siin waayay wixii aan ka baryay?

Waxa aan ku leeyahay: dhakhtarku inama siiyo dawada aynnu doonaynno, ee waxa uu ina siiyaa dawada aynnu u baahan nahay!

Laga yaabee in aad Ilaahay ka baryayso wax ay dhibi kuugu jirto!

Waxa aad wax ku eegaysaa aragtidaada aadamanimo ee gaaban, Ilaahayna waxa uu wax ku kala debberayaa cilmigiisa dhammayska tiran.

Saaxiib; Ilmaha yari haddii uu arko kiniinka midabada kala duduwan leh, waalidkiina uu u diido, waxa uu Ilmuhu u arkayaa wax uu u baahnaa in la iska hortaagay, waalidkuna way garanayaan in diidmadaasi ay tahay deeq jaad kale ah!

Sidaas ayuu Ilaahay wax ugu debberaa naxariistiisa, ee ka edebso!

Amaba laga yaabee in uu Ilaahay doonay in uu ku siiyo waxa aad ka dalbatay, ee aan waqitigiisii la gaadhin uun, wax waliba in xilliga ku habboon ay yimaaddaanna waa qayb murtida Rabbi ka mid ah oo aadan arkaynin.

Saaxiib; bal akhri

(وَلَمَّا بَلَغَ أَشُدَّهُ وَاسْتَوَىٰ آتَيْنَاهُ حُكْمًا وَعِلْمًا) القصص ١٤.

"Markii uu gaadhay [Muuse] hanaqaadnimada buuxda, ee uu gaadhay markii uu caqligiisu buuxsamay, ayaannu siinay fahan iyo aqoon."

Waxa jira waxyaabo badan oo ay tahay in aad u bislaato si aad u ilaashato marka lagu siiyo!

Saaxiib; haddii uu Ilaahay nebi Yuusuf markii koowaad ee xabsiga la dhigayba uu ka badbaadin lahaa, ma aanu gaadheen madaxnimada uu hantay.

Waxa uu ku jiray Yuusuf nkh'e xabsiga, se Ilaahay ayaa waayaha u diyaarinayay oo arrimihiisa u debberayay, waxana uu u diyaarinayay sababihii uu deeqdaas weyn ku heli lahaa.

Saaxiib; tobankii sano ee uu Muuse nkh'e ku qaatay Madyan kama aanay dayacmin, ee si uu Masar u yimaaddo waxa ay ahayd in ay duruufuhu isugu toosaan, isaguna uu si wanaagsan ugu soo bislaado, xilka uu qaadi doonaa aad ayuu u cuslaa, dibdhiggiisaasina waxa uu ahaa bislayn iyo diyaarin!

Saaxiib; Muslimiintu waxa ay damceen in ay hubkooda qaataan oo ay Maka isku difaacaan, dulmigana ay iska dhiciyaan, balse in dagaalka loo idmo waxa dib loogu dhigay hijradii karaamaysnayd ka dib!

Ilaahii hijrada ka dib u hiiliyay horeba iyaga oo Maka jooga wuu u hiilin karayay, ee Ilaahay waxa uu doonayay in uu marka hore tarbiyadeeyo, oo hubka aanay caqiidadu ka danbayni, jidka qumman dhakhso ayuu uga leexdaa, Ilaahayna waxa uu la doonayay in hubka loo qaato uun keliya koruqaadista kelmaddiisa, ee aan loo qaadan ka–aarsiga cadawga iyo in nafta si gaar ah loogu hiiliyo midna.

Saaxiib; qisooyinkoodaa cibro iyo waaya'aragnimo ayaa ka buuxda ee ku waxqaado oo ku waayo arag!

Haddii waxaas aad doontay laguuba wada diido, waa kuu naxariis.

Haddii lagu siiyo murti ayaa ku jirta.

Haddii ay soo dibdhacdana, xilligeedii ayaan wali la gaadhin!

Nabaadiino saaxiib.

# 038 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa aan xalay ka akhriyay buugga Taariikhda Dimishiq ee Ibnu Casaakir, in uu yidhi Suhayl oo ahaa Xasm walaalkii:

Waxa aan riyo ku arkay Maalik Ibnu Diinaar dhimashadiisii ka dib, markaasaan ku idhi: "Abu Yaxyow; maxaad kala kulantay Rabbigaa?!

Waxa uu igu yidhi: "waxa aan kala kulmay denbiyo aad u badan oo uu igaga tirtiray male wanaagsan oo aan Ilaahay ka haystay!"

Saaxiib; malaha Ilaahay aad ka leedahay wanaaji, ma jiro wax ka wanaagsan malahaas suuban ee aad Ilaahay ka haysato oo uu qalbigaagu qaadaaye, qalbigaaga malahaasi ha ka buuxo.

Yaqiinso in Allaha deeq–badanaha ahi haddii aad hantisiiso qalbigaaga uu ku cafiyayo.

Marka kafantaada laguugu lebbiso, qabrigaagana ciidda lagu rogo, waxa aad ku jirtaa gacanta Rabbigii aad isaga u sujuudi jirtay.

Deeq–badanihii aad dartii wax u sadaqaysan jirtay.

Deeq–badanihii aad dartii dadka ugu debecsanayd adiga oo doonaya in uu isaguna adiga kuu debco.

Deeq–badanihii aad dartii dadka niyadda ugu dhisi jirtay adiga oo doonaya in uu niyaddaada dhiso adigana.

Deeq–badanihii aad arrimahaas oo dhan isaga kaga cabsan jirtay, qofka ka cabsadaana wuu nabad galay... wuu nabad galay saaxiib.

Hadda lafteeda waxa aad ku jirtaa gacanta Ilaahay, ee malaha aad ka leedahay Rabbigaa wanaaji!

Saaxiib; muuminku haddii uu Ilaahay u laabto, waxa uu la mid noqdaa sida qof safar ku maqnaa oo ehelkiisii u soo laabtay, ee malaha wanaagsan ee aad Rabbigaa ka leedahay mar kastaba kaas ha ahaado, Ilaahay wuu ka naxariis badan yahay in uu cadaabo qalbi ay isaga maxabadiisu ka buuxsantay'e.

Aadamahaba qofka gobta ahi ma dhibo dadka jecel, ee bal ka warran Ilaahayna?!

Saaxiib; marnaba ha ka shakiyin in xilliga su'aasha uu Ilaahay kugu sugi doono, si hufanna aad ugu jawaabi doonto: "Ilaahaygu waa Rabbigay, diintayduna waa Islaam, nebigayga iyo rasuulkayguna waa Maxamed!

Qalbigu waxa uu ku dhawaaqaa wixii laga buuxiyay, weelkana waxa laga shubaa wixii ku jiray uun, Ilaahay wuu ka deeqtoon yahay in uu labaclabacleeyo qalbi isaga laga buuxiyay!

Saaxiib; marnaba ha ka shakiyin in aad kitaabkaaga midigta ka qaadanayso, ehelkaaga iyo dadka aad jeceshahayna aad u imanayso adiga oo ku leh: "waa kan kitaabkaygii ee akhriya!

Kitaabkaas laga buuxiyay salaadda, soonta, sadaqadda, istiqfaarta iyo niyad'dhiska dadka kale, Ilaahay qofka leh midigta ayuu uga dhiibayaa, ee malaha aad Rabbigaa ka leedahay wanaaji.

Saaxiib; marnaba ha ka shakiyin in aad jidka siraad si fudud ku dhaafayso xitaa adiga oo denbiyo ku soo dhacay.

Miyaad Illawday mar kasta oo aad dambaabtaba qoomamadii ka danbaysay ee aad ka ciishoonaysay?

Miyaad illawday istiqfaartii aad Rabbigaa gacmaha u hoorsanaysay iyo qalbijabkii kaaga dambeeyay denbigaas?

Waxaas oo dhammi Ilaahay agtiisa kama aha maalaaycni dayacmaya!

Saaxiib; marnaba ha ka shakiyin in aad jannada xisaab la'aan iyo cadaab la'aan ku gelayso, nebiguna ﷺ uu gacantiisa kaaga waraabinayo cabbitaan aanu dib danbe harraad kaaga dambaynayn, intaas oo dhan ka dibna aad wejiga Rabbigaa daawanayso, mana jiro wax intaas ka wanaagsani, haba yaraato'e ma jiro, ee malaha aad Rabbigaa ka haysato wanaaji.

Nabaadiino saaxiib.

# 039 – Waan ku salaamay saaxiib

Dadka isjeceli way dhacdaa in ay iskhilaafaan, balse xidhiidhada ka dhexeeyaa badanaabaa isuma eka, oo farqi aad u weyn ayaa u dhexeeya.

Qofka kaaga taga adiga oo badweyntaas murugada ah dhex fadhiya, iyo ka kuu yimaadda marka khilaafku halkii u danbaysay uu marayo si uu kuugu yidhaahdo: “Ilaahay ayaan ku dhaartaye in aadan igu fududayn!”

Farqi weyn ayaa u dhexeeya, qofka ku jecel ee iska seexday ee kaaga tegay in aad la lababoglayso oo aad la baaxaa degto dhinbiisha khilaafka, iyo ka kuu yimi habeenka qaybtiisa danbe si uu kuugu yidhaahdo: “khilaafkii maalinnimadka dhinac i nooga du’, kaa ma yeelayo in aad seexato iyada oo ay indhahaaga ilmo ku taagan tahay’e!”

Khilaafyada iyo isku–dhacu mar kastaba ma xuma, ee waxa ay ina tusaan booska aynnu ku leenahay qalbiyada dadka aynnu jecel nahay, waana qodobka ugu wanaagsan ee ay isku–dhacyadu leeyihiin!

Ma jiraan wax ka qurxoon in aad ogaato in aadan marnaba qofkaaga dhayal la ahayn xataa haddii aad khaldan tahay, in uu ku niyad jebiyaana aanay dhacaynin, xataa haddii aad gefto oo aad adigu qalbi jebiso!

Saaxiib; laba kasta oo isjecel waxa u dhexeeya miiq dun ah.

Dadka sida dhabta ah isu jeceli mar kasta oo ay iskhilaafaan, miiqoodaasi wuu giijismaa oo xoogaysmaa, sidii horena ka sii adkaadaaba!

Waxa iyaguna jira dad isjecel oo mar kasta oo ay iskhilaafaan miiqaas jacaylkooda jaraba, ka dibna soo laabta oo dib isugu gunta, si aanay hadda ka dib xidhiidhkoodu u sii ahaanin miiq dun ah, ee uu u noqdo xadhig dhumuc leh!

Saaxiib; erayada haasaawuhu way qurxoon yihiin marka heshiiska la yahay, laakiin marka la iskhilaafsan yahay ayay ka sii wanaagsan yihiin!

Niyad'dhisku waa macaan marka la iswaafaqsan yahay, se marka uu xaalku cakiran yahay ayuu ka sii macaan yahay!

Hore ayaa loo yidhi: "qofka aad ka xanaajiso ee aan waxyeello kuu geysan, saaxiib ka dhigo!"

Aniguna waxa aan ku leeyahay: "ka dhigo gacaliye iyo garab aad ku tiirsato!"

Ma jiraan wax ka wanaagsan in aad ogaato in aadan qof agtiisa dhayal ka ahayni. Ma jiraan wax ka qurxooni!

Nabaadiino saaxiib.

## 040 – Waan ku salaamay saaxiib

Hantiile aad u lacag badnaa ayaa hal inan ah dhalay, aad ayayna u xanuunsatay, koomana way gashay.

Daafaha dalka oo dhan wixii dhakhaatiir joogay wuu isugu keenay, laakiin waxba way u qaban kari waayeen, ilaa uu maalinkii danbe dhakhtar qariib ahi yimi magaaladii, dadkiina ay uga warrameen inantii hantiilaha xaaladdeeda, isagiina uu ku adkaystay in uu inantaas arko.

Markii uu dhakhtarkii in badan ku cadaadiyay taajirkii ayuu aakhirkii ka yeelay, maadaama inantiisaas dabiibkeedaba uu ka quustay!

Markii uu shaybaadh degdeg ah ku sameeyay ayuu dhakhtarkii ku yidhi hantiilihii: "inantaada xanuunkeedu waa nafsi!"

Hantiilihii: "oo waa maxay xanuunka nafsiga ahi?!"
– "wax yar ka dib ayaan ku tusayaa!"

Waxa uu u yeedhay dhakhtarku adeegtadii inanta ee u wehel yeeli jirtay, waxana uu ka dalbaday in ay u sheegto magacyo ay jeclayd gabadhaasi in loogu yeedho mid ka mid ah.

Gabadhii waxa ay magacyadii ugu yeedhyeedhay si cod sare ah, balse waxba way soo biirin waayeen.

Ugu danbayntii; waxa ay ku dhawaaqday magac ay gabadhii dhaqdhaqaaq samaysay markii ay maqashay!

Dhakhtarkii waxa uu dalbaday in wiilka magacaas leh loo keeno, mise waaba wiilka magaalada ugu saboolsan!

Waxa uu xaalku u muuqday in ay inantu fahantay in aanay suure ahayn in uu aabbeheed ninkaas u guuriyaa, ka dibna murugadii ay ka qaadday ay xaaladdaas u horseedday!

Markii uu wiilkii soo galay ee uu gacanteeda qabtay ayay indhaha kala furtay, sidii in ruux cusub lagu afuufay oo kale!

Dawo kastaba dhakhtarka laguma gado saaxiib!

Waxa jiro indho haddii aad ku dhaygagto oo aad u fiirfiirsato uun, waxa ku hayaaba ay kaa suulayaan, iyo gacmo haddii aad qabsato ladnaantaadii oo dhammaystirani ay kuu soo laabanayso, iyo laabo haddii aad madaxaga quusiso aad dareemayso ammaan aanu dareemin hoggaamiyaha ciidankiisa hubka ku gaadhan dhex joogaa!

I rumayso saaxiib; waxa suure ah in qof laabtiisa yari ay kuu noqoto adduunka oo dhanba meesha kuugu ammaanka badan!

Waxa jira laab–isgelin ruuxda kugu soo celinaysa, sida in qofka aad jeceshahay aad si xooggan ugu dhegto, aad uduggiisa carafsato, aadna isaga kor iyo kalba uga war doonto, sidii aabbe inantiisa kor iyo kalba ka war doonaya, marka ay dugsiga ka soo laabato ka dib!

Waxa jira faro marka ay madaxaaga taabtaan aad dareemayso in ay xanuun–baabi'iye kuu yihiin, iyo timo marka aad ursato aad dareemayso sida uu dareemo qof qarqoomay oo ka dhergay biyihii qarqiyay, oo markii uu quustay uu ka soo gaadhay qof badbaadinayaa.

Sidaas oo kale ayaad dareemaysaa, sidii in aad si dhakhso ah u neefsanayso, ka dib markii aad u malaysay in ay ajashaadii tahay ee aad wadka isu dhiibtay!

Waxa jira qosol ruuxda kuu soo celinaya, marka uu dhanka midig isku sawiro tushka (daloolka yar) ee aad mooddo calaamadda kolmaha ee hadalka dhigmada ah lagu xadeeyo, amaba ay labadiisa dhan ee tushka lihi noqdaan sidii labada qaybood ee dayaxa, oo waxa aad dareemaysaa in xanuun kasta oo jidhkaaga hayay uu baaba'ay!

I rumayso; dawo kastaba farmasiiyadu ma gadaan.

Nabaadiino saaxiib.

# 041 – Waan ku salaamay saaxiib

Qalbiga ayaa i dhaqaaqa marka aan ka akhriyo kutubta xadiiska, in uu saxaabi weydiiyay mid kale: “xaggee ayaad ka timi?” Oo uu ugu jawaabay: “dhanka nebiga ﷺ.”

Iyo in saxaabi uu saxaabi kale la kulmay oo uu weydiiyay xagga uu ku socdo, oo uu ugu jawaabay: “xagga nebiga ﷺ.”

Sidaas yar ee fudud ayay ugu jawaabayeen, waxa aan ka imi dhanka nebiga, iyo dhanka nebiga ayaan u socdaa!

Waxa aan jeclaystay in aan noqon lahaa kaas ku sii socda rasuulka, oo waxa aan ku odhan lahaa: “rasuulkii Allow; qalbiga ayaa i xanuunaya!”

Oo inta uu gacanta laabta iigu salaaxo uu i samir siiyo.

Laga yaabee in uu igu odhan lahaa: “ha is’uur xumayn, waa maalmo kooban oo ku dhaafaya’e!”

Ama laga yaabaa inta uu qalbigayga gacantiisa dulsaaro in uu yidhaahdo: “isxeji qalbiyohow!”

Oo inta uu qalbigaygu saldhigto uu xasilo, illeen way dhacdayba in ay dadka qaar marka uu u yeedho ku xasilayeen intaas uun’e!

Waxa aan jeclaystay haddii marka aan u xiiso nebiga ﷺ, ee boholyowgu uu laabtayda gilgilo, uu iigu dhibir samaado sidii uu ugu debcay geedkaba, oo uu laabta ii geliyo sidii uu laabta u geliyay.

Intaas ka dib, adduunka waxba igama aanay gelin!

Waxa aan jeclaystay haddii aannu isqabanno qof aan jecelahay in aan u imaaddo oo aan shafeecadiisa ka

dalbado, oo inta uu i raaco uu dhaawaca qalbiga dhayo, sidii uu ula lugeeyay Muqiisba markii uu xiisaha la daltabyoonayay ee ay Bariiri ka tagtay, ee uu nebigu ﷺ ugu lahaa iyada: "haddii aad dib ugu noqon lahayd isaga way fiicnaan lahayd!"

Waxa aan jeclaystay iyada oo ay deyni i cuslaysay in aan u iman lahaa nebiga ﷺ, oo inta uu i raaco uu midka deynka igu leh iga damiinto, sidii uu Jaabirba deynka ula debberay, ee uu ugu yidhi Yuhuudigii deynka ku lahaa: "ka sug Jaabir!"

Waxa aan jeclaystay iyada oo uu i xumeeyay saaxiib, in aan u iman lahaa nebiga ﷺ aniga oo gudaha ka gubtahanyoonaya, oo uu ii hiiliyo, sidii uu Bilaalba ugaga hiiliyay markii uu Abu Dar ku yidhi: "ina Dugulow!" Ee uu ugu yidhi: "war ma hooyadii ayaad ku caayaysaa?! Wali jaahiliyadii ayay wax kaaga sii hadheen!"

Amaba jeclaan lahaayee haddii aan waayahaas agtiisa ugu weynahay sidii Abu Bakar, oo inta uu dartay u xanaaqo uu yidhaahdo: "maad ii deysaan saaxiibkay!"

Waxa aan jeclaystay aniga oo bukooda oo uu gurigeyga igu soo booqdo nebigu ﷺ, sidii uu ugu booqday Sacad Ibnu Abii Waqaas oo kale, ee uu niyadda ugu dhisay.

Waxa aan jeclaystay inta ay wax iga murugaysiiyaan in uu niyadda ii dhiso, sidii uu niyadda ugu dhisay ilmihii yaraa ee shinbirkiisu uu ka dhintay!

Waxa aan jeclaystay xataa wax yarba ha ahaadeen'e in ay wax i yara diiqadeeyaan, oo inta aan isaga u imaaddo uu murugada iga khafiifiyo, arrinkaas in uu ila soo xalliyana uu ii raaco, sidii uu jaariyaddii yaraydba

ugu raacay qoyskeedii ee uu uga maslaxay, markii ay hawl u direen ee ay ka soo raagtay!

Waxa aan jeclaystay in aan isaga la safro, oo aan qalbigayga iyo indhahaygaba ku ilaaliyo, laga yaabaa in ay luladii ka tan badisay oo uu gaadiidka aannu saaran nahay ku dulgam'aye, oo aan jidhkayga tiirsimo uga dhigo, ka dibna uu iigu yidhaahdo sidii uu Abu Dalxaba ugu yidhi: "Ilaahay ha kuu ilaaliyo sida aad nebigiisa u ilaalisay!"

Waxa aan jeclaystay in aan dagaalka la geli lahaa maalinkii Uxud, si aan dalxa ugaga horreeyo oo aan dhabarkayga ugu fooroiriyo, oo uu isku sii taago si uu buurta u fuulo, ka dibna uu yidhaahdo: "way u waajibtay Ad'ham [Aadan]!

Waxa aan jeclaystay in mar kasta oo ay noloshu afka igu soo kala qaaddaba, uu i soo maro sidii uu u soo maray qoyskii Yaasirba, oo uu igu yidhaahdo sidii uu Yaasirba ugu yidhi: "samir Yaasirow; ballankiinnu waa janno'e!"

Wax kastaaba markaa dhayal ayay ila noqon lahaayeen!

Gacalle rasuulkii Allow, maxaan dhankaaga u xiise qabaa.

Nabaadiino saaxiib.

# 042 – Waan ku salaamay saaxiib

Mid ka mid ah barayaasha jaamacadda ayaa xidhan jiray saacad dumar, ardayduna ka–sheekayntiisa golayaasha nusasaacaha ayay ku camiran jireen, ilaa ugu danbayntii uu arday kula dhacay su'aal uu barahaas ku weydiiyay sababta uu u xidhan yahay saacadda dumarka.

Waxa uu u sheegay barihii, in ay tahay saacaddii inantiisii oo ka dhimatay!

Saaxiib; qof kastaba waxa ku taagan waran haddii uu dadka kale tuso ay oohin darteed ilmada saydhi lahaayeen.

Balse in uu u dulqaato warankaas oo uu ku samro ayuu doorbidayaa, maadaama u–dhibridda ay dadku kuu naxaan lafteedu ay xanuun tahay, waliba ay aad u xanuun kulushahay!

Noloshani waa dagaal qadhaadh, ee yaanay muuqaallada guud ku dagin (khiyaamin)!

Dhoollacaddayntaas aad arkayso waxa ka danbeeya dhaawacyo iyo dakharro badan oo ay dadku dadka kale ka qarsadaan!

Qosolkaas waxa ka danbeeya illin haddii aad arki lahayd aad odhan lahayd: "sidee ayuu u qoslayaa qofkan ilmada ka socota daraadeed in uu qallalo gebigiisuba ku sii siqayaa?!"

Dadku waa sida buuraha saaxiib, kama aha dhanka adkaanshaha, ee waxa ay ka yihiin dhanka inta qarsoon.

Waxa ay yidhaahdaan aqoonyahannada cilmiga dhulka ee Geology–gu, buurta inta laga arkaa waa uun

saddexmeelood meel ahaan, oo labada kaleba dhusinka hoose ayay ku aasan yihiin.

Innaguna sidaas ayaynnu nahay!

Inta aynnu qarsanno ayaa ka badan inta aynnu muujisanno!

Xanuunnadeennu ma aha waxyaabaha aynnu cunaynno, ee waa waxyaabaha innaga ina cunaya!

Saaxiib; qof kastaaba waxa uu la nool yahay dhibaabo xanuunjinaya si kasta oo uu u dafiraba, qalbi kastana waxa ku yaalla nabar dhaawacan oo qalan, si kasta oo uu u qariyaba!

Yaanay muuqaallada guud ku dagin, waxyaabaha aad aragtaa ma aha sida ay kuugu muuqdaan'e!

Qofka deggan ee aad ku majeerato isu–dheellitirnaantiisa, laga yaabaa in uu qalbigiisa ka holcayo dab Ilaahay cid aan ahayni aanay ogayni!

Qofkaas aanu dushiisa qiiqu ka baxaynin, macneheedu ma aha in aanu gubanayn!

Ka caasiga ahina kuma raaxaysanayo macsiyadiisaas, ka muddeeca ahina dhayal kuma aha qof sugan oo jidka uu Rabbi u jeexay raacaya!

Ka haysta qof jecel oo si adag u haysta oo in aanu waayin darteed wax walba u hurayaa, nafis iyo raaxo kuma jiro.

Ka qalbigiisa bohosha gacallaha u baahani ay ka bannaan tahay ee aan qofna faraha ku hayninna, waa sidoo kale!

Dhawr jeer ayaan kaaga warramay qiso aan akhriyay oo ahayd, nin maalin u galay farmasii oo uga cabanayay

xanuun jidhka ka haya, ruuxdiisana bahda ka saaraya oo diiqad iyo nafisdarro u horseedaya.

Dhakhtarkii markii uu si kastaba u baadhay waxba wuu ka waayay.

Markaasuu u sheegay in dhibtiisu ay tahay nafsi, ee uu isku dayo in uu naftiisa u raaxeeyo!

Waxa uu u sheegay dhakhtarkii, in uu wax akhriyo, socdaalo oo asxaab cusub uu barto.

Waliba waxa uu ugu daray talo ah, in uu magaalada yimi majaajilleyste aad u maad badan oo la yidhaahdo Carolina, dadkana sida uu uga qoslinayo uu gaadhsiiyo heer ay wixii dhibaatooyin haystayba illaawaan, ee uu ninkaas aado oo uu soo daawado majaajilladiisa.

Ka dibna ninkii bukaanka ahaa dhakhtarkii ayuu eegay oo uu ku yidhi isaga oo ilmaynaya: “waa aniga Carolina digtoore!”

Nabaadiino saaxiib.

# 043 – Waan ku salaamay saaxiib

Haddii aad i weydiiso sidee ayaan dhanka Ilaahay u aadaa?

Waxa aan ku leeyahay, xaalad kasta oo aad ku jirtaba dhanka Ilaahay aad.

Guclee haddii aad awooddo,

U soco dhankiisa haddii aad awoodi weydo,

U gurguuro haddii ay tallaabadu ku gabto,

Waxaas oo dhanba haddii aad awoodi weydana halkaaga istaag, oo ha marin dhabbo kale oo ka fog ta dhankiisa lagu aado, in Ilaahay dartii loo hakado lafteeda ayaa ah socod dhanka Ilaahay lagu aadayo'e!

Ma garanayo sababta uu imminka niyaddayda ugu soo dhacay Camar Ibnul Jamuux aniga oo kula hadlaya, wejigiisa ayaa sidii hillaac bilig yidhi ii hormaray.

Waxa aad mooddaa in aan arkayo isaga oo nebiga ﷺ u yimi oo uga cabanaya ubadkiisa oo doonayay in ay ka horjoogsadaan in uu dagaalka aado, maadaama uu laangadhe (jiis) ahaa, laangadhenimaduna aanay ka reebayn jihaadka in uu qayb ka noqdo!

Waxa uu ku yidhi: "wallaahay laangadhanimadaydaas ayaan jannada la gelayaa rasuulkii Ilaahayow. Haddii Ilaahay dartii la ii dilo lugtaydan oo bedqabta sow jannada ku dhex mari maayo?!"

"Haa!" Ayuu ku yidhi nebigu ﷺ.

Markii uu nebigu ﷺ meydkiisii isdultaagay shahiidnimadiisii ka dib, ayuu ku yidhi isaga oo la

hadlaya: "waxaba aad mooddaa in aan arko adiga oo lugtaadaas oo bedqabta jannada ku dhex maraya!"

Adigana laangadhanimadaadu waa mid qalbigaaga ah!

Maxaa ku helaya haddii aad dhanka Rabbi ula guclayso qalbigaagan wada dakharrada (nabarrada) ah?!

Denbiga aad hadda ku dhacayso, ka istiqfaarso!

Gaabiska aad maanta samayso, berri iska gud!

Qallooca aad imminka sababto, fursadda ugu dhow ee aad hesho ku toosi!

Qofka ilmaynaya illinta ka tir, Ilaahay dadka qalbi jabsan wuu ka ag dhow yahay'e!

Dadka niyadda u dhis, ma jiro wax ka wanaagsan in Ilaahay lagu caabudo in dadka niyadda loo dhiso'e!

Garab iyo gaashaa u noqo qofka ay waayuhu liiciyaan,

Qofka muraaradillaacsan madaxa u salaax,

Ka dhiig baxaya u boogo–dhay.

Adduunkani waa goob dagaal saaxiib,

Waana naadir in uu qofna ka nabad galaa,

Dadkuna waa gurboodkii Ilaahay,

Waxana uu Ilaahay dadka ugu jecel yahay, hadba ka gurboodkiisaas ugu waxtarka badan!

Nabaadiino saaxiib.

# 044 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa aad i leedahay waxa uu ahaa sannad xun oo waa Ilaahay mahaddii in aannu ka soo bedbaadnay.

Haddii aad bedbaadadaas uga jeeddo in aynaan dhimanin, waa dhab in aynnu bedbaadnay!

Balse ma aanan fahmin bedbaadada aan ahayn in aynnu jidka Siraad ka tallawno!

Wixii taas ka sokeeyaaba waa guul barkumataal ah oo aan sii ridnayn!

Saaxiib; ma aha guul in aad noolaataa, mana aha jab in aad dhimataa!

Ee sirtu wa waa sida aad u nooshahay, iyo waxa aad u dhimanayso!

Ma garanayo sababta aniga oo hadda wax kuu qoraya uu niyaddayda ugu soo dhacay Muscab Ibnu Cumayr isaga oo jooga maalinkii Uxud!

Muscab waa wiil Qurayshi ah oo qurxoon, hantiile ah oo badhaadhe ku barbaaray, oo meydkiisii uu saxarahaas wadhan yahay oo uu sugayo in qabri loo qodo!

Waxaba ay u waayeen kafan ay ku asturaan, oo haddii ay madaxiisa gaadhsiiyaan kafanta lugaha ayaa feydma, haddii ay lugaha dedaanna madaxa ayaa feydma!

Marka xisaabaha adduunka lagu eegayo, dhimashadaas oo kale marka la barbar dhigo noloshii badhaadhaha iyo barwaaqo–sooranka ahayd ee uu soo qaatay, waa gebagebo aan la mahadin oo xun!

Se xaqiiqadu waa in maalinkaasi uu ahaa maalinkii ugu farxadda badnaa Muscab Ibnu Cumayr!

Haddii ay noloshu tahay bedbaado, way badan yihiin bedbaadayaashu.

Haddii uu jabku yahay dhimashana, ugu danbaynta dhammaanteen waynnu jabaynaa saaxiib!

Qodobka ay tahay in aynnu u daymo badinaa, waa sida uu noqon doono habeenka i noogu horreeya qabrigu!

Ma bohol ka mid ah hogagga naartaa?!

Mise waa beer ka mid ah beeraha jannada?!

Bal suurayso sida uu arrinku u fudud yahay, haddana uu u adag yahay!

Shahaadada PhD–da ah ee aad sidataa maalinkaas waxba kuu tari mayso, mar haddii aanu qalbigaagu xifdiyin casharka fasalka koowaad ee bilawga ah ee odhan jiray:

Waa kuma Rabbigaa?!

Waa tee diintaadu?!

Waa kuma nebigaagu?!

Nabaadiino saaxiib.

# 045 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa uu yidhi Yoonis Assudafi: "ma aanan arag qof Shaafici ka caqli badan. Maalin ayaannu doodnay oo aannu arrin isku qabanay. Maalin danbe ayuu ila kulmay, markaasuu gacanta i qabtay oo uu igu yidhi: 'Yoonisow; miyaynaan walaalo ahaan karin aynnuba arrin gaar ah isku qabanno'e?!'"

Saaxiib; haddii aanan adiga kula jirin macneheedu ma aha in aan liddigaaga ahay.

Waxa jira dagaallo aanay ila gudboonayn in aan galo, maadaama aad adigu gashay!

Waxa jira muranno aan dhankooda ka ledayo, maadaama aad adigu gashay oo aad igaga filan tahay!

Iga raalli ahow; kuma nooli mabda'a: wixii ay yihiinba waan la ahay, wixii haleelaana way ila haleelayaan!

Mabda'na iima aha in aan dameeri dhaan raaxcday noqdo!

Dagaalladayda aniga ayaa doorta.

Yaa se kugu yidhi waa qasab in uu qofku lahaado dagaal uu gelayo?!

Saaxiib; ha igu qasbin in aan arko waxa aad arkayso, labadeennuba indho isku mid ah ayaynnu leenahay, se isku si wax uma arkaan'e!

Ha igu qasbin in aan noqodo nuqul kaa minguursamay (koobigaaga) adiga, ama in aan wax kasta oo aad tidhaahdaba sacabka kuu tumo oo aan kuu nacamleeyo, amaba aan aragti kasta oo aad aaminsan tahay kula qaato oo aan aamino.

Xaq ayaad u leedahay in aad waxa aad doonayso tidhaahdo oo aad aaminto, ee ha illaawin in aan aniguna xaq u leeyahay intaadaas oo kale!

Saaxiib; haddii aan kugu idhaahdo: “bal u yara kaadi!” Ma ihi fulay ee waan kula talinayaa!

Cadhadu qofka indha ayay tirtaa, dhibaatadu qofka ay haysataana si wacan uma arko maadaama uu ku dhex jiro!

Mararka qaar waa in aad xoogaa ka yara fogaataa si aad muuqaalka guud ee arrinka dusha uga wada aragto!

Si wacan niyadda ugu hay in aan ahay saaxiibkaa ee aanan ahayn seeftaadii!

Ha ii adeegsan dagaalladaada iyada oo aanay aniga waxba iga gelin!

Saaxiib; xaqa iyo baadilku waa bar cad iyo bar madow oo keliya, se nolosha caadiga ah wax waliba waa dameeri (midab danbaska oo kale ah), oo khayr kastaba in yar oo shar ah ayaa ku jirta, shar kastana in yar oo khayr ah ayaa ku jirta!

Ha ka dhigin mawqifyada adduunyada oo dhammi sidii in ay yihiin dagaal caqiido!

Xanaaqaagu ha koobnaado, waxyaabaha aad isha ka laabataana ha bataan, marar badanna isha xidho afkana dhawr, arag maqal warkana ood!

Nabaadiino saaxiib.

## 046 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa ay yidhaahdeen: "marka aad murugooto waxa aad aaddaa qofka kuugu jecel dadka. Marka aad faraxdana waxa aad aaddaa qofka aad ugu jeceshahay."

Nasiib ayaad leedahay haddii labadaas xaaladoodba aad isla hal qof uun aaddo!

Saaxiib; murugba laguma sheegi karo ta aad hesho cid kula qaadda.

Murugadu waa in aad oydo oo aad weydo cid ilmada kaa tirta!

Waa in aad jabto oo aad weydo cid kaa la dabbaalata!

Waa in aad argagaxdo oo aad weydo cid ku xasilisa!

Waa in ay waayuhu qalbigaaga jebiyaan, oo aad weydo cid kugu tidhaahda: "aniga ayaa tukube kuu ah ee i cusko!"

Saaxiib; ma aha farxad ta aad weydo cid kula wadaagtaa!

Farxaddu waa in aad guuleysato, oo aad aragto dhoollacaddaynta qof guushaada inta aad ku faraxsan tahay ka badan isagu ku faraxsan!

Waa in aad heer sare gaadho oo aad aragto sida uu ugu faraxsan yahay, maadaama uu ahaa sallaankii aad guushaas u kortay!

Waa in adiga lagugu wada mashquulo oo kamaraduhu ay ku qabtaan, oo aad aragto isaga oo si walba ugu faraxsan xataa haddii uu yahay kaabadda lagu soo joogjoogsanayo!

Saaxiib; haddii uu qof ka kaaftoomi lahaa in farxaddiisa la la wadaago, waxa ka kaaftoomi lahaa ka jannada dhexdeeda loogu bushaareeyay ee kitaabkiisii midigta laga siiyay, laakiin kama aanu kaaftoomin ee markaaba waxa uu u cararay dhanka dadkii uu jeclaa isaga oo ku leh:

(هَاؤُمُ اقْرَءُوا كِتَابِيَهْ) الحاقة ١٩.

“[Marka ehlu jannaha kitaabkiisa midigta laga siiyo ayuu ku odhanayaa dadkii uu jeclaa] kaalaya akhriya kitaabkayga!”

Nabaadiino saaxiib.

# 047 – Waan ku salaamay saaxiib

Haddii aad i weydiiso: "waa kuma gacaliyaha koowaad ee aad jeceshahay?"

Waxa aan ku leeyahay;

Gacaliyaha koowaad ma aha qofka ugu horreeya ee aad qalbigaaga siiso, ee waa qofka ugu horreeya ee aad awoodi weydo in aad qalbigaaga ka soo ceshato!

Gacaliyaha koowaad khasab ma aha in uu noqdo qofka koowaad ee aad gacłooto, ee waa qofka koowaad ee qalbigaaga gaadha ee aanay isaga cidi uga horraynin jacaylkiisa, xataa haddiiba uu dad kale yara jantay oo ay xiise geliyeen!

Saaxiib; marar badan ayay dhacdaa in aynnu dareennadeenna fahmi weynno, oo xataa ka–helitaanka aynnu jacayl u aragno, la–qabsiga aad qof si aad ah isaga ag dhowaataan aynnu jacayl u malaynno, waxana sababaya in qof kastaba uu ka bannaan yahay boos wax aan jacayl weyn ahayni aanay buuxinayn, inta aanu jacaylkaas weyni saldhiganna, xiisaha iyo rabitaanka aynnu u haynno darteed, dareen kasta oo ina daaraba waxa aynnu u malaynaynaa jacaylkaas weyn ee aynnu tebaynay, wax yar ka dibna waxa aynnu ogaanaynaa markaaba in aynaan jacaylkaas dhabta ah qaadin, ee keliya aynnu ciddaas ka helnay uun, amaba aynnu ka–ag–dhowaanshihiisa caadaysannay oo aynnu la qabsannay uun, ee jacaylku waa masalo goonni ah oo waxaasba ka geddisan!

Jacaylka koowaad, waa ka adiga oo aaminsan in aad caqligaaga iyo qalbigaagaba hoggaanka adigu u hayso, ka

dibna aad si kedis ah u ogaato in aadan qalbigaaga adigu maamulinba oo aanu gacanba kuugu jirin!

Caqligaaguna aanu awoodin in uu qalbigaaga dhegta soo qabto oo uu ku yidhahado: "bal yara cago dhigo!"

Waxa aad is'arkaysaa adiga oo sidii faras tartan ku jira hore uun isu sii tuuraya, waxaas oo jamaahiir ku xeeranna aan arkayn, xisaabaha dushiisa ka dhacaya, sharatanka iyo yeedhisyada ka dulbaxayana aan dheg u jalaq siinayn, ee halkaas abbaartiisa ah uun isha ku haya oo isku sii maqiiqaya!

Jacaylka koowaad, waa kaas kaaga warramaya in dareen kasta oo gacaltooyo oo aad hore u soo dareentay uu ahaa caadifad carruurnimo oo aan qaangaadh ahayn, imminkana la gaadhay xilligii uu qalbigaagu jacaylka dhabta ah dhadhamin lahaa, ee aad ula yaabto sidii ilmo dhallaan ah oo aan roobka hore u arag oo ay markani ugu horrayso, qoyaankana farxad iyo raynrayn ku dareemaya oo samada eegaya, isaga oo doonaya in uu arko halka ay biyuhu ka soo daadanayaan, marka uu sababta garan waayana aan aad uga murugoonayn, ee raynrayntaas qoyaanku ay kaga filnaanayso faduusha ogaanshaha meesha uu roobku ka imanayo!

Saaxiib; jacaylka koowaad waxa uu yimaaddaa isaga oo sawaxan badan wata, gacantana ku sita mandaraq oo hog weyn qodaya, dhammaanba dareennadaadii horena godkaas ku guraya, ciiddana ku aasayaa isaga oo ku leh: "ugu danbayn waykan oo imi, aniga ayaana hadda ka dib jooga, ee xiisahaaga iyo rabitaannadaada oo dhanba aniga igula noolow!"

Nabaadiino saaxiib.

# 048 – Waan ku salaamay saaxiib

Waa maxay qalbijabkaas aan codkaaga ka arko iyo murugadaas indhahaaga ka muuqataa?!

Ma waxa aad isu malaynaysaa in aadan ka mid ahayn dadka wanaagsan (saalixiinta), maadaama aad ku dhacdo denbi aadan iska deyn karaynin, mar kasta oo aad ka toobad keentana aad gadaal ugu laabanayso?!

Yaa kugu yidhi dadkii wanaagsanaa denbiyo ma aanay lahayn?!

Yaa kugu yidhi kuma aanay jirin dagaal isjiidadkaas aan dhammaadka lahayn, ee marna ay naftooda kula jireen marna shaydaanka, oo mar ay ku guuleysanayeen, marna ay ku jabayeen?!

Dhammaanba dadkii wanaagsanaa sidaas ayay ahaayeen saaxiib, balse maadaama uu Ilaahay jecel yahay, hu dhawra ayuu guudkooda sudhay oo ceebahooda wuu u asturay!

Saaxiib; bal akhri hadalka Rabbigaa ee ah:

(وَالَّذِينَ جَاهَدُوا فِينَا لَنَهْدِيَنَّهُمْ سُبُلَنَا) العنكبوت ٦٩.

“Kuwa u halgama dartayada, waxa aannu ku hanuuninnaa jidkayaga toosan.”

Ma waxa aad u malaynaysaa in jihaadku uu yahay uun ka seefta iyo gaashaanka?!

Dagaalka aad ugu jirto in aad ilaashato hufnaanta qalbigaagu, waa jihaad!

Wuu kuu qorayaa Ilaahay kor ahaaye ajarka loollankaas aad kula jirto denbigaas, murugada marka aad ku dhacdo ka dib aad la muraaradillaacayso, ku–dhicitaankaas ka dib, hinqashadaada aad dhanka

wanaagga ugu kacaysid iyo istiqfaartaada gefkaas aad ka danbaysiinayso.

Arrimahaas oo dhammi waa jihaad aad Ilaahay dartii ugu jirto, intaas oo dhan ka dibna Ilaahay jidka qumman ayuu kugu hanuuninayaa!

Waa ballan uu Ilaahay ku baaqay taasi, mana jirto Ilaahay cid ka ballan–oofin badani.

Idil ahaanba dadku way danbaabaan saaxiib, kuwooda wanaagsan iyo kuwooda xuniba way ka siman yihiin, se kuwa wanaagsani way asturtaan denbiyadooda oo kuma faanaan, way ka denbidhaaf dalbadaan oo kuma sii adkaystaan, wayna qirtaan ee uma cudur daaraan oo daw uma sameeyaan.

Saaxiib; qoomamada denbiga ka danbaysaa waa wanaag.

Ilmada macsida ka danbaysaa waa wanaag.

Denbidhaaf–dalabka ka danbeeya gefku waa wanaag.

Marba haddii aad dareemayso qadhaadhka denbiga waxa aad tahay qof wanaagsan.

Inta aad dareemayso diiqadda iyo dullinimada ka–dheeraanshaha Ilaahay, waxa aad tahay qof wanaagsan, oo dadka xunxuni dareennadaas ma laha!

Nabaadiino saaxiib.

# 049 – Waan ku salaamay saaxiib

Abaal ayaynnu u haynaa caqabadaha aynnu nolosha ku waajahno, oo iyaga ayaa dadkan aynnu nahay inaga soo saaray.

dhibaato kasta oo aan ku diliniba way ku xoojisaa oo difaac ayay kuu samaysaa.

Tallaallada ay carruurta siiyaan waa xanuun sahlan oo yasiran, oo jidhkooda ayay barayaan cudurkaas, haddii markaas ka dib uu ku dhacana, jidhkooda oo garanaya oo difaac ka sii samaystay ayaa la dagaallama.

Noloshuna waa sidaas oo kale, oo jug kasta oo ay kugu dhufataaba awood ahaan way ku xoojinaysaa, go'aankaagana way adkaynaysaa.

Saaxiib; wanaagsanaa jugaha ku xanuunjiyay, ee haddana ku tusay dhinacyada aad ku xooggan tahay, adiga oo hortood isu malaynayay in aad dhinacyadaas ka liidato!

wanaagsanaa khiyaano moogganaan kaa toosisay, oo aad dabadeed go'aansatay in aad halkaas ku hakato, haddii aadan dhexda inta aad soo socotay khiyaanadaas la kulmi lahaynna aad gaadhi lahayd aakhirka dhabbahaas, oo aad uga dhici lahayd argagax iyo af–kala–qaad aan ka–laabasho lahayn!

Wanaagsanaa masiibo kugu habsatay, oo ku tustay dadka kugu xeeran xaqiiqadoodu!

Iyada dabadeedna aad aragtay qofkii aad garabka iyo gaashaankaba ka filanaysay oo noqday qofka koowaad ee kaa taga, kuwo aadan ahmiyadba siin jirinna aad dhaadday in ay yihiin dadka kula rafaaday ee

naftooda kuu bixiyay, ee dhegta kuu saaray: "ha cabsan! Dartaa ayaannu halkan u joognaaye!"

Wanaagsana mawqif kadeed badan ku baday oo khibrad aad ka hanatay, la'aantiina haddii aad badhaadhe iskaga jirto aadan xikmaddaas uga dhaadhacdeen!

Waan ka xumahay saaxiib, laakiin hungada iyo ka–daba–baxu (khiyaamadu) waa dugsiga ugu weyn ee aynnu wax ka baranno!

Wanaagsanaa hungo aad ka damqatay, balse haddana dad badan qalbigaaga ka xaadhay, dadkii u qalmayay qalbigaagana gole keentay!

Wanaagsanaa dagaallada aad ku jabtay, balse haddana aad ku baratay in ciidanka aad isku hallaynaysay ay ahaayeen afka baarkiisa!

I rumayso; in aad waxyaabaha kugu xeeran xaqiiqadooda ogaato, ayaa ka xanuun yar in aad iska aaminsanaato oo aad ku dagnaato adiga oo aan ka war qabin!

Saaxiib; badaha deggani badmaaxyo xariifyo ah ma soo saaraan, askarta dhabta ahina kuma soo shaac baxaan saldhigyada tababarka, ee waxa ay ka dhashaan goobta dagaalka ubucdeeda!

Abaal u hay duufaanka kugu kacay ee ku bisleeyay, iyo dagaalka qadhaadh ee ku baraarujiyay!

Nabaadiino saaxiib.

# 050 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa aad i weydiinaysaa: "maxaan sameeyaa arrimihii way igu soo oodmeen oo albaab ii furani ma jiro'e?!"

Aniguna waxa aan ku leeyahay: xidhiidhada marka ay noqoto, dariiq soo oodmaa ma jiro, ee mar walba meel uun laga baxo iyo irrid furan ayaa la helaa, si uu xidhiidhkaasi u yeesho muuqaal ka duwan ka uu markaas leeyahay, oo uu sidii hore ka sii xoogganaado!

Xidhiidhada qaar waa sida dunta suufka ah oo kale, oo mar kasta oo isdhexgalgalkeeda iyo isa–sudhankoodu uu bato, way sii adkaadaan!

Iskhilaafka iyo isqabashada marar badan abaal ayaynnu u haynaa, oo waxa ay ina tusaan heerka aynu ka joogno qalbiyada dadka kale, iyo inta ay dadka kale agteenna ka joogaan!

Mararka qaar ayuu noqdaa xidhiidh dhulyaal (sakaraad) ah, oo nolol iyo geeri midna aan lagu tirinayn, sida qofka koomada ku jira oo kale, ee aan dadka dhintay ee la aasayna lagu tirin, kuwa nool ee soconayana aan ka mid ahayn!

Laga yaabaa in uu xidhiidhkaasi sidaasba ku soo afmeermo, taas lafteeduna waa irrid laga baxay.

Haddii lagugu yidhaahdo noloshu qofna uma istaagto ee way socotaa, ha beenaysan!

Sidoo kale; rumayso in waxa muhimka ahi aanu ahayn nolosha lafteeda, ee uu yahay dhadhankeeda saaxiib.

Ku dheg dadka noloshaada dhadhanka u sameeya saaxiib.

Xidhiidh kastaaba xilli uu hoos u yara dhaco wuu soo maraa, se ma aha in uu soo afmeermay, ee waa nasashada dagaalyahannadu ay kaga yara hakadaan kadeedka adduunka.

Mararka qaar waynnu u baahan nahayba masaafadaas iyo bedkaas hoosudhaca xidhiidhku uu sababayo, si marka aynnu ka soo kabanno si sidii hore ka sii xooggan aynnu hore ugu soconno!

Bal u fiirso leebka marka la ganayo, inta qaansada caloosha loo geliyo, ayaa si aad ah dib loogu celiyaa, ka dibna waa la ganaa, markaasuu isaga oo dheeraynaya, oo huba bartilmaameedkiisa toos u baxayaa, haddii aan sidaas oo dhan dib loogu jiidi lahaynna awooddaas oo dhan ma aanu heleen, xidhiidhaduna waa sidaas oo kale!

Nabaadiino saaxiib.

## 051 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa nebiga ﷺ caado u ahayd dagaalku marka uu dhammaado: "yaa maqan?"

Sidii u caadada ahayd ayuu maalin weydiiyay markii uu dagaalkii idlaaday: "yaa maqan?"

Markaasay asxaabtii ku tidhi: "cidna!"

Markaasuu yidhi: "laakiin waxa aan tebayaa Julaybiib!"

Way baadheen oo shuhadadii ayay ka dhex heleen, isaga oo dhinac yaalla toddoba mushrikiintii ah oo uu laayay, aakhirkiina ay isaga dileen!

Madixiisa inta uu nebigu ﷺ istaagay ayuu yidhi: "toddoba ayuu ka dilay, markaasay dileen. Ninkani waa wehelkayga jannada!" Ka dibna dhabta ayuu ku hayay meydkiisa intii qabriga loo qodayay!

Waa Julaybiib ninkaasi saaxiib.

Waxa uu ahaa nin muuqaal ahaan foolxun oo caydh ah, sidaas ayuuna xisaabaha adduun ku ahaa, se Ilaahay agtiisa sheekadiisu weji kale ayay ka leedahay, oo waxa uu ahaa nin uu qalbigiisu qurxoon yahay, iimaankana uu hodan qaniya ka yahay!

Markii u danbaysay ee uu adduunka ka tegayayna waxa uu intiisii ugu danbaysay ku sii qaatay dhabta nebiga ﷺ intii ay qabriga u qodayeen.

Allaa gebagebadaasi wacanaa, waqtigaas u danbeeyay ee uu adduunka ku sii qaatayna wanaagsanaayee!

Ilaahayow khaatumada khayr noogu khatin.

Saaxiib; arrintu marnaba ma aanay ahayn mid wejiyo la xidhiidha, ee waxa ay taagnayd qalbiyo, quruxda dhabta ahina waxa ay ahayd ta ruuxda, dugsoonka wada dhaqanka, tudhaalaha u–dhibridda iyo hadalka debecsan!

Arrintu maalinnaba ma aanay noqonin mid la xidhiidha jeebabka, ee waxa ay la xidhiidhaysay qalbiyada, hantida dhabta ahina waa ta ruuxda.

Waxa ay ahayd arrintu, iimaankaa sida buuruhu ay dhusinka dhulka ugu aasan yihiin u qotada dheer, ee aanay dhacdooyinka habeenkii gilgili karin.

Yaqiintaas faca weynna isgedgeddiga waayuhu ma suul daaraan (hagardaameeyaan).

Nabaadiino saaxiib.

# 052 – Waan ku salaamay saaxiib

Si xishood leh ayaad ii weydiinaysaa: "intee in le'eg ayaad dabaqdaa hadalladaada?!"

Si qadhaadh leh ayaan aniguna kuugu jawaabayaa:

Waxa aan u dagaallamaa in ay ficilkayga iyo qawlkaygu is yeeshaan, laakiin way dhacdaa in aan marar badan ku fashilmaa!

I rumayso; waxa i soo maray waqtiyo badan oo aan ku fekeray in aan waxqoristaba iska daayo, balse waxa i samir siiyay oo laabta ii culay Xasan AlBasri markii uu lahaa: "haddii dadka taladooda iyo ficilkoodu ay is leeyihiin uun ay dadka kale la talin lahaayeen, cidiba cid lama aanay taliseen!"

Markaasaan guntiga giijistay oo aan dagaalkaygii guunka ahaa ku laabtay, aniga oo isku deyaya noloshan in qoraalkaygu uu ii ekaado, mar kasta oo aan ku guuleystana waan farxayay, mar kasta oo aan fashilmana waan niyad xumaanayay!

Waxa i samir siiyay taariikhda iyo sooyaalka Khadiib AlBaqdaadi, oo waxa uu ka warramay imaamkii xaramka ee Yuusuf Ibnul Xusayn Arraasi, in dhimashadiisii ka dib riyo lagu arkay oo la weydiiyay: "sidee ayuu Ilaahay kaa yeelay?!"

Oo uu ku jawaabay: "wuu ii denbi dhaafay!"

– "Oo muxuu kuugu denbi dhaafay?"

– "Erayo aan idhi markii aan sii naf baxayay! Waxa aan idhi: 'Ilaahayow; dadka hadalkayga ayaan ugu baaqay, laakiin naftayda ficil ahaan waan khiyaamay, ee khiyaanada naftayda igaga tir waanada hadalkayga!'"

Saaxiib; qofka garaadka lihi hadalka kiisa xun iyo ficilka kiisa xun ma kulmisto.

Haddii aad wax xaddo, ha odhan xatooyadu waa xalaal!

Haddii aad ficil ahaan wax u khiyaanto, hadal ahaanna ha u khiyaamin!

Mar walbana u halgan sidii uu qawlkaagu ula jaan qaadi lahaa ficilkaaga, noloshu waa dagaal joogto ah oo aad marna guuleysanayso marna aad jabayso, dhammaanteenna ceebo cago leh oo dhulka dulsocda ayaynnu nahay ee Ilaahay ayaa ina asturay!

Nabaadiino saaxiib.

# 053 – Waan ku salaamay saaxiib

Maalmahan habdhaqannadaadu aad ayay ii dhibeen.

Laga yaabaa haddii qof kale ay dhibaatooyinkaasi igaga iman lahaayeen in aanay wax–ka–soo–qaad ila yeesheen!

Balse nabarka saaxiibka xanuunkiisu waa labanlaab, waranka gacalluhuna wuu ka dhaawac weyn yahay warmaha kale.

Ma taqaanaa waxa ugu xun ee ay leeyihiin khilaafyada dadka isjeceli?

Waa in aynnu labadeennuba banyaal nahay oo goldaloolooyinkeenna cid waliba ay arki karto!

Sidaas daraadeed; dadka aynnu jecel nahay – ama aynnu jeclayn – waa kuwa sida ugu xun i noo waxyeellayn kara, oo halka ay nabarka inagala eeganayaan si wanaagsan ayay u yaqaanaan!

Halka aad u dhimanayso ayay yaqaanaan saaxiib... halka aad u dhimanayso!

Ma taqaanaa saaxiib waxa nabarkaas ka sii xanuunka badan?

Waxa nabarkaas ka sii xanuunka kulul?

Waa hungada!

In aad isu malayso in aad dhankooda iska hubto, oo aad ogaato in aad kawaankii lagugu qali lahaa saarnaydba!

In aad aaminsanaato in aadan dhankooda dhayal ka noqonayn, oo aad ogaato in aadan ba iyo ta toona ka ahayn!

Nabarku wuu raystaa oo dhaawiciisii wuu bogsadaa, balse hungadu utinta ay kugu reebtaa waligeedba way soo labakaclaysaa!

Saaxiib; kaa ma aanan xumaanin, iyada oo in aan ku jidh diidaa ay ahayd waajibka ugu yar!

Kaa mana cadhaysni, iyada oo cadhadu ay tahay dareen dabeeci ah marka aad ku sugan tahay mawqif kan la mid ah, se waan kaa xanuunsaday!

Jug weyn ayaan kaa tirsaday!

Way i xanuunjinaysaa marka aan ka fekero in aan kor iyo kalba kaa war hayay oo aanay xogi igu kaa seegganayn, haddana aan ogaaday in aan kaaga dhiganahay sidii qof qariib ah oo inta aad madaar isku bariidiseen aad kala tagteen, oo aanan garanayn, isaguna aan i garanayni!

Saaxiib; aad ayay u kadeed badan tahay in saaxiibadii ay kala noqdaan dad qariib isku ah!

Nabaadiino saaxiib.

# 054 – Waan ku salaamay saaxiib

Ha u malayn in aan ahay war–jira–moog oo la i khiyaamay!

I rumayso; waan ogaa in aan hungada intaas le'eg la kulmi doono, markii aan jidkan doortay ee aan tallaabadii koowaad qaadayba!

Saaxiib; laga yaabaa in aad doonta aad raaci rabto ku aragto dalool iyada oo marsada taagan oo aan baddaba wali u dhaqaaqin, se haddana aad isbiimayso oo aad fuusho, adiga oo ku nayaayiraya in jacaylku uu dalool kastaba awdayo, xataa daloollada doomaha ku yaalla, aadna ku danbayso dalool qalbigaaga ka dalooshamay!

Saaxiib; laga yaabaa in aad ogaato in qof garabkiisu uu ku habboon yahay uun qaadista jinaasooyinka, laakiin haddana aad ku tiirsato garabkiisaas, adiga oo u malaynaya in jacaylku uu xataa qalbiyada toosiyo ee aanu garbaha oo keliya uun toosinin, se aad ku danbayso meyd saaran garabkii aad ogayd in aanu qaadista jinaasooyinka wax aan ahayn ku habboonayn!

Saaxiib; laga yaabaa in aad marka koowaadba kakanaan la kulanto, laakiin aad socdaalkaaga sii wadato adiga oo isku qancinaya, in ay ka tahay gacaltooyo iyo la–dhaqan wanaagsan!

Waad rabbaayadayn kartaa xayawaannada dugaagga ah, se markaasaad ogaanaysaa in rabbaynta dugaaggu ay ka sahlan tanay rabbaynta dadka, markaasaad ku danbaynaysaa ugaadh dhiiggeedii ku maydhatay!

Saaxiib; markeenii koowaadba ma aynaan indho la'ayn, Ilaahay ayaa igu og'e mana aynaan ahayn war–jira–moog, ee keliya waxa aynnu aaminnay uun in uu jacaylku mucjisooyin sameeyo!

Nabaadiino saaxiib.

# 055 – Waan ku salaamay saaxiib

Dhaaxay raalligelintu soo ahayd astaanta ilbaxnimada iyo maanfurnaanta, balse dhacdo kastaaba kuma habboona raalligelinta iyo cudurdaarashada!

Cudurdaarashada iyo raalligelintu waxa ay macne sameeyaan, marka aad lugtayda qasdi la'aan ugu joogsato, ee macne ma sameeyaan marka aad qalbigayga ku joogsato!

Ama marka aad iga jebiso qalin ama koob aan jecelahay, ee ma aha marka aad niyaddayda jebiso!

Ama marka aad iga jeexdo jaldiga buug igu qaali ah oo aan ku ammaanaysiiyay, ee ma aha marka aad dhaawacdo karaamadayda aan kugu aaminay!

Saaxiib; waxa jira gefaf aanay waxba ka tarin weedha ah: "waan ka xumahay!"

Mararka qaar ayuu dhaawucu ka weyn yahay cudurdaarashada iyo raalligelinta, nabarkuna uu ka qoto dheer yahay erayada raalligelineed, niyadjabkuna uu ka kakan yahay mid ay dhammaanba niyad'dhisyada caalamku wax ka qabtaan!

Waxa jira gefaf aan la cafiyi karin, sida in aad isku taagto halka i xanuunaysa, adiga oo og in xanuunka ay xanuun ka badan iigu sii darayso!

Ama in aan kuu sheego sir xataa aan naftayda in aan ka qariyo ku dhowaa, oo aan ku arko adigii oo igula dagaallamayaba!

Amaba in aan ku dhigo halka ugu qotada dheer qalbigayga, oo aan ku arko adiga oo fasahaadin la dhex jooga!

Saaxiib; dhacdooyinka qaar lama hagaajin karo, biyahana ma dhacdo aalaaba in halkii ay ka soo burqadeen ay ku laabtaan, haddii ay ku laabtaanna waxa ay noqonayaan biyo wasakhaysan, qofna ma doonayo biyo wasakh ah xataa haddii uu harraad u dhimanayo, ee ha ii cudur daaran, iyada oo mindidaada uu dhiiggaygii ka da'ayo!

I rumayso; in aad aamusnaan igu dhaafto ayaa aniga iyo adigaba i noo habboon!

Waxba ha ii cudur daaran, adiga oo qalbigayga ka qoday god aanay buuxinayn dhammaan erayadaadaas aad iigu niyad'dhisayso ee aan macnaha ii samaynayni!

Saaxiib; ha ii soo laaban mar haddii adiga oo gacanta igu haysta aad iga tagtay!

Nabaadiino saaxiib.

# 056 – Waan ku salaamay saaxiib

Dadka qaar ma soo laba noqdaan, ee hal mar ayay cimrigaaga ku soo marayaan sida maalinkii aad dhalatay oo kale!

Hal mar ah ayuun baad cimrigaaga oo dhanba la kulmaysaa qof inta aad horfadhiisato aad garan waayayso meel aad hadalka uga bilawdo, ee isaguna kugu odhanaya: “ha isdhibin, waan garanayaa waxa aad doonayso in aad ii sheegto adiga oo aan odhaninba’e!”

Marka ay erayadaadu kuu gooyaan (hadalku uu kaa soo bixi waayo), qofka isagu sidaas kugu afgaranaya!

Hal mar ah ayuun baad cimrigaaga oo dhanba la kulmaysaa qofka aad doqonniimada saayidka ah kula kacdo, ka dibna aad isa soo canaanato ee adiga oo cudur daaranaya oo raalli gelinaya aad u timaaddo, ee inta aadan juuqba u odhan kugu odhanaya: “ha u bixin. Si wacan ayaan kuu garanayaa oo ma tihid qof xun, ee waxa aad markaa ku jirtay xaalad adag oo waxaas kaa keentaye!”

Hal mar ah ayuu cimrigaaga oo dhanba ku soo marayaa, qof inta ay duruufuhu idinku adkaadaan aad doonayso in aad ka tagto, oo inta uu gacanta ku qabsado ku odhanaya: “kaa ma yeelayo in aad iga tagto, oo aad ayaan ugu daalay raadintaada intii aan kaa helayay!”

Hal mar ah ayuun baad cimrigaaga idilkiiba la kulmaysaa qofka iyada oo ay kun iyo kow derbi idiin dhexeeyaan, marka aad adigu fanashada derbiyadaas ka daasho, aad arkayso iyada oo aanu isagu daalaynin ee uu dartaa derbiyadaas uga soo tallaabayo, oo uu ku

leeyahayba: "wax kastaaba waa sahalo mar haddii aad ila jirto adigu!"

Hal mar ah ayuun baad cimrigaaga oo dhan la kulmaysaa qofka aad doonayso in aad ka tagto adiga oo uga baqaya in aad dhib u geysato, ee aad arkayso isaga oo ku leh: "ila joog, cadaab aan adiga kula maro ayaa iiga macaan janno aan adiga kugu waayay'e!"

Hal mar ayuun baad jirahaa iyo joogahaaba (weligaa) la kulmaysaa qofka aan qofna u ekayn, isagana aanu qofna u ekayn, ee ha iska dayicin!

Nabaadiino saaxiib.

## 057 – Waan ku salaamay saaxiib

Laga yaabaa in aad u malayso mararka qaar in aan ku liidayo!

Wallay ka tahay, kuma liidayo saaxiib, ee waan ku canaantaa!

Cadawga ayaa la liidaa, se dadka la jecel yahay waa la canaantaa, aniguna wallaahay waan ku jecelahay!

Wax kasta oo dhexdeenna ka dhacaba maanka ku hay, in aad xor u tahay in aadan gacallayaashayda aan jecelahay ka mid noqon, laakiin aanan sinaba u oggolaanayn oo ay mamnuuc kaa tahay, in aad cadawgayga ka mid noqotaa!

Haddii ay cadaawadi timaaddo in la iswaajahaa waa mahuraan, adiguna waad igala weyn tahay qof aannu iswaajahno oo kuu ma quudhayo!

Haddii aad iga xanaaqdo inta aan laabtayda kuu qaawiyo ayaan ku odhanayaa: "sida aad doonto uga cad gooso laabtayda, laakiin u naxariiso qalbigaas aanay adiga cid aan ahayni ku jirin!"

Haddii aad maalinna sababtayda u oyday, inta aan kuu imaaddo aniga oo ku raalli gelinaya ayaan ku odhanayaa: "waa tii aan garabkaaga geeri ku banneeyaa, ishaadaas aan inta badan ka soo qosliyay, way igu adag tahay in aan aqbalo in aan ka oohiyaa!

Imminkana waanigan ku hortaagan, oo haddii aad iga cad goosanaysana waa ii gacaltooyo, haddii aad i canaananaysana waa ii gacaltooyo!

Saaxiib; hore ayaa loogu maahmaahay, qofka ku canaantaa wadajirkiinna ayuu ka taliyay, aniguna marka

aan ku canaananayo, waxa aan doonayaa in aad ii negaato oo aynnu wadajirno!

Ha iga cabsan marka aan ku canaananayo, ee ka baq marka aan iska daayo canaanashadaada!

Amaba aan ku idhaahdo'e, waligaa ha iga baqin, mar kastaba dhankayga gacan aamin ah ayaad kaga jirtaa, qalbigaygana waad ku weyn tahay, haddii aad ila jirto iyo haddii aad i jidh diiddaba, haddii aad ii dhowdahay iyo haddii aad iga durugtaba, marka aad ii cadhaysan tahay iyo marka aad raallida iga tahayba!

Nabaadiino saaxiib.

# 058 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa aad i weydiinaysaa farxadda oo aad i leedahay: "goorma ayaan hananayaa?!"

Aniguna waxa aan ku leeyahay: farxaddu ma aha boosteejo aad gaadhayso, ee waa dariiq aad marayso!

Saaxiib; beddel aragtida aad caalamka ka haysato, caalamka kuu muuqda ayaa isbeddelaya'e!

Marka aad farxadda ka raadiso qalbigaaga dibeddiisa, weligaaba sidaas ayuun aad u baadi goobaysaa!

Marka aad qalbigaaga ka raadisana, waxa aad arkaysaa adiga oo sidii baadi kaa luntay oo kale u helay!

Farxaddaadu adiga ayay kaa bilaabantaa ee dadka kale kama timaaddo!

Waa dhab in aanu qofku keligii ku noolayn meerahan, dadkuna aanay dadka kale ka maarmin, ee waxa aan uga socdaa, in aad adigu noqoto ka haga ee maamula noloshaada, mabda'ayadaada dartoodna aad u noolaato, xataa haddi ay dadku u arkaan wax liita oo aan wax–ka–soo–qaad lahayn!

Ha isu dhiibin dabaylaha isbeddelka wata (mabda'aaga ha ka tanaasulin), haddii aad og tahay in ay wax uun sii qarribayaan oo ay kud ka guur oo qanjo u guur yihiin!

Saaxiib; haddii ay dadka oo dhammi waayaha u wada hogtaan adiga waxba kaa dhibi mayso, mar haddii aad adigu sugan tahay!

Haddii ay dadka oo dhammi sugnaadaan oo qummanaantooda ay xejistaanna, waxba kuu tari mayso mar haddii aad adigu hogato oo aad gorodda laalaadiso!

Ixtiraamka aad naftaada u haysaa waa arrin shakhsi ah oo aanay dadka kale waxba ka gelin, haddii aad taas si wacan u garanaysidna waxa aad haysaa tallaabadii koowaad ee farxadda.

Saaxiib; ha noqon xaasid, xaasidnimadu dadka kale nimcada kama kaxayso, adigana nimcada aad haysato ayay agtaada ka macne tiraysaa'e!

U daymo badi waxa gacantaada ku jira bal, in ay aad u badan yihiin ayaad arkaysaaye!

Ha u fiirsan waxa dadka gacantooda ku jira, wax kasta oo aad haysataaba way kula qiimo beelayaan'e!

Ma farxo qof aan qanacsanayni, ee qanac aad faraxdid'e!

Saaxiib; waxba ha ka qoomamayn tagtadii, waqtigaa tegay waa cashar aynnu barannay uun, ee ma aha waaqic ay tahay in aynnu ku noolaanno'e!

Ha ka yeelin wixii tegay in ay kula tagaan adigana, ama wixii ku dhaafay in ay adigana ku qaataan!

Dhabanaano (dhirbaaxo) kasta oo kugu soo dhacday abaal u hay, way ku bislaysaye.

Dagitaan (khiyaamo) kasta oo lagugu soo sameeyayna sidoo kale, in aadan si ku–talaxtag leh cidna ugu kalsoonaan ayuu ku baray'e.

*Kufniin kastana sidoo kale, in aad kacdo ayuu ku* baraye!

In aad duuduubto bogaggii tagtada macneheedu ma aha in aad illawdo, ee waa in aadan ka yeelin in uu

ku maamulo, waana qayb ka mid ah badhaadhaha iyo farxadda, ee duuduub bogaggaas!

Saaxiib; ha noqon qori uu xar galay, oo tabasho kastaaba ay ka oohiso, dhib kastaaba ay legeddo, sida dhallaankana wax kastaba ka cawda.

Adkaysi yeelo oo baro sidii aad u hinqan (kici) lahayd mar kastaba adigu taageero la'aan, dhaawacyadaadana aad ugu arki lahayd xusuuso aad ka haysato maalmihii adkaa ee ku soo maray ee aad ka nooshahay!

Adkaanshaha farxad ayaa ku jirta, ee qof adag noqo!

Saaxiib; farxadda macneheedu ma aha in waxqabadyo waaweyn oo caadajiidh (waxyaabo mucjiso ah) ah ka dhabayso.

Waxyaabo yaryar ayaa sameeya farxadda, ee ha isdhayalsan!

Raalligelinta waalidka waxa ku jirta farxad haddii aad macaansato oo aad ku qanacsan tahay.

Denbidhaaf–dalabkaaga waxa ku jirta farxad haddii aad u fiirsato.

Addeecista Ilaahay waxa ku jirta farxad haddii aad si qalbiga ka soo go'day ula noolaato.

Ilmada aad qof ka tirto, niyadda aad u dhisto iyo gacanta hagar la'aaneed ee aad qof dhibban u fidiso, iyagana farxad ayaa ku jirta!

Farxaddu ma aha mucjisooyin iyo waxyaabo caadajiidh ah in la sameeyo, ee waa waxyaabo yaryar oo si kalgacayl leh loo sameeyo, ee isjeclow!

Nabaadiino saaxiib.

# 059 – Waan ku salaamay saaxiib

Waa in aad barataa in sii–deynta waxyaabaha qaarkood uu mararka qaar u baahan yahay awood ka weyn ta ay u baahan tahay in aad ku sii dhegganaataa!

Waynnu ka baqnaa waxyaabaha qaar in aynnu weyno, oo waxa aynnu ka cabsannaa sida aynnu noqon doonno waxyaabahaas la'aantood.

I rumayso; isla marka aad go'aansato in aad waxaas faraha ka qaaddo, ayaad dareemaysaa awood aadan hore u dareemin!

Iyo farxad aan kala–go' lahayn oo aadan hore u heli jirin, sababtuna, waa in ay tahay markii koowaad ee aad naftaada doooratay wixii kale oo dhanna aad iskaga tagtay!

Saaxiib; qofka ku rabaa mar kastaba samirkaaga tijaabin maayo!

Sidaa awgeed; ku kalsoonow qaneecada ah, in kuwa kugu kellifay in aad qaadato go'aankaas ah in aad iskaga tagtaa, ay kaa doonayeen in aad ka tagto, balse aanay dadku mararka qaar jeclayn in ay noqdaan qofka koowaad ee taga ee albaabka soo xidha, ee ay mar kastaba maqaska adiga gacanta kuu saarayaan, ee goo xadhiggaas hummaagga ah oo xorow!

Saaxiib; in aad adiga oo karaamo leh iska tagto, ayaa ka mudan in aad sii negaato adiga oo karaamo seegay oo bahdilan!

*Haddii uu qofku karaamadiisa waayo,* wax u soo hadhayaa ma jirayaan, ee si dhab ah u kala baro, qofka adiga kula dagaal gelaya, iyo ka adiga kula dagaallamaya, oo ku dheg ka hore ee kula dagaal gelaya, xataa haddii ay

halbawlayaasha gacmahaagu googo'ayaan adiga oo ku dheggan, oo ha ku sii dhegganaan ka danbe ee adiga kula dagaallamaya, xataa haddii ka–tegitaankiisa aad u malaynayso in aadan ka soo waaqsanayn oo aad ku halaagsamayso!

Saaxiib; waxa qofka soo mara xilliyo uu dhaado sida uu war–jira–moogga (qof cid waliba ay ka hoos bixi karto) isaga ahaa, dhibna ma laha dareenkaas baraarugga ahi, marba haddii aad ugu danbayntii kaalintaada dhabta ah garatay!

Waxa soo mara qofka xilliyo uu dhaado sida uu u degdegay markii looga baahnaa in uu yara hakado oo uu cagta u yara dhigo!

Sidoo kale; taasina dhib ma laha, mar haddii aad ugu danbayn qiimahaagii garatay!

Waxa soo mara qofka xilliyo aanu naftiisa ka cafiyin maadaama ay oggolaatay in gefafka qaar ay soo noqnoqdaan!

Balse taasina wax weyn ma aha, mar haddii ugu danbayn aad fahantay oo aadan dhoohane (qof aan waxba ogeyn) sii ahaanayn!

Saaxiib; ugu danbaynta qofku waxa uu gaadhaa qaneeco ah, in aanay habboonayn in uu dagaalladaas lagu khasaarayo galaa, oo la gaadhay xilligii uu naftiisa dooran lahaa ee raaxadeeda uu ka shaqayn lahaa, ee dooro naftaada!

Nabaadiino saaxiib.

# 060 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa ay ku odhanayaan: "waad isbeddeshay!"

Waa wax laga xumaado in dadku natiijooyinka wax aan ahayn aanay arkin, qof sababaha natiijadaas keensaday u fiirsanayaana aanu jirin!

Qofna ma oga in shakhsigan deggan ee qabow ee aad noqotay, uu yahay natiijada gubashooyin badan oo ku soo maray, oo adiga cid aan ahayni aanay ka war qabin!

Qofka gacanta biyo ku haystaana lama mid aha ka gacanta dhinbiisha ku haya!

Qofna ma oga in shakhsiyaddan digtoon ee aad noqotay, ay tahay natiijada dagniinno iyo khiyaamooyin badan oo ku soo maray, oo adiga cid aan ahayni aanay dareenin!

Qofka nabarka qalani uu ku yaallaana lama xanuun aha midka ay xagtini soo gaadhay!

Ma oga qofna in shakhsiyaddan goonnidaaqa ah ee aad yeelatay, ay tahay natiijada kalsoonidii aad ku talax tagtay ee hungada ku soo gebagebowday, qadhaadhkeedana adiga cid aan ahayni aanay dhadhamin!

Qofka qadhaadhka dhadhamiyaana lama mid aha ka weelka ku shubay, ka loo tacsiyaynayaana lama mid ah ka tacsiyaynaya, bukaanka xanuunsanayaana lama mid aha ka soo booqday, geedkana jidibku (faashku) kama dhigo geed, ee meyd dogob ah ayuu ka dhigaa, ee sidee ayaanad isu beddelayn?!

Nabaadiino saaxiib.

## 061 – Waan ku salaamay saaxiib

Nebigu ﷺ waxa uu Yaman u diray Mucaad Ibnu Jabal, isaga oo Mucaad gaadiidkiisii saaran, ayuu nebiguna ﷺ dhinac soconayay oo uu la dardaarmayay.

Markii uu nebigu ﷺ dardaarankii ka dhammaaday ayuu ku yidhi: "Mucaadow; laga yaabee in aadan i arag sannadkan ka dib, laga yaabaa in aad soo marto (anigoo geeriyooday) masjidkayga iyo qabrigayga!"

Markaasuu Mucaad ooyay!

Waanigaas imminkana anigu ooyaya saaxiib!

Dareenka laabtiisa xulayay xanuun badnaayee markaas.

Waxa uu sawirtay nebiga oo ruuxdiisii sharfanayd ay ka baxday jidhkiisii daahirka ahaa, oo inta kafan lagu duubay qolkii Caasha xabaal looga qoday, oo nebiyada waxa lagu aasaa halka ay ku geeriyoodaan.

Waxa luxudka (iilka) loo geliyay sidii uu ku dardaarmay, ciiddana waa lagu dam siiyay!

Alla qolkaasi nasiib badnaayee, daahirnimadii koonka oo dhan ayuu kulmistay.

Alla bal muu qalbigaygu qolkaas ahaan lahaa!

Alla bal maan kafanta jidhkiisa ku duuduuban ahaan lahaa!

Amaba xabbad ciid ah oo ka dabooshay kadeedkii dacwadda iyo kakanaantii socdaalka dacwadeed!

Alla bal maan ahaan lahaa albaabka qolka, aan cimrigayga oo dhanba u taagnaado dugsigiisa oo aan jidhkiisa sharfan ilaaliyo'e!

Saaxiib; mar kasta oo aad qof kugu qaali ah weydo, isku samirsii sayidkaagaas, cid isaga ka qaalisanayd oo ka mudnayd ma jirto, adduunka oo dhanna waxa ka qaalisan cidhibta kabtiisa'e.

Haddana ugu danbayntii; xabaal ayuu u hoyday!

Nabaadiino saaxiib.

# 062 – Waan ku salaamay saaxiib

Dadka ayaad iiga cabanaysaa, markaasaad iga waayaysaa wax aan ka ahayn samirsiintaydii caadada ii ahayd.

Waxa aad iga dhadhansanaysaa in aan ka cabanayo waxa aad adiguba ka cabanayso!

Se dhib ma laha in qof dhaawacani uu qof kale oo sidiisa dhaawacan dhayaa, oo dhadhanka dhaawacaaga qof aan dhadhamini ma dhaadi karo, xanuunka nabarkana qof aan soo tijaabini waxba ka garan maayo.

Ka dibna waxa ay ku odhanayaan saaxiib: "waad isbeddeshay!"

Runtuna waa in aadan isbeddelin, ee aad wax fahantay, oo aad fahandarradii iyo dhoohanaantii ka kortay, qalbi wanaaggaagii aad cid walba u bandhigtay, ee qaar aan u qalmin aad siisayna aad ka weynaatay!

Waxa aad ula muuqanaysaa qof xun oo liita, maadaama aad go'aansatay in aad naftaada darteed u noolaato!

Waxa aad ula muuqanaysaa qof kakan oo qalbi–dhagax ah, maadaama aad joojisay tanaasulkii iyo dulqaadashadii ku–talaxtagga ahaa!

Mushkiladda dadku saaxiib, waa in ay wanaag kasta oo aad u samaysaba u arkayaan waajib ay xaq kuugu lahaayeen!

Samir kasta oo aad iyaga ugu samirtayna ay xaq ay kugu leeyihiin u arkayaan!

Dulqaad kasta oo qalbigaaga oo gubanaya aad u muujisayna waxa ay u arkayaan in aad raalli ku tahay!

Ma oga in uu qofku si walba ugu dedaalayo in aanu jarin miiqa dunta ah ee isaga iyo dadka u dhexeeya, laakiin aakhirka uu gaadhayo marxalad uu dedaalkaas ka daalo oo uu faraha ka qaado!

Saaxiib; iska hubi cidda aad wax u quudhayso, deeqdaadu qofka liitaa in uu kugu danaysto ayay keentaa, cafiskaagana doqonku in uu ku dhayalsado ayuu ka sii qaadaaye!

Saaxiib; qofna rabitaankiisa ha raalli gelin, xataa haddii ay keensanayso in aadan qolkaaga ka bixin, tanaasulka iyo dulqaadka badanna yaree oo ha u hurin qof aan garanayn sababta aad sidaas u samaynayso, maadaama aad doonayso in aad sii haysato oo aydinaan iswaayin.

Ha u noqonin qof liita bakoorad uu ku tukubo oo isla marka uu iskii in uu u socdo awoodo uu kala jebiyo!

Garab iyo gaashaanna ha u noqon danayste mar walba isagu kaalinta koowaad isdhigaya!

Laakiin qofka marka aad dhankiisa tallaabo u qaaddaba dhankaaga isaguna tallaabo u soo qaada,

Qofka aad gacan hagar la'aaneed u fidiso ee hiif la'aan ugu dhega,

Qofka aad caawisay ee fursaddu marka ay ku soo aaddo in uu ku garab qabto aan ka labalabayn,

Qofka aan agtaada dhayalka sahalada ah ku ahayn ee aad adiguna og tahay dhankiisa in aad tabtaas oo kale ka tahay oo aadan ku fududayn,

Gawsdanbeedka ku qabso oo ku dheg, dadka jaadkaas ahi aad ayay dhif iyo naadir u yihiin, mar walbana in aad heshaa way adag tahaye!

Se dadka intiisa kale, iska uruuri oo ha isa siin, badigoodu rar saayid ah oo culays uun kugu kordhiya ayay kugu noqonayaan'e!

Nabaadiino saaxiib.

# 063 – Waan ku salaamay saaxiib

Alla iimaanku muxuu xaalka aadamaha gedgeddiyaa, addoonka mudane ayuu ka dhigayaa, mudanahana addoon!

Bilaal Ibnu Rabaax addoon ayuu ku ahaa Umaya Ibnu Khalaf agtiisa, ilaa markii uu iimaanka yeeshay ee uu xaqa rumeeyay, markii uu Umaya bacaadka Maka ku cadaabayayna, Bilaal mudane ayuu ahaa, Umayana addoon, oo Bilaal jidhkiisa waa la lahaa, qalbigiisa se xor ayuu u ahaa, halka Umaya uu jidhkiisu xorta ahaa, qalbigiisana uu addoonka ka ahaa, qofkuna waa qalbigiisa iyo hadba sida uu yahay uun!

Maashida oo ahayd Fircoon gabadhii hablihiisa timaha u feedhi (shanlayn) jirtay, waxa ay ahayd addoon la leeyahay, Fircoonna waxa uu ahaa boqor sida uu aaminsanaa garaadkii siyaasadeed ee waagaas ay reer–Masar lahaayeen, iyo Ilaah sida uu u arkayay garaadka diimeed ee dadkaasi.

Markii ay iswaajaheen labadoodaasi xaalkii wuu isgeddiyay.

Fircoon ayaa noqday addoon, Maashidina waxa ay noqotay boqorad.

Ubadkeedii ayuu mid mid dab uu shiday ugu tuuray, mar kastana waxa uu wax u weydiinayay sidii addoon dullaysan isaga oo ku leh: “waa kuma Rabbigaa?!”

Markaasay iyaduna sidii boqorrada ugu jawaabaysay: “Rabbigayga iyo Rabbigaaguba waa Ilaahay!”

Fircoon markaa waxa uu lahaa jidhkeeda, se qalbigeeda iyada ayaa lahayd, qofkuna waa hadba qalbigiisu sida uu yahay!

Saaxiib; ha u malaynin in Bilaal iyo Maashidi ay ahaayeen dhacdooyin beri hore ahaa oo la iska illaaway, ee goor kasta iyo goob kastaba waxa jira Bilaal iyo Maashida, qaarkood ay ku celcelinayaan "keli... Ilaahay waa keli!" Kuwo kalena ay ku celcelinayaan: "Rabbigayga iyo Rabbigaaguba waa Ilaahay!"

Sheeko xallad leh ayaan kaaga qisoonayaa saaxiib ee i dhegayso.

Afar sano ka hor gabadh nadaafadda ka shaqaysa oo Xabashiyad ah oo 18 jir ahayd oo la odhan jiray Bortikaan, diinteeduna ay Kiristan ahayd ayaan gurigayga shaqo ka siiyay.

Markii aan arkay in ay aad diinteeda ugu dheggan tahay ayaan u sheegay, maalinka axadda haddii ay kaniisadda aadayso in aan sii qaadayo, marka ay ka soo noqonaysana aan soo qaadayo.

Waxa ay ii sheegtay in aanay taas hadda u baahnayn, ee ay doonayso in ay soonto.

Waan ka aqbalay, xaaskaygiina waxa aan u sheegay in ay cunto ku habboon qof sooman u diyaariso 12[ka] duhurnimo, oo ah saacadda ay iyagu afuraan.

Waxa ay ahayd gabadh aad u wanaagsan, annaguna ehel wacan ayaannu u noqonay.

Waxa aannu ula dhaqmaynay sidii in ay tahay qof dhiigayaga iyo dheecaankayaga ah, xataa waxa ay iigu yeedhi jirtay aabbow, xaaskaygana waxa ay ugu yeedhi jirtay hooyoy.

Carruurtayduna waxa ay ula dhaqmi jireen sidii walaashood.

Marka aannu hudheel aadno hal miis ayaannu wax ku wada cuni jirnay oo hal qoys ayaannu isku ahayn, sida inantayda ayayna miiska wax iigula cunaysay.

Marka aannu carruurtayada dhar u soo gadaynno, dhar la qiime ah ayaan u soo gadi jirnay.

Xataa marka aan carruurtayda nusasaacaha siinayo mid la mid ah ayaan siin jiray.

Marna uma aanan sheegin in diinteedu ay khaldan tahay, Islaamkana uguma aanan yeedhin!

Maalin kasta waxa aan carruurtayda u dhigi jiray Riyaadu Saalixiinka, marna kama aanan dalbanin in ay nala soo fadhiisato.

Hablaha ayay qolka la seexan jirtay, habeenkii ayayna inantayda Faadumo weydiin jirtay diintayada.

Laba sano ayuu xaalku sidaas ahaa.

Sannadkii saddexaad, Ramadaan hal toddobaad ka hor ayay igu tidhi: "aabbow; waxa aan doonayaa in aan wax kuu sheego!"

"Soo daa!" Ayaan ku idhi.

Way ashahaadatay!

Bishii Ramadaan oo dhanna way nala soontay, taraawiixdana guriga ayay nagula tukan jirtay maadaama bandawgii karoonuhu uu jiray oo masaajiddadu ay xidhnaayeen.

Si layaab leh ayay salaadda u ilaalin jirtay, heer xataa ay carruurtayda salaadda ku ilaalin jirtay.

Waxa dhammaaday xilligii ay nala shaqaynaysay, waxana ay damacday in ay dalkeedii ku laabato oo aanay ka soo noqonin!

Waan ogaa in ay halkaas mucaaradad xooggan kula kulmi doonto.

Oo dee sidee ayay inan yari ehelkeeda oo dhan u waajahaysaa iyada oo mawduucu uu waliba diin yahay?!

Ka dib waxa aan u sii diyaariyay iswaajihiddaas sugaysa.

Waxa aan u sheegay, in u–samo–falka waalidka iyo xidhiidhinta qaraabada aanu macneheedu ahayn in uu qofna diintiisa inagu qasbo, qof walibana uu keligii dhimanayo, keligii la aasayo, Ilaahayna uu keligii is'hortaagayo!

Waxa aan uga warramay qisooyin badan, sida markii nebi Ibraahin nkh'e iyo aabbihii ay iswaajaheen, iyo sidii uu baarrinimadiisii u ilaashaday isaga oo aan diintiisiina ka tegin!

Iyo Sacad Ibnu Abii Waqaas markii ay hooyadii iswaajaheen, ee ay ku dhaaratay in aanay waxna cunayn waxna aanay cabbaynin ilaa uu Islaamnimada ka laabto.

Ee uu yidhi: "hooyoy; haddii aad boqol nafood lahaan lahayd, oo ay mid mid nafahaasi kaaga bixi lahaayeen, kama aanan laabteen diintaydan!

Waxa aan uga warramay Bilaal iyo dhawaaqiisii waaray ee ahaa: "keli... Ilaahay waa keli!"

Waxa aan uga warramay Maashida iyo jawaabteedii dhaxalgalka noqota ee ahayd: "Rabbigayga iyo Rabbigaaguba waa Ilaahay!"

Waxa aan uga warramay Suhayb Arruumi, iyo markii uu nebigu ﷺ ku yidhi: "waad ku macaashtay ganacsigaagii Abu Yaxyow!"

Wixii aan filayay ayaa dhacay, inantaydiina halkaas way ku keliyaysatay, se gabadh taag daran ma aanay ahayn!

Waxa ay lahayd go'aankii Bilaal, kalsoonidii Maashida, awooddii Sacad iyo saahidnimadii Suhayb.

Waxa ay ka dalbadeen in ay Islaamka ka tagto, wayna ka diidday!

Si kasta oo ay isugu dayeenba waxba way ka aqbali weyday!

Markii ay isku dayeen in ay u guuriyaan, iyaga oo in uun in ay diinteeda ku soo laaban doonto rajaynayana, waxa ay ku tidhi: "Muslimaddu Muslin ayuun bay guursataa!"

Si joogto ah ayay iila soo hadli jirtay, aniguna aan niyadda ugu dhisi jiray.

Waxa aan u sheegi jiray in ay ehelkeedana u samo fasho, diinteedana ay ku dhegganaato.

Malihii wanaagsanaa ee aan ka lahaa way ka dhabaysay.

Maanta ayay ila soo xidhiidhay oo ay igu tidhi: "aabbow; marka ay Ramadaan bilaabanto ii soo sheeg aan soomo'e!"

Waxa ay noo timi iyada oo Kiristan ah oo magaceedu uu yahay Bortikaan, waxana ay naga tagtay iyada oo Muslimad ah oo magaceedu uu yahay Nuur!

Waxa ay na bartay ka badan wixii aannu barnay.

Waxa ay na bartay in iimaanku uu sameeyo mucjisooyin caadajiidh (qeyral caadi) ah, qofkuna uu yahay hadba qalbigiisu sida uu yahay uun!

# 064 – Waan ku salaamay saaxiib

I rumayso marka aan ku leeyahay, dagaalka ugu qadhaadh ee uu qofku galaa, waa ka uu u galo ilaashiga saafinimada qalbigiisa!

Noloshani qalbiyada way engejinaysaa!

Wax kasta oo aad khasaartaba, qalbigaaga ha khasaarin, qofka qalbigiisa waayaa waa qof jabay, adduunka oo idilba ha ku guuleysto'e!

Saaxiib; muuminku noloshan adduun waxa uu ku yahay sidii dagaalyahan dagaal ku jira, oo booska uu ka dagaallamayo wuu bedbeddelaa, laakiin goobta dagaalka marnaba kama baxo.

Dagaallada qaar aad ayay u qadhaadh yihiin oo ciidanku ma wada waajihi karaan, dhibna ma laha in dagaallada qaar dibugurasho la sameeyaa, marba haddii niyaddu ay tahay in ugu danbaynta dagaalkaas aynnu ku adkaanno.

Haddii aad lahayd cibaado aad dabaysha xawaareheeda kula tartanto, oo aad muddooyinkii u danbeeyay hakasho iyo horusocod la'aan iska aragtay, jiho kale samee oo afka u saar.

Haddii albaab aad dhanka Ilaahay ku aadi jirtay uu kaa xidhmo, ha fadhiisan oo shanta dhabanka ha saarin, ee furo irrid kale oo aad dhanka Rabbigaa ku aaddo.

Salaatulaylkii ahaa cibaadadaada ugu xooggan ee aad hadda awoodi weyday, ku beddel sadaqooyin aad maalinkii la baxdo.

Soontii sunnaha ahayd ee aad joojisay, ku beddel booskeedii xifdinta Quraanka.

Naftan haddii aadan ku mashquulin xaqa, baadil ayay kugu mashquulinaysaa, ee xaqa ku daali.

Noqo sida askariga dhaawacan ee is'adkaynaya, si uu u gaadho fadhiisinkii ciidankiisa.

Ha isu dhiibin dhaawacyadaada, geeridaada ayay sababayaanye!

Saaxiib; addoonka waxa lagaga xarrimaa cibaadada denbi uu ku dhacay, ee iska jir in aad denbigaas ka dhigto jeedal gacanta shaydaanka ku jira, oo mar kasta oo aad cibaado ku hammido uu kugu jeedalo!

In aad goob dagaal ku guul darraysataa kama dhigna in aad dagaalkii oo dhanba ku khasaartay!

Shinbirka in uu baal ka dhacaa kama dhigna in shinbirkaasi uu dhulka ku dhacay!

Geedka in ay laani ka jabtaa kama dhigna in ay dabayshu geedkaas ka adkaatay!

Qofku wuu istiili karaa oo naftiisa kadeedka wuu xamilsiin karaa, ee ha bannayn booskaaga aad dagaalka kaga jirto!

Nabaadiino saaxiib.

## 065 – Waan ku salaamay saaxiib

Jacaylka marka ay noqoto, waynnu raad goobnaa cudurdaarrada, amaba innaga ayaa hal'abuurna, maadaama aynnu doonaynno in aynnu sii negaanno!

Mar kastaba xidhiidhinta innaga ayaa ku hormarna innaga oo isku qancinayna, in laga yaabo in uu ina soo xidhiidhin lahaa ee uu mashquulay!

Innaga ayaa xaalkiisa horweydiinna innaga oo isku leh, in uu ina soo xaal waraysto wuu doonayay ee wax ayaa helay!

Waxa aynnu u dirnaa: "ma fiican tahay?!"

Waxa aynnu nafeheenna ku qancinaa in sababta uu i noo soo xaal waraysan waayay ay tahay in aanu fiicnayn oo ay wax uun heleen!

Ma jiraan wax ka qadhaadh in aad mar walba noqoto qofka wax bilaabayaa!

Saaxiib; ha dawarsan jacaylka!

Jacaylka marka ay noqoto, danayn ayaa danayn dhasha, oo xaalwaraysi ayaa xaalwaraysi dhala, oo hadal–horbilaabid ayaa hadal–horbilaabid dhasha!

Iska jir in aad u fahanto hadalkaygan in aan ku leeyahay i sii aan ku siiyo ka dhig xaalka lammaankaaga kaa la dhexeeya, dadka isjecel xisaabtanka noocaas ahi kama dhexeeyo'e!

Ee waxa aan uga jeedaa hadalkaygaas, inta aadan wax walba hurin ee aadan badka iskeenin, hubi marka koowaad in aad tahay gacallaha qalbiga lammaankaagaas!

Dareennada caadifadeed ee loo quudho qof aan u qalmini nafta quudhsi ayay ku yihiin, aniguna waxa aan

kula doonayaa in aad noqoto gacalle la jecel yahay, ee aadan noqonin qof liita oo la quudhsado!

Dareennada caadifadeed ee loo quudho qof aan u qalmini, waa sidii ubax lagu beeray kuddaafad!

Baro halka aad ku beerayso ubaxyadaada, haddii aad aragto in ay carrasan tahay, biyaha indhahaaga ku waraabi, muhimna ma aha haddii aad kun jeer noqoto qofka wax walba horbilaabayaa!

Balse i rumayso; qofka sida dhabta ah kuu jeceli, kuguma kellifayo in aad mar walba noqoto qofka wax walba horbilaabaya!

Nabaadiino saaxiib.

# 066 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa aad i leedahay: "Ilaahay waan baryaa, se si hoose ayaan isu weydiiyaa sida uu Ilaahay waxaas oo dhan u beddelayo?!"

Waxa aan ku leeyahay: adiga waxa lagaa doonayaa waa ducada uun, se sida ay wax u dhacayaan hawl adiga kuu taalla ma aha, ee ha ka soo qaadin mid ka mid ah waxyaabaha aad wax ka qaban karto ee adiga ku hurran, sida ay waxaasi u dhacayaanna waa uun sababo, sababaha oo dhammina gacanta Ilaahay ayay ku jiraan!

Marka xigta, waxa aan kaaga digayaa, in ay kula weynaato arrin sida uu Ilaahay wax uga qabanayaa!

Haa!

Way dhacdaa in qofku uu waxyaabaha qaar madhacaan u arko marka uu dhankiisa ka eegayo, wayna dhacdaa in uu si hoose isugu yidhaahdo: "waxa ay masaladani u baahan tahay mucjiso!"

Saaxiib; sidaas awgeed ayayba ducadu u jirtaa... si ay mucjisooyin u samayso!

Balse ugu horrayn, waa in aad ka beri yeeshaa xooggaaga iyo xeeladdaadu in ay wax ka qaban karaan, oo aad xoogga iyo xeeladda Ilaahay u dhaaftaa, aadna Ilaahay u baridaa sida uu qofka qarqoomaya ee aan arkaynin xataa xunbo uu cuskadaana uu Ilaahay u baryo, ee uu Ilaahay u miciinsado, isaga oo si yaqiin ah ugu qanacsan in uu ducada ka ajiibayo!

Oo iska jir in aad Ilaahay ula dhaqanto sidii in aad tijaabinayso oo kale, oo rumee marka hore, ka dibna natiijooyinka uun sug!

Saaxiib; marba haddii aad u aragto in arrinkaagu uu sababaha ugu gacan jiro, Ilaahay wuu isu kiin deynayaa adiga iyo sababaha, iyaga ayuuna hawshaada u dhaafayaa. Se marka aad u aragto in arrinku uu isaga gacantiisa ku jiro kor ahaaye... isaga gacantiisa oo keliya, waxa uu arrinkaaga u sababaynayaa xataa sababo aan cidna niyaddooda ku soo dhacaynin!

Saaxiib; Ilaahay si dadban ayuu hawlaha u dhammeeyaa.

Sidaas awgeed; shardi ma aha in aad aragto tallaabooyinka iyo sababaha uu farajkaagu ku jiraa!

Markii Yuusuf nkh'e sida dulmiga iyo gabboodfalka ah loogu tuuray xabsiga, wuu awoodayay Ilaahay in uu soo diro danab derbiyada xabsigaba dumiya oo uu ka soo saaro, se haddii uu sidaas yeeli lahaa waxa uu Yuusuf ka soo bixi lahaa xabsiga iyada oo tuhunkii uu wali ku oogan yahay oo aanay cidina berinimadiisa aaminin, Ilaahayna waxa uu la doonayay xorriyad iyo denbi la'aan wada jira!

Habeennimo ayuu u soo diray Fircoon riyo, masaladaas yar ee fudud ayuuna ugu baahday Yuusuf oo uu u dalbaday in loo keeno, Yuusufna uu diiday in uu xabsiga ka soo baxo ilaa berinimadiisu ay caddaato, sidaasna uu ku noqday xor xil haya oo aamin ah!

Marka aad sababaha i weydiinayso, intan si wacan u xasuuso!

Yaa xataa sii saadaalin karayay in riyo habeennimo ay dhammaanba waaqicii jiray daba geddiyayso oo ay wax ka beddelayso?!

Saaxiib; wax walba Ilaahay u daa, ka dibna u fiirso mucjisooyinka dhacaya uun.

Nabaadiino saaxiib.

# 067 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa aad i leedahay: "way bateen daandaansadayaashii qofka adyadda la soo doonanayay, ee maxaan sameeyaa?!"

Aniguna waxa aan ku leeyahay: kor isu qaad oo isla sarree!

Kuma qasbanid in aad gasho iswaajihid kasta oo laguugu yeedho, ama aad ka qayb qaadato dagaal kasta oo hortaada ka dhacaya.

Waxa jira dagaallo in aad ku jabtaa ay aad u qadhaadhahay, in aad ku guuleysataana ay liidato oo macne buuran aanay lahayn!

Saaxiib; mar ayaan akhriyay in tukuhu uu yahay shinbirka keliya ee ku dhaca in uu gallaydhka u badheedho, oo inta uu dusha kaga fadhiisto uu qoorta ka qaniino, se gallaydhku marnaba hoos isuguma soo celiyo kaalinta tukanimada oo lama dagaallamo, ee keliya kor ayuun buu u sii duulaa, kor ayuu hawada u sii fantaa, ilaa uu gaadho masaafo aanay sanbabada tukuhu xamilaynin, markaasuu tukihii oo ku hungoobay dagaalkaasi iskaga degaa gallaydhka!

Casharkaas si wacan u baro, oo ha ka yeelin in ay heerkooda hoos kuugu soo celiyaan!

Kor u sii fano hawada, ilaa ay gaadhaan heer ay ku neef qabatoobaan kalsoonidaada!

Qaabkaas oo keliya ayaad dagaalkaas ku adkaanaysaa!

In aad kor isu sii qaaddo oo aad hore u socoto.

Nabaadiino saaxiib.

# 068 – Waan ku salaamay saaxiib

Kaa ma qarinayo in aan aad uga diiqadoodo marka telefishannada qaar ay helaan qof da' weyn oo 100 sano kor u dhaafay, ee ay uga hadlaan sidii in uu yahay qof sameeyay wax mucjiso ah!

Su'aasha ugu horraysa ee ay ku boobaan, waa imisa jir ayaad tahay?!

Iyaga oo ka doonaya in uu ku dhawaaqo tirada dadka oo dhan oo wada maqlaya, oo aaminsan in ay mucjiso tirada ku jirto!

Qofna ma weydiinayo waxa uu soo sameeyay cimrigaas dheer oo dhan, waxqabadyada xaqiiqada ah ee uu soo sameeyay?!

Qofna ma weydiinayo inta buug ee uu akhriyay?!

Inta qof ee uu niyadda u dhisay?!

Inta illin uu qof ka masaxay?!

Iyo inta jeer ee uu si niyo ah qalbiga uga qoslay toona?!

Saaxiib; sannaduhu keliya waa tiro uun, cimriga dhabta ah ee qofkuna ma aha cimriga uu tirsanayo, ee waa maalmaha uu sida dhabta ah u noolaa!

Waxa laga sheekeeyaa, in nin Carab ahaa oo la odhan jiray Jibri oo socod badnaa uu magaalaba magaalo uga gudbi jiray.

Mid ka mid ah safarradiisii ayuu ku galay tuulo, waxana uu soo maray xabaaleheedii oo arrin ka yaabisay uu ku soo arkay.

Waxa uu arkay qabriyada oo ay ku dulqoreen magaca marxuunka iyo da'diisa, waxana uu ka yaabay in

cimriyadoodu ay wada gaabnaayeen, marka la barbar dhigo xabaalaha oo ah nooca lagu aaso dadka waaweyn, ee aanay ahayn xabaalo carruureed.

Waxa uu ka akhriyay qabrigii koowaad, in uu qabrigan ku aasan yahay Sacad, oo noolaa sannad iyo saddex maalmood!

Qabrigii labaadna waxa uu ka akhriyay, in ay ku aasan tahay Faadumo, oo noolayd laba sano iyo hal toddobaad!

Qabriba qabriga ka danbeeya dhabannahays ayuu ka qaadayay.

Ugu danbayntii; waxa uu soo gaadhay gaadhkii qubuuraha, waxana uu ku yidhi: "nin weyn oo waayo badan wax badan u soo joogay ayaan ahay, balse ma aanan arag wax igaga yaab badan tuuladiinan!"

Gaadhkii oo dhoollo caddaynaya ayaa ku yidhi: "laga yaabaa in aad u jeeddo cimriyada gaagaaban ee lagu qoray qabriyada. Waxa aannu cimriga qofka ka xisaabinaa maalmaha uu farxadda ku noolaa oo keliya! Sacad tusaale ahaan; waxa uu noolaa 50 sano, laakiin hal sano iyo saddex maalmood oo ka mid ah ayuun buu farxad ku qaatay. Balse inta maalmood ee kale ee uu noolaa, waxa uu ku qaatay rafaad iyo kadeed! Waxa aannu qornay uun intii uu faraxsanaa, intii uu kadeednaana waannu laalnay!"

Jibri ayaa ku yidhi: "haddii aan magaaladiinna ku dhinto, ku qora qabrigayga: waxa qabrigan ku jira Jibri, oo uurka hooyadii iyo xabaasha toos ugu kala gudbay!"

Saaxiib; muhim ma aha inta uu qofku noolaanayaa, ee muhimaddu waa sida uu u noolaanayo!

Waxa aan kaaga digayaa, in cimrigaagu uu noqdo keliya maalmo tirsan uun, haddana ay jiraan sannado aad ku faanayso in aad soo qaadatay, iyaga oo haddana ah keliya tiro madhan oo aan macne xanbaarsanayn!

Saaxiib; cirmiga laguma qiyaaso tirada maalmaha, ee waxa lagu cabbiraa tirada tijaabooyinka!

Nabaadiino saaxiib.

# 069 – Waan ku salaamay saaxiib

Laga yaabaa in aad imminka isleedahay: "sidee ayuu Ilaahay xaqaygii iigu soo celinayaa?!"

Amaba laga yaabaa in aad xoog u cadhaysan tahay oo aad isleedahay: "sidee ayuu Ilaahay iigu aar gudayaa?!"

Waxa aad markan eegaysaa sababaha, wax walibana markaas waxa ay kuu la muuqanayaan wax adag oo sida ay ku dhacaan ay dheer tahay oo ay dhib leedahay!

Saaxiib; ha ka fekerin adkaanshaha dhankaaga kaaga muuqda, ee ka feker awoodda Rabbigaaga aad baryayso!

Goorma ayaynnu bilawnay in aynnu Ilaahay weydiisanno sida uu wax i noogu samaynayo saaxiib?!

Sida ay wax u dhacayaan Ilaahay isaga ayaa og, ee innagu si yaqiin ah ayuun baynnu u barinaa!

Se qorshaynta dagaalka iyo hubka aargoosigu, Ilaahay ayay gacantiisa ku jiraan, Allaha awoodda weyni isaga ayaa murtidiisa ku debberaya!

Ilaahay badanaaba waxa uu inagaga yaabsadaa hubka uu u doorto dagaalka!

Markii uu Nuux gacmihiisa kor ugu taagay samada isaga oo leh:

(أَنِّي مَغْلُوبٌ فَانْتَصِرْ) القمر ١٠.

"Waa la iga itaal roonaaday ee ii gargaar!"

Marnaba kuma aanay soo dhicin in aargoosiga Ilaahay uu noqon doono mid la la deyaamo oo ilaa heerkaas argagax badan!

Laga yaabaa waxa ugu badan ee uu Ilaahay ka rajaynayay in ay ahayd, in uu hal mar wax ku hab siiyo, ama uu qaylo ku halaago!

Haba yaraato'e cid dhulka ku dhaqan ama samada ku nooli ma aanay filanayn in hubka dagaalkaas uu Ilaahay u adeegsanayaa uu noqdo biyo!

Hubka uu Ilaahay kor ahaaye u adeegsanayo dagaalkaas uu ugu gargaarayo addoonkiisa dulman waxa uu noqday, in uu Ilaahay amray samada in ay biyeheeda soo hooriso, dhulkuna uu biyihiisa soo burqiyo, baduhuna ay berriga daboolaan.

Dhulku dabo iyo dacal wuu qarqoomay, heer la gaadhay in cid amarkaas Ilaahay cid kale ka badbaadin karaa aanu jirin, Ilaahay mooyaane!

Qisooyinka Quraanku ma aha sheeko lagu madadaasho saaxiib, ee waa caqiido, casharro iyo iimaan, qofka la dulmiyaana waxa keliya ee uu u baahan yahay, waa in uu gacmihiisa cirka u taago oo uu Ilaahay u cabto.

Se fasiraadaha la xidhiidha dagaalkaasi sida uu u dhacayo iyo hubkiisu, waa arrimaha uu Ilaahay murtidiisa ku kala debberayo.

Saaxiib; haddii aad noolaato waayihii Namruud oo kale, oo aad aragto isaga oo dadka amraya in ay u sujuudaan, oo aad aragto isaga oo nebi Ibraahin nkh'e si kulul oo ismuujin leh ula doodaya oo leh:

(أَنَا أُحْيِي وَأُمِيتُ) البقرة ٢٥٨.

"Aniguba wax waan nooleeyaa waxna waan dilaa!"

Laga yaabaa in aad adiga oo amankaagsan isweydiiso: "sidee ayuu Ilaahay waxaas oo dhan u beddelaya! Ama hub noocma ah oo wax gumaada ayuu

Ilaahay u dooranayaa in uu ku dulleeyo gabboodfalahaas?!"

Dabcan; qofna niyadiisa kuma aanay soo dhacaynin, in uu Ilaahay korreeye u soo diri doono mid ka mid ah askartiisa, si uu uga aarsado.

Askari yar oo xataa ishu ay dirqi ku arkayso!

Kaneeco!

Haa!

Hal xabbo oo kaneeco ah oo uu sanka ka geliyay ayaa maskaxdiisa degtay!

Ma uu xasili jirin ilaa dadkii isaga u sujuudayay ay madaxa kabo kaga garaacaan!

Qaabkaas fajicisada leh ayuu Ilaahay u debberaa amuuraha saaxiib!

Saaxiib; haddii aad goobjoog u ahaan lahayd markii Ibraahin nkh'e la saaray gacanka manjaniiqa ee dabka lagu tuuray, waxa aad is'odhan lahayd: "laga yaabaa in uu Ilaahay ku damiyo dabkaas biyo uu ka soo shubo samada hal mar!"

Kaas ayuu ahaa xalka keli ahi mar haddii dabkaasi uu isagu iskii wax u gubayo.

Se dabkaasi amarka Ilaahay ayuu ku shaqaynayay, amarkii la siiyayna waxa uu noqday, in uu qaboobo oo uu nabad geliyo Ibraahin, wuuna fuliyay!

Ilaahay korreeye xataa waxa uu beddelaa waxyaabaha arrimaha u gaarka ah ee ay ku sifaysan yihiin haddii uu doono.

Mindidii afka badnayd ma aanay gawricin Ismaaciil!

Nibirigii dadcunka ahaa ma aanu cunin Yoonis xataa isaga oo liqayba!

Wax walba oo koonkan ka jiraa amarka Rabbi ayay ku shaqeeyaan, ee ha eegin sababaha, ee la jir Rabbiga sababaha, isaga ayaa kaaga filnaanaya wixii dhankaas khuseeyaba'e!

Nabaadiino saaxiib.

# 070 – Waan ku salaamay saaxiib

Ilaahay waxa uu ugu jecel yahay marka uu addoonkiisu isaga oo hortaagan isu dhul dhigo ee uu taagdarradiisa u muujiyo, ee isu dhul dhig Ilaahay oo taagdarradaada oo dhan isaga la hortag, niyad'dhisku sidaas ayuu kuugu imanayaaye!

Isugu dhul dhig oo tamar yaridaada ugu muuji sidii Yuusuf nkh'e walaalihii markii ay lahaayeen:
(يَا أَيُّهَا الْعَزِيزُ مَسَّنَا وَأَهْلَنَا الضُّرُّ وَجِئْنَا بِبِضَاعَةٍ مُزْجَاةٍ فَأَوْفِ لَنَا الْكَيْلَ وَتَصَدَّقْ عَلَيْنَا إِنَّ اللَّهَ يَجْزِي الْمُتَصَدِّقِينَ) يوسف ٨٨.

"Mudanow; annaga iyo ehelkayagaba abaar iyo waqti adag ayaa na soo maray, waxana aannu kuu la nimi raasamaal yar (alaab liidata), ee nagaga gado intii aad horeba noogaga gadan jirtay, oo wax nagu sadaqayso, Ilaahay ayaa u abaal guda sadaqaystayaasha'e."

Haddii aad doonayso in uu Ilaahay ku ciseeyo, isu dullee isaga marka hore!

Hadda u fiirso hadalkoodaas: "boqorow!"

Adigana waxa aan kuu dirayaa Allaha in uu yidhaahdo waxaas: "ahow" uu markaasba ku ahaanayo!

Way fiican tahay in aad niyadda ku hayso in uu Ilaahay naxariis badan yahay, laakiin marka hore xasuusnow in uu wax walba karo!

Xasuusnow sidii uu dhulka u amray in uu biyihiisa soo burqiyo, isaga oo u hiilinaya Nuux nkh'e, ee uu dhan walba biyaha uga soo saaray!

Iyo sida uu u amray ushii Muuse in ay noqoto mas ee ay u noqotay!

Iyo sida uu u amray buurtii in ay dusha kaga timaaddo (qoomkii Shucayb) ee ay ugu habsatay!

Iyo sida uu u amray baddii in ay kala jeexanto oo dariiq qallalan ay samayso ee ay u noqotay!

Iyo sida uu dabkii u amray in aanu wax gubin ee holaciisii uu u damay!

Iyo sida uu mindidii u amray in aanay wax gawricin ee ay u af beeshay!

Iyo sida uu nibirigii u amray in aanu dheefshiidin ee dugaagnimadiisii ay u dantay!

Waa kaas Allaha weyn ee aan kula doonayo in aad baridaa, ee karaankiisu uu badan yahay, joogtadana uu yahay ee uu waarayaa!

U fiirso hadalkoodaas:

(مَسَّنَا وَأَهْلَنَا الضُّرُّ) يوسف ٨٨.

"Annaga iyo ehelkayaga dhibka (abaarta) ayaa na taabtay!"

Saaxiib; marka aad dadka u cabanayso, waxa aad ka helaysaa keliya dareenno caadifadeed haddii ay ugu wanaagsanaato, iyo eegmooyin naxariiseed oo laguu dhibro.

Se marka aad Ilaahay u cabato, marka aad adiga oo garbo beelay aad u timaaddo, adiga oo duulaya ayaad ka noqonaysaa!

Marka adiga oo niyad jabsan aad u timaaddo, waxa aad ka noqonaysaa adiga oo niyaddu ay kuu dhisan tahay!

Marka adiga oo qalbi jabsan aad u timaaddana, adiga oo farxad ku geeraaraya ayaad ka noqonaysaa!

Ee u cabo Rabbigaa!

U adeegso anshaxa carruurta, ilmuhu marka uu wax doonayo wuu ooyaa ilaa inta la siinayo'e!

U oy Rabbigaa saaxiib!

U bari isaga sida faqiirka qadaa–ma–dhergaha ah ee wax uu jidiinka mariyo aan haysani uu albaabada dadka u gacmo hoorsado!

Ugu catow Ilaahay sida uu bukaanku dhakhtarka ugu cataabo oo kale, Ilaahay wuu jecel yahay in la baryo'e!

Waxa soo arooray in uu Ilaahay u waxyooday Muuse nkh'e: "Muusow; i weydiiso milixda qooshkaaga (cajiinkaaga), calafka gaadiidkaaga iyo indhasha (qadhabida) kabtaadaba!"

Qofka Ilaahay u baahda wuu hodansiiyaa, ka Ilaahay ka kaaftoomana Ilaahay wuu ka kaaftoomaa!

U fiirso hadalkooda ah:

(وَجِئْنَا بِبِضَاعَةٍ مُزْجَاةٍ) يوسف ٨٨.

"Waxa aannu kuu la nimi alaab liidata oo aan badnayn!"

Saaxiib; iska jir in ay addeecistaada iyo cibaadadaadu ku cajebiso.

U eeg sidii addoon gaabis badani uu kaga jiro gudashada waajibkiisa, malaa'igtana ka baro edaabta cibaadada!

Hal taako oo kasta oo samada ku taalla malag ayaa sujuudsan ama rukuucsan, maalinka qiyaamena waxa la soo xaadirinayaa iyaga oo leh: "Ilaahayow xumo ka nasahnid'e, cibaadadii aad xaqa noogu lahayd kuu ma aanaan cibaadaysan!"

Saaxiib; marka aad cibaadadaada nusqaan ka dareemayso, ogow in lagaa aqbalay!

Marka aad u aragto in ay dhammays tiran tahay, sidii in aad Ilaahay ugu manno sheeganaysidna, ogow in dib laguugu soo celinayo oo aan lagaa aqbalin!

Cibaadadeennu waa badeecad yar oo yasiran, ee Ilaahay waxa uu i nooga aqbalaa karaamayn iyo dheeraadsiin uu i noogu deeqay!

Ogow; addoonna in aanu Ilaahay xeelad iyo xoog uu leeyahay ugu toosin, ee xulasho uu Ilaahay doortay uu ugu toosay!

Ogow; qofna in aanu Ilaahay kaga jeesan rabitaankiisa, ee Ilaahay uu ka kaaftoomay oo uu ka jeestay!

Ugu mahad naq Ilaahay xulashada uu ku doortay, adiga ayaa u baahan'e isagu kuu ma baahna'e!

U fiirso hadalkooda ah:

(فَأَوْفِ لَنَا الْكَيْلَ) يوسف ٨٨.

"Ee nagaga gado intii aad horeba noogaga gadan jirtay!"

Saaxiib; Ilaahay weydiiso aqbalaad, waxa badan qof salaad u taagan oo natiijada qudha ee uu ka gaadhayaa ay tahay daal iyo diihaal uun, iyo qof sooman oo harraad iyo gaajo uun ka korodhsanaya'e, oo ogow; in aanu qofna jannada ku galayn camalkiisa, ee uu ku gelayo naxariista Ilaahay oo daboosha.

Xataa nebigu kuma gelayo camalkiisa, ee waxa uu ku gelayaa naxariista Ilaahay!

Bal ka warran cidda nebi Maxamed ﷺ ka martabad hoosaysana, innaga oo dhammaanteen isaga ka hoosaynna!

Kitaabka شعب الإيمان ee Bayhaqi, iyo kitaabka Xaakim ee المستدرك waxa ay soo werinayaan, in uu nin Ilaahay ku caabudayay 500 oo sano buur fiiqeed oo aanu wax macsiyo ahna lahayn, markii qiyaamihii la gaadhayna uu Ilaahay ku yidhi malaa'igta: "addoonkaygaas naxariistayda jannada ku geliya!"

Ka dibna uu yidhi: "maya'e Ilaahayow waxa aan ku gelayaa camalkayga!"

Markaasuu Ilaahay ku yidhi: "nimcooyinkayga aan ugu deeqay oo keliya camalkiisa bal ku qiyaasa!"

Markaasay nimcada aragga oo keli ahi camalkiisa oo dhanba ka badanaysaa, iyada oo jidhkiisii kale oo dhammi uu hadhsan yahay!

Markaasuu Ilaahay odhanayaa: "geliya addoonkaygaas naarta!"

Ninkii ayaa isaga oo naxsan odhanaya: "ii naxariiso Rabbigayow; ii naxariiso!"

Markaasuu Ilaahay odhanayaa: "addoonkaygaas naxariistayda jannada ku geliya!"

U fiirso hadalkooda ahaa;

(وَتَصَدَّقْ عَلَيْنَا) يوسف ٨٨.

"Oo wax nagu sadaqayso!"

Waa sidaas saaxiib... waa sidaas baryada faqiirka og hantiilaha uu wax weydiisanayo in aanay jirin qaab uu deeqdaas kaga mutaystay, ee calooshiisa hurinaya ee qalbigiisa jilcisanayaa!

Sidaas oo kale ha noqoto baryada Rabbigaa, baryo ka soo yeedhay qof in wax lagu mannaysto doonaya, oo og Allaha uu ka baryayo in aanu sinaba uga mutaysan, ee deeqtoonidiisa uu kaga doonayo!

Baryo uu tuugayo Rabbi haddii uu u diido aan dulmiyin, haddii uu siiyana deeqdiisa iyo naxariistiisa ku siiyay!

Nabaadiino saaxiib.

## 071 – Waan ku salaamay saaxiib

Ma'muun Ibnu Mahraan ayaa ku yidhi saaxiibkii: "marka aan wax sadaqaystaba waxa aan arkaa hantidaydii oo kordhaysa!"

Markaasuu saaxiibkii bilaabay in uu wax badan sadaqaysto, se hantidiisii ay nusqaantay, markaasuu u sheegay in sadaqaddii uu isagu nusqaan ka korodhsaday!

Ma'muun ayaa ku yidhi: "anigu Ilaahay yaqiin ayaan ugu camal falay, adiguna in aad tijaabiso ayaad ugu camal fashay!"

Saaxiib; tallaabada koowaad ee aqbalaadda ducadu, waa in qalbigaagu uu aamminsan yahay in uu Ilaahay kaa ajiibayo!

Tallaabada koowaad ee bogsashaduna, waa in uu qalbigaagu ku xasillan yahay in uu ku shaafiyayo!

Tallaabada koowaad ee denbidhaafkuna, waa in uu qalbigaagu yaqiinsan yahay in uu kuu denbi dhaafayo!

Aqbalaadda Rabbi waxa ugu degdeg badan in uu Ilaahay eego qalbiga addoonkiisa, oo uu arko in rajadiisii oo dhanba uu Rabbigii u gacan geliyay!

Se ducada tijaabinta ahi, waa cibaado ganacsi ah, oo inta aad lacag badeecad geliso, aad dhaqdhaqaaqa suuqa la socoto.

Haddii aad ku faa'iiddo, maalgashi wanaagsan ayaad samaysay, haddii aad ku khasaartana, sababihii macaashka ayaan markaa keenin fursaddii ku habboonayd faa'idada!

Saaxiib; Ilaahay loo ma caabudo si i tus oo i taabsii ah, oo haddii uu wax ina siiyo aynnu nidhaahno wuu

karaa, haddii uu ina siin waayana uu iimaankeennu gilgisho oo yaqiinteennu ay dhantaalanto!

Ka baro yaqiinta dadkii hore.

U fiirso sida ay nebi Muuse nkh'e hooyadii ugu tuurtay webiga, iyada oo kalsooni buuxda ku qabta in uu u soo celin doono!

Ilaahay ayay rumaysay oo wax kasta oo kaleba way beenisay!

Ma aanay odhanin: "sidee ayuu ilmo hadda dhashay ugu badbaadayaa sanduuq ay mawjaddu hadba dhan u weecinayso?!"

Ma aanay odhan: "sidee ayaan Fircoon anigu ugu diraa isaga oo raadinayaba oo gawrac la doonaya?!"

Waxa ku filnayd keliya in ay maqashay ballanka Rabbigeed ee ahaa:

(إِنَّا رَادُّوهُ إِلَيْكِ) القصص ٧.

"Annaga ayaa [wiilkaaga] dib kuugu soo celinayna!"

Si ay biyaha u raaciso iyada oo aan ka labalabaynayn!

U fiirso Haajar oo uu keenay iyada iyo cunuggeedii dhallaanka ahaa nebi Ibraahin nkh'e saxare lama–degaan ah, aan biyo, baad iyo wehel toona lahayn, oo uu qarbad biyo ah iyo kuus timir ah uga tegay, ka dibna uu dhabarka u jeediyay oo uu ka tegay!

Markii ay dhawr jeer ku celcelisay weydiinta meesha uu aadayana, ugu danbayntii ay ku tidhi: "ma Ilaahay *ayaa ku amray in aad halkaa nagaga tagto?!*

Ee uu ugu war celiyay: "haa!"

Ee ay ku tidhi: "iska tag haddaa, Ilaahay nama dayacayo'e!"

Markii biyihii ay ka dhammaadeenna ay dhex guclaysay Safa iyo Marwa, iyada oo biyo ay jidiinka ku qoyso ka raadinaysa!

Ilaahayna uu samsamka uga jeexay addimada ilmeheeda dhexdooda!

Yaqiintii Haajara Ilaahay waxa uu ugu guday biyaha samsamka!

Saaxiib; Ilaahay ma dayaco ciddiisa!

Nabaadiino saaxiib.

# 072 – Waan ku salaamay saaxiib

Sheeko–xariiro ayaa soo tebisa, in uu nin adhijir ahaa adhiga kayn daaqsiin jiray, waxana caado u ahayd in uu cuudkiisa ku garaaco laxanno macaan.

Maalin ayay abeeso laxankiisii jeclaysatay, oo inta ay godkeedii gashay ay Shilin dahab ah ka soo saartay oo ay adhijirihii ku hor tuurtay!

Adhijirihii Shilinkii dahabka ahaa ayuu qaatay oo gurigiisii ayuu isaga oo faraxsan ku laabtay, subaxnimadkii xigayna isla meeshii ayuu aaday, cuudkiisiina laxannadii macaanaa ayuu ku tumay, abeesadiina way soo baxday oo cabbaar ayay ku jaastay laxankii, sidii oo kale ayayna godkeedii uga soo saartay Shilin dahab ah oo ay ugu hortuurtay adhijirihii!

Muddo ayuu xaalku sidaas ku socday, xaalkii adhijiruhuna wuu soo wanaagsanaaday, markaasuu go'aansaday in uu waajibka xajka soo guto, wiilkiisa ayuu adhigiina u xil saaray, isaga oo kula dardaarmay in meesha uu doono ee kaleba uu adhiga ku raaco, meeshii uu lacagta ku bartay mooyaane, isaga oo aan u sheegin sababta!

Wiilkii wax uu muddo ka warwareego meeshiiba, aakhirkii waxa uu iskula shawray in aabbihii aanu sabab la'aan jeexaas (daaqsinkaas) ugu diidin, faduulnimadii iyo xamaasaddii dhallinyaranimo ayaana ku riixay in uu meeshaas ka war doono, adhigiina meeshii uu aabbihii ka waaniyay ayuu u raacay, cuudkiina wuu garaacay, abeesadiina sideedii ayay soo baxday oo ay dheeshay,

aakhirkiina inta ay godkeedii gashay ayay Shilinkii dahabka ahaa u soo saartay oo ay ku hortuurtay!

Wiilkii isaga oo Shilinkii sita ayuu ku soo laabtay gurigii oo hoos uu isugu yidhi: "waa hubaal in ay abeesadani kayd aasan qarsanayso, ee inta aan dilo ayaan kaydkaasna u hadhayaa keligay!

Subixii xigay ayuu seeftiisii iyo cuudkiisiiba qaatay, isaga oo ay ka go'an tahay in uu abeesadaas dilo oo uu kaydkaas hantaa.

Markii uu laxannadii kaga yeedhsiiyay ee ay abeesadiina sidii caadada u ahayd u soo baxday ayuu seeftii galka kala baxay, iyadiina way ka fakatay, laakiin dibka ayuu ka jaray, markaasay qaniintay oo uu dhintay!

Odaygii markii uu xajkii soo gutay ayuu soo laabtay, geerida wiilkiisiina waa loo sheegay iyo in ay abeeso qaniintayba, markaasuu fahmay in ay abeesadu tii uu yaqaanay tahay, xanaaqii uu qaadayna waxa uu ku goostay in uu ka aarsado abeesadaas.

Halkii ayuu adhigii u daaq geeyay, cuudkiina wuu tumay, abeesadiina way soo baxday, si degdeg ahna way ugu noqotay godkeedii oo Shilinkii dahabka ahaa ayay u soo saartay oo ay adhijirihii u tuurtay.

Markaasay ku tidhi: "qaado oo tag, adiguna wiilkaagii illaawi maysid, aniguna dibkaygii illaawi maayo'e!"

Ma jiro qof dhaawacyadiisa illaawaa saaxiib, si kasta oo waqti dheeri uu dhaawacaas uga soo wareego, nabarkiisuna uu u bogsadaba, haddana waa kii raadkiisu uu joogo ee jiro!

Ka dhibka geystaa waligiiba waa qof godob galay oo aargoosiga wuu ka cabsadaa, ka la dhibaana waligiiba fursad uu ku aarsado ayuu gaadaa!

Waxa ugu xun ee dhaawacu uu leeyahay ma aha xanuunka ku lammaan, in kasta oo uu xanuun kulul yahay, ee waxa ugu xuni waa kalsoonida jabta!

Ka la dhaawacayna kalsooni danbe ma qaadayo, ka wax dhaawacayna ma rumaysanayo in baabka dhaawacaas la laabay ee waligiiba wuu raad gadanayaa (wuu is'ilaalinayaa)!

Saaxiib; dhaawacyada qaar waxa keliya ee wax ka qabtaa waa in inta niyadjabka la aqbalo hore looga sii socdo oo aan lagu sii dulnegaanin!

Nabaadiino saaxiib.

# 073 – Waan ku salaamay saaxiib

Dhowaan waxa aan daawaday filin i cajebiyay oo xanbaarsan farriin xeel dheer, qoraagiisana ka tarjumaya.

Magaciisu waa Shutter, waxana uu ka sheekaynayaa qisada qof dhabarka hoostiisa xanuun ba'an ka dareemaya, shaybaadho badanna sameeyay, dhakhtarro door ahna u tegay, se ku hungoobay.

Dhakhtarna ma aanu garan sababta xanuunkiisaas.

Maalin ayuu sawir raajo (X–ray) ah iska qaaday, waxana uu la fajacay, markii uu arkay gabadh ku fadhida garabkiisa!

Waxa uu isku deyay in uu xasuusto cidda ay gabadhaasi ahayd.

Markaasuu gartay in ay ahayd gabadh uu habeen jiidhay oo dhimatay, oo uu ka cararay isaga oo aan dhakhtarka iyo askarta midna gaadhsiinin warkeeda!

Filinku waxa uu ku dhisan yahay fekrad sheekabaraley ah oo ah, in ruuxaha la dulmiyaa ay caydhsadaan kuwii dulmiyay!

Waa hubaal in aynnu aaminsan nahay in ruuxuhu ay janno ku dabbaalanayaan ama ay naar ku jiraan, se waxa filinku uu igu cajebiyay, waa in lagu saleeyay fekradda ah, in waxa xun ee aynnu samaynaa aanay inaga hadhaynin!

Fekraddaasi ma aha mid diinta ka fog.

Waynnu aaminsan nahay in daalimku ugu danbaynta uu ciqaabtiisa mutaysanayo, ka samaha falaana uu ahaalmarinta samafalkiisa helayo, haddii aanay adduunka ku helinna ay aakhiro ku helayaan!

Se waxa caddaaladda Ilaahay ee adduunka ka mid ah, in ficillada qaar uu ciqaabtooda soo dedejiyo oo abaalintooda uu qofka adduunka ku marsiiyo!

U fiirso tusaale ahaan u–samafalka waalidka iyo waalid–caasininada, way adag tahay in kuwaas ilaa qiyaamaha dib loo dhigo abaalintooda, oo ilmaha waalidkii ku foolka adag waxa lagu ciqaabaa ubad ku adag isagana, ka baarriga ahna waxa lagu abaaliyaa ubad baarriyiin ah.

Sidoo kale; way yar tahay in uu Ilaahay daalim gabboodfale ah ka aar gudi waayaa, haddii uu aakhrio dib ugu dhigana, waa xikmad uu isagu u ogaal badan yahay!

Saaxiib; adduunka waxa ka jirta meerto aan wareegga joojinin, qof walibana koobka uu dadka kale ku waraabiyo ayaa isagana lagu waraabinayaa, ee hagaaji waraabka aad dadka siinayso, waxa lagugu waraabinayaa adigana koobka aad ku waraabisay iyaga'e!

Nabaadiino saaxiib.

# 074 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa aan xalay akhriyayay taariikh–nololeedka saaxiibkay Mustafa Maxamuud, horena waanigii kuugu sheegay in aanay mahuraan ahayn in aad qof la kulantaa, si aad ula saaxiibto.

Waxa jira shakhsiyo aad og tahay haddii aad la kulmi lahayd in aad saaxiibo noqon lahaydeen!

Waxa uu aad u jeclaa Mustafa Maxamuud qalliinnada meydadka, heer uu sannadkiisii koowaad ee kulliyadda caafimaadka ee jaamacadda soo gatay meyd jeexii oo inta uu dhex dhigay maaddada Formaldehyde uu sariirtiisa hoos dhigtay!

Ma aanu ogayn in maaddadaas Formaldehyde ee meydadka qudhunka lagaga ilaaliyaa ay leedahay ur aan la dareemayn oo haddii muddo badan uu qofku nuugo sanbabadiisa baabi'inaysa!

Saddex sano markii uu xaalkaas ku jiray ayay sanbabadii aad u xanuuneen, saddexdii sano ee ku xigayna qol gaar ah ayaa keligii lagu faquuqay, jaamacadda ma aanu aadi karaynin, heer isaga oo halkaas ku jira ay saaxiibadii qalin jebiyeen, isaguna uu qolkaas ku xidhnaa!

Waxa uu aaminay in uu yahay nujub nasiib daran, maadaama xataa qalinjebintii uu seegay, waxa keliya ee loo oggolaana uu ahaa akhriska.

Muddadaas waxa uu akhriyay wax ka badan afar kun oo buug!

Markii kadeedkaasi uu ka dhammaaday, xanuunkaasina uu daayay, waxa uu dareemay in

sannadahaasi ay ahaayeen waqtigii ugu wacnaa ee uu soo qaatay, ayna ahaayeen sannadaha isaga sameeyay ee shakhsiyadda uu yahay uu Ilaahay sababta uga dhigay!

Saaxiib; Ilaahay dhibirsamaantiisa mararka qaar qaab imtixaan ah ayuu i noogu keenaa!

Haddii aanu Mustafa Maxmuud faquuqaas geli lahayn, laga yaabee in uu qalin jebin lahaa isaga oo dhakhtar caadiya ah, isaga oo aanay cidina garanaynna uu dhiman lahaa.

Se Ilaahay ayaa doonayay in uu sameeyo ninkii soo saari lahaa barnaamijka Aqoonta iyo Iimaanka!

Saaxiib; haddii aanu xabsi geli lahayn, Yuusuf ma aanu noqdeen khasnajiga Masar!

Haddii aan la marin lahayn imtixaankii gawricista, Ibraahin ma aanu noqdeen Ilaahay saaxiibkii!

Haddii aanay la kulmi lahayn imtixaankii ay ilmaha ku dhashay aabbe la'aanta, Maryama qisadeeda kitaabada samaawiga ah lagama akhriyeen!

Waxa xumaan ka nasahan Allaha kuu imtixaamaya si uu kor kuugu qaado!

Saaxiib; ku kalsoonow debberaadda iyo maaraynta Ilaahay!

Dilkii wiilka yari waxa uu ahaa naxariistii ugu weynayd ee uu Ilaahay ugu deeqay waalidiintii uu Khadar ilmahooda dilay, oo wax yar ayuu Ilaahay kugu imtixaamayaa, si uu wax weyn kaaga badbaadiyo!

Laga yaabaa adiga oo akhriyaya siirada nebiga ﷺ, in aad qalbiga uga murugooto wixii uu kadeed soo mutay, isaga oo Maka gacamadeeda maraya oo sii

macasalaamaynaya iyada oo ay ilmadu indhihiisa qarqisay habeenkii hijrada.

Se haddii aanay hijradii jiri lahayn, Islaamku dawlad ma aanu yeesheen.

Haddii aanu xanuunka firaaqa uu Maka ka baxay mari lahaynna, maamuuskii furashada Maki ma aanu dhaceen!

Nabaadiino saaxiib.

# 075 – Waan ku salaamay saaxiib

Taabicigii weynaa ee Cabdillaahi Ibnu Muxayriis ayaa galay meherad uu doonayay in uu dhar ka gato.

Nin garanayay ayaa ku yidhi ninkii meheradda lahaa: "waa Ibnu Muxayriis oo ah fiqiyahankayaga iyo caabidkayaga, ee si wanaagsan wax uga iibi!"

Ibnu Muxayriis ayaa xanaaqay oo inta uu maradii iska dhigay ku yidhi: "war lacagtayada ayaannu wax ku gadanaynaa ee diintayada wax ku gadan maynno!"

Ibnu Kasiirna waxa uu uu soo tebiyaa, in Abu Cabdillaahi Al'Isbahaani aanu roodhidiisa iyo agabkiisa kale toona ka gadan jirin hal meherad, badankana uu ka iibsan jiray meherado aan laga garanayn, oo uu odhan jiray: "waxa aan ka baqayaa in ay laabta iga jeclaystaan oo aan noqdo qof diintiisa ku qadhaabta!"

Saaxiib; quudka ugu xun ee uu qofku cunaa waa ka uu ku gato diintiisa!

Alla badanaa dadka diintooda ku qadhaabtaa!

Immisaa guryo qasriyo ah qiimaha la dhaafsaday uu yahay caqiido dhan!

Immisaa gaadhi raaxo ah qiimaha la dhaafsaday uu yahay fatwo dhigmooyinka (nusuusta) shareecada looga qiil deyay oo deelqaaf ah!

Ilaahay ha u naxariisto'e waa halkii uu Imaamu Shaafici ka lahaa: "in aan quudkayga ka raadsado qoob–ka–ciyaar iyo jaas, ayaa ii dhaanta in aan diintayda ku qadhaabto!

Saaxiib; ha u fiirsan ilmada wadaadka wax wacdiyaya, ka hor inta aadan u fiirsan halka uu ka taagan yahay loollanka xaqa iyo baadilka!

Ha ku sirmin afmiinshaarnimada khadiibku uu kaga warramayo adduun'naca (saahidnimada), ka hor inta aadan u fiirsanin isaga xaalkiisa!

Waa hubaal in ay waajib inagu tahay in aynnu qaadanno hadalka xaqiiqada ah, xataa haddii uu beenawaas i noo sheego, se taas macneheedu ma aha in uu qofku noqdo dhegweyn uu daadku hoos maro oo si fudud ku dagma!

Nabaadiino saaxiib.

# 076 – Waan ku salaamay saaxiib

Marka aad u fiirsato waaayeelka iyo waayaha ay ka sheekeeyaan, si kasta oo aanay caddayn iyo tixraac u lahayn, haddana waxa ay leeyihiin macne dhab'abbaar ah oo sax ah.

Shinbir ayaa waayihii nebi Saleebaan nkh'e damcay in uu jidhaan (haro yar) biyo fadhiyaan ka cabbo, markaasuu arkay in carruur yaryari ay ku ag ciyaarayaan, kolkaasuu is yidhi: "wallaahay in aanan ka ammaan helaynin ciyaalkaas, ee halkan ayaan iskaga sugayaa inta ay ka kala dareerayaan meesha, markaas ayuun baana aan ka cabbayaa jidhaantaas oo aan ka dhergayaa!"

Markiiba ciyaalkii way tageen, koodii u danbeeyay markii uu dhaqaaqay ayuu biyihii yimi oday gadh weyn oo astaamo suubanaan iyo dunwanaag ahi ay ka muuqdaan.

Markaasuu haddana shinbirkii isyidhi: "odaygan maamuuska leh kama cabsi qabo oo gadhkiisa dheeri waxa uu u eg yahay kii caabidiinta iyo saahidiinta."

Biyihii ayuu ku soo duldegay. Odaygii ayaa dhagax ku soo tuuray oo il kaga dhuftay!

Shinbirkii nebi Saleebaan ayuu u yimi oo uu uga soo dacwooday.

Nebi Saleebaan nkh'e waxa uu amray in odaygaas loo keeno, labadii darafna wuu isu dhegaystay, waxana uu amray in odaygaas ishaas uu shinbirka ka riday isheeda isagana laga rido.

Se shinbirkii ayaa ku yidhi: "nebi Saleebaanow; u daa ishiisa iyadu denbi ma laha'e, oo ka xiir gadhka, isaga

ayaa sababay in aan dhagartiisa aamino oo aan isku–hallayn biyaha ugu dego'e!"

Saaxiib; diintu inta aanay muuqaalka guud noqonin waa johoradda gudaha.

Waa muran–ma–doon in labada dhanba ay muhim yihiin, se waxa ugu foolxun qofka muuqaalka sare in ay diini ka muuqato, qalbigana uu faajir ka noqdo!

Waxa se ugu door roon qalbiga saafiga ah ee badhaxa tiran, xataa haddii aanay muuqaalkiisa guud wax diin ahi ka muuqanayn!

Saaxiib; inta aadan gadhka dheerayn gacmahaaga ka laabo hantida dadka iyo xuquuqdoodaba.

Inta aadan ilkahaaga cadayga ku nadiifin, maanka ku hay in ay xaaraan tahay in aad ilkahaaga u soofayso cunista hilibka dadka!

Saaxiib; Luqmaan ayaa wiilkiisii ku yidhi: "aabbo; iska jir arrinka halista ah ee mudan in laga digtoonaado, ee ah in aad dadka u muujisato Alle–ka–cabsi, qalbigaaguna uu faajir noqdo!"

Nabaadiino saaxiib.

# 077 – Waan ku salaamay saaxiib

Nin ayaa ku yidhi Mubarridkii ahaa naxweyahanka caanka ah: "hebel ayaa i caayay oo inta aan u dulqaatay aan ka aamusay. Markaasuu ku caayay adigana, tabtii oo kale ayaan uga aamusay!"

Mubarrid ayaa ugu jawaabay: "in aad isla kay sinto ma aanay ahayn, oo in aad dhibka adiga laguu geysanayo xamishaa waa dulqaad, se dhibka saaxiibkaa loo geysanayo in aad xamishaa waa dhabar–jebin!"

Saaxiib; qofka qalbiga saaxiibkii ku negi kama faaruqo xataa haddii uu ka fogaado!

Nebigu ﷺ waxa uu u xiisay Kacab Ibnu Maalik, markaasuu dadkii weydiiyay: "waar Kacab maxaa helay?!"

Nin ayaa ugu jawaabay: "waxa inaga reebay go'iisa shaalka ah iyo isu–fiirfiirsigiisa faanka leh!" Isaga oo doonaya in uu ku dhalliilo in uu ogaan dagaalka uga hadhay.

Mucaad Ibnu Jabal ayaa kacay oo yidhi: "waad hadal xun tahay! Wallaahay rasuul Allow wax aan wanaag ahayn ninkaas kuma ogin!"

Saaxiib; saaxiibkaa waa qareenka ruuxdaada iyo qayb qalbigaaga ka mid ah, ee ka ilaali in agtaada lagu xanto, oo ha ka yeelin qofna in uu carrabkiisa ku duro, ama uu hilibkiisa hortaada ku feento.

*Haddii ay dhacdo oo hortaada sidaas saaxiibkaa* loogu galana, ma tihid oo uma qalantid saaxiibnimo!

Saaxiib; nebiga ﷺ ayaa asxaabta wacad kula galay baycadii dhimashada ee ka dhacday geedka Ridwaan

agtiisa, asxaabtana gacanta ayuu u taagayay oo mid mid ayuu baycada (heshiiska) uga aqbalayay.

Markii ay dhammaantood ka faaruqeen asxaabtii, iyada oo markaas uu Cismaan Ibnu Cafaan ugu xidhnaa Qureysh Maka, ayuu nebigu ﷺ gacantiisii bidix gacantiisa midig ku qabtay, markaasuu yidhi: "tanina waa gacantii Cismaan!"

Alla saaxiibtinimadaasi sugnaydee oo cajiibsanaydaa saaxiib!

Gacantii Cismaan ayaa maqnayd, waxana kaalinteedii qaadatay oo u taagnayd gacantii ugu mudnayd ee ifkan soo martay!

Saaxiib; haddii aan kaa maqanahay waxa la iga sheegayo ha ii qaban.

Ma rumaysanayo hadal xun oo la iiga kaa sheegay, ee ha rumaysan hadal xun oo la iiga kaa sheegay adiga oo aan wax iga weydiinin, hana odhan timir laf ayaa ku jirta, iyo weedha garnaqa ee caanka ah ee ah, eedaysane kastaa waa ceeb–ka–saliim ilaa denbiga lagu caddaynayo midna!

Haddii dadka oo dhammi ay i tuhmaan, adigu i beri yeel!

Iima dhibayso eedayntoodu, sida ay ii dhibayso in aad aaminto in ay mahuraan tahay in aan keeno caddayn muujinaysa in aanan denbigaas ku eedaysnayni!

Saaxiib; saaxiib ayaa yidhi isaga oo saaxiibkii ka hadlaya: "xataa haddii uu yidhaahdo 'waxa aan ahay Rabbigiinii ugu sarreeyay!' Waxa aan odhanayaa aayaddii ayuu akhriyayaa! Haddii aan arko iyada oo uu gadhkiisa khamri ka da'ayana, waxa aan odhanayaa waa lagu daadiyay!"

Nabaadiino saaxiib.

# 078 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa aad i leedahay: "ii warran oo qalbigayga samir sii."

Aniguna waxa aan ku leeyahay: oo ma waxa jira samirsiis ka mudan in uu Ilaahay weynaaye og yahay waxa qalbigaaga ka hugmaya?!

Haddii aanay dadku mudnaantaada ogeyn, ama wax aadan ahayn ay kugu sheegaan, maxaad uga baahan tahay qareen ku difaaca, adiga oo asal ahaanba aan eedaysane ahayn?!

Garsoorka samooyinka iyo dhulku ma sugo markhaatiyo, ee waxa markhaatiyada suga cidda aan dhacdada xog'ogaalka u ahayn, Ilaahay wax walba waa ka daalacanaya!

Ilaahay ma soo dhoweysto afmiinshaarnimada qareennada, ee garsoorayaasha faahfaahinaha hoose ee dhacdada mooggan ayaa soo dhoweysta.

Iyaga ayaa dhacdada sheekadeeda ka dhegaysta qof aan goobjoog u ahayn, ee hadal–qummanaan iyo garasho aftahannimo ay weheliso ku soo tebinaya!

Se Rabbigaa dhicitaanka dhacdadaas xataa ka hor ayuu ogaa, markii ay dhacdayna waxba ogaal ah kuma aanay biirinin, oo ogaalka uu u leeyahay waxa aan dhicini waxa uu la mid yahay ogaalka uu u leeyahay waxa dhacay, ee qalbigaaga hagaaji, waa halka uu kaa daalacanayo'e.

Qalbigaaga ayuu daawanayaa oo waxa ku jira uu kugu xukumayaa, ee kuguma xukumayo waxa ay dadku kaa sheegayaan, iyo waxa aad adigu odhanayso midna!

Saaxiib; Ilaahay cidna ma khiyaamo!

Ilaahay meel kore uun inagama daalacanayo, ee gudeheennana wuu daalacanayaa!

Gudaha ayuu inaga daalacanayaa saaxiib, ee dhankaas aad ugu daymo badnow!

Markii uu Ibnu Saluul nebiga gadaashiisa salaadda subax ku tukanayay, dad badan ayaa ku dagmay Alle–ka–cabsigiisaas, se Ilaahay waxa uu soo saarayay xukunkiisa:

(إِنَّ الْمُنَافِقِينَ فِي الدَّرْكِ الأَسْفَلِ مِنَ النَّارِ) النساء ١٤٥.

"Munaafiqiintu naarta xagga ugu hoosaysa ayay ka gelayaan!"

Markii la eedeeyay Caasha, dad badan ayaa tuhunkaas ku sirmay oo ka qayb qaatay, se Ilaahay berinimadeedii Quraan ilaa qiyaamaha la akhriyayo ayuu ku soo saaray!

Waa laba qalbi oo kaaf iyo kala dheeri ah, haba kala duwanaadaan labada mawqif'e!

Saaxiib; baadiyaha ayuu ka yimi nin reer–miyi ah oo aanu hal qof oo saxaabada ka mid ahi garanayni, waxana uu nebiga ﷺ wacad kula galay jihaadka iyo hijrada.

Duullaan la qaaday ayuu ciidankii raacay ninkaas aan la garanayni, isaga oo waxa keliya ee uu difaacanayaa uu yahay erayga tawxiidka.

Waa lagu guuleystay dagaalkaas, markii qaniimada la qaybinayayna wuu maqnaa, nebiguna ﷺ intii ku soo aadday meel ayuu u dhigay.

Markii uu yimi ayaa loo sheegay in nebigu ﷺ uu qaniimadaas meel u dhigay.

Inta uu nebiga ﷺ u yimi ayuu ku yidhi: "rasuulkii Allow; maxay ahayd waxani?!"

Nebiga: "waa qaybtii qaniimada kaaga soo aadday!"

Ninkii ﷺ: "laakiin in aan qaniimadan helo darteed kuu ma aanan raacin, ee waxa aan kuu raacay in aan qoorta leebabka u dhigto oo aan Ilaahay dartii u dhinto, sidaasna aan jannada ku galo!"

Markaasuu nebigu ﷺ ku yidhi: "haddii aad Ilaahay dhab wax ula niyooto wuu kuu rumaynayaa."

Ka dib duullaan kale oo la qaaday ayuu qoortii uu tilmaamay leeb kaga dhacay!

Markaasuu nebigu ﷺ yidhi: "ma isagii baa?!"

"Haa!" Ayaa lagu yidhi.

Markaasuu nebigu ﷺ yidhi: "Ilaahay ayuu dhab ugula niyooday, Ilaahayna wuu u rumeeyay!"

Markaasuu go'iisii ku kanfay, salaaddiina uu ku tukaday, uuna u duceeyay.

Ducadiina intii ay saxaabadu ka maqashay waxa ka mid ahaa: "Ilaahayow; addoonkaagii dartaa ayuu u soo haajiray, shahiidnimana wuu ku dhintay, aniguna marag ayaan uga ahay!"

Saaxiib: ma garanayo samirsiis kaas ka mudan!

Nin aan la garanayn oo hal saxaabi aanu magiciisa aqoonin, buugaagta taariikhduna aanay wax isaga ku saabsan qorin, oo markii uu dhintayna garanwaa u ahaa sidii markii uu nebiga ﷺ wacadka la galayayba uu u ahaa weeye.

In aynaan adiga iyo anigu toona aqoonini maxay ka nusqaamisay ninkaas?!

Waxa ka badan in uu Ilaahay garanayo, xataa haddii aynaan innagu aqoonin.

Ha u bixin saaxiib! Ha u bixin!

Sadaqadda qari intii karaankaa ah, xataa haddii lagugu xanto bakhaylnimo, inta aanay kugu eedayn ayuu Ilaahay kuu qoray sadaqaddaadiiye!

Kac habeenkii oo tuko inta aad ku taamayso ee jidhkaaguna uu xamilayo, xataa haddii ay kugu xantaan in aad dhanka cibaadada ku liidato, inta aanay kugu xaman ka hor ayuu Ilaahay kuu og yahay ilmada diirran ee dhabannadaada ka qulqusha habeenkiiye!

Oo sunnayaasha soon, xataa haddii ay kugu xantaan in Ramadaanta mooyaane aadan mar kale soomin, Ilaahay ayaa kuu og harraadka dhuuntu ay kula qallasho inta aanay kugu dhalliiline!

Saaxiib; qofka waxa laga soo maraa dhanka qalbigiisa uun, ee haddii aan dhankaas lagaaga soo dhicin, wax kasta oo lagugu sameeyaaba, xataa haddii cirka iyo dhulkaba tuurta laguu saaro, waxba kaa ma dhibayaan!

Nabaadiino saaxiib.

## 079 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa aad i leedahay: "Ilaahay iiga bari in uu shaydaanka iga nabad geliyo!"

Aniguna waxa aan ku leeyahay: waayahay. Laakiin sidoo kale waxa aan Ilaahay kaaga baryayaa, in uu naftaada kaa nabad geliyo!

Waadigaa indhaha iigu gubaya sidii in uu iga soo yeedhay hadal amankaag iyo fajiciso lihi!

Isdeji saaxiib; la inagagama yimaaddo dhanka shaydaankaas xun uun'e!

Naftu waa faras xakamadiid ah, qofkeedana mahlakooyin ayay gondaha u gelisaa!

Ibliis laftiisaba ma aanu jirin shaydaan waswaasiyay markii uu diiday in uu nebi Aadan nkh'e u sujuudo, ee naftiisa ayaa dhibaatadaas gelisay!

Kibirka, islaweynida, qabka aan u–meeldeyista lahayn, laandheeranimada madhan ee sal iyo sees toona aan lahayn iyo in uu isu arkay san–ku–neefleba in uu ugu sarreeyaa, waa ta ilbidhiqsi gudihii caabidnimadii ka saartay ee shaydaan la iska naaro ka dhigtay!

Markaasaad ila yaabaysaa marka aan Ilaahay kaaga baryo, in uu naftaada qudheeda kaa magan geliyo!

Saaxiib; waxa jira dad aanu shaydaanku waswaasinin, oo ay naftoodu hore mugdiyada baadinimada u muquursanayd, heer ay hal'abuurto oo ay hadba soo biiriso xeelado iyo hab cusub oo lunsanaan iyo baadinimo ah oo aanu xataa shaydaanka laftiisu ku fekerin!

Shaydaanku ma waswaasiyo dad uu gaadiidsado oo hadh iyo habeenba isaga uun u heellan, ee waxa uu waswaasiyaa

kuwa goor iyo ayaanba naftooda la jihaadaya ee xakamaha ku haya!

Kuwa marka ay kufaanba kacaya, ee marka ay danbaabaanba denbidhaafka dalbanaya!

Kuwa ah jabhadda dagaalka kula jirta shaydaanka ee colka daahii go'ay ay yihiin waa kuwaas.

Marka aan Ilaahay kaaga baryayo in uu sharka naftaada kaa nabad geliyo, waxa aan kaaga baryayaa in aad adigu naftaada hanato, ee aanay iyadu adiga ku yeelanin!

Nabaadiino saaxiib.

## 080 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa uu leeyahay Ibnul Jawsi: "waxa meelaha aan wax ku wacdiyo ku toobad keenay in ka badan 200 oo kun oo qof. Waxa aan Islaamiyay in ka badan 200 oo kun oo qof. Way badan yihiin inta uu wacdigaygu ka ilmaysiiyay dad qalbi adkaa oo isla weynaa ee ilmada hooriyay. Maalin ayaan meel u fadhiistay wacdi, markaasaan arkay in ka badan 10 kun oo qof oo dhammaantood sidii aan u wacdiyayay uu qalbigoodu jilcay, ama indhohoodu ay ilmeeyeen. Markaasaan isweydiiyay, bal ka warran haddii ay iyagu badbaadaan, adiguna aad halaagsanto?! Markaasaan idhi: Ilaahayow; boqorkayow; haddii aad cadaab ii qortay berri, ha ogaysiinin iyaga, adiga oo weynida aad agtooda ku leedahay dhawraya ee aan dartay u samaynayn, yaanay is'odhanin Ilaahay waxa uu cadaabay kii na barayba'e!"

Saaxiib; Ilaahay ma gaadho qof isagu isla dhacsan oo cirkaas isla marayaa.

Dadka wanaagsani mar kasta oo ay Ilaahay u dhowaadaan, waxa ay dareemaan in uu ku jiro gaabis aanay hore u dareemi jirin, oo qofku mar kasta oo uu dareemo macaanka u–dhowaanshaha Ilaahay, waxa uu ka cabsadaa qadhaadhka ka–fogaanshihiisa aanu wali gaadhinba.

Ama si kale haddii aan u dhigno; waa sida jaahilka iyo aqoonyahanka, oo jaahilku waxa uu u maleeyaa in uu wax walba yaqaanno, se aqoonyahanku waxa uu og yahay in aanu wax badan ogayn.

Waxa ugu badan ee inta uu le'eg yahay jahliga qofku tusi karaa, waa in uu wax barto uun!

Se jaahilku maba oga waxa aanu aqoonin, markaasuu isu maleeyaa in uu yahay ka dadkaba ugu aqoonta badan.

Waa sidaas xaalka iimaankuna.

Ka wax sadaqaystaa waxa uu markaaba dareemaa in ay wax weyni u dhiman yihiin, oo waxa uu ka boganayaa in uu hal dalool uun awday (gufeeyay)!

Se bartii–yaqaanka isagu wixiisa isku kooba ee aan cidna gacanta u kala furini waa war–jira–moog, oo daloollada bannaan ee ay tahay in uu buuxiyo waxba uma oga.

Jaahilnimadu marar badan waa nimco qadhaadh!

Waa sida nimcada mayeedhaanka (bahaa'imta) ee aan xisaabta iyo cadaabta midna lahayn, ee hammi adduun iyo mid aakhireed toona aan sidin.

Qofka soonta sunnaha ah sooma, waxa aad arkaysaa isaga oo gaabis badan iska dareemaya, haddii uu dhaafo maalin uu caadaystay in uu soomo oo aanu soomini!

Se qofka aan arrimahaas iskuba mashquulini, ma dhadhaminayo qadhaadhka waayitaankooda iyo in ay ka maqan yihiin, maadaama aanu asal ahaanba macaankooda dhadhaminin!

I rumayso saaxiib; haddii qof salaatulaylka caadaystay ay habeen sariirtiisa ku xidhxidhaan, waxa uu la ooyayaa xiisaha uu u hayo in uu Rabbigii is'hortaago oo uu u tukado.

Se qofka aan macaankaas dhadhamin, ee ruuxdiisa aan dhex muquursiinin, sariirtiisa ayaa isaga janno u ah!

Nabaadiino saaxiib.

# 081 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxyaabaha aad sida kedisada ah ku heshaa marar badan waxa ay ka wanaagsanaan karaan waxyaabaha aad raadinayso!

Markii ay safarleydii soo aadeen ceelkii uu nebi Yuusuf ku jiray, biyo ayay doonayeen ee ujeeddo kale kama aanay lahayn, balse waxa ay ka heleen nebi… nebi Yuusuf ayay ceelkaas ka heleen!

Ninkii quruxdiisa darteed ay haweenkii faraha iswada jareen, ayay kediso aan ku–talagal ahayn ku heleen!

Ma garanaysid waxa uu Ilaahay kuu qorsheeyay!

Saaxiib; adigu waxa aad masuul ka tahay falsamaynta iyo ficilka, se natiijadu Ilaahay oo keliya ayay gacantiisa ku jirtaa.

La aad adduunka dawliskaaga madhan, bisinkana u qabo, ceelkana ku rid, laga yaabaa in aad ka hesho qof noloshaada hallawsan kuu hagaajiya, dhinacyada aad ka dhantaalan tahayna kuu dhammays tira'e!

Laga yaabaa qofkaasi in uu rafaadka noloshaada raaxo kuugu beddelo.

Waxa ugu wanaagsan ee aynnu noloshan ku helnaa, waa waxa uu Ilaahay inagu soo aaddiyo innaga oo aan qorshaysan oo aan ku talo galsanayn.

Nabaadiino saaxiib.

# 082 – Waan ku salaamay saaxiib

Maka ayaa Muslimiintii lagu dhibay, mid kasta oo ka mid ahina waxa uu dareemayay sidii in buurta Daalo laabta laga saaray.

Madiini iimaanka way aqbali ogayd, qalbiyo diinta u dhibrayaana way joogeen, Aws iyo Khasrajna waxa ay noqonayeen tamarta iyo tukubaha dacwaddan.

Nebigii ﷺ ayaa dhex yimi oo shaaciyay in la galay xilli cusub oo adduunka oo dhanba beddeli doona, Islaamkuna waxa uu yeeshay dawlad!

Se asxaabta intii Maka ku hadhay noloshii ayaa cidhiidhi ku noqotay oo naqaska ayaa lagu dhejiyay, heer ay dareemayeen in irbad daloolkeed lagu yidhi ka neefsada!

Marba mid ayaa ka soo baxay Maka, xiddigba xiddig kale ayuu ka daba yimi, dayaxiina waxa uu ka soo daahiray Madiina.

Iyada oo ifka sare uu ka jiro dayax iftiinkii cadceedda soo celinayaa, Madiina waxa joogay dayax dhulka oo dhanba Quraanka ku iftiiminayay.

(اللَّهُ نُورُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ) النور ٣٥.

"Ilaahay waa nuurka samooyinka iyo dhulka."

Suhayb ayaa hadda gacamada Maka maraya, isaga oo ku taamaya in uu aragtida suubanaha ku indhakuulan doono.

Balse Qureysh oo aan nebigoodiiba u naxariisani, Suhayb iyo xaalkiisana u nixi maayaan!

Way ka soo daba baxeen si ay u soo qabtaan oo hijrada ay uga horjoogsadaan, markaasuu ku yidhi:

"waad og tihiin in aan leeb ganidda idiinku xariifsanahay. Wallaahay in aydinaan i soo gaadhayn aniga oo aan leebabka aan sito idinku madhin, ka dibna aanan seeftayda idinkaga cad goosan inta ay naftu igu jirto!"

Markaasay ku yidhaahdeen: "adiga oo caydh ah ayaad noo timi oo hodan ayaad noqotay, markaasaad doonaysaa in aad naftaada iyo hantidaadaba nagala tagto. Wallay ka tahay!"

Markaasuu weydiiyay: "haddii aan hantidayda idiinka tago aniga ma iska kay deyneysaan aan hijroodo'e?!"

"Haa!" Ayay yidhaahdeen.

Markaasuu u sheegay halka ay hantidiisii taallo, horena uu u sii socday!

Nebigu ﷺ dhacdadaas toos ayuu ula socday, oo Jibriil ayaa warka qodob qodob ula socodsiinayay.

Markii uu Suhayb Madiina soo gaadhay ayuu nebigu ﷺ weji bashaash ah iyo dhoollacaddayn kala hortegay, isaga oo ku leh: "waad ku faa'idday beecaagii Abu Yaxyow!"

Saaxiib; beecaasi sababta uu u guuleystay waa in uu Ilaahay dartii ahaa!

Beec kasta oo Ilaahay dartii loo galaana waa tabtaas uun oo guul ayuu ku danbeeyaa.

Sadaqada aad sabool baahan farta ka saarayso, *isdareensii in ay tahay badeecad aad ku macaashtay.*

Waqtiga aad iska soo jarto ee aad waalidkaa ugu kaxayso dhakhtar, isdareensii in uu yahay ganacsi aad ku macaashtay.

Aargoosiga adiga oo awooda aad Ilaahay dartii isaga cafido, isdareensii in uu yahay ganacsi aad ku macaashtay.

Xumaanta laguu geystay ee aadan ka fal celin adiga oo awooda, isdareensii in ay tahay badeecad aad ku macaashtay.

Saxiib; Ilaahay la ganacso, waa ganacsi aan wiiqmayn'e!

Nabaadiino saaxiib.

# 083 – Waan ku salaamay saaxiib

Waa taas la gaadhay Ramadaan, adigana waxa ku cusleeyay oo kor iyo kal ku qarqiyay denbiyo.

Awd oo gufee daldaloollada qalbigaaga, ruuxdaada hanjabsanna kobci, si xamaasad lehna dhanka Rabbigaa u aad oo isaga u cabo oo ku dheh: "addoonkaagii gefsanaa wuu kuu soo laabtay, ka–dheeraanshahaagiina wuu ku dhibtooday, masaafooyinka fog ee uu ku jirsadayna kubka iyo bawdaduu kaga soo jabay. Rabbigayow; addoomo kale oo aan aniga ahayn waad leedahay, lkn anigu Ilaah aan adiga ahayn ma lihi. Waxa aad tahay abbaartayda, dhanka aan aadayo iyo qiblada ruuxdayda, ee ii fur albaabada aad u furto kuwa sida dhabta ah kuu garta, kuwa aad ka toobad aqbashana igu dar, kuwa ehlu salaadka ahna ila qor, kuwa soonta badanna ila soo xaadiri."

Waa tan oo waa la gaadhay Ramadaan saaxiib, bishii ay dhuuntuna harraadaysay qalbiyaduna ay cokanaanayeen ee ay biyaha ka dhergayeen.

Xiidmuhu ay madhnaanayeen, ruuxuhuna ay dhergayeen.

Jidhku uu taag darraynayay, iimaankuna uu xoogaysanayay.

Dhaqdhaqaaqu uu yaraanayay, caqiidaduna ay adkaanaysay.

Ee dib u cusboonaysii iimaankaaga saaxiib, Ilaahay waxba ugama baahna in aynnu cunnada iyo cabbitaanka ka tagno, ee waxa uu Ramadaanta i noogu soo diraa si uu i noo kala hufo oo uu i noo kala haadiyo, uu i noo

maydho oo aynnu u noqono kuwo isaga la–kulankiisa ku habboon, ee faa'idada aad Ramadaanta ka helaysaa yaanu gaajo iyo harraad uun noqon.

Ramadaan ma aha nidaam cuntada lagu qaabeeyo (diet).

Ramadaan waa nasiinadaada iyo nefiskaaga, adiguna safarka dheer ee aad soo gashay waa taas ay caguhu kula dhiigayaan, ee Rabbigaa agtiisa rarka dhigo, dhanka Rabbigaa ayaad ka timi, Rabbigaana waad la jirtaa, dhanka Rabbigaana waad aadaysaaye.

Waa tan oo timi Ramadaan saaxiib.

Haddii ay gaajadu ku kadeeddo, harraadkuna uu dhuunta ku qallajiyo, u sheeg naftaada kuwii iyada oo gaajadaas iyo harraadkaasi ay hayaan seefta qaatay ee naftooda huray, Ilaahay dhiiggooda ka gatay, si ay Ramadaantani i noo soo gaadho.

Ramadaan ayuu ahaa dagaalkii Beder, ee markii ugu horraysay uu Islaamku seefta u siibtay si uu Quraanka u difaaco, seeftaasina ay sidaas galka uga saarnaanayso ilaa qiyaamaha uu ka ummaddan u danbeeyaa Dajaal la dagaallamayo.

Ramadaan ayay ahayd furashadii Maki, ee magaaladaasi ugu danbayntii ay aqoonsigeedii Islaamnimo soo ceshatay, ee ay noqotay caasimaddii tawxiidka, ee uu nebigu ﷺ ku yidhi gaaladii Qureysheed: "iska taga xor ayaad tihiin'e." Ee uu Bilaal kacbada dusheeda koray isaga oo koonka oo dhanba ogaysiinaya in Ilaahay cid ka weyni aanay jirin.

Ramadaan ayay ahayd goobtii Qaadisiya, ee Sacad Ibnu Abii Waqaas iyo Abu Muxajin uu weydiiyay

Cumar Ibnul Khaddaab: "immisa ayuu qaatay dagaalku?!" Ee ay u sheegeen in uu socday salaaddii subax ilaa casarkii, ee uu ku yidhi: "Ilaahay ayaa xumo ka nasahan'e, baadilku intaas oo dhan xaqa uma adkaysto, ee laga yaabaa in uu jiro denbi aniga iyo idinkuba aynnu ku dhacnay!"

Ramadaan ayay ahayd goobtii Balaadu Shuhadaa', ee Cabdiraxmaan AlQaafiqi uu 70[ka] km u jirsaday Paris isaga oo leh: "Ilaahayow; dhiiggayga ayaan u hurayaa raalli gelintaada!"

Ramadaan ayay ahayd furashadii Camuuriya, ee Muctasim iyo ciidankii ka gadooday sharafta hal gabadh oo Muslimad ahayd oo lagu xad gudbay ay furteen. Ilaahay cisigeenii ha i noo soo celiyo'e.

Ramadaan ayay ahayd goobtii Caynujaaluut, ee Sayfudiin Qudus iyo Mangooliyaankii ay isku muteen, ee ay mujaahidiintii dhulka ku soomeen, jannadana ay ku afureen.

Ramadaan ayay ahayd goobtii Shaqxab, ee ay Ibnu Taymiya iyo Ibnul Qayim safka hore ee dagaalka ku jireen, iyada oo aanay qalinka kaga kaaftoomayn dhiiggooda, fiqigana aanay kaga kaaftoomayn jihaadka.

Waa tan oo timi Ramadaan saaxiib, qalbiga ayayna saafiyaynaysaa, ee kala huf oo kala haadi qalbigaaga.

Iska jir in aad Ramadaan kala baxdo qalbigii aad ku gashay oo sidiisii ah.

Nabaadiino saaxiib.

## 084 – Waan ku salaamay saaxiib

Wuhayb Ibnul Wardi, Sufyaan Assawri iyo Yuusuf Ibnu Asbaad ayaa maalin kulmay.

Sufyaan ayaa yidhi: "mawtal qaflaha kediska ah maanta horteed waan necbaa, se maanta waxaan jeclaysanayaa in uu wedku igu kediyo!"

Yuusuf: "oo sababma?!"

Sufyaan: "sida aan fitnada uga baqayo darteed!"

Yuusuf: "laakiin ma necbi in aan sii raago!"

Sufyaan: "oo maxaad geerida u neceb tahay?!"

Yuusuf: "laga yaabaa in aan ku aado maalin aan toobad keeno oo aan camal wanaagsan falo!"

Markaasuu Yuusuf ku yidhi Wuhayb: "adigu maxaad ka leedahay?!"

Wuhayb: "anigu waxna dooran maayo, ee hadba wixii uu Ilaahay ii dooray ayaan jeclaysanayaa!"

Alla wacnaayee iimaankii dadkii hore saaxiib.

Sufyaan geerida ayuu ka jeclaysanayaa in diintiisa laga fitneeyo, oo haddii aanu caqiidadiisa bedqab ku haysan karin, qabri in uu jiifo ayuu ka jecel yahay.

Bal u fiirso sidaas layaabka leh ee uu ugu dedaalayo in uu isaga oo guulcystay adduunkan ka baxo.

Dan kama laha muddada uu noolaanayo, ee muhimaddiisu waa sida uu u noolaanayo!

Saaxiib; halyeynimada nebi Nuux nkh'e ma aha sannadaha uu noolaa, ee waa qaabka uu guyaashaas u noolaa.

Bal u fiirso weynida ay leedahay ku–dhowaad kun sano oo uu arlada dulsocday isaga oo qalbigiisu uu iimaanka Rabbigii ku sugan yahay!

Halka Sacad Ibnu Mucaad aanu 36 sano wax ka badan noolayn, haddana geeridiisii uu carshiga Ilaahay la gariiray, 70 kun oo malagna ay aaskiisii ka qayb galeen!

Muhim ma aha in cimrigu uu dheeraado ama uu gaabto saaxiib; ee waa in uu ku dhammaado u–gucleynta iyo aaditaanka dhanka Ilaahay!

Ka kaalay Sufyaan Assawri oo i noo keen Yuusuf Ibnu Asbaad.

Isagu aragti kale ayuu qabaa!

Waxa uu doonayaa in uu cimrigiisu dheeraado, si uu Ilaahay u caabudo, u toobad keeno, Ilaahayna uu aad ugu sii dhowaado.

Cimriga muuminka oo dheeraadaa waxa uu u kordhiyaa Ilaahay in u dhoweeyo uun.

Ma burinayo qodobkani hadalkaygii hore.

Haddii aad hadalkayga u fiirsato waxa aad ka dhadhansanaysaa in aan labada fekradoodba kulminayo!

Fekradda ah in uu qofku u shaqaysto sidii in uu berri dhimanayo, Iyo fekradda ah in uu qofku doono in uu muddo dheer noolaado, si uu iimaankiisu u sii kobco.

Miyaadan maqlin in ay laba walaalo ahi u yimaadeen nebiga ﷺ oo ay Islaameen, midkood ayaana ka kale cibaadada uga dedaal badnaa, dagaal ayuuna ku shahiiday, kii kalena muddo ka dib ayuu dhintay.

Dadkii ayaa isla dhex maray hadal ahaa, in kii hore uu uga dheereeyay jannada.

Markaasuu nebigu ﷺ ku yidhi: "miyaanu kan danbeba tukan jirin? Ramadaanna aanu soo gaadhin? Maxaad ka og tihiin heerka ay gaadheen salaaddiisii iyo soontiisii?!"

Imminkana saaxiib; inaga keen Sawri iyo Yuusufba, oo i noo keen Wuhayb Ibnul Ward.

Qodobkan waxa uu ahaa saddexdoodaas ka ugu fahansan, waxana fahankiisu uu gaadhsiisanaa heer uu maamuusay oo arrinkiisa oo dhan uu u gacan geliyay Rabbigii, waxa uu hadba Rabbigii u doorayna uu jeclaysanayo.

Saaxiib; noloshan qof kastaaba waxyaabo uu ka doonayo ayaa jira.

Qof kastaba waxa jira naawilaad uu Ilaahay si diirran uga dalbado, dhibna ma laha in uu addoonku Rabbigii wax ka naawilaa.

In uu qofku waxa uu rabo Rabbigii kula eerto oo uu ka baryaa waa waxyaabaha cibaadada dhammays tira.

In uu Ilaahay waxa yar iyo waxa badanba weydiistaa.

Balse qofku ma gaadho addoonnimada dhammayska tiran, ilaa uu ogaado in waxa uu Ilaahay u dooray ay uga roon yihiin waxa uu isagu doortay!

Saaxiib; qof kasta oo inaga mid ahi Ilaahay wax uu si aad ah uga baryay ayaa jira, oo uu u maleeyay in noloshiisu ay cadaab noqonayso haddii aanu helin, Ilaahayna uu u diiday oo aanu baryadaas ka ajiibin, muddo ka dibna ay waayuhu u xaqiijiyeen in si walba uu khayrku ugu jiray in aanu Ilaahay waxaas siinin!

Saaxiib; diidmada uu Ilaahay wax aynnu doonaynno inaga xarrimaa waa nimco muddo ka dib uun la ogaanayo, in ducadeenna la aqbali waayana waxa ku jirta ilaalin Rabbaani ah oo waayuhu marka ay muddo socdaan uun la ogaan doono.

Ee hoggaanka naftaada u dhiib Ilaahay, oo ku dheh: "Ilaahayow qalbigayga adiga ayaan kuu gacan geliyay, xukunkaagana waan ku qanacsanahay, qadderkaaguna waa ii caddaalad!"

Nabaadiino saaxiib.

# 085 – Waan ku salaamay saaxiib

Qalbigaagu ha ka nabad galo in uu jabo.

Qalbijabku aad ayuu u xanuun kulul yahay wallaahay, xataa haddii aanu dhawaaq samaynin!

Qalbijabkana waxa ka sii kaarka badani Ilaahay ha kaa nabad geliyo'e, waa in aanay wax soo kaaba oo niyadda u dhisaa jirin!

Mar walba nabarkaas waad taataabanaysaa oo ma illaawaysid, si kasta oo aad ugu aragto in boogtaasi ay bogsatay!

Ha ka nabad galo qalbigaagu adduunyadan aan ammaanka lahayn, qofkuna aanu garanayn dhanka ay dhirbaaxada waayuhu kaga imanayso, iyo gacanta nabarka ku dhacayaa uu kaga imanayo midna!

Qalbigaagu ha ka nabad galo gedgeddoonka waayaha ee hadba sida aadan jeclaysanayn u dhacaya.

Qalbigaagu ha ka nabad galo kala–tagga dhaca marka si xeel dheer xidhiidhku uu u xoogaysto, aad ayuu u xanuun kulul yahay'e.

Oo ha ka nabad galo kala–fogaanshaha iska–ag–dhowaanshaha ka danbeeya, waa xanuun aan la xamilaynin'e.

Oo ha ka nabad galo faquuqnaanta wehelka ka danbaysa, waa kelinimo laga xumaado'e.

Qalbigaagu ha nabad galo, oo ha ku jiro xaalkiisii asalka ahaa ee ahaa saafinimada markii uu Ilaahay uumay, saafigii lagu indho doogsanayay ha sii ahaado, adigana ha ku farax geliyo.

Waxa ugu farxad badan in qofku uu qalbigiisa eego, oo uu arko in uu ka madhan yahay xiqdi, xaasidnimo, nac iyo rabitaan ah aargoosi iyo wiirsi!

Ruuxdaadu ha nabad ahaato oo yaanay ka xuub siiban saafinimadii ay samada kore kala timi, hana u xiise qabto Rabbigeed, oo yaanay ku wasakhoobin dhoobada dhulka ee ay ku dhex jirto.

Damiirkaagu ha nabad ahaado oo mar walba baraarugsanaan iyo feejignaan ha ku jiro, si aanu qofna eray xun ugu xaganin, xataa ubaxna aanu qof ugu tuurin!

Fidradaadu nabad ha ahaato oo ha bed qabto, xaqa xaq ha u aragto oo ha raacdo, baadilkana baadil ha u aragto oo ha ka dheeraato.

Ciqaabta ugu xun ee qof uu maraa waa fidradiisa oo fasahaadda.

Waa in uu ku adkaysto difaaca baadilka isaga oo xaq u arka.

Oo uu ku adkaysto la–dagaallanka xaqa isaga oo baadil u arka!

Waxa aan kugu baraarujinayaa in aadan ka mid noqonin kuwa uu Ilaahay yidhi:

(وَهُمْ يَحْسَبُونَ أَنَّهُمْ يُحْسِنُونَ صُنْعًا) الكهف ١٠٤.

"[Kuwa uu dedaalkoodiiba ku dhammaaday] iyaga oo isu malaynaya in ay wax wanaagsan samaynayaan."

Iimaankaagu nabad ha ahaado oo laan curdin ah oo saafi ah ha ahaado, sidii markii koowaadba uu ahaa oo kale.

Laan ay martay neecawda tawxiidku, oo aan cid sharafteeda ku tumanin, cidna aan sirteeda faafin, denbina nooca uu doonaba ha ahaado'e aan dhayalsan!

Nabaadiino saaxiib.

# 086 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa aad i weydiinaysaa: "maxaynnu isla hal dhacdo qaabab kala duwan ugaga fal celinaa, iyada oo dhacdadu ay isla iyadii uun tahay, ma innaga ayaa isbeddelnay?!"

Aniguna waxa aan ku leeyahay: ma toos ayaan kaagaga jawaabaa, mise marka hore tusaale ayaan kuu soo qaataa?

Sidii caadada kuu ahaydna si qoto dheer ayaad ii dhegaysanaysaa, waxana aad faraha iigu tilmaamaysaa in aan tusaalaha soo horraysiiyo.

Hagaag saaxiib.

Nin saaxiibkii soo booqanaya ayaa wiilkiisii hore u sii kaxaystay, suuqa ayayna sii dhex mareen.

Waxa ay maqleen nin dhawaaqaya oo doonaya awr in uu hal Dirham ku gado.

Wiilkii ayaa aabbihii ku yidhi: "aabbe; i noo iibi awrka!"

Aabbihii: "ma Dirham dhan? Waa qaali aabbe!"

Hal sano ka dib ayay isla dhacdadii tabteedii u soo laabatay.

Suuqii ayay soo mareen iyada oo uu nin ku dhawaaqayo awr uu boqol Dirham ku gadayo.

Aabbihii inta uu ninkii boqolkii Dirham siiyay ayuu awrkii ka soo gatay!

Wiilkii oo amankaagsan ayaa aabbihii weydiiyay: "aabbow; sannadkii hore waxa aan kaa codsaday in aad awr Dirham i noogu gaddo, waxana aad tidhi waa qaali, maantana 100 Dirham ayaad awr ka bixisay!"

Aabbihii: “aabbo; qiimaha shaygu si kasta oo uu u yar yahayba waa ku qaali qofka aan haysanin, si kasta oo uu u badan yahayna wuu la jaban yahay qofka haysta! Sannadkii hore Dirham ma aanan haysanin, haddii adduunka oo dhanba hal Dirham la igaga gadi lahaana in uu qaali yahay ayuun baan u arki lahaa, maadaama aanan haysanin! Se sannadkan Ilaahay ayaa ii nimceeyay, boqolka Dirham ayaana maanta igala qiimo yar Dirhamkii aanan sannadkii hore haysanin!”

Waxa aan filayaa in hadda warku uu si weyn kuugu dhacay, hadalka aan soo wadaana uu iska cad yahay!

Dhacdooyinku waa isla kuwii uun saaxiib; se mar kasta oo ay ina soo maraanba sidii markii hore aynnu ahayn ma sii ahaanaynno.

Sidaas awgeed ayay falcelineheennu u kala duduwanaadaan.

Waxa qofka soo mara marar uu awoodo in uu buuraha adduunka oo dhanba qaado.

Haddana waxa soo mara xilliyo aanu xabbad quruurux ah qaadi karin!

Waxa qofka soo mara marar aanay dabaylaha caalamka oo dhammi si kasta oo ay duufaan xooggan u yihiinba liicinin.

Haddana waxa soo mara xilliyo laydha yari ay dhulka ku ridayso!

Saaxiib; mararka qaar innaga oo sugan ayuu nabarku inagu dhacaa oo inama rido, laakiin hungo yar oo ina haleeshay ayaynnu la dhacnaa oo adhaxda inaga jebisa, oo ruuxdeenna jilbaha dhulka u dhigta, si kasta oo

jidhkeennu uu dadka ula muuqdo in uu xooggan yahay oo uu qoton u taagan yahay!

Saaxiib; hal mar ma wada dhacno, ee waxyaabo badan ayaa isu keen biirsada!

U fiirso dhirta damallada ah marka ay doonayaan in ay gunta ka jaraan.

Hal mar oo gudin lagu dhufto, toban jeer, 20 jeer... sida sidaas loogu wado ayuu marka danbe hal garaacid oo aan kuwii hore ka xoog weyneyn ee la mid ah u dhacaa geedkaasi.

Keliya garaacistii hore ayuun baa wiiqday oo nuglaysay, garaacistaas ugu danbaysayna waxa ay muujisay uun dhibaatadii hore ee geedkaas soo gaadhay inta ay le'ekayd.

Innaguna sidaas ayaynnu nahay.

Nabaadiino saaxiib.

# 087 – Waan ku salaamay saaxiib

Wasiirkii Ibnu Sayaat waxa uu ahaa nin arxan daran oo macangag ah.

Waxa uu odhan jiray: "waligay qof uma aanan naxariisan, oo naxariistu waa liidasho iyo habacsanaan!"

Waayaha ayaa la geddoomay, xaalkuna wuu ku xumaaday, xabsina wuu galay, oo cadawgiisii ayaa ku xidhay qafas cidhiidhi ah oo ay hareeraha masaabiiri kaga taxan yihiin, mar kasta oo nuuxsadana musbaar ayaa mudayay, markaasuu ku cabaadayay: "war ii naxariista! War ii naxariista!"

Markaasaa lagu odhanayay: "naxariistu waa liidasho iyo habacsanaan!"

Saaxiib; sunnaha Ilaahay ee koonka ayaa sidaas ah.

Qof kastaaba waxa uu ka cabbayaa koobkii uu dadka ka waraabin jiray.

Daallinka waxa lagu ibtilaynayaa mid ka sii daallinsan!

Macangagga waxa lagu sallidayaa mid ka sii macangagsan!

Lidkeeduna waa sidoo kale, oo cidda wanaag fasha cid ka wanaagsan ayaa loo sakhirayaa.

Qofka dadka u debca Ilaahay ayaa isagana qalbiyada dadka u debciya.

Ka dadka niyadda u dhisa, isagana niyadda ayaa loo dhisaa.

Qofka dadka kale danahooda u fuliya ee baahiyahooda u kafeeyana Ilaahay ayaa u soo dira cid isagana danihiisa u fulisa oo baahiyihiisa u kefaysa!

Saaxiib; maantadan aad joogto, waxa aad dooranaysaa maalmahaaga soo aaddani sida ay noqon doonaan!

Ma taqaanaa sababta uu shahiidku uga badbaado imtixaanka qabriga?!

Waxa uu hore u soo dhadhamiyay imtixaankii seefta, Ilaahay wuu ka naxariis badan yahay in uu addoonkiisaas labadaas imtixaan ku kulmiyo!"

Sababta ay Yuusuf walaaladii gacmaha ugu hoorsanayeen ee ay u baryayeen, waa in ay hore u galeen gef baryadaas mutaysiiyay!

Suleekha sababta indho la'aanta loogu riday, waa in ay Yuusuf ka xarrimtay in uu koonkaas waasica ah daawado oo ay xabsi gelisay!

Qiyaamaha qofka ugu horreeya ee maro la huwinayaa waa nebi Ibraahin nkh'e, sababtuna waa in sida uu Ibnu Xajar xusayo isaga oo qaawan dabkii lagu tuuray!

Ilaahay qiyaamaha marka uu u yimaaddo addoonkiisii hodanka ahaa isaga oo aan lahayn wanaag aan ka ahayn in uu dadka ka cafiyi jiray deynka, Ilaahay wuu cafiyaa isagana, oo abaalintu waxa ay ka dhalataa hadba camalkaagu sida uu ahaa!

Saaxiib; maanta beer ayaad falaysaa, berrina midheheeda ayaad goosanaysaa, ee iniinyaha aad beerayso hadda hagaaji, aad goosashada ku faraxdid'e.

Caddaaladda Ilaahayna waxa ka mid ah, in badiba wixii la beerto saracooda adduunka lagu goosto, balse haddana uu Ilaahay xikmaddiisa darteed aakhiro dib ugu dhigo!

Haddii khayrka aad beeratay aadan adduunkan ku goosanin, ku niyad samow in aadan aakhiro hal xabbo seegaynin!

Nabaadiino saaxiib.

## 088 – Waan ku salaamay saaxiib

Axnaf Ibnu Qays sunne ayuu soomayay ilaa intii uu gaboobayay.

Markaasaa maalin lagu yidhi: "waad weynaatay, soontuna way ku dhibaysaa hadda!"

Kolkaasuu yidhi: "waxa aan sahay uga dhiganayaa safar dheer oo i sugaya!"

Safar dheer saaxiib.

U fiirso hadalkaas!

Ma doonayo in aan ku baqe galiyo, iyada oo haddana nin kuu digay aanu ku dilin.

Ee haddana waxa aan kugula talinayaa sahayda... sahayda saaxiib!

Noloshan dabadeed dhanka Ilaahay ayaynnu safar u galaynaa, adduunkuna waa halkii laga sii sahay qaadanayay, ee sahay qaado saaxiib.

Mar kasta oo sahay qaadashadu ay kugu adkaatana, in aad aakhiro u socoto nafta ku samir sii.

Saaxiib; nebigu ﷺ mar walba waxa uu asxaabtiisa ku samir siin jiray jannada.

Jacfar Ibnu Abii Daalib ayaa labada gacmood la jaray, markaasuu u sheegay in uu Ilaahay laba baal oo uu jannada ku dhex duulayo ugu beddelay!

Asxaabta ayaa arkay tuwaallo xariir ah oo boqorrada Faaris ay lahaayeen oo ay la dhaceen, markaasuu u sheegay in tuwaallada Sacad Ibnu Mucaad ee jannadu ay ka qurxoon yihiin!

Mid ayuu ilmo yari ka dhimanayay, markaasuu u sheegayay in ay nebi Ibraahin iyo Saari kafaalo qaadeen.

Waxa dhintay Cabdillaahi Ibnu Xisaam, markaasuu wiilkiisi Jaabir u ooyay, markaasuu u sheegay in Ilaahay inta uu aabbihii nooleeyay uu toos ula hadlay iyaga oo aanay waxna u dhexaynin, uuna ku yidhi: "addoonkaygiiyow; niyayso wax!"

Waxa uu soo maray nebigu ﷺ reer–Yaasir markii la jidhdilayay, isaga oo samir siinayana waxa uu yidhi: "samra reer–Yaasirow, ballankiinnu waa janno'e!"

Jannadu waa waxa dhib kasta oo aad ku jirtaba ku samir siinaya saaxiib, ee iyada samirsiis ka dhigo!

Saaxiib; noloshan qadhaadhkeeda iyo macaankeeduba wuu dhammaanayaa.

Gaajada soonta iyo harraadkeeduba way ina dhaafayaan, ajarkeeduna wuu hadhayaa.

Daalka salaatulayshu wuu ina dhaafayaa, ajarkeeduna wuu hadhayaa.

Inta aad masaajidka u socoto waad illaawaysaa, laakiin ajarkiisa waa la xasuusnaanayaa.

Keliya niyadda ku hay, in marka aad sidaa jannada u gasho dhib kasta oo aad darteed u soo martayba ay dhayal kula noqonayso.

Nabaadiino saaxiib.

## 089 – Waan ku salaamay saaxiib

Mararka qaar dhibku waxa uu inagaga yimaaddaa qof aad i noogu qaali ahaa!

Nabarka inagu dhacaa xanuun sidaas u weyn ma laha, ee gacanta inagu dhufanaysa ayaa xanuunka leh!

Waxa ina dhaawacayaa hadalka ma aha, ee qofka uu afkiisa ka soo baxayo weeyaan!

Dhacdadu sidaas oo dhan i nooma dhantaalayso, ee filashada wanaagsan ee cidda ay inagaga imanayso aynnu ka haysanay ayaa dil inagu ah!

Saaxiib; gudinta koowaad ee geedka ku dhacdaa wax weyn ma gaadhsiiso, ee waxa xanuunjiyaa waa in daabka gudinta isaga laga jaray!

Sabuuladka marka golxobta lagu jarayo kama danqado, oo awalba wax aan goyn ahayn kama aanu filanayn.

Ugu danbaynta; geedkana waxa rida garaaca gudinta, sabuuladkana waxa jara afka golxobta!

Go'intaankoodu waa isku mid, se dareennada ku kala lammaan ayaan isu dhoweyn!

Go'itaanka geedka waxa ku lammaan hanjab iyo quus!

Waxa ku lammaan in uu gunta kaa rujiyo kii aad beertay, ama aad la fududaato qof agtaada milgo iyo maamuus weyn ku leh, ama uu ku quudhsado qof aad qudhaada u halligtay, oo aad wejigiisa fallaadhaha cadceeddu si aanay u dhibin gacmahaaga uga dhigaysay!

Balse go'itaanka sabuuladku waa wax caadi ah, waana ku–talagal waxa ku dhacay oo beer–goosasho iyo

caadadeed ah, sabuuladkaas iyo golxobtaas lagu jarayana xidhiidhka ka dhexeeyaa waligoodba sidaas ayuu ahaa, sidaas ayuuna waligiiba sii ahaanayaa, wax xanuun ahina kuma jiro!

Waxa xanuunka ahi waa gedgeddoonka qalbiyada!

Waxa xanuunka ahi waa iska–hor'imaadka ka danbeeya isweheshiga!

Waxa xanuunka ahi waa in uu kaa oohiyo kii aad ilmada ka masaxday!

Oo uu qalbigaaga jebiyo kii aad mar walba niyaddaada dhiskeeda, niyaddiisa dhiskeeda ka horraysiin jirtay!

Saaxiib; aad ayuu u xanuun kulul yahay tafaraaruqa ka danbeeya isku–tiirsanaantu, iyo in cidda kale heerka ay qalbigaaga ka joogaan aadan qalbigooda ka joogini, iyo in aanay u qalmin wixii aad dedaal iyo diihaal daraadood u martay!

I rumayso saaxiib; aad ayay u xanuun kulushahay in aad oroddo, oo aad oroddo, oo aad ogaato goor ay xeedho iyo fandhaal kala dhaceen in aad dhankii qaldanaa u sii ordaysay, oo aadan ciddaa aad u ordaysay ka sii ag dhowaanin ee aad ka sii fogaatayba!

Nabaadiino saaxiib.

# 090 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa aad i weydiinaysaa: "in aan sababihii wax iigu hagaagi lahaayeen sameeyaa miyay ka hor'imanaysaa talo–saarashadii Ilaahay?!"

Waa markii iigu horraysay ee aan sidan oo dhan ula yaabo su'aal aad i weydiisay!

Waxa aan u malaynayay in arrinkaasi uu yahay doqoni–garatay, fahankiisuna beri hore uu kuu dhacay!

Way dhacday oo hore ayaan si dadban arrinkaas kuugu tilmaamay, in kasta oo uu tibaax uun ahaa, se dhib ma laha in aan hadda si faahfaahsan kaagaga warramaa!

Saaxiib; Cumar Ibnu Khaddaab ayaa soo maray nin ay awrkii cadho kaga dhacday.

Waxa uu arkay isaga oo gacmaha kor u taagaya oo Ilaahay awrkiisa caafimaad u weydiinaya.

Markaasuu ku yidhi: "way fiicnaan lahayd haddii aad ducadaadaas ku sii xoojin lahayd xoogaa xaydh aad ku dhamooqdaa!"

Cumar si yaqiin ah ayuu u ogaa, in Ilaahay uu awoodo in uu awrkaas dawo la'aan dabiibo, haddana sidoo kale waxa uu og yahay, in adduunkani uu yahay degaan sababo ku dhisan, qofkana laga rabo in uu sababaha la yimaaddo, balse aanu yaqiintiisa iyo kalsoonidiisa sababaha duldhigin, ee uu Rabbiga sababahaas ku kalsoonaado!

Dhakhtarku Ilaahay idankiisa la'aantii waxna ma dabiibo.

Balse taas macneheedu ma aha in aynnu isdaweyntaba joojinno!

Taas liddigeeda, ma aaminaynno in dawadaasi ay tahay ta iskeed wax u dabiibaysa, ee amarka Ilaahay aynnu aaminno!

Wuxuba waa intaas!

Waa in aad isu dheelli tirto sababta oo aad la timaaddo, iyo Ilaahay oo aad talo saarato!

Saaxiib; haddii aad u fiirsato hijradii nebigu ﷺ uu Madiina ku aaday, waad fahmi lahayd masaladanba.

Siiradu ma aha cashar taariikh ah oo laga sheekeeyo, ee waa manhaj nololeed.

Nebiga ﷺ oo uu Abu Bakar la socdo ayaa dhuumasho kaga baxay Maka, waana sababo uu la yimi.

Nin dalyaqaan ah oo dariiqa ku hagana hore ayuu u sii kaxaystay.

Waa nebi oo wuu og yahay in uu Ilaahay si walba u ilaalinayo, Ilaahay agtiisana uu miisaan ku leeyahay oo aanu marnaba Ilaahay ku kellifayn in uu saxaraha ku lumo, balse haddana sababihii wuu la yimi, maadaama uu ogaa in adduunku uu sababo ku dhisan yahay!

Waxa uu sidoo kale ina baray in sababta oo la la yimaaddaa aanay marnaba ka hor'imanayn Ilaahay in la talo saarto, ee waxa dhacayaaba ay qadderka Ilaahay ku dhacaan!

Isaga oo og in aanu waddadaas hijrada gaajo ugu dhimanayn, ayuu haddana sahay hore u sii qaatay!

Isaga oo og in Ilaahay uu mushrikiinta ka indho saabayo, ayuu haddana Cabdiraxmaan Ibnu Abii Bakar amrayay in adhi uu la joogay uu raadkooda ku baabi'iyo!

Maalinkii Uxudna waxa uu xidhay laba dirac (agab dagaaleed) ee hal dirac ma aanu ku kaaftoomin, isaga oo si yaqiin ah u og in diracyadaasi aanay geerida marnaba ka horjoogsanayn, haddana muuminku waa garaadyahan fiiro dheer!

Saaxiib; xataa mucjisooyinka caadajiidhka ah, ee sida sunnayaasha Ilaahiga ay u socdaan liddigooda u socdaa, waxa ay lahaayeen sababo muuqda oo la arki karo.

U fiirso Ilaahay marka uu Maryan ku leeyahay:

(وَهُزِّي إِلَيْكِ بِجِذْعِ النَّخْلَةِ) مريم ٢٥.

"Oo u soo ruxrux xaggaaga jirridda geed-timireedka."

Wuu awoodayay Ilaahay in uu timirta u soo daadiyo iyada oo aan waxna ruxin, iyada oo waliba Maryan markaas umushay oo aan awood ay geed ku ruxdaba lahayn, haddana Ilaahay waxa uu faray xoogaa dedaal ah in ay samayso!

Saaxiib; markii Muuse uu reer–Banii Israa'iil kaxaystay ee Fircoon iyo ciidankiisii ay ka daba tageen, ee xeelligii badda ay isla soo gaadheen, Ilaahay waxa uu Muuse ku yidhi:

(اضْرِب بِّعَصَاكَ) الشعراء ٦٣.

"Ku dhufo ushaada [badda]."

Ushu badda ma kala jeexayso saaxiib, mana aha sabab wax weyn oo macne weyn soo biiriya samaysa, badduna ushaas uu nebi Muuse nkh'e ku dhuftay darteed uma aanay kala qaybsamin, ee Ilaahay waxa uu addoonka ka doonayaa in uu sameeyo sabab yar oo uu awoodo!

Saaxiib; markii uu nebi Nuux nkh'e ka quustay qoomkiisii, ee uu si yaqiin ah u ogaaday in intaas hore u soo raacday mooyaane qof kale aanu soo raacaynin, ayuu samada gacmaha u taagay oo uu baryootamay, amarkii Ilaahay ee u yimina waxa uu noqday:

(وَاصْنَعِ الْفُلْكَ) هود ٣٧.

"Oo samee doonta."

Ilaaha karaanka badan ee addoonkiisaas iyo muuminiintiiba doontaas ku badbaadiyay, wuu awoodayay in uu doontaas la'aanteedna badbaadiyo, ee waxa uu ka doonay in uu sabab la yimaaddo oo uu faraha yara taagtaago, illeen waa imtixaan la marinayo inta uu le'eg yahay fahanka addoonku uu u leeyahay sunayaasha Ilaaha koonka e!

Saaxiib; markii Ayuub uu cudurkii ku dheeraaday, ee uu damcay in uu Ilaahay ka baryo caafimaad, waxa uu Ilaahay ku yidhi:

(ارْكُضْ بِرِجْلِكَ ۖ هَٰذَا مُغْتَسَلٌ بَارِدٌ وَشَرَابٌ) ص ٤٢.

"Ku garaac dhulka cagtaada, waxani waa biyo maydhasho oo qabow iyo cabbitaan'e."

Wuu awoodayay Ilaahay in uu dedaal la'aan, dawo la'aan iyo cabbitaan la'aan dabiibo, se haddana in uu sabab la yimaaddo ayaa la faray!

Mar haddii aanay dhammaantoodba intaas aynnu soo xusnay ka maarmin in ay sabab la yimaadaan, ha sugin adiguna guul bilaa sabab iyo dedaal ah!

Nabaadiino saaxiib.

## 091 – Waan ku salaamay saaxiib

Nin ayaa weydiiyay boqorkii u danbeeyay ee boqortooyadii Mundiriyiinta ee Yaman ee Nucmaan Ibnul Mundir inantiisii Hinda: "iiga warran boqortooyadiinnii iyo sidii aad ahaydeen?!"

Hinda: "miyaan soo koobaa mise waan faahfaahiyaa?!"

Ninkii: "soo koob!"

Hinda: "waxa aannu waa bariisanay iyada oo qof kasta oo aan arkaaba uu addoon noo yahay, waxana aan gabbal dhacsannay iyada oo cadawgayagii aannu gacantooda ku jirno!"

Ilaahay ayaan ka magan galaa nimcadu in ay iga baaba'do saaxiib!

In adduunku uu kuu dhabar jeediyo adiga oo badhaadhihiisa u bartay!

In khayraadkii aad gacanta guyaasha ku haysatay ay kaa mudhuxsadaan!

Adiga oo la'aantaa aan kalfadhi la yeelan jirin in lagaa maarmo oo aan laguba tebin!

Adiga oo lagu karaamayn jiray in lagaa leexdo oo aan maqaamba in aad leedahay laguu arkin!

In lagu quudhsado ka dib markii lagu qadderin jiray!

Adduunku aad ayuu u fool xun yahay saaxiib haddii xaalku sidii wanaagsanayd ee uu ahaa uu kaa la geddoomo!

Qofka karaamaysnaanta iyo cisiga u bartay dullinimada iyo baahidu way dilaan!

Waxa ay qalbigiisa iyo naftiisa u cantuugaan sida jiirku maro uu helay uu hadba dhinac qayb uga cantuugo, ilaa uu gaadhsiiyo heer aanay sinaba maradaasi ku habboonaan!

Saaxiib; xanuunka qofka ku dhasha bukaanku, wuu ka fudud yahay xanuunka qofka ku habsada caafimaadkii uu haystay dabadii! Dhibtoodka faqiirka saboolnimada ku dhashay wuu ka fudud yahay qofka hantiilaha soo ahaa ee caydhoobay!

Xanuunka qofka aan gacalle jecel haysani wuu ka fudud yahay xanuunka qofka jacaylka soo dhadhamiyay ee dabadeedna waayay!

Wax kasta oo aad haysatay oo aad weydaa aad ayay nafta ugu adkaanayaan, se in uu qofku ka murugoodo waayitaanka aanu haysanin wax aanu waligiiba hore u soo dhadhamin, ayaa ka fudud oo ka xanuun yar in uu ka murugoodo wixii uu haysan jiray!

Ilaahay ayaan kaaga magan galayaa in aad ka fogaato adiga oo u dhowaa, Wallaahay waa nimco kaa suusha'e!

Waa nimco kaa suushay in uu ku waayo dariiqii aad masaajidka u mari jirtay isaga oo xifdiyay tallaabooyinkaaga!

Ama ay kuu xiisto meeshii aad sujuudda dhigi jirtay oo ay ku weydo!

Ama uu kitaabkaaga Quraanku dhasoobo ka dib markii uu xifdiyay carafta farahaaga!

Ama gacantaada aad dib u ceshato adiga oo waxbixin ku sheegganaa oo aad bakhayl noqoto!

Ama la gaadho barqadii oo salaatu duxadii aad ku sheegganayd aadan danaynin!

Oo la gaadho qaybta saddexaad ee danbe ee habeenkii oo salaatulayshaadii aad u baratay aadan dhankeeda u dhaqaaqin!

Saaxiib; qofka isaga oo Ilaahay u dhowaa ka fogaaday, eedaad ayuu ku noolaadaa, eedaadna wuu ku dhintaa!

Ma helo macaansiga dadka Ilaahay addeecaa ay helaan, mana helayo raaxada kuwa Ilaahay caasiyaa ay helayaan, waaba haddii macsiyada ay raaxo ku jirto'e!

Nabaadiino saaxiib.

# 092 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa aad i leedahay: "waxa aan dareemayaa taagdarro aanan waxba ka qaban karaynin, marka aan arko iyada oo diintan duullaan argagax leh lagu soo qaado, wax aan hadal ahaynna aanan ka geysan karaynin!"

Aniguna waxa aan ku leeyahay: erayga ayay mararka qaar qoriga ka mudan, iyada oo midkoodna aanu ka kale ka maarmaynin, ka kale kaalintiisana aanu buuxinaynin!

Sidii aanay wax dhayal ah oo fudud u ahayn shahiidnimadii Xamse, ayaanay u fududayn qof daalim xaqa kala hortegay oo amarkii Ilaahay faray, wixii uu Ilaahay ka reebayna ka waaniyay oo uu daalimkaasi dilay!

Badanaa eray ka xanuun kulul xabbadda nabarkeedu!

Way badan yihiin gacmaha qoriga qaadanaya ee xabbadda xaqa ugu jihaadayaa, laakiin aad ayay naadir u yihiin carrabyada xaqa ku dhawaaqaya ee aan la gabbanayni!

Saaxiib; Cumar Ibnu Khaddaab ayaa masaajid soo maray, markaasuu arkay Xasaan Ibnu Saabit oo gabay ku dhex tirinaya, markaasuu fursaddaas ka faa'idaystay isaga oo aan gabayga yasaynin, ee qiimaha masaajidka kor u qaadaya!

Markaasuu Xasaan ku yidhi: "amiirkii muuminiintow; waxa aan gabayga masaajidka ku dhex tirin jiray iyada oo mid kaa khayr badani uu joogo!"

Markaasuu dhanka Abu Hurayra u jeestay isaga oo ku leh: "Ilaahay ayaan kugu dhaariyay'e, miyaadan

maqlin nebiga oo leh: 'Xasaanow; adiga oo iga wakiil ah u jawaab. Ilaahayow ku xooji Jibriil!'"

Abu Hureyra: "haa!"

Markaasuu Cumar iskaga tegay!

Saaxiib; marka dagaal ay ciidamo iskaga horyimaaddaan, waxa diintani ay ku badbaadi jirtay seefta Khaalid, Abu Cubayda iyo Musanaa.

Marka dagaalka fekerka ahi uu oogsadana, diintani waxa ay ku badbaadi jirtay maansooyinka Xasaan Ibnu Saabit.

Khaalid waxba kama qaban karo halka uu Xasaan wax ka tarayo!

Dhammaan maansooyinka Xasaanna ma buuxin karaan kaalinta hal seef oo Khaalid uu cid ku dhufto!

Qodobka aan uga socdaa saaxiib, waa in diintani ay leedahay albaabo kala duwan, qof kasta oo inaga mid ahina uu albaab buuxiyo, ee kaalintaada waligaa ha dhayalsan.

Mar haddii uu Ilaahay ku siiyay hubka erayga iyo aftahannimo, cibaadadaadana aad ku dheggan tahay oo aadan dhayalsanin, waxa uu kuu xil saaray albaab ka mid ah albaabada diinta, ee ka soo bax masuuliyaddaas oo ha isyasin!

Saaxiib; qofka hodanka ah waxa lagu beegay albaabka sadaqadda.

Suugaanyahanka iyo abwaanka waxa lagu beegay albaabka ilaalinta caqiidada, raddinta shubahaadka iyo sheegista erayga xaqa ah!

Dagaalyahanka waxa lagu beegay albaabka dagaalka!

Baraha waxa lagu beegay albaabka dhismaha jiilka soo kacaya!

Hooyada waxa lagu beegay albaabka barbaarinta iyo tarbiyadaynta halyeeyada!

Saxafiga waxa lagu beegay albaabka ah in uu diinta ka ilaaliyo in hadal dhabarka lagaga toogto!

Daaciga dadka diinta ugu baaqa waxa lagu beegay albaabka ah in uu dadka dhanka Ilaahay u kexeeyo!

Saaxiib; Bukhaari waxa uu ku dedaalay in uu buuxiyo kaalinta xadiiska, Saxiixul Bukhaari ayuuna soo saaray!

Muslim ayaa isaguna ku dedaalay in uu buuxiyo kaalinta sunnaha, Bukhaari ayuuna sii xoojiyay!

Maalik ayaa isaguna ku dedaalay in uu buuxiyo kaalinta fiqiga, Muwada' ayuuna soo saaray!

Axmed Ibnu Xanbal ayaa isaguna ku dedaalay in uu buuxiyo kaalinta caqiidada, Musnid ayuuna soo saaray.

Dhabarkiisii jeedalka lagu garaacayayna Ilaahay waxa uu ku badbaadiyay diinta ummaddan dhan!

Nabaadiino saaxiib!

# 093 – Waan ku salaamay saaxiib

Rabiic Ibnu Khaysam ayaa ku yidhi xaaskiisii: " i noo samee Khabbays (nooc cunto ah)."

Maadaama Khabbaystaasi ay tahay cunto karinteedu ay dhib badan tahay, dhadhankeeduna uu macaan yahay, waxa ay u malaysay in uu mid ka mid ah maamuusleyda magaalada casuumayo.

Waxa uu gurigii yimi isaga oo uu la socdo nin waalani!

Cuntadii ayuu u guray ninkii oo uu ka dhergiyay, iyada oo uu ninkii waalnaa dhareerku ka daadanayo.

Markii uu ninkii waalnaa tegay ayay ku tidhi xaaskiisii: "waynnu iskellifnay oo cunto ayaynnu diyaarinnay, ninkan waalan ee aad keentayna wax uu cunay iyo wax kaleba ma kala garanayo!"

Markaasuu ku yidhi: "laakiin Ilaahay ayaa garanaya waxa uu cunay!"

Si wacan ugu fiirso saaxiib hadalkiisaas:

"laakiin Ilaahay ayaa garanaya waxa uu cunay!"

Ilaahay dartii waxa aad qabanayso u samee oo abaalgud iyo ammaan cidna ha ka sugin, waxba kuu ma dhimayso in aan wanaaggaaga la ogaanin oo adiga uun aan lagu hadal haynin, iyo in aan laguu sacabinin midkoodna'e!

Asal ahaanba wax kasta oo ay dadku ogaadaan waxa u fudud in istusnimo iyo iscajebini ay gasho, wixii istusnimo ay gashana manfacoodu sidaas ayuu kugu dhaafay!

Saaxiib; si qoto dheer ayuu ii gilgilaa xadiiskii nebiga ﷺ ee uu kaga warramayay in qiyaamaha nebi waliba uu la soo xaadirayo intii rumaysay, tiro aad u badan iyo tiro yarbana uu sheegay, ka dibna uu yidhi: “waxa imanaya nebi aanay cidina la soconin!”

Bal yara suurayso dhacdadaas!

Nebi uu Ilaahay waxyi soo raaciyay, baaqay, daalay, xaqa caddeeyay, daliillo keenay, jidka toosan dadka jeclaysiiyay, u nasteexeeyay, ka run sheegay, caddaalad sameeyay oo gefafkii loo geystay cafiyay, haddana aanay cidina rumaynin!

Haddana maalinka qiyaame safka nebiyada ayaa la la soo xaadirinayaa, maadaama uu Ilaahay dartii u adeegayay!

Laakiin cidda taabacda, natiijooyinka, sacabinta iyo ammaantu waa wax Ilaahay gacantiisa ku jira, haddii uu doono wuu siiyaa addoonka, haddii uu doonana wuu ka qadiyaa!

Saaxiib; u camal fal wejiga keliya ee wejiyada oo dhanba kaaga filnaanaya!

Sadaqadda aadan Ilaahay dartii u bixinin Ilaahay agtiisa wax macne ah ka samayn mayso!

Qofka aad niyadda u dhisto adiga oo dan adduunyo ka leh, waxa aad niyaddaas ku baabi’isay ajarkaagii aakhiro!

Bukaanka dan aad ka leedahay darteed aad u soo booqatay, in aad gurigaaga iska fadhido ayaa kuu dhaantay!

In aanu qofku wanaagba samaynin, laakiin niyadiisu ay wanaagsan tahay, ayaa uga door roon in uu wanaag sameeyo iyada oo niyadiisu ay xun tahay!

Nabaadiino saaxiib.

## 094 – Waan ku salaamay saaxiib

Xalay qoraal aan akhriyay ayuu jidhiidhico jidhku ila dubaaxiyay!

Gabadh ayaa qortay: "laga soo bilaabo muddo laba sano ka badan ma aanan xijaabanin, fasalkana waxa igula jirtay gabadh khamaar xidhata, mar kasta oo ay i soo ag martana waxa ay igu soo tuuri jirtay hadallo i dhibaya oo dhalliil ah.

Muddo sannad ku dhowaad ah ka dib waan xijaabtay oo khamaar ayaan xidhay, halka gabadhii ay iska dhigtay xijaabkii, imminkana maba xijaabato!"

Saaxiib; ma aha markii koowaad ee aan waxyaabo arrinkan la mid ah akhriyayo, ilaa aan ku qancay in qofka ugu fiirfiirsada denbiyada dadka sidii in uu Rabbigii xisaabinayay yahay, aanay dheerayn goorta uu siiban doono ee uu gelayo kaalinta dadkaas uu sida xaqiraadda leh u eegayay ee uu iskala weynaa maadaama uu dhanka u–hoggaansanka Ilaahay uga dhowaa!

Qofka denbiyada dadka ku eega il uu taag darradiisa ku dareemayo, ee u arka in aanu xeelad iyo awood uu leeyahay hoggaansanaataas ku kasbanin ee uu fadli iyo dheeraad uu Ilaahay siiyay ku hoggaansamay, ee Ilaahay bedqabkiisaas ku mahadiya, ee dadkana hanuun Ilaahay u weydiiya, Ilaahay wuu ka nabad geliyaa in uu macsiyadaas ay dadku ku dhaceen uu isaguna ku dhaco!

Saaxiib; wallaahay in aanu qofna awood uu leeyahay isagu Ilaahay ugu hoggaansamin, ee Ilaahay ayaa ku maamuusay hanuunka!

Qofna in uu ka kaaftoomay darteed Ilaahay ugama fogaado, ee Ilaahay ayaa horraanta horeba isaga ka kaaftooma!

Ilaahay ayaan kugu dhaariyay'e, haddii aad qof caasi ah oo denbi dhex dabbaalanaya la kulanto, ha ku jeesjeesin, ee macsiyada nac oo qofka ku dhex jira soo dhoweyso, haddii aanu Ilaahay kuu naxariisan adiguba kaalintiisaas ayaad ku jiri lahayd'e!

Waxa aan kaaga digayaa in aad qofna denbiga uu ku dhex jiro ku quudhsato, qofka cid kale wax ku quudhsadaa aakhirka waxaas wuu ku dhacaa isaguna, muddaba ha ka soo wareegto'e!

Saaxiib; markii Maxamed Ibnu Siiriin uu faqiirka noqday ee uu xabsiga galay maadaama uu ganacsigiisii ku khasaaray oo deynkii uu iska gudi kari waayay ayuu yidhi: "in ay sidani igu dhacdo 20 sano ayaan sugayay, oo mar ayaan nin xaaladdan oo kale ku dhacay aan quudhsaday oo aan ku idhi, ninka kacayow!"

Haddii ay cidhib–danbeedka quudhsiga dhibaatooyinka yaryar ee adduun ay sidaas tahay, maxaad u malaynaysaa cidhib–danbeedka quudhsiga gefafka diinta uu qofku ka gelayana?!

Cabdillaahi Ibnu Cumar ayaa qodobkan si waafi ah u fahmay oo yidhi: "wallaahay, haddii aan gabadh uur leh ku quudhsado uurkeedaas, waxa aan ka baqaa in aniguna uur qaado!"

Nabaadiino saaxiib.

# 095 – Waan ku salaamay saaxiib

Xalay waxa aan ku mashquulsanaa qisada nebi Yoonis nkh'e oo aan u daymo badinayay.

Waa qiso uu ka dheefayo qofka qalbiga ka fahma ka hor inta aanu caqliga ka fahmini.

Waxa aan la dhacay, markii uu nibirigu liqay ee uu is'arkay in uu calooshiisii ku jiro, sida uu markiiba u gartay dhanka looga soo dhacay ee uu imtixaanku kaga yimi.

Si wacan ayuu u fahmay gefka uu galay ee imtixaankan ku sababay, markaasuu dhanka toobadda iyo denbidhaaf–dalabka u cararay isaga oo leh:

(لَا إِلَٰهَ إِلَّا أَنْتَ سُبْحَانَكَ إِنِّي كُنْتُ مِنَ الظَّالِمِينَ) الأنبياء ٨٧.

"Ilaah xaq lagu caabudaa ma jiro adiga mooyaane, xumo ka nasahnid Ilaahayow, aniguna waan gefay."

Waxa aan la cajabay in markii koowaad ee imtixaanku uu haleelayba, uu sababtii isagu naftiisa ka raadiyay, intii aanu dadka kale eedda saarin ee aanu iyaga sababta tuurta u saarin!

Waa dhab in uu ahaa nebi macsuum ah oo denbi la', dhawrsoonida marka laga eegana aanu dhankaas ku gefin.

Se waxa uu sameeyay nebinimadiisa arrin ku liddi ah, oo markii uu arkay sida ay tolkii u beeninayaan, cadhadii uu ka qaaday hadalka Ilaahay ee aanay dhegba u dhigaynin, ayuu dedejistay in gebigoodaba cadaab lagu soo rogo.

Markiiba xaalkiisa ayuu qiimeeyay, eeddu in ay isaga joogtana wuu arkay, soo–laabashadana wuu u degdegay!

Saaxiib; Ilaahay mararka qaar waxa uu kadeed i noo geliyaa si uu dhankiisa dib i noogu celiyo.

I rumayso; haddii uu addoonku ujeedkaas fahmo, isla marka uu wax dhibaya dareemaba isaga oo qalbigiisa dabada ka wada oo diiddan in uu Ilaahay ka fogaado ayuu degdeg ugu laaban lahaa, Ilaahayna kama jeesanayo oo kama raalli noqonayo in addoonkiisaasi uu ka fogaado markaa!

Taas oo keliya ayaa mudan in Ilaahay loogu sujuudo sujuud shukri ilaa weligeedba wejiga dhulka lagu hayo!

Waa in uu addoonka faqiirka ahi fogaado, oo Allaha hodanka ahi uu soo dhoweysto!

Waa in uu guuro addoonka baahani, oo Allaha aan baahani uu xidhiidhiyo!

Waa in uu hanjabo ka taagta darani, oo Allaha awoodda weyni uu xoojiyo!

Haddii uu addoonku macnahaas oo keliya fahmi lahaa, isaga oo qalbigiisa ay si niyo ah uga soo go'day ayuu dhanka Rabbigii aadi lahaa, ilbidhiqsiyadii uu ka fogaadayna uu ka khajili lahaa!

Nabaadiino saaxiib.

## 096 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa aad iiga sheekaynaysaa xiqdiyada iyo naca, waxana aad i weydiinaysaa:

"muxuu hebel oo aanan waxba u geysani ii neceb yahay?!"

Nacaybku waa dareen dilaa ah saaxiib, Ilaahay ha u gargaaro qofka wax neceb oo naftiisa ha ka badbaadiyo'e, waa qof aan awoodin ugu horraynba in uu naftiisa jeclaado, sidaa awgeed; ha ka sugin in uu cid kalena jeclaado!

Yaanay iskaga kaa qaldamin danaystaha iyo xaaqidku (qofka wax neceb).

Danaystuhu dadka kale ma necba ee in ka badan inta dadka kale ayuun buu naftiisa jecel yahay, in kasta oo wax la jeclaysto aanu ahayn, haddana cudurdaarkiisa ayuu leeyahay, oo naftan aadamaha haddii aan lagu xakamayn dabarka Alle–ka–cabsiga, xadhkaha ayay goosanaysaa!

Se ka xaaqidka ahi cidna ma jecla, xataa naftiisana ma jeclaa!

Wuu isla yar yahay oo isaga ayaa isla yasan, nacaybka uu dadka kale u hayaana waa kii uu naftiisa u hayay oo inta uu ka tan badiyay oo ka soo fatahay, oo uu dadka kale kala duldhacay!

Saaxiib; yaa yidhi qofka wax necebi waxa uu u baahan yahay in uu cudurdaar u helo nacaybkiisa?!

Ibliis waxa uu nebi Aadan nkh'e nacayb u qaaday iyada oo aan ruuxba lagu afuufin!

Sidaas ayuu nac iyo nacayb laabta ugu qaaday, iyaga oo aan isqabanin oo aanay waxnaba dhex marin!

Markii uu amarkii Ilaahay ee ahaa in ay Aadan u sujuudaan malaa'igta soo gaadhay, Ibliisna uu malaa'igtaas ku xisaabsanaa, oo amarka cidda sharafta mudan la siinayaa kuwa ka meeqaamka hooseeyana waa u amarkaas uun.

Tusaale ahaan; haddii aad ku tidhaahdo wasiirrada marka uu madaxweynuhu soo galo ixtiraamkiisa dartii u istaaga, marnaba amarkaasi kama dhigna in wasiirraduna ay istaagaan, kaaliyayaashooduna ay iska sii fadhiyaan, oo amarkaas ayay qaadanayaan iyaga oo fahansan in xaalku uu sidaas yahay!

Ibliis sujuudda xaasidnimo iyo xiqdi ayuu u diiday, maadaama uu ku soo kacay dareen xun oo gudihiisa ku jiray, iyo cuqdad ahayd nuqsaan uu dareemayay oo uu Aadan ku tuhmay oo uu qarin kari waayay, maadaama abuurista Aadan iyo amarka u–sujuudistiisu markan ay waaqic taagan oo uu arko noqdeen!

Saaxiib; qofka wax necebi waa ka ugu halisaysan noocyada dadka!

Danaystaha waxa aad ku raalli gelin kartaa in aad u sed buriso oo wax badan aad isaga siiso.

Ka cadhaysan waxa aad ku raalli gelin kartaa in aad u cudur daarato.

Ka axmaqa ah ee dhibta badan waxa aad kaga nabad geli kartaa in aad iska ururiso.

Balse ka wax neceb, haddii aad ka tagtana wuu ku daba socdaa, haddii aad irridda ka xidhatana daaqadda ayuu kaaga soo gelayaa!

Wax kasta oo aad samaysaba wax aad ku raalli gelin kartaa ma jiraan, maadaama dhibaatadu asal ahaanba aanay adiga dhankaaga ahayn ee ay isaga dhankiisa tahay, ayna isaga gudihiisa ka oogan tahay!

Nabaadiino saaxiib.

# 097 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa aan ku leeyahay: Ilaahay qof kasta oo uu abuurayba murti ayuu ka leeyahay, ee si kasta oo aad xikmadda qofkaas ku duugan u garan weydo, ku kalsoonow oo rumayso in ay xikmad dhab ahi qofkaas ku duugan tahay!

Haddii aanu Ilaahay i noo sheegin murtida ku duugan khalqigiisa sababta uu u abuuray, laba sababood oo aasaasiya ayaa ka danbeeya:

Ta koowaad: waa in aan Ilaahay la weydiinin waxa uu samaynayo, waana tallaabada koowaad ee uu addoonku u qaadayo dhanka ka–edebsiga Rabbigii, la'aanteedna aanu iimaanku ansaxaynin.

Ama aynnu nidhaahno'e, uu iimaanku noqonayo laangadhe jiis ah oo aan saani u soconayn!

Ta labaad: waa in uu Ilaahay korreeye inaga doonayo in aynnu caqligeenna ka shaqaysiinno oo dhacdooyinka taariikhda aynnu ku qiimaynno, si aynnu uga soo xiganno casharro iyo cibrooyin aynnu waaqiceenna ku daweynno!

Maskax–tuujinta, fekerka falanqayneed iyo in aan jawaabaha la siinin ardayda wax baranaysaa, miyaanay ahayn in iyaga la siinayo masaaxo ay ku baadhaan oo ay iyagu ku daah feydaan aasaasyada tarbiyaddan ugub?!

Maxaynnu marka ay dadku sidaas samaynayaan ugu ammaanaynaa, Ilaahay marka uu sidaas masaaxadaas i noo siiyana aynnu wax u tuhmaynaa, Ilaahay ayaynnu ka magan galnay wejigiisa sharfan in aynnu ka shakino'e!

Markaasaad igu odhanaysaa: "marnaba ma shakiyayo, ee waxa aan isku deyayaa in aan wax fahmo!"

Markaasaan ku odhanayaa: saaxiib; iskudaygaas fahmidda ah laftiisa ayaaba ah cibaado.

Balse waxa aan dareemayaa in aad qof gaar ah tilmaamayso!

Markaasaad i odhanaysaa: "qof aan si gaar ah u tilmaamayaa ma jiro, laakiin marba haddii aad i weydiisay, waxa aad iiga warrantaa, tusaale ahaan, murtida ku jirta abuurista qof daalim ah sida Fircoon oo kale!

Saaxiib; Fircoon waa mid ka mid ah tusaalayaasha ugu mudan ee loo soo qaadan karo murtida uu Ilaahay ka leeyahay abuurtiisa!

Haddii aanay Fircoon iyo kuwayawga la midka ahi jiri lahayn maba aynaan fahaneen sunnaha ah imtixaamidda!

In ka xooggan lagu imtixaamo awood, maamuus iyo talis, ka taagta daranna lagu imtixaamo samir iyo halgan!

Fircoon iyo kuwa la midka ah la'aantood, ma fahmaynno sida uu Ilaahay xorriyadda dadka ugu siiyay ee uu ugu seeto dheereeyay, si ay rabitaankooda iyo ikhtiyaarkooda ugu caabudaan ama ay ugu caasiyaan!

Haddii uu Ilaahay addeeciddiisa dadka ku qasbi lahaa, imtixaanka adduun ee soo hadhi lahaa muxuu ahaan lahaaba?!

Sidee ayay dadku uga gudbayaan imtixaanka ama ay ugu dhacayaan, haddiiba aanay ficilladooda xorriyad u haysan oo rabitaan madax bannaan aanay lahayn?!

Qofka wax lagu qasbo imtixaanba laguma laha, ka wax lagu sandulleeyaana waa qof la xaddiday damaciisii oo waxba lama weydiinayo!

In uu Ilaahay daalimka gabbood falaha ah awood siiyaa waa in uu xujada ku oogayo, in aanu si toos ah u soo faro gashanin ficilladiisa oo dulmigiisaas aanu ka qabanin kuwa uu dulmiyayo marka uu dulmigaas geysanayaana waa mahuraan, si uu ugu imtixaamo kuwaasna samirka iyo la–halganka dulmiga!

Saaxiib; haddii aanu Fircoon jiri lahayn, ma aynaan fahaneen in aadamuhu uu ka taag yar yahay oo awooddiisu aanay gaadhsiisnayn heer uu ku beddeli karo qadderka Ilaahay!

Markii uu Fircoon riyada ku arkay dab weyn oo qasrigiisa dhex eryanaya, qolyihii riyooyinka fasirayayna ay ugu sheegeen in uu yahay wiil ka dhalan doona reer–Banii Israa'iil oo burburka mulkigiisa sabab u noqon doona, ee uu bixiyay amarka ah in la gawraco wiil kasta oo reer–Banii Israa'iil u dhasha, ee sannado badan sidaas loo gawracayay, uu haddana markii uu Muuse dhashay isaga laftigiisu qasrigiisa ku barbaariyay isaga oo aan waxba ka qaban karaynin!

Markaasaynnu fahmaynaa in qadderka Ilaahay ay shaki la'aan tahay in uu fulayo!

Saaxiib; haddii aanay Fircoon iyo kuwa la midka ahi jiri lahayn, ma aynaan ogaaneen in ay qalbiyadu Ilaahay gacantiisa ku jiraan oo hadba sida uu doono uu wax u jeclaysiiyo ama uu uga masaxo!

Bal suurayso markii ay aragtay Aasiya Bintu Musaaxim sanduuqii looxa ahaa ee biyaha

dulheehaabayay, ee ay ilaaladii amartay in ay u keenaan, markii ay furtay ee ay Muuse nkh'e ku aragtayna uu Ilaahay gacaltooyadiisa qalbigeeda geliyay!

Gacaltooyadaasi waa ta ka horjoogsatay nebi Muuse nkh'e gawricii!

Sidoo kale; waxa ay dadkaas dhibka badnaa u jiraan si aynnu u ogaanno in abaalmarintu ay ku xidhan tahay hadba camalku nooca uu yahay iyo mugga uu le'eg yahay.

Nebi Muuse nkh'e hooyadii markii hore waa laga xarrimay iyada oo amarka Ilaahay fulinaysa, markaasuu haddana Ilaahay u sameeyay ilmeheedii hooyo labaad oo iyada ka dhaxashay!

Saaxiib; haddii aanay Fircoon iyo kuwa la midka ahi jiri lahayn, ma aynaan ogaan karneen in uu qof qof kale noloshiisa qasi karo, fasahaadkeenna iyo hallaysnaanteennana waxa ayaynnu ku eedayn lahayn oo aynnu cudurdaar uga dhigi lahayn degaanka iyo duruufaha!

Balse Ilaahay waxa uu xaaskii Fircoon ee Aasiya i nooga dhigay xujo cad, si aynaan gefafkeenna ugu cudur daarin in lammaaneheennii uu inagu sababay!

Hal qasri ayuu ninkuna ka dhex lahaa: "waxa aan ahay Rabbigiinii ugu sarreeyay!" Xaaskuna ay ku dhex sujuudaysay oo ay ka dhex lahayd: "waxa xumo ka nasahan Rabbigayga ugu sarreeya!"

Ma aragtay hadda xikmadda Ilaahay ee xeesha dheer?!

Saaxiib; haddii aanu Fircoon jiri lahayn ma aynaan ogaaneen in guryuhu ay leeyihiin siro, lammaanuhuna

iyaga oo guri ku wada nool, sariirna ku wada seexanaya, haddana masaafada u dhexaysaa ay ka fog tahay inta ay cirka iyo dhulku isu jiraan!

Bal u fiirso kala–fogaanshaha intaas le'eg!

Mid ka mid ah gaaladii ugu caansanayd taariikhda, ayaa qaba mid ka mid ah muuminadihii ugu caansanaa taariikhda!

Saaxiib; masaafooyinku ma aha waxa dadka kala fogeeya ama isu soo dhoweeya, ee qalbiyada ayuun baa sidaas sameeya!

Saaxiib; haddii aanu Fircoon jiri lahayn, ma aynaan ogaaneen in walaaluhu mararka qaar ay noqdaan halbawlaha wadneheenna, oo markii ay nebi Muuse hooyadii biyaha raacisay, ee ay meel ducada la fadhiisatay, walaashii sanduuqa ayay daba cararaysay iyada oo doonaysay in ay ogaato halka uu webigu geynayo walaalkeed!

Markii uu diiday dumarkii in ay naasnuujiyaanna, inta ay qof talo u wada isaga dhigtay, ay u tilmaantay qoys kafaalo qaadi kara naasnuujintiisa.

Sidaas ayay sabab ugu noqotay in uu Muuse ku soo laabto dhabta hooyadii.

Markii uu Ilaahay nebi Muuse nkh'e ku maamuusay nebinimada, waxa uu yidhi Muuse:

(وَأَخِي هَارُونُ هُوَ أَفْصَحُ مِنِّي لِسَانًا) القصص ٣٤.

"Oo walaalkay Haaruun ayaa iga aftahansan."

Kama aanu xumaanin in uu tilmaamo halka uu walaalkii kaga fiican yahay isaga!

Dhiiggu biyo ma aha saaxiib!

Saaxiib; haddii aanu Fircoon jiri lahayn, ma aynaan ogaaneen in ay addoomuhu iyagu sameeyaan dadka addoonsanaya:

(فَاسْتَخَفَّ قَوْمَهُ فَأَطَاعُوهُ) الزخرف ٥٤.

"Waxa uu (Fircoon) fududaystay qoomkiisii, wayna addeceen."

Markii uu arkay in ay madaxa u foororinayaan, ayuu sidii faraska dusha uga fuulay!

Gabboodfaluhu sidiisa daalim uma noqdo, ee addoomaha ku hareeraysan isaga ayaa sameeya daalimnimadiisaas!

Gar–ma–qaatayaashiyo dadkaa beera ruux gudhane!

Hadraawi

Ma fahantay hadda sida ay muhimka u ahayd in uu jiro Fircoon, si aynnu u fahanno sunnaha Ilaahay ee nolosha!

Nabaadiino saaxiib.

# 098 – Waan ku salaamay saaxiib

Ha taahin ee adkayso!

Waan ogahay in nabarka ku gaadhay uu halis yahay, dhiigbaxaagana ay ku adag tahay baandhaysyada samirkaagu in ay joojiyaan!

Laakiin ha illaawin, in waxaas oo dhanba aad adigu isu soo duday!

Qofkaas ku karbaashay adiga ayaa si uun jeedalkaas ugu gacan geliyay!

Kaas ku gawracayna adiga ayaa qoortaada u banneeyay mindidiisa!

Kaas sida faraska adhaxdaada u fuulayna adiga ayaa dhabarkaaga u fooroorIyay!

Saaxiib; Ilaahay ayaan ka magan galayaa in aan kugu wiirsado, laakiin waxa aan doonayaa in aan hummaagga indhahaaga saaran kaa leexiyo!

Dadka kale dhibbanayaal wax ka tirsanaya uma nihin, ee horraanta horraameedba nafaheenna ayaynnu dhibbanayaal u nahay!

Waxa aan doonayaa dhaawacaaga xaqiiqadiisa in aan ku tuso, dhaawaca aadan ogayn suure ma aha in aad iska daaweysaaye.

Aniguna waan doonayaa in aad bogsooto, laakiin in aad si dhab ah oo aad wax walba og tahay u dabiibanto ayaan door bidayaa!

Saaxiib; dunwanaaggaaga ayaa kibirkoodaas sameeyay.

Kalsoonidaada indhaha la' ayaa bartay in ay ku dhayalsadaan!

Mar walba niyadda ku hay in aan in badan ku lahaa, tobankaaga faroodba shamaca ha ku wada shidin, ee hal mid la hadh, si marka aad ka qoomamayso aad u qaniinto!

Balse dhib ma laha!

Wali dawo iyo dabiib waa laguu hayaa, mar kasta oo aad diyaar u noqoto shifayn waa lagaa haqab tirayaa!

U adkayso sidii ninkii jaahiliga ahaa ee sanamka uu caabudayo timirta ka samaysan jiray, ee maalinkii caabudi jiray, habeenka haafkiisa danbe haddii uu gaajoodana cuni jiray!

Sidaas oo kale ula dhaqan sanamyada lafta iyo ludka (cadka) leh ee aad sida ka–fiirsi la'aanta ah u qaddistay (bini aadanka aad muunaysay)!

Ka soo deji cirkaas kore ee aad saartay, oo cagahaaga hoos dhig, hana ku joogsan xataa, ee ka tallaabso uun... ka dul tallaabso uun!

Saaxiib; waa caadi haddii uu dhaawac ku soo gaadho, marba haddii aad xaqiiqada ku ogaanayso!

Waa caadi in aad hungowdo, marba haddii aad ugu danbaynta ogaanayso in ay markoodii horeba dun xumaayeen, sababta ay kuu la wanaagsanaadeenna ay ahayd uun malahaagii wanaagsanaa!

Saaxiib; wax kasta oo ku soo gaadhaaba waa sahalo, mar haddii aad wax ku fahmayso!

Nabaadiino saaxiib.

## 099 – Waan ku salaamay saaxiib

Cumar Ibnu Cabdilcasiis ayaa u diray Ismaaciil Ibnu Abii Xakiim Qusdandiiniya (Istanbul), si uu u soo madax furto maxaabiis Muslimiin ahaa.

Isaga oo degmo dhex maraya ayuu maqlay nin tirinaya gabay uu macnihiisu ahaa:

Iyadoo suldaankay ledoo sabarka uu tiirshay,
Soojeed ku qaadanay aniyo hammi i saarnaa!

Ismaaciil ayaa yidhi: "waa nin Carab ah wallaahay!"

Albaabka inta uu ku garaacay.

Markii uu ka furay ayuu ku yidhi: "kuma ayaad tahay?!"

Ninkii: "waxa aan ahay Waabisi oo waa la i qafaashay, la i jidh dilay, la i argagax geliyay, markaasaan diintooda galay!"

Ismaaciil: "amiirkii muuminiinta ayaa ii soo diray in aan maxaabiista soo madax furto, adiga ayaana wallaahay u xaq leh in aan ku furto haddii aadan gaalnimada qalbigaaga u sii deynin!"

Ninkii: "wallaahay gaalnimada qalbiga ayaan u sii daayay!"

— "Ilaahay ayaan kugu dhaariyay'e i raac oo diintaada u soo laabo, sidaadii horena ku soo noqo!"

— "xaggee ayaan u Islaamaa sow marka aan magaalada tago la igu odhan maayo Kiristankow, carruurtayda iyo xaaskaygana sidaas oo kale loogu yeedhi maayo?! Wallaahay in aanan Islaamayn!"

— "Quraanka ayaad akhriyi jirtay sow ma aha?!"

— "Cid iga Quraan akhris wacnayd ma aanay jirin!"

— “Maxaad Quraankii ka sii haysaa?!”

— “Waxa aan ka sii hayaa aayad keliya oo ah:

(رُّبَمَا يَوَدُّ الَّذِينَ كَفَرُوا لَوْ كَانُوا مُسْلِمِينَ) الحجر ٢.

“Waa intaas oo ay (in badan) jeclaysan lahaayeen kuwa gaaloobay (aakhiro) haddii ay Muslimiin ahaan lahaayeen.”

Markaasuu Ismaaciil xaqiiqsaday in kadeedkii uu ka tan batay, oo uu iskaga tegay!

Aad ayay u naxdin badan tahay qisadani saaxiib.

Waxa ay kugu kellifaysa inta aad wadnahaaga gacanta saarto in aad Ilaahay ka barido in uu qalbiga kuu adkeeyo oo uu diinta ku sugo, halka uu isagu raallida ku yahayna uu marsiiyo, halka uu raallida ka yahayna uu ku dilo!

Saaxiib; waxnaba laguma qiimeeyo bilawyada wanaagsan, ee sida ay ku soo dhammaadeen ayaa xaqiiqadooda muujinaysa!

Mar walba uga baq iimaankaaga in uu marin habaabo.

Qalbigaagana in uu kufo, ka dibna uu garan waayo si uu u kaco.

Ama inta uu fogaado, uu garan waayo si uu u soo laabto!

Saaxiib; ha u malayn in aad Ilaahay ugu hoggaansantay awood aad adigu leedahay, ee waxa aad ugu toosnaatay fadli iyo dheeraad uu kuugu deeqay!

Ka bari Ilaaha jidkiisa kugu hanuuniyay in aanu mustaqbalka kaa kaaftoomin oo aanu faraha kaa qaadin!

Kaa ma quus gelinayo dhanka Rabbigaa!

Ilaahay ayaan ka magan galay taas, illeen waligayba siyaabahaas oo kale kuu lama aanan dhaqmin, malaha aan Rabbigay ka haystaana kaas ma aha'e!

Laakiin waxa aan doonayaa in aan ku idhaahdo, dhammaan dadkii jidka qumman ka leexday hanuunsanaantoodii dabadeed, waxa ay isu malaynayeen in ay iyagu iskood isu hanuuniyeen, markaasay ka aamin noqdeen in ay gadaal ka fitnoobi karaan, Ilaahayna kama aanay baryin in uu sugo oo xaqa uu solansiiyo mar walba!

Saaxib; haddii uu qof ka maarmayo in uu Ilaahay ka baryo in uu ku sugo qalbigiisa iimaanka, nebi Maxamed ﷺ ayaa ka maarmi lahaa, illeen waa kii isaga oo Ilaahay baryada isuna dhul dhigaya ka tuugsanayay: "Ilaaha qalbiyada gedgeddiyow, qalbigayga diintaada ku sug!"

Nebigii ayaa sidaas leh, ee bal ka warran qof aniga iyo adiga oo kale ahna?!

Saaxiib; bal u fiirso aayaddan:

(وَلَا تَتَّخِذُوا أَيْمَانَكُمْ دَخَلًا بَيْنَكُمْ فَتَزِلَّ قَدَمٌ بَعْدَ ثُبُوتِهَا وَتَذُوقُوا السُّوءَ بِمَا صَدَدتُّمْ عَن سَبِيلِ اللَّهِ ۖ وَلَكُمْ عَذَابٌ عَظِيمٌ) النحل ٩٤.

"Oo ha ka dhiganina dhaarihiinna dhagar dhexdiinna ah (haddii aad burisaanna sidaas waad ku halaagsamaysaan), sida cag sinbiriirixatay sugnaanteedii ka dib, waxa aadna ku dhadhminaysaan xumaan (ciqaab adduunka) ay u sabab tahay in aad ka hor'istaagtaan (dadka) jidka Ilaahay, waxa aadna leedihiin cadaab weyn."

U fiirso sida ka–bogashada leh ee uu Ilaahay u cabbiray: "in ay lugi (xaqa) ka siibato, intii la solansiiyay ee ay xaqa ku toosnaatay ka dib!"

Ma aanu odhanin Ilaahay "markii ay dhabbaha xaqa in yar ku socotay ka dib!"

Mana aanu odhanin "iimaankii aan salka adag ku fadhiyin ka dib!"

Ee waxa uu yidhi: "sugnaanshiiyeheedii ka dib!"

Bal suurayso, in aad suganto, toosanto, oo aad hanuunto, intaas oo dhan ka dibna aad jidka qumman ka leexato!

Saaxiib; waayaha ha uga aamin noqon iimaankaaga, dhacdooyinkana ha uga aamin noqon diintaada!

Meelaha fitnooyinku ay ka jiraan uga firdho sida aad libaaxa uga carari lahayd haddii uu ayda kaaga soo horbaxo!

Ha imtixaamin naftaada, waa dhif iyo naadir in uu qof ka badbaado imtixaan'e!

Ha dhex geyn qalbigaaga aagagga shubahaadka, oo ha noqon sidii adhijire seero agtooda adhiga daajinaya, adhigaasi waxa ay u dhow dahay in uu seerahaas u daato'e!

Nabaadiino saaxiib.

## 100 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa jira wan yar oo marka uu sidaas u dhasho hooyadii laga qaado, oo aanay mar danbe isaga iyo hooyadii is'arkaynin!

Waxa loo geynayaa dameer uu iyada jaqayo, ilaa uu marka danbe aaminaba in ay iyadu hooyadii tahay!

Marka uu weynaadana waa la tumayaa (xiniinyaha ayaa laga dilayaa), dhogortana lagama xiiro si uu haybad u yeesho oo uu u cufnaado, geesihiisuna aad ayay u weynaadaan maadaama uu tuman yahay, isaguna aad ayuu u weynaadaa, qoortana aleen (koor) ayaa loo sudhaa, adhigana hoggaamiye ayaa looga dhigaa oo isaga ayaa foolaad horgala looga dhigaa!

Balse wankaasi waa halyey bug ah oo hoggaamin gacan–ku–rimis ah loo dhiibay!

Ilaa ay dameertii naas nuujisay hor socoto isagu ma soconayo, wankaas marka koowaad ee la arko hoggaamiyaha u muuqanayana, waxa isaga laftiisa hoggaamisa dameertaas!

Laga yaabaa in aad hadda isweydiinayso saaxiib: "sheekadaas oo dhan maxaan ka faa'idayaa?!"

Hagaag.

Ha degdegin!

Haddii aad xaalka wankaas u fiirsato, waxa aad arkaysaa in badan oo dadka ahi in ay xaalkiisaas oo kale ku jiraan!

Dad badan oo sheeggan, dad taabacsanna leh, oo sidii askari ku kalsoon xikmad badnida taliyihiisa u daba socda isaga, laakiin haddana xaqiiqadoodu ay tahay

dameeri dhaan raacday daba socda dameertii naas nuujisay ee soo saartay iyaga ee innagana halyeeyada i nooga dhigtay, sifo hoggaamiye oo aan ka ahayn aleennada qoorta uga lushana aan lahayn!

Saaxiib; muhim ma aha in uu qofku horgalaha wax hoggaaminaya noqdaa, ee muhimaddu waa in uu jidka saxda ah hayo!

In uu qofku dibka u danbeeya ka noqdo xaqa, ayaa si walba uga mudan in uu waranka caaradiisa iyo horgalaha ka noqdo baadilka!

Abu Jahal hoggaan ayuu u ahaa tolkii, laakiin hoggaan baaqday oo xumo ku haga ayuu noqday!

Qaaruun hantiile jiitay ayuu ahaa, laakiin hantidiisaasi fasahaadka iyo fasahaadinta ayay ka shaqaynaysay!

Fircoonna maalinka qiyaame intii taabacsanayd ayuu naarta u hoggaaminayaa!

Ugu horrayn; dhanka aad ku jihaysan tahay ka fiirso in uu saxan yahay iyo in uu khaldan yahay, jihada aad u socoto ayaa ka mudan xawaaraha aad ku soconayso'e!

Socdaalka dhanka Ilaahay sida gaabiska ah loogu socdaalaa, ugu danbaynta wuu gaadhayaa uun!

Haddii uu gaadhi waayana dhib ma laha, illeen ku-dhimashada jidka Ilaahayba waa gaadhitaan uun'e!

Laakiin socdaalka dhanka Ilaahay lagaga sii durkayo, xawaareheedu waxba ka anfici maayo, oo mar kasta oo ay sii dheeraysaba, in ay Ilaahay ka fogaato ayuun baa sii badanaysa!

Saaxiib; ugu horraynta iska sax dhanka aad ku jihaysan tahay, ka dibna sida aad doonto u socdaal!

Nabaadiino saaxiib.

## 101 – Waan ku salaamay saaxiib

Nin reer–miyi ah ayaa baadiyaha ka yimi, waxa uu u soo galay nebiga ﷺ oo la fadhiya asxaabtiisii, markaasuu yidhi: "kiinee ayaa Maxamed ah?!"

Alla isdhuldhig badnaayee saaxiib!

Kursi ka sarraysiinaya dadka kuma aanu fadhiyin!

Dhar maamuus u yeelaya oo dadka kale ka soocaya ma aanu sidanin!

Sida dadka kale ayuu dhulka iska fadhiyay, dharka dadka kale oo kalena wuu sitay!

In uu isagii yahayna lama garanayn ilaa la tilmaamo!

Ma suuraysan kartaa dhacdadaas quruxdeeda iyo sida xaaladdaasi ay u sahlanayd ee ay nafta u farax gelinaysay?!

Ma suuraysan kartaa in shakhsigaas ciidda iska fadhiyaa uu maalin samada toddobaad joogay?!

Ma suuraysan kartaa in shakhsigaas dadkiisa iska dhex fadhiya ee aan laga garanayn ay aadamaha oo dhammi maalinka qiyaame u imanayaan oo ay weydiisanayaan in uu albaabada jannada u furo?!

Ma suuraysan kartaa in shakhsigaas maalin jilbo jabsaday ee ruugagga ku fadhiistay isaga oo niyadda u dhisaya wiil yar oo uu shinbirkiisii ka dhintay, uu yahay ka koowaad ee maalinka qiyaame qabrigiisa la jeexayo ee laga soo saarayo?!

Ma suuraysan kartaa in shakhsigaas dharkiisa irbadda ku tolanayay, kabihiisana gundhiga ku tolanayay, adhigiisana lisanayay, uu yahay shakhsigii

nebiyada tujiyay maalinkii samada kore loo dheelmiyay ee uu hoggaaminta aadamaha oo dhanba soo qaatay?!

Ma suuraysan kartaa in shakhsigaas xaaskiisa kula tartamayay saxaraha ee ay mar ka dheeraysay, marna isagu ka dheereeyay, uu yahay kii uu u yimi malagga buuruhu, isaga oo u hiilinaya maalinkii Daa'if lagu shiiday?!

Dadka maqaamka leh ee maamuusani way isdhuldhigaan saaxiib, kuwa maqaamka hooseeya ama aan maamuuska weyn lahayninna way isweyneeyaan!

Qof kasta oo kibra waxa u sababa wax uu isku quudhsado oo uu isagu iska arkay!

Saaxiib; Xakiim Ibnu Xisaam waxa uu ka mid ahaa maamuusleydii Quraysheed, waxana uu wax ka baran jiray Mucaad Ibnu Jabal, isaga oo haddana Mucaad ka weynaa 50 gu'!

Markaasaa lagu yidhi: "ma ilmahan yar ayaad wax ka baran?!"

Kolkaasuu ugu jawaabay: "dadka waxa halaagayba waa kibirka!"

Wallaahay dadka waxa halaagay waa kibir saaxiib!

Waxa dhacda inta uu qof hanti badan helo, in uu sidii Qaaruun dadka socod dhoollatus iyo jeesjees uu kaydadkiisa ku faanayo leh u dhex maro!

Waxa dhacda inta uu qof shahaado helo, in uu dadka u dhex maro sidii qof garanaya cilmigii ummadihii hore iyo aqoontan ugubba!

Waxa dhacda inta qof xil loo igmado, in uu dadka u dhex maro sidii in maamulka iyo talada adduunka oo dhanba loo dhiibay!

Waxa dhacda inta uu qof baraha bulshada caan ka noqdo, in uu dadka u dhex maro sidii in uu yahay ninkii Qusdandiiniya furtay!

Saaxiib; hodannimada uu kibirku la socdaa waa saboolnimo!

Shahaadada uu kibirku ku lammaan yahay waa jaahilnimo!

Xilka uu kibirku ku lifaaqan yahay waa liidasho!

Caannimada uu kibirku ku sidkan yahay waa yasnaan!

Ha la saaxiibin qof kibraani ah xataa haddii uu ku soo dhoweysto!

Hana ka tanaasulin qof isdhul dhiga xataa haddii ay derbiyo idiin dhexeeyaan!

Nabaadiino saaxiib.

## 102 – Waan ku salaamay saaxiib

Xalay in badan ayaan taagnaa aniga oo ka fekeraya hadalkii Imaam Maalik uu ku yidhi ardaygiisii Qucnabi ee ahaa: "si kasta oo ay wax agtaada dheel uga noqdaanba, ha ku dheelin diintaada!

Saaxiib; diintaadu waa laftaadii, cadkaagii iyo dhiiggaagii, ee ha iska beerdarayn, haddii ay dhacdana wax kaa soo hadhaya oo macne kuu samaynayaa ma jirayaan!

Ugama jeedo denbiyada aynnu ku dhacno, oo dhammaanteenba waynnu samaynaa macsiyooyin. Maaliknа ugama aanu jeedin sidaas, ee diintaasu waa caqiidadaada!

Waa in aad ka dhawrto wax kasta oo duraya, oo aad ka dhawrto shirki qarsoon oo dadka ammaantooda aad ku hananayso, ama gabboodfale aad u sacabbo tunto adiga oo maamuus adduunyo kaga doonaya, aakhiradaadana ku gadanaya!

Waa in aad ka dhawrto in aad hadba cidda xooggan la safato oo aad dabkii baxaya dab ku qabsato, dhufayska xaqana aad ka baxdo!

Saaxiib; kuwani waa sifooyinka addoomaha ka baqa hadba ka jeedalka sita, ee aan ka biqin xaqa iyo ka ku eedaamaya!

Saaxiib; macsiyooyinka xataa saxaabadii ayaa ku dhici jirtay, nebiyada ayuun baana macsuumnimada ceeb–ka–saliimnimada ah ee uu Ilaahay ugu deeqay kaga badbaaday!

Haddana saxaabadaas caqiidadoodu sida ay buuruhu dhulka ugu rakiban yihiin ayay qalbiyadooda ugu rakibnayd!

Waayihii nebiga ﷺ waxa jiray nin la odhan jiray Cabdillaahi, oo ahaa nin aan fariidnimo lagu xamanin oo dadka aad uga qoslin jiray, marka uu nebigu ﷺ la kulmana wuu ka qoslin jiray.

Ninkaasi waxa uu ku ibtilaysnaa khamriga, nebiguna ﷺ xadkii ayuu ka jaray oo wuu jeedalay.

Mar kale ayuu cabbay, oo haddana sidii loo jeedalay!

Mar saddexaadkii ayuu nin Muslimiinta ka mid ahi yidhi: "nacdali heshayga badanaa denbiga lagu soo qabanayaa!"

Nebiga ﷺ ayaa ku yidhi: "ha nacdalina! Wallaahay waxa aan ku ogahay in uu jecel yahay Ilaahay iyo rasuulkiisaba'e!"

Maacis Ilaahay ha ka raalli noqdo'e ayaa isaguna sinaystay!

Abu Muxajin ayaa isagana la xidhay dagaalkii Qaadisiya markii la gelayay, maadaama uu khamri cabbay!

Balse waxaas oo dhan oo ay ku kaceenba, haddana caqiidadoodu way u dhawrsoonayd oo sinaba wax wasakheeyaa uma aanay gaadhin!

Ma lihi macsiyooyinku dhib ma laha ee ha la sahashado, ee waxa aan tilmaamayaa in aan macsiyooyin iyo denbiyo sinaba looga fakan karin.

Maadaama uu xaalku sidaas yahay, ayuu Ilaahay u furay albaabada toobadda oo aan marnaba la xidhaynin, ilaa ay qorraxdu galbeed ka soo baxayso!

Waxa aan sidoo kale tilmaamayaa, in denbiga Muslimku uu kibir jebiyo oo uu edbiyo, mararka qaarna macsiyadu ay kibir jebiso oo ay Ilaahay u dhoweyso, ayna ka wanaagsanaadaan daaco iyo wanaag uu sameeyay oo uu isku cajebiyo!

Macsiyada uu galo Muslimka ka qoomamaynayaa isaga iyo Rabbigii ayay u dhexaysaa, wixii addoonka iyo Rabbigii ka dhexeeyaana waa sahalo, waxa yasirayaana ma aha in macsiyadu ay yar tahay, ee waa in raxmadda Ilaahay ay weyn tahay, balse caqiidooyinku haddii ay fasahaadaan, camal kasta oo la sameeyaa si kasta oo uu u badan yahayba ma hagaajiyo!

Ee diintaada ha dhayalsan oo dheel yaanay kaa noqonin!

Nabaadiino saaxiib.

# 103 – Waan ku salaamay saaxiib

Xalay waxa aan ka akhriyay buugga Addabaqaat ee Ibnu Sacad wuu i gilgilay, weliba aad ayuu ii gilgilay!

Waxa dhacda in inta uu qofku wax akhriyo uu ku dareemo sida uu u yar yahay oo uu isquudhsado, maadaama dad badan oo qalbiyadooda inagaga dheereeyay ay jiraan!

Yaanan kugu dheerayn ee aan warka kuu soo ururiyo'e, waxa laga soo weriyay Ibnu Sacad in markii uu nebigu ﷺ Madiina yimi, uu degay guriga Abii Ayuub AlAnsaari sannad iyo dheeraad.

Markii uu Cali Faadumo guursaday ayuu ku yidhi nebigu ﷺ: "guri raadso."

Gurigii waxa uu ka helay meel nebiga ﷺ xoogaa ka durugsan.

Markaasuu nebigu ﷺ Faadumo u yimi oo uu ku yidhi: "waxa aan doonayaa in aan agtayda kuu soo raro!"

Faadumo ayaa ku tidhi: "Xaarisa Ibnu Nucmaan i noo weydii in aannu isbeddelno."

Guriga Xaarisa waxa uu u dhowaa guriga Abii Ayuub ee uu nebigu ﷺ deggan yahay.

Markaasuu nebigu ﷺ ku yidhi: "hore ayuu Xaarisa guri noogu beddelay oo waan ka xishoonayaa!"

Warkii ayaa Xaarisa gaadhay, markaasuu u yimi nebiga ﷺ oo uu ku yidhi: "waxa i soo gaadhay rasuulkii Allow in aad doonayso in aad Faadumo agtaada u soo rarto, guryahaygaas ayaana ugu dhow xaafadda Banii Najaar, aniga iyo hantidayduna Ilaahay iyo rasuulkiisa

ayaannu u adeegaynaa, hantida aad iga qaadato ayaana iiga wanaagsan aniga ta aad iiga tagto!"

Markaasuu nebigu ﷺ u duceeyay!

Ka dib Faadumo ayuu agtiisa gurigii Xaarisa ee ahaa u soo raray!

Bal u fiirso jacaylkaas saaxiib!

Gurigii nebiga ﷺ iyo kii inantiisa Faadumo ayaa yara kala durkay, guriga oo keli ahina uu gacallayaashaas isjecel isu soo dhoweynayo, ee inta aad nebiga ﷺ u timaaddo aad ku tidhaahdo: "aniga oo dhammiba adiga ayaan kuu adeegayaa!"

Ee aadan waliba hadal uun kaga ekaanin ee aad ficil ahaan u fuliso.

Aad gurigaaga uga baxdo inantiisa, maadaama aad og tahay in uu soo–dhoweysigeeda jecel yahay!

Yaa Allaah!

Waa dhacdo haddii aanay buugaagta taariikhdu sugi lahayn, aynnu odhan lahayn waa sheeko male'awaal ah!

Saaxiib; mar ayaan innaga oo is'horfadhina kugu idhi, nebinimada oo keli ahi ma aha doorasho la xusho cidda noqonaysa, ee saaxiibtinimaduba waa doorasho.

Ilaahii nebigiisa dadka kale ka doortay, ayaa sidoo kale isagana asxaabtiisii la rafiiqi lahayd u dooray!

Bal suurayso maalinkii hijrada markii uu Abu Bakar nebiga ﷺ u dhiibayay koobka caanaha ah, ee isaga oo ka sheekaynaya uu leeyahay: "nebiga ayaa cabbay ilaa aan anigu ku raalli noqday in uu ka haqab beelay!"

Bal jacaylkaas weynidiisa u fiirso!

In uu nebigu ﷺ cabbo caanaha oo Abu Bakar uu ka cokanaado (dhergo)!

Bal u fiirso maalintii Beder, dagaalkii koowaad ee uu Islaamku galay, sida uu jacaylkii nebiga ﷺ iyo asxaabtiisu uga soo daahiray!

Jacaylku saaxiib waa mawqifyo (xaalado la wada maro)!

"Ila taliya dadyohow!" Ayuu nebigu ﷺ ku celcelinayay.

Iyada oo Abu Bakar iyo Cumarba ay hadallo wanaagsan ku hadleen ayuu haddana weli nebigu ﷺ ku sii celcelinayay: "ila taliya dadyohow!"

Markaasuu Sacad Ibnu Mucaad fahmay, in uu doonayo in ay Ansaari la taliso!

Inta uu kacay ayuu ku yidhi: "waxa aad mooddaa in aad annaga talo naga doonayso rasuulkii Ilaahayow!"

"Haa!" Ayuu nebigu ﷺ ku yidhi.

Sacad: "wixii aannu hanti lahayn waa kuwaas oo adiga ayaannu kuu gacan gelinay, ee inta aad doonto ka qaado, inta aad doontana ka tag, inta aad naga qaadato ayaana nagala door roon inta aad nooga tagto! Xataa haddii aad badda noo dirayso, waannu kula galaynaa oo hal nin oo naga mid ahi kaa ma hadhayo! Dagaalka waannu u samir badan nahay, marka aannu rag gacan isa saarnana si dhab ah ayaannu u dagaallannaa, ee noo hag halka uu Ilaahay ku amray!"

Alla dun samaayee Sacad saaxiib!

Waxa aad mooddaa in uu leeyahay: "giddigayo adiga ayaannu nafta kuu huraynaa, amarkaagana aannu

fulinaynaa. Waxa aannu nahay leebabka qaansadaada, ee dhanka aad doonto noo rid!"

Wali jacaylkaas oo kale ma aragtay saaxiib?!

Haddii aad adigu hore u soo aragtay, wallay iga tahay anigu ma aanan arag!

Haddana waxa dhacay dagaalkii Uxud, Muslimiintiina waa la dhabar jebiyay maadaama ay qaansoolaydii buurtii difaaca ahayd ka soo daadegeen.

Dhacdadaas aadka u xanuunka kululayd, asxaabtu jidhkooda ayay gaashaan uga dhigayeen nebiga ﷺ, oo ay leebabka cadaawaha kaga ilaalinayeen.

Abu Dalxa ayaa hortaagnaa oo laabtiisa leebabka uga dhigayay isaga oo leh: "inta aan adiga lagu dilin annaga ayaa na la madhinayaa rasuulkii Allow!

Alla weynaayee jacaylkaas Abu Dalxi!

Waa marka aad diyaarka u tahay in aad dhimato, si gacallahaaga aanay xataa qodax yarina u mudin!

Markii ay nebiga ﷺ dhaawacyadu soo gaadheen, labadii diric ee uu xidhnaa iyo dhiigbixii ku socday dartoodna uu dhagaxii lagu baxsanayay fuuli kari waayay, Dalxa Ibnu Cubaydullaah ayaa hoos fadhiistay oo dhabarka u foororiyay, si uu nebigu isugu taago oo uu dhagaxa u fuulo.

Markii uu nebigu ﷺ dhagixii fuulay ayuu yidhi:

"Way u waajibtay [janno] Abu Dalxa!"

Gaashaan uun uma aanay noqon, ee xataa sallaan ayay u noqdeen, si uu gacallohoodaas ay *jeclaayeen kor u* fuulo!

Dhacdo taas oo kale ah miyaad weli taariikhda ku maqashay!

Wallaahay in aanan anigu maqlin!

Saaxiib; jacaylka ay u qabaan dartii in ay ka maqnaadaan ma aanay xamili jirin.

Sawbaan ayuu nebigu ﷺ weydiinayaa: "maxaa midabkaagii beddelay?!"

Sawbaan: "rasuulkii Allow, xanuun ma qabo oo ma buko, laakiin haddii aan ku arki waayo xaalad laga xumaado ayaan gelayaa ilaa inta aan kaa arkayo. Markaasaan xasuustay aakhiro, kolkaasaan ka baqay in aan ku arki waayo, maadaama nebiyada xaggooda kor laguugu qaadayo, haddii aan anigu jannada galana aan maqaamkaaga meel ka hoosaysa gelayo, haddii aanan jannada gelinna aanan kuba arkaynin!"

Ma maqashay wali qof gacallihiisa xiisaha uu u qabo dartii midabka wejigiisu isla doorinayo saaxiib?!

Wallaahay in aanan anigu maqlin!

Saaxiib; ma ku soo gaadhay warka gabadhii reer–Banii Diinaar, ee maalinka qudha ninkeedii, walaalkeed iyo aabbeheedba la dilay, ee markii loo tacsiyadeeyay tidhi: "waa sidee rasuulkii Ilaahay!"

Ee lagu yidhi: "wuu fiican yahay!"

Ee tidhi: "i tusa aan arko'e!"

Ee markii ay ka bogatay tidhi: "masiibo kastaaba mar haddii aanay waxba ku soo gaadhin waa sahalo rasuulkii Ilaahayow!"

Alla jacaylkaasi weynaayee saaxiib! Weynaayee!

Gabadh la kurboonaysa waayitaanka aabbeheed, walaalkeed iyo ninkeedii, haddana dadka weydiinaysa xaalka rasuulka iyo sida uu yahay?!

Adduunka oo dhammi dhayal ayuu la ahaa maadaama uu nebigii ﷺ Ilaahay bed qabo oo uu ladan yahay!

Nabaadiino saaxiib.

# 104 – Waan ku salaamay saaxiib

Suldaan Saleebaan AlQaanuuni ayaa damcay in uu dumiyo oo uu dib u dhiso mid ka mid ah xarumihii dawladda, markaasuu weydiiyay dadkii injineerka ugu wanaagsan, waxana loo sheegay in uu yahay Micmaar Sinaan.

Markii Micmaar Sinaan uu soo gaadhay, wixii uu ka doonayayna uu u soo bandhigay, ayuu aqbalay xilkaas, hawshiina uu ku dhaqaaqay.

Wali sheekadu intaas aynnu ka soo aragnay waa caadi!

Arrinka dhacdadaas layaabka ka dhigaya ayaa ah, in Suldaanku uu dhismahaas si dhow ula socday oo wax kasta oo ku saabsanba uu ka war hayay.

Waxa uu u fiirsaday in Micmaar Sinaan markii uu dhismihii guunka ahaa duminayay, uu adeegsaday shaqaale, haddana markii uu dhismaha cusub bilaabayay uu dhammaan shaqaalahaas hore wada fasaxay oo uu qaar cusub u diray!

Suldaankii ayaa u yeedhay oo weydiiyay: "Micmaar Sinaan; markii aad dhismaha duminaysay shaqaale gaar ah ayaad adeegsatay, markii aad dhisaysayna shaqaale kale, ee maxaad sidaas u samaysay?!"

Sinaan ayaa yidhi: "Suldaan; dadka duminta ku wanaagsani dhismaha kuma wanaagsana!"

Bal hadalkaas si xeel dheer ugu fiirso!

Dadka duminta ku wanaagsani dhismaha kuma wanaagsana!

Qaacido ka dhigo saaxiib.

Qofka ku dhaawacaa ma aha kii ku daweynayay, ee dawadaada ha ka raadin halka uu xanuunku kaaga yimi, illeen nin ku dilay hadh kuu ma jiido'e!

La aad dhaawacaaga meel ka durugsan oo ka fog!

Qofka kaa oohiyay ma aha ka ilmada dhabankaaga ka masaxaya!

Gacanta ku dhirbaaxdaa ma aha ta laabta ku gashanaysa!

Ka ku niyad jebiyaa ma aha ka niyadda kuu dhisaya!

Jooji fursadahan dheeraadka ah ee aad dadka siinayso!

Bisaylka iyo waaya'aragnimada waxa ka mid ah, in aad gaadho qaneeco ah, in aan dadka qaar wanaag laga filanin!

Saaxiib; kuguma dhiirri gelinayo in aad qof kakan noqoto, waad og tahay in aan debecsanida iyo dadka debecsanba jecelahay!

Ee waxa i dhibaya dadka mar walba wax iska indho tira ee iska cafiya ee inta ay nabarkooda qarsadaan dadka isaga denbi dhaafa!

Waxa aan kaa doonayaaba waa in aadan noqon dheel qof kale gacan ugu jirta!

Waa in aadan noqon ka–maadsi uu qof og dunwanaagsanidaadu ka soo qaado doqonniimo iyo in aad tahay dhallaan aan waxba ogeyn, oo uu kugu dheelo!

Waxa aan kaa doonayo in aad fahantaa, waa in qofka isku hubsada in aadan ka tegaynin oo aadan ka dhaqaaqi karin, aadan la sii joogin, si weynna aadan u ilaashanin!

Qofka ku xumaynaya maadaama uu isku hubo in aadan goyn karin ee aad la sii joogayso, waa in aad dareensiiso in aad iskaga tegi karto!

Saaxiib; dhammaanteen waynnu gefnaa oo wax waynnu illawnaa!

Waa mahuraan in aynnu dadka kale u denbi dhaafno oo gefafkooda aynnu cafinaa, si marka aynnu gefno innagana la i noo cafiyo.

Balse waa kaaf iyo kala dheeri, gef dhaca oo laga gudbo, cudurdaarasho iyo niyad'dhis lagu raalli geliyaana ay ka danbayso, hal gef oo yar oo xumaadaana aanay habboonayn in wada dhaqankii wanaagsanaa ee badda ahaa uu ka weynaado oo uu baabi'iyaa!

Ee waxa aan ku leeyahay, ka digtoonow mar walba qofka xun!

Ka mar walba ku dhaawacaya, ee mar walba dooranaya waxa aad isku haysaan in uu ku guuleysto, xataa haddii uu adiga ku niyad jebinayo!

Waa qofkaas isku–hallaynta ka qaba in aadan ka tegaynin, ee marka aad dhaawacyadaada soo daweysato, niyaddaada uu jebiyayna aad soo kabato, aad isaga dib ugu soo laabanayso!

Waa in aadan qofkaas mar kasta oo aad dhibsataba dhabarkaaga u jeedinin, marka aad soo raysatana aadan isaga dib ugu soo laabanin, isaguna inta uu caadaysto aanu mar walba si xun kuu la dhaqmin!

Qofka noocaas ah waa in inta aad hal mar dib u soo eegto aad ku tidhaahdo adiga oo indhihiisa eegaya: "way iga dhan tahay! Intaa ka badan kuma sii xamili karo!"

Nabaadiino saaxiib.

# 105 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa aad i weydiinaysaa sida aan u dareemo farxadda?

Aniguna waxa aan ku leeyahay: miyaan kuu jawaabaa mise marka hore sheeko ayaan kaaga qisoodaa?

Hore ayaan u ogaa sida aad u jeceshahay in aan kuu qisoodo, fekraddaas aan kaa haystayna ma aadan beenayn'e, waadigaas i leh: "maya'e qisada iiga sheekee!"

Hagaag saaxiib.

Aan kaaga qisoodo sheekada uga furanaysa rafaadka jawaabta su'aashaas adag ee gudaha ballaadhan ee aad i weydiisay!

Iyada oo barnaamij toos ah ay tiifiiga kaga jiraan, ayuu weriyihii weydiiyay martidii barnaamijka oo ahaa hantiile: "wixii farxadda ugu badan noloshaada aad ka heshay muxuu ahaa?!"

Hantiilihii: "waxa aan soo maray afar heer oo ay farxaddu leedahay, ilaa aan markii danbe bartay farxadda dhabta ah.

Marxaladdii koowaad waxa aan aaminsanaa in farxaddu ay ku jirto hadba alaabaha aad haysataa sida ay u badan yihiin, sawirgacmeed kasta oo qaali ah waan gatay, gawaadhida ugu qaalisan ayaan gatay, guryaha ugu qurxoon ayaan iibsaday, balse kediso ayay igu noqotay in aanan wax farxad ah oo la sheego ka helin!

*Marxaladdii labaad* waxa aan aaminay, *in farxaddu* ay ku jirto in aan noqdo mid ka mid ah wejiyada caanka ah ee ay bulshadu taqaanno ee maamuuska la huwiyo.

Xaflado waaweyn ayaan qabtay.

Waxqabadyo waaweyn ayaan ka qayb qaatay.

Wargeysyada ayaa wax iga qoray.

Dadka ayaa i hadal hayay oo i qaadaa dhigay.

Haddana dhadhan farxadeed oo la sheego kama aanan helin!

Marxaladdii saddexaad waxa aan aaminay, in farxaddu ay ku jirto in uu qofku ku hawllanaado mashruucyo waaweyn.

Waxa aan gatay kooxdii kubbadda cagta ee magaalada.

Waxa aan gatay degaankii ugu badnaa ee ay dadku u dalxiis tegi jireen.

Haddana wax farxad ah oo la sheego kama aanan helin!

Marxaladdii afaraad ayaan helay farxadda, laakiin si kedis ah ayaan ku helay!

Saaxiibaday mid ka mid ah ayaa iga codsaday in aan wiljeerro (kursi–curyaanka) u iibiyo carruur naafo ahayd.

Degdeg ayaan u bixiyay lacagtii carruurtaas loogu gadayay gaadhi–curyaannadaas.

Muddo ka dib ayuu saaxiibkay ii yimi oo uu iga codsaday in aan carruurtaas wiljeerradaas marka lagu wareejinayo soo xaadiro, oo aan aniga laftaydu ku wareejiyo.

Waan ka aqbalay, markii aan arkay sida ay carruurtii yaryarayd ugu farxeen wiljeerradaasna, farxad aan caadi ahayn ayaan dareemay, balse waxa aan u malaynayay in farxaddaasi sidii kuwii hore ay intan uun ku ekayd!

Markii aan sii baxayay ayuu carruurtii mid ka mid ahi gacanta i qabsaday, markaasaan ku idhi: 'ma wax kale oo aad u baahan tahay oo aan kuu sameeyaa jira?!'

Markaasuu igu yidhi: 'maya! Laakiin waxa aan doonayaa in aan wejigaaga xafido, si aan jannada kuugu garto oo aan Ilaahay hortiisa kuugu mahad naqo!'

Maalinkaas ayaan madashaas wax aad u qaali ah kala soo laabtay.

Waxa aan la soo laabtay dhadhanka farxadda ee dhabta ah!"

Farxaddu waxa ay ku jirtaa waxbixinta saaxiib.

Waxa ay ku jirtaa qof niyad jabsan oo aad niyadda u dhisto, ka dibna aad dareento, in niyaddaas la dhisay ayba taada tahay!

Waxa ay ku jirtaa dhaban murugaysan oo illin ka qubanaysay aad ka masaxday, ka dibna aad dareento in qofka ilmada laga masaxayaa uu adiga yahay!

Waxa ay ku jirtaa sadaqo aad qof faqiir ah gacanta u gelisay, ka dibna aad dareento in aad tahay qofka lacagtaas qaatay ee aadan ahayn ka bixiyay!

Waxa ay ku jirtaa miskiin isaga oo taag daran oo xaalad aanu waxba iska dhicin karaynin ku jira aad u hiilisay, ka dibna aad dareentay in guushiisu ay tahay guushaada!

Waxa ay ku jirtaa in aad dad isku dhacsan heshiisiiso, ka dibna aad dareento naftaada oo aad muddo kala maqnaydeen in aad dib isugu soo laabateen!

Farxaddu waxa ay ku jirtaa gacanta Ilaahay saaxiib, ee meel Ilaahay ka durugsan ha ka raadin!

Nabaadiino saaxiib.

# 106 – Waan ku salaamay saaxiib

Aad ayaan ula dhacay hadalka Cumar Ibnul Khaddaab ee ahaa: "ma ihi xeeladayste, xeeladaystena ima khiyaami karo!"

Ama aan si ka dhow u idhaahdo'e, shakhsiyadda Cumar oo dhan ayaaba i cajebisa!

Marka loo baahdo in uu adkaado qof kakan ayuu noqon jiray, heer qofka arkaa uu u maleeyo in aanu weligii debecsanaan yeelanayn!

Marka ay tahay in uu debecsanaado wuu debcayay, heer qofka arkaa uu u malaynayay in aanu weligii qallafsanaanayn!

Fasiraadaha iyo tafaasiisha hoose ma aanu dhaafi jirin, heer qofka arkaa uu u malayn jiray in aanay weligii waxbaba dhaafaynin!

Haddii uu damco in uu wax ismoogganaysiiyo, waxa uu ka soo qaadi jiray arrinkaasba in aanu arag oo aanu maqal!

Halkaas ayay ku jirtaa garaad badnidu saaxiib!

In wax walba halkooda ku habboon la dhigo.

Adkaanshaha halka ku habboon.

Dhibirsamaanta halka ku habboon.

Oo haddii midkood ka kale halka ku habboon la dhigo, waa lagu halaagsamayaa!

Xikmaddu, waa in aad xisaabiso waxa dhacay marka ay mahuraanka tahay, oo aad cafido marka uu cafisku mahuraanka yahay.

Haddii midkood ka kale halka uu ku habboon yahay la geeyo, waa lagu kadeedmayaa!

Marka la isku soo xooriyo, waa in aad noqoto hadba sida ay mawqifka iyo xaaladda aad markaas ku jirtaa keensanayaan ee mahuraanka ay ka dhigayaan, oo aadan waxna ka dhimin waxna ku darin!

Waa in aad caqliga halkiisa ku habboon dhigto, qalbigana halkiisa ku habboon!

Waa in aad jeedalka halkiisa ku habboon dhigto, gacantana halkeeda ku habboon!

Marnaba ha odhan "maya" meeshii laga doonayay "haa"!

Marnaba ha odhan "haa" meeshii laga doonayay "maya"!

Ha gelinin hakad halkii laga doonayay in aad dhigto joogsi!

Albaabna si kama–danbays ah ha u xidhin, haddii ay xikmaddu farayso in aan la wada xidhin!

Noqo qof wanaagsan oo aanu daadku hoos maraynin, qofka dunta wanaagsan ee hal'adaygga iyo go'aanka adag waa la ixtiraamaa, laakiin qofka wanaagsan ee dhegweynta aadka u debecsan ah waa la dhayalsadaa oo waa la liidaa!

Noqo deeqsi adiga oo wax diidi kara, badanaa dadku waa danaystayaal dantooda kaa fiirsanaya'e!

Saaxiib; waxaas oo dhan waxa lagu magacaabaa murti (xikmad).

(وَمَن يُؤْتَ الْحِكْمَةَ فَقَدْ أُوتِيَ خَيْرًا كَثِيرًا) البقرة ٢٦٩.

"Oo qofka la siiyo xikmad, dhab ahaan waxa la siiyay khayr badan."

Nabaadiino saaxiib.

# 107 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa aad dib ii la falanqaynaysaa hadal aan hore kuugu idhi oo ahaa: denbi kastaaba ciqaab ayuu leeyahay!

Waxa aad i leedahay: "laakiin inta aynnu caasinimo samaynno ayaynaan haddana ciqaab la kulmin'e, sidee ayaad u odhan kartaa denbi kastaaba ciqaab ayuu leeyahay?!"

Waxa aan ku leeyahay: hadalkayga dhammaan denbiyada ha ku dabbaqin!

Ilaahay wuu naxariis badan yahay, ilamana gudboona in aan Ilaahay kor ahaaye ciqaabtiisa iyo naxariistiisa xukumo anigu, oo aan go'aamiyo in qof kasta oo denbi ku dhacaba la ciqaabayo, illeen ugu danbaynta dhammaanteen denbiilayaal ayaynnu nahay saaxiib'e!

Balse waad i khalad fahantay!

Ama aniga ayaa si khaldan wax kuugu sheegay oo aan hadalka kuu balballaadhin, isaga oo xoogaa yara madmadow uu ku jiro oo aanu kala caddaynna kaaga tegay!

Waxa aan kaa tegay caqligaaga oo ay mawjado fekerkaas ahi ku hirdamayaan!

Saaxiib; ciqaabta ugama jeedo in qof kasta oo denbi sameeyaba uu qabar samada kaga soo dhacayo!

Waxa jirta ciqaab taas ka xun oo ah, in uu addoonkaas denbiilaha ah Ilaahay qalbigiisa iskaga baxo oo uu ka sii jeesto!

Saaxiib; qasab ma aha in ciqaab kastaaba ay noqoto tii Fircoon oo kale in badda lagu qarqiyo denbiilaha.

Ama in sidii Qaaruun dhulka la la jaro.

Ama sii Namruud ay kaneeco madaxa ka gasho!

Kuwaas waxa la yidhaahdaa aargoosiga Allaha muquuninta badan!

Balse ciqaabta aynnu ka hadlaynaa waa mid weji kale leh:

Waa in uu qalbigaagu dhinto adiga oo nool!

Waa in aad geeri soo marto oo aanu qalbigaagu ka gilgilan!

Qofka aan geerida ku waano qaadaninna, xataa haddii ay buuruhu hortiisa ku hirdamaan kuma waano qaadanayo!

Waa in aad dhegaysato aayad Quraan ah, oo xataa tin timahaaga ka mid ahi aanay la khushuucin.

Hadda waa Quraankii lagu soo dejiyay buurta ee ay khushuucda la gigilantay!

Ma ciqaab taas ka weyn ayaa jirta?!

In qalbigaaga ay dhagaxaantu ka debecsanaadaan!

Wuu la helay Ibnul Qayim markii uu yidhi: "ciqaabta ugu adag ee addoon la mariyaa waa qalbigiisa oo adkaadaa!"

Saaxiib; ma waxa jirta ciqaab ka xun in ay habeenno badan oo dhaadheeri ku soo maraan, adiga oo aan xataa laba rakcadood oo salaatulayl ah ku sii darsanin?!

Iyo in aad maqasho mu'addinkii oo leh: "u kaalaya salaadda" misana aanu qalbigaagu dhanka masaajidka kuu jihaynin?!

Ama ay Ramadaan ku soo marto, oo aadan si u qalanta uga faa'idaysan!

Ama aad salaadda u kacdo adiga oo ka cago jiidaya, oo ay kugu tahay sidii qof doonaya dhagax uu tuurta ku sido in uu iska rogo?!

Ma waxa jirta ciqaab ka adag in uu qofku ka waayo salaaddiisa dhadhankii uu nebigu ﷺ lahaa: "noogu raaxee Bilaalow?!"

Saaxiib; ma waxa jirta ciqaab ka adag in uu qofku ku mashquulo dadka iyo arrimaha liita, iyo muran madhalays ah oo uu u galayo sidii dagaal ama geeri aakhiro ama guusha nololeed oo kale ah?!

Ama qof caan ah oo liita oo aad ilbidhiqsi ilbidhiqsi ula socoto, sidii in uu yahay adduunka ka ugu cilmiga badan, oo wax walba oo ku saabsan aqoontii guunka ahayd iyo tan casriga ahba isaga loo daba fadhiisanayo?!

Ma waxa jirta ciqaab ka adag in ay qofka ilmadu ka engegto (qallasho),

In gacmihiisu ay ka caajisaan in ay Ilaahay baryaan oo uu samada u fidiyo,

Ama uu carrabkiisu ka daalo ku–celcelinta xuska Ilaahay?!

Saaxiib; ciqaabaha oo dhammi ma aha qabar qofka ku habsanaya, ee in Ilaahay uu albaabkiisa ka xidho ayaa ka adag taas... aad ayay waliba uga adag tahay!

Nabaadiino saaxiib.

# 108 – Waan ku salaamay saaxiib

Waayihii addoonsigu uu Maraykanka ka jiray, addoomaha waxa loo kala qaybin jiray laba qaybood oo kala ah, addoomaha guryaha iyo addoomaha beeraha.

Addoomaha beeraha waxa loo la dhaqmi jiray sida xoolaha oo kale.

Waxa ay ahaayeen noolayaal u nool keliya in ay wax beeraan, iniinyaha ay dhulka ku daadiyaan, beertu marka ay bislaatana ay gooyaan, iyaga oo aan wax xuquuq iyo ixtiraam ah lahayn, abaalmarin, fasax iyo caafimaadkooda oo la dhawrana aan marnaba loo samaynayn!

Waxa u sii dheeraydd, in marka ay wax yar oo khalad ah sameeyaan jeedal iyo karbaash lagu garaaci jiray, amaba sayidkaas lihi faraha mid ka mid ah ayuu jari jiray, maadaama aanay beertu si wacan u soo go'in!

Balse addoomaha guryaha ka adeegaa, waxa ay isku magacaabi jireen dabaqadda addoomaha ee badhaadhaha ku nool!

Waxa ay cuni jireen hanbada ka soo hadha qoyska addoonsada iyaga, dharka duugooba ee qoyskaasna way xidhan jireen, guryahana way ka shaqayn jireen, addoomaha beerahana way yasi jireen oo in ay ka liitaan ayay u yaqaaneen!

Mar kasta oo ay addoomaha beeruhu go'aansadaan in ay isxoreeyaanna, addoomaha guryaha ayaa warkooda u gudbin jiray kuwa addoonsada, markaasay kuwaasina ciqaabaha ugu adag marsiin jireen addoomaha beeraha!

Saaxiib; haddii aad dhacdada noocaas ah u fiirsato, waxa aad si dhab ah u dareemaysaa xaqiiqooyinkan soo socda:

— Ciddii koowaad ee gadoodka addoomaha hortaagnayd ma aanay ahayn dadka addoonsada, ee waxa ay ahaayeen addoomaha isu arkayay in nimcada ay ku jiraan ay ku jirto in ay sayidyadaas addoonsadaa sidaas u sii addoonsadaan oo ay xaaladdaas ku sii jiraan!

— Addoomaha qaar ayaa isu arkaya in aanay qoorta ka xidhnayn, maadaama xadhigga ay ku xidhan yihiin uu ka yara dheer yahay ka addoomaha kale ku xidhan!

— Haddii uu qofku waqti dheer addoonnimo ku qaato, shakhsiyaddiisa ayuu addoonnimadaas ka dhex arkaa, wuuna ku qancaa, qof kasta oo xorriyad doonayana waxa uu u arkaa in uu khaayin yahay!

— Dadka qaar way neceb yihiin qofka isku daya in uu isxoreeyo, maadaama gudaha hoose ee qalbigooda ay ka og yihiin in aanay awoodayn in ay xoroobaan. Waxa ay la qabsadeen in ay noqdaan addoomo dabagale u ah cid kale, xorriyadduna dameer–dhaanraacdaynimadaas ayay meesha ka saaraysaa.

Qofka waqti dheer qoolka addoonnimada ku qaatana, fidradiisa xornimeed ayaa khadka ka baxda, markaasaanay sayidka addoonsanaya ugu hiilinayn in uu sayidkooda yahay darteed, addoomahana aanay uga hor'imanayn xornimo doonkooda in ay addoomo yihiin darteed, ee keliya ay ka baqayaan masuuliyadda uun!

Masuuliyadda xornimada!

Haddii aad saaxiib u fiirsato xaalkeenna waayahan, waxa aad dareemaysaa in aynnu ku nool nahay xoogaa

labadaas nololood ee addoomaha beeraha iyo addoomaha guryaha kala ah!

Haddii aad shaqo raadiso oo aad shaqo la'aan ka cabanayso, ka shaqada kuu diidayaa ma aha sayidka iska leh, ee waa addoomaha guryaha!

Kuwa kugu eedaynaya in aad dalkaaga neceb tahay, haddii aad caddaalad bulsheed raadisana kugu tuhmaya in aad fitno oogaysaa waa iyaga!

Haddii aad qof maxbuus ah weydiiso sababta loo xidhay, waxa ay kugu eedaynayaan in dibedda lagaa soo maal gelinayo oo aad cido kale u shaqaynayso!

Xataa haddii adiga oo dal kale jooga aad hubkaaga qaadato oo aad gumeysi ku soo duulay ka difaacdo, waxa ay dhalliilayaan waddaniyaddaada, adiga oo hadda ka fogba!

Sababtuna, waa in aad halbawlihii addoonnimadooda taabatay!

Tuuggu wuu neceb yahay qofka aaminka ah, maadaama uu ceebtiisa tuugnimada ah ku soo xasuusanayo!

Caasiga denbiga dhex dabbaashaa wuu neceb yahay ka Ilaahay addeeca, oo marka uu isbarbar dhigo waxa uu dareemaa sida aanu waxbaba u ahayn!

Qof kasta oo xor ahi meel kasta oo adduunka ahba ha joogo'e marka uu gadoodo, meel kastaba ha joogaan'e addoomaha guryuhu way colaadinayaan!

Dadka qaar ayaa in ay noqdaan dib dabagale ah iyo dameeri dhaan raacday cid kale daba socda uun mooyaane, wax kaleba aan aqoonin!

Nabaadiino saaxiib.

## 109 – Waan ku salaamay saaxiib

Xalay waxa aan akhriyay sheeko aad u wanaagsan oo ka dhacday Ciraaq 1956[kii].

Macallin ayaa waayay ardaygiisii aadka u xariifka ahaa ee shahaadada PhD–da diyaarinayay, markaasuu gurigiisii ku booqday maadaama uu u maleeyay in uu xanuunsaday, wax aan bukaan ahaynina aanay ka horjoogsanin in uu jaamacadda soo xaadiro.

Markii uu aqalkii ardaygiisa soo gaadhay, ayuu arkay gebigiisuba in uu yahay hal qol oo duug ah, ardaygana faqiirnimadiisu ay gaadhsiisan tahay heer aanu suuraysanin!

Markii uu ardaygii barihiisii koob shaah ah u keenay, ayuu macallinkii ku yidhi: "maxaad jaamacadda u iman weyday?!"

Ardaygii: "aqoonta laguma gato xidhmo baytaraaf (khudrad) ah!"

Macallinkii oo amankaagsani intii aanu ardaygii sababta hadalkiisaas weydiinin ayuu hadalka ka boobay oo uu yidhi:

Macallinkaygii qaaliga ahaayow, toddobaad ka hor ayaan aad u gaajooday, adduunna waxa aan haystay Shilin iyo badh. Roodhi ayaan Shilinkii ku iibsaday, nuskiina waxa aan la aaday khudradlaha oo baytaraaf ku iibso ayaan is'idhi.

Khudradlihii ayaa igu yidhi: "xidhmada baytaraafka ahi waa Shilin!"

Waxa aan ku idhi: "waxa aan ku bari karaa masalo naxwe ah, ama waxa aan kaaga sheekayn karaa qiso

suugaan ah, ee adiguna xidhmadaas baytaraafka ah nus Shilinkaas igaga iibi!"

Isaga oo igu jeesjeesaya ayuu yidhi: "aqoontaadaasi baytaraaf kuu jari mayso!"

Waxa aan ogaaday in uu ku saxsan yahay, waxbarashada in aan iska daayana waan go'aansaday, si aan u raadsado shaqo ii jaraysa xidhmada baytaraafka ah iyo roodhidayda!

Macallinkii waxba faallo ah kuma aanu darsanin hadalkii ardaygiisa, ee waxa uu siiyay fargal dahab ah, waxana uu ku yidhi: "ii soo gad faraatigaas, berrina jaamacadda kaalay, markaasaynnu wada hadlaynaaye!" Ka dib wuu kacay oo uu iska baxay.

Maalinkii xigay ayuu ardaygii oo lacagtii fargalka sidaa yimi.

Barihii: "qiime sare ayaad ku iibisay'e, halkee ayaad ka gadday?!"

Ardaygii: "waxa aan ka gaday suuqa lagu sameeyo waxyaabaha qaaliga ah!"

— "Oo maxaad uga soo iibin weyday khudradlihii?!"

— "Khudradluhu ma garanayo qiimiga dahabka!"

— "Sidoo kale; qiimaha aqoontana ma garanayo! Dhibaatadu ma aha in aanay aqoontaadu qiimo lahayn, ee waa in aad u soo bandhigtay cid aanay agteeda qiimo ka lahayn!"

Saaxiib; sheekada ardaygaas iyo khudradlahaasi aad ayay u soo noqnoqtaa.

Mararka qaar, waxba inagagama soo laabtaan waxyaabaha aynnu samaynaynno, mana aha sababtu in

ficilkeenaasi aanu qiimo lahayn, ee waa in aynnu u samaynaynno cid aan qiimaynayn!

Haddii aad cid jacayl ku horto, oo wax aan dhib iyo nabarro ahayn aadan ka dheefin, macneheedu ma aha in jacaylku aanu qiimo lahayn, ee waa in aad qof aan u qalmin siisay!

Haddii aad qof wanaag u samayso oo uu xumaan kuugu abaal gudo, macneehedu ma aha in wanaaggaagu aanu dadka waxba taraynin, ee waa in dadka qaar ka mid ahi aanay wanaagba u qalmin!

Saaxiib; iska hubi marka hore halka aad naftaada dhigayso, ka dibna isweydii natiijada waxa aad samaynayso!

Laga yaabaa in hal ubax oo ku yaalla beer aad u ballaadhani, aanu beertaas wax badan ku soo biirinin!

Laakiin marka uu ubaxaas nin wax jeceli goosto ee uu siiyo gacalisadiisa, ayuu halkaas ubax ka qiimo badanayaa dhammaanba xidhmooyinka ubaxa ah ee caalamka yaalla!

Qaddiyaddani gebigeeduba ma aha sida aad wax u samaynayso, ee waa halka aad ku samaynayso!

Ma aha xilliga aad samaynayso, ee waa cidda aad u samaynayso!

Nabaadiino saaxiib.

# 110 – Waan ku salaamay saaxiib

Xalay waxa aan akhriyay qisada "Iliad of Homer" ee uu afka Carabiga u soo tarjumay Mamduux Cadwaan.

Waxa aan ku dulhakaday qayb ka mid ah oo aan jeclaystay in aan kula wadaago.

Waxa uu ku leeyahay Homer gabaygiisaas Iliad: "mar walba maanka ku hay wiilkayow; in uu caqligaagu ka dheregsanaado waxyaabaha xirfadaha lagu hanto, si aanay abaalmarinuhu kuu seegin!

Qofka dhirta gooyaa aad ayuu ugaga xariifsan yahay dhirgoynta, qofka la xoogga ah ee aan lahayn khibradda dhir–jarista!

Xirfad ayay naakhuudayaashu ku maamulaan doonta dheeraynaysa, iyada oo ay hadba dabayluhu dhan u weecinayaan!

Xirfad ayuu dareewal dareewal kale kaga dheereeyaa, halka qofka ku kalsoonaada fardihiisa iyo gaadhi–faraskiisu isaga oo aan maamulayn, ay gacmihiisa ka baxayaan ee ay la geddoomayaan!

Laakiin ninka yaqaanna sidii uu fursadda uga faa'idaysan lahaa, xataa haddii ay fardihiisu gaabiyaan, isaga ayuun baa ugu danbaynta ka horgaadhaya kaas kale!"

Laga yaabaa saaxiib in aad hadalladiisaas ka dhadhansatay waxa aan aniguba ka dareemay.

Beri hore ayay dadku ogaadeen muhimadda ay leedahay khibraddu, in awood la yeesho, iyo in habkii loo maamuli lahaa awooddaas la bartaana ay kala duwan yihiin!

In aad ficil gaar ah samayn kartaa kuma filna in aad falkaas samayso, oo in aad khibrad u lahaatаа waa mahuraan!

Waxyaabaha qaar ayaan asal ahaanba awood u baahnayn.

Dadka dhaqda lohodka (Maxaar – Oyster) si ay luul uga soo saaraan, waxa keliya ee ay sameeyaan waa in ay lohodkaas dusha ka yara dalooliyaan, ka dibna ay xabbad quruurux ah geliyaan gudihiisa, isaguna uu xeraysto oo uu luul ka dhigo!

Ilmo dhallaan ah ayaa awooda in uu lohodkaas daloolkaas u sameeyo, laakiin arrinka looga baahan yahay meeshaasi ma aha daloolinta lohodkaas, ee waa in aad garanayso halka laga daloolinayo, sida loo daloolinayo iyo daloolkaasi inta uu le'ekaanayo, waana taas khibradda laguu sheegayaa!

Sheekadaas aan kula wadaagay waxa ay i xasuusisay, qiso aan hore innaga oo is'horfadhina kaaga sheekeeyay. Ma garanayo in aad xasuusato iyo in kale'e!

Waxa aan kaaga sheekeeyay markab weyn oo shidaalka qaada, oo badda dhexdeeda ku xumaaday.

Shirkaddii markabka lahayd injineerradii ugu xirfadda badnaa ayay keentay, laakiin waxba way ka qaban kari waayeen!

Badda dhexdeeda ayuu markabkii oo xumaaday iska dulheehaabayay!

Waxa markii danbe u yimi qof u sheegay shirkaddii in uu jiro makaanig duq ah oo markabyada noocan ah khibrad aad u badan u leh!

Way la xidhiidhay shirkaddii oo degdeg ayaa loo keenay makaaniggii.

Waxa uu galay khankii hijiinnada, mid hijiinnadii ka mid ah ayuuna gacanta dulmarmariyay isaga oo cillad ka raadinaya, markaasuu shandaddii uu qalabkiisu ku jiray ku laabtay oo uu kala soo baxay dubbe, hal marna uu ku dhuftay hijiinkii, kabtankiina uu amray in uu istaadho markabka!

Amankaag ayay ku noqotay markii uu markabkii weynaa daarmay!

Makaaniggii duqa ahaa ayay weydiiyeen lacagta uu doonayo ee uu shaqadaas uu qabtay ku rabo!

Waxa uu dalbaday toban kun oo Doollar!

Khasnajigii ayaa u arkay in lacagtaasi ay badan tahay, maadaama aanu makaaniggaasi wax aan hal dubbe oo uu hijiinka ku dhuftay ahaynba qabanin!

Markaasuu ka dalbaday makaaniggii, in uu u soo qoro juwan uu ku sharraxayo sababta uu ugu adkaysanayo in lacagta intaas le'eg lagu siiyo shaqada uu qabtay!

Makaanigii duqa ahaa ayaa juwankii ku qoray: "hal Doollar waa qiimaha halka mar ee aan dubbaha ku dhuftay, 9,999[ka] kalena waa qiimaha in aad garanayso in aad dubbe ku dhufato!

Waa taas khibradda laguu sheegayaa saaxiib!

Nabaadiino saaxiib.

## 111 – Waan ku salaamay saaxiib

Xenophon waxa uu ahaa mid ka mid ah ardaydii Socrates.

In kasta oo uu cilmiga iyo aqoonta aad u jeclaa, haddana waxa uu jacayl weyn u hayay dagaalka, sida loo badinayana waxa uu ahaa nin bilaa mabda' ah!

Waxa uu la dagaal geli jiray hadba cidda hanti badan siisa!

Laga yaabaa in kii uu shalay la dagaallamayay uu maanta iyaga la safan yahay, waxana uu daacad u ahaa oo uu wax walba dartii u samaynayay hantida oo keliya!

Haddana sidaas oo ay tahay; wuu ilaashaday shakhsiyaddiisii aqoonta jeclayd ee gudihiisa ku noolayd.

Waxa uu qoray buuggiisa caanka ah ee Anabasis, oo uu ku diwaan geliyay dhacdooyinkii dagaalkii uu ka qayb qaatay ee uu Cyrus–kii yaraa kula dagaallamayay walaalkii Artaxerxes–kii Labaad.

Ma aanu ahayn buuggaasi keliya taariikhdii dagaalka oo qayaxan uun, ee waxa ku lammaanaa xoogaa falsafad iyo suugaan ah!

Yaanan ku sii dheeraan sharraxiisa'e, waxa uu Xenophon buuggiisaas ku leeyahay: "caqabadaha ku soo waajahayaa ma aha webiyo, buuro iyo dagaalyahanno kale midna, ee caqabadda keliya ee ku qabsanaysaa waa adiga laftaada!

Haddii aad dareento habawsanaan iyo xasillooni darro,

Haddii aad garan weydo in aad dhankii saxda ahaa u socoto iyo in kale, Oo aadan kala saari karin saaxiibka iyo cadawga,

Adigu isku canaano oo cid kale ha ku eedaynin!

Mar walba ka feker in aad diyaar u tahay in aad dagaal ku waajahan tahay.

Wax waliba waxa uu ku salaysan yahay aragtida aad caalamkan ka haysato.

In sida aad wax u aragto aad wax ka beddesho, ayaa wax walba sidii ay kuu la muuqdeen si aan ahayn u beddelaya,

Halkii aad ka ahayd calooshii–u–shaqayste xun, waxa aad isu beddelaysaa dagaalyahan hal'abuur leh!"

Si wacan ugu fiirso weedhiisaas ah: "wax waliba waxa uu ku salaysan yahay aragtida aad caalamkan ka haysato!"

Saaxiib; mawqifka aynnu qaddiyad ka haysanno iyo halka aynnu ka taagan nahay, kama tarjumayo xaqiiqadeeda, ee waxa uu ka tarjumayaa innaga xaqiiqadeenna!

Way badan yihiin mawqifyada aad falcelin gaar ah ka samaysay, muddo ka dibna uu mar kale isla mawqifkii ku soo maray, oo aad falcelin tii hore ka geddisan ka bixisay.

Mawqifku waa isla isagii uun hadda saaxiib, ee adiga ayaa isbeddelay!

Abwaanaddii Khansaa' ee jaahiliyaddii noolayd ayaa walaalkeed Sakhar weyday, muddo aad u dheerna ay u barooranaysay, heer iyada oo kabihii Sakhar ay qoorta u sudhan yihiin ay kabcada dawaafi jirtay,

dhimashaduna waxa ay iyada la ahayd marxaladdii ugu danbaysay ee nolosheeda!

Balse markii ay Islaamtay, afarteedii wiilba dagaalkii Qaadisiya ayay ku weyday, markaasay Ilaahay u mahad naqday, oo ay qalbiga adkaysatay, hal dhibic oo ilmo ahina aanay ka soo dhicin!

Islaamka ayay ku ogaatay in dhimashadu aanay ahayn gebagebadii iyo marxaladdii u danbaysay, ee ay tahay bilaw kale!

Dhimashadu waa isla dhimashadii uun labada jeerba, laakiin Khansaa'dan danbe ayaan ahayn Khansaa'dii hore, oo aragtidii ay caalamka ka haysayay ayay beddeshahay, markaasuu caalamkiina sidii uu iyada la ahaa iska beddelay!

Nabaadiino saaxiib!

## 112 – Waan ku salaamay saaxiib

Tawraadda la beddelay ee aan la cuskan karin ee xog aan si rasmi ah looga soo dheegan karin, waxa ku xusan qiso ku saabsan nebi Daa'uud nkh'e, iyo soddoggii Shaul.

Daa'uud ayaa dareemay in uu Shaul doonayo in uu dilo, xogtaasna waxa uu ku siraystay saaxiibkiisii uu ku kalsoonaa ee Jonathan, Jonathan–na waa Shaul wiilkiisa iyo Daa'uud seeddigii!

Jonathan kama aanu rumaysanin Daa'uud hadalkaas uu aabbihii uga sheegay, waxana uu u sheegay in xidhiidhkoodu aanu wanaagsanayn, laakiin aanay gaadhsiisnayn heer uu dilkiisa ku fekeri karo!

Balse Daa'uud aad ayuu u garaad badnaa, waxana uu dejiyay qorshe tijaabo ah oo uu hal dhagax laba shinbirood ku wada tooganayo, oo ah in niyada Shaul ee dhabta ah uu kashifo, Jonathan–na uu ku qanciyo in uu fekraddiisaas ku saxsanaa ee aanay ismoodsiis ka ahayn, aabbihii Shaul–na uu dilkiisa qorshaynayay!

Shaul ayaa casuumad sameeyay oo Daa'uudna ugu baaqay.

Daa'uud waxa uu go'aansaday in uu ka cudur daarto casuumaddaas, uuna farriintaas cudurdaarashadiisa ugu sii dhiibo wiilkiisa Shaul.

Cudurdaarashadiisaasi ma aanay ahayn mid si buuxda loogu qanci karo, haddana wuu ka cudur daartay uun.

Waxa uu Daa'uud ku yidhi Jonathan: "haddii uu aabbahaa cudurdaarkaygaas aqbalo, aniga ayaa khaldan

oo ujeeddo xun ilama aanu doonayn! Haddii uu aqbali waayana, wuu xanaaqayaa oo waxa laabtiisa ku jira ayuu afku ka xadayaa!"

Markii uu Jonathan soo gaadhay aabbihii ee uu cudurdaarashadii Daa'uud u sheegay, ayuu Shaul xanaaq iyo qaylo isku daray isaga oo leh: "imminka ii soo qabta oo ii keena, dil ayuu istaahilaaye!"

Saaxiib; qofka ku jeceli cudurdaarashadaada wuu aqbalaa.

Xataa haddii uu cudurdaar kuu waayo, isaga ayaa kuu sameeya qaar uu allifay!

Marka aynnu doonaynno in aynnu cid ku sii dhegganaanno, waxa aynnu baadhnaa sababo aynnu kula sii joogno!

Qofka ku necebi weligii kaa raalli noqon maayo, xataa haddii aad farahaaga oo dhanba shamac isaga u baxaya ka dhigto!

Qofka doonaya in uu kaa tago, ma awoodaysid in aad ku sii dhegganaato, xataa haddii aad ka soo xidho albaab kasta oo uu kaaga tegi lahaa, meel ayuun buu dalool ka samaysanayaa oo uu ka baxayaa!

Badiba mawqifyada iyo dhacdooyinka noloshu waxa ay leeyihiin wejiyo badan, shar iyo khayrna ka aad doontaba waad kala soo dhex bixi kartaa.

Ka ku jeceli wax walba wanaagga ayuu kala soo dhex baxayaa. Ka ku necebina wax walba xumaanta ayuu kala soo dhex baxayaa!

Cudurdaarashooyinka ayaana niyooyinka kashifa!

Waxa ay toos kuu tusayaan laabaha dadka kale waxa kuugu jira.

Qofka aad ku gefto ee cudur daarkaaga aqbalaa, waa qof doonayay in uu kula sii negaado, xataa haddii aadan u cudur daaran lahayn!

Qofka cudurdaarkaaga aqbali waayana, ogow in uu awalba sugayay khalad yar oo kaa dhaca, si uu kaaga tago!

Nabaadiino saaxiib.

## 113 – Waan ku salaamay saaxiib

Abu Xafsal Abbaar waxa uu saaxiib la ahaa Ibnu Shabrama, muraad ayaana saaxiibkiisaas ka galay, markaasuu u dhammeeyay.

Abu Xafsi inta uu saaxiibkii u yimi ayuu u mahad naqay.

Markaasuu saaxiibkii Ibu Shabrama ku yidhi: "maxaad iiga mahad naqi?!"

— "Hawsha aad ii dhammaysay!"

— "Iska tag niyow! Haddii aad saaxiibkaa wax uga baahato isaga oo awoodaya in uu kuu gudo, oo aanu hiil iyo hoo toona isla kaa garab taagin, inta aad weyseysato ku tuko oo inta aad afar jeer takbiirato, dadka kaa dhintay ku tiri!"

Saaxiib; saaxiibku waa jaallaha ruuxda iyo qayb qalbiga ka mid ah.

Marba haddii aanu qofku heerkaas kula gaadhin, ha ku sheegin saaxiibkaa, ee ku tiri dadka asxaabta iyo macaariifta aad dushaas iska taqaanaan ah!

Saaxiibku dhayalsi ma galo, wax kastaaba haddii ay xataa qofka la fududaadaan.

Abu Bakar iyo Cumar ayaa arrin isku qabtay, dadka maamuusanina iyaguba way iskhilaafaan, haba kaga wanaagsanaadaan dadka kale in ay degdeg khilaafkaas u xalliyaan oo daloolkiisa ay isaga awdaan'e, Abu Bakar ayaana markan khaldanaa.

Degdeg ayuu markiiba Cumar ugu cudur daartay.

Cumar oo dabci qallafsanaa, walina aanay cadhadii ka bi'in ayaa hore cudurdaarkii uga aqbali waayay.

Abu Bakar adduunkii ayaa ku soo yaraaday, mar kasta oo uu xaalku ku adkaadana nebiga ayuu aadi jiray.

Inta uu u tegay ayuu uga warramay waxa isaga iyo Cumar ka dhex dhacay, iyo sida uu cudur daarashadii uga aqbali waayay.

Balse dhanka kale, Cumar oo maamuuskiisa leh ayaa dhakhso dib isugu laabtay, masaajidka ayuuna yimi isaga oo Abu Bakar raadinaya.

Halka dhanka kale nebiga ﷺ aanay xaaladdaasi la fududaanin, in saaxiibkii laga murugaysiiyaana ay ku adkaatay.

Inta uu ka kacay masaajidka ayuu khubad jeediyay nebigu ﷺ isaga oo leh: "dadyohow; Ilaahay ayaa ii kiin soo diray, waad i beeniseen (markii hore), Abu Bakarna wuu i rumaystay, naftiisa iyo maalkiisana wuu isla kay garab taagay, ee ma ii deyneysaan saaxiibkay?!"

Abu Bakar ayaa u sheegay nebiga ﷺ in uu Cumar ka xaq lahaa!

Cumar laftiisu Abu Bakar agtiisa dhayal kuma aanu noqonin ee xaqiisa wuu u qiray, sida isagaba uu nebigu ﷺ u maamuusay!

Saaxiibku agtaada marnaba dhayal kuma noqonayo saaxiib!

Saaxiib; waayeheenan xaalkii la yaqaanay sidiisii ma aha, waayuhuna aad ayay isu beddeleen.

Saaxiibtinimadii way yaraatay, saaxiibadiina faro–ku–tiris ayay noqdeen.

Garbihii lagu tiirsan karayay way yaraadeen.

Qalbiyadii xanuunka kula qaybsanayay way yaraadeen.

Indhihii haddii ay dhibka kaa fududayn kari waayaan kula ooyayayna sidoo kale!

Ilaahay ha u naxariisto Acmash markii uu yidhi: "waxa aan soo gaadhay dad aanu saaxiibku saaxiibkii bil ama laba arkaynin, marka uu la kulmana aanu hadalkiisu dhaafaynin, sidee tahay? Iyo xaalkaagu waa sidee? Haddana haddii uu hantidiisa kala–badh weydiisto siinaya!

Haddana waxa aan soo gaadhay kuwo kale, oo haddii uu qofku saaxiibkii hal maalin arki waayo, uu wax kastaba ka waraysanayo, xataa digaagadda gurigiisa joogta, haddii uu Shilin hantidiisa ah weydiistana aan u quudhaynin!"

Innagu xilliga dadkan danbe ayaynnu dhaqan nahay saaxiib.

Saaxiibadu aad ayay u yar yihiin, oo waa sidii xabbad dhogor ah oo cad oo dibi madow ku taalla.

Haddii aad hesho saaxiibka noocaas ah ee marla'aragga ah, ku dheg oo ha sii deynin ee ku faro adayg!

Qofka aan lahayn saaxiib naadir ah oo marla'arag ahi, dhimashadiisa horteed ayuu dhintaaye!

Nabaadiino saaxiib.

## 114 – Waan ku salaamay saaxiib

Boosteejada metrooga ee caasimadda Washington ayuu nin 50 daqiiqo oo xidhiidh ah si macaan uga garaacayay kaman (violin), waxana muddadaas dhaafay in ka badan kun qof, toddoba qof oo keliya ayaana istaagay oo dhegaystay muusigiisii, qaar kalena inta ay lacag yar u dhigeen ayay dhaafeen, lacag $30 ahna wuu ka helay.

Markaasaa muuqaalkaas la faahfaahiyay.

Waxa uu ahaa tijaabo ay jaamacadi samaynaysay, ninkaas kamanka tumayayna waxa uu ahaa Joshua Bell oo ah shakhsiyadda ugu xariifsan dhanka kamanka waayeheenan.

Kamankaas uu garaacayayna qiimihiisu afar milyan oo Doollar ayuu ahaa!

Tijaabadaas hal toddobaad ka hor, waxa uu Joshua ku qabtay xaflad Boston, kaadhadhkeedii oo idilna waa la wada gatay, kaadhka ugu qiimaha jabanina waxa uu ahaa $100!

Waxa aan filayaa saaxiib in aad fahantay ujeedka tijaabadaas laga lahaa.

Waa qiimaha uu qofku ku leeyahay meesha aan ku habboonayn!

Joshua Bell oo toddobaad ka hor malaayiin Doollar xafladdiisaas Boston ka soo faa'iday, boosteejadaas metrooga $30 oo keliya ayuu ka helay!

Ninkii xafladdiisa ay kumannaanka qof soo xaadireenna, toddoba qof oo keliya ayaa isu taagay oo dhegaystay markan!

Saaxiib; qofku meesha aan ku habboonayn wuu ku qadder dhacaa.

Einstein–ka jaamacadaha dunida oo idili ay ku hammiyayaan in uu muxaadarooyin ka jeediyaa, haddii uu suuqa khudradda tago oo uu dadka uga warramo aragtidiisii Saamigalka ama aragtidiisa Mareeg–ifeedda (Fabric of the Cosmos) ee ka warranta sida ay meerayaasha iyo xiddagaha ifka sare isugu xidhiidhsan yihiin, cidina ma dhegaysanayso, waaba haddii aanay dadka qaar qof waalan u arkin'e!

Musdafa Maxmuudkii caalamka Islaamka oo dhammi uu tiifiiga ku dhaygagsanaan jiray si uu u daawado barnaamijkiisii Aqoonta iyo Iimaanka (AlCilmu Wal Iimaan), waxa uu soo mari jiray meheradaha xaafadda uu deggan yahay, ganacsatadaasina xataa qiimaha kama aanay dhimi jirin marka uu wax ka gadanayo!

Mutanabigii madaxtooyada Sayfu Dawlah AlXamadaani iyo qasrigii Kaafuur Al'Ikhsiidi, ma aha Mutanabiga ay dadku yaqaanaan!

Abu Yuusuf AlQaadiga golihii khilaafada ee Haaruun Arrashiid, ma aha Abu Yuusufka suuqyada Baqdaad maraya!

Axmed Ibnu Xanbalkii uu Baqiyi Ibnu Mukhlid uga yimi Andalus ee Baqdaad uu ugu yimi isaga oo intaas oo dhanba soo lugeeyay si uu cilmiga Xadiiska uga barto, waxa Baqdaad kula noolaa qaar ay quud raadintu ka mashquulisay barashada Xadiiska!

Saaxiib; naftaada gee degaanka ay qiimaha ku leedahay.

Haddii looxadda Monaliza la geeyo suuqyada shacabka, qofna gadan maayo!

Seeftii Maxamed AlFaatix dadka caamada ah haddii la dhex keeno, waa uun bir biraha la mid ah!

Lacagta naadirka ah ee Roman–kii ka soo hadhay, innaga inalama laha qiimiga ay la leedahay raadraacyahannadda (Archaeology)!

Ha geyn naftaada meel ay ku qiimo beelayso!

Saaxiibkay ayaa ii hadyadeeyay diwaanka gabayadii Mutanabi oo uu qoray Ibnu Jinni, meelo ka mid ahna uu Mutanabi laftiisu qoray.

Haddii uu buuggaasi u gacan geli lahaa hudheelle saanwejka iibiya, laga yaabaa in uu xaashadihiisa saanwejka macaamiishiisa ugu duuduubi lahaaba!

Nabaadiino saaxiib.

## 115 – Waan ku salaamay saaxiib

Sannadkii 1949$^{kii}$, ayuu raysalwasaarihii Lubnaan ee Riyaadu Sulxi u magacaabay wasiirka beeraha Bahiij Taqiyudiin, waxana ay ahayd markii ugu horraysay ee uu boos wasaaradeed gacanta ku dhigo.

Habeenkaas ayuu suugaanyahankii Siciid Taqiyudiin u qoray waraaq walaalkiisaas wasiirka laga dhigay.

Waxa uu ku yidhi: "walaalkay Bahiijow; Ilaahay cimriga ha kuu dheereeyo. Waxa aan maqlay in aad wasiir noqotay, qoyskeenna sharaf weyn ayay u tahay. Balse waxa aan jeclaystay in aan ku xasuusiyo, markii aynnu yaryarayn in aynnu u tartami jirnay keenna ku horseexda furaashka aabbeheen ahun. Waan hubaa in aad xasuusato sidii uu gacmeheenna u ursan jiray ee uu u hubin jiray in aynnu cuntadii si wacan uga soo dhaqnay, si uu i noogu oggolaado in aynnu la seexanno.

Imminka aabbeheen ciidda wuu ka hooseeyaa, muddo ka dib ayaynnu innaguna ciidda hoosteeda la jiifsanaynaa, ee ku dedaal walaal in gacmahaagu ay nadiif noqdaan marka aynnu aabbe la seexanaynno!"

Saaxiib; aad ayay ii saamaysay farriintaas Siciid Taqiyudiin uu walaalkiisaas wasiirka ah u qoray.

Waxa aynnu suuraysanaynaa aabbahaas ubadkiisa gacmahooda urinaya, marka ay iilka galaan ee safarkoodii adduunyo uu soo idlaado.

Haddii aanu aabbuhu halkaas gacmahooda ku tijaabinaynna, waxa jooga Rabbi ku tijaabinaya!

Gacallahaygow; ku dedaal in aad qabrigaaga u hoyato adiga oo aan hantida ummadda Shilin aan kuu xalaal ahayn ka cunin!

Ilaaha deeqtooni wixii isaga iyo adiga idinka dhexeeya wuu kaa cafiyayaa, laakiin caddaaladdiisa waxa ka mid ah in aanu cafiyin xuquuqda aad dadka ka gasho!

Ha illaawin in shahiidka wax kastaba laga dhaafo, deynka mooyaane, maadaama wax kasta oo kaleba ay yihiin xaq Ilaahay, deynkuna uu yahay xaq aadame!

Saaxiib; ha gelin qabrigaaga adiga oo ka tegaya qof aad niyadda ka jebisay, qalbi aad dhaawacday, ama il aad illinteedu in ay daadato sababtay!

Nabaadiino saaxiib.

# 116 – Waan ku salaamay saaxiib

Muddo sannad ku siman waxa aan akhriyay buug talooyin aabbe ah oo uu qoray Jackson Brown.

Buuggaas in uu buug ahaan u qoro markii hore ma aanu qorshaynayn, ee waxa uu ahaa talooyin uu jackson wiilkiisa u qorayay uun, oo sidii farriin oo kale ahaa, markii uu wiilkiisaasi magaalo kale jaamacad darteed ugu safrayay ee uu gurigooda ka tegayay.

Ka dib ayuu talooyinkaas sii badiyay ilaa ay markii danbe buuggaas noqdeenba, si wacan ayuuna sameeyay markaas, oo talooyinkaasi ma aanay lumin ee buug ayay ku sugmeen oo ay ku diwaan gashameen!

Muhimadda aynnu ka leenahay arrinkaasi, waa in aynnu xalay ka doodaynay masalo aanan si ku habboon jawaab kaafi ah uga bixinin.

Saaka markii aan toosay ayaan xasuustay mid ka mid ah talooyinkaas Jackson uu wiilkiisa siiyay, waana talo labadeennaba hadalka badan inaga furanaysa.

Waxa uu ku yidhi Jackson wiilkiisa: "arrimahaaga maaddiga ah (dhaqaale) ha kala sheekaysan qof aad kaaga hanti badan, ama aad kaaga hanti yar!"

Saaxiib; badiba waxyaabaha noloshan ka jiraa waa saamigal, qof kastaana waxa uu wax ku qiimeeyaa hadba karaankiisa iyo aqoontiisu heerka ay joogaan, ee kuma qiimeeyo sida ay waxaasi waaqica dhabta ah ka yihiin.

Tusaale ahaan; jadwalka isku–dhufashadu ardayga fasalka saddexaad ku jira wuu la adag yahay, laakiin ardayga dugsiga dhexe ahi biyo u kabban maayo!

Jadwalku waa isla jadwalkii uun, ee dadka ayaan isku mid ahayn!

Sidaa awgeed; marka uu qof arrin gaar ah cabbirayo ama uu xukun saarayo, waxa uu ku qiyaasayaa mastaradda karaankiisa!

Hal kiiloomitir oo lug ahi, barbaarka xooggan waa u tamashle, laakiin odayga duqa ah waa u socod kadeed iyo rafaad uu ka marayo!

Xataa malabka, quudkaas aadka u macaani, qofka xasaasiyadda la dhibban sun ayuu ku yahay!

Wax waliba waa sidaas oo kale oo waa saamigal uu qofba dhan ka taagan yahay!

Saaxiib; waxa aan la yaabanahay sida aad ugu geftay xulashada la–taliyayaashaada.

Hantiilaha jiitay ee aad la tashatay wixiiba wuu kuu sahlay oo in ay fududahay ayuu ku dareensiiyay, maadaama hantida aad haysataa gebigeeduba ay isaga ula mid tahay inta uu ku bixiyo saddex maalmood oo tamashle fasax ah uu soo qaatay!

Isla khaladkaas oo kale ayaad ku dhici lahayd haddii aad la tashan lahayd qof aan qadadiisii haysaninna, oo waxa uu kuu la talin lahaa sidii in aad tahay qof haysta maalkii Qaaruun iyo kaydkiisii oo kale!

Waa in aad la tashataa qof karaan ahaan iyo hanti ahaanba aad iska ag dhow dihiin, taladiisaasi marnaba hadal uu iska yidhi noqon mayso.

Mararka qaar waa mahuraan in aad fahanto, in dadka qaar ay bari eegayaan, adiguna aad galbeed eegayso!

Nabaadiino saaxiib.

## 117 – Waan ku salaamay saaxiib

Dabayaaqadii qarnigii 19aad ayuu boqorkii Jarmalka ee Wilhelm–kii Labaad oo ay la socoto xaaskiisii booqday Dimishiq.

Waxa u soo baxay qaabilaaddiisa badhasaabkii Turkiga ahaa ee Musdafa Caasim Baashaa.

Qorshaha siyaasadeed ee aadka u badan ee horyaallay waxa barbar socday, qorshe tamashle iyo dalxiis ah oo socdaalkaas taariikhiga ah ku lammaanaa.

Markii uu boqorkaas Wilhelm booqday qalcadda Dimishiq, ayay aragtay xaaskiisii dameer cad oo beledi dad–yaqaana ah.

Inta ay ka heshay ayay boqorkii ka dalbatay in uu u gado si ay Jarmalka ugu qaadato.

Badhasaabkii ayaa ninkii dameerka lahaa raadiyay, waxana uu noqday nin miskiin ah oo Abul Khayr la yidhaahdo.

Waxa uu ka dalbaday in uu dameerkaas boqoradda u hadyadeeyo, laakiin wuu ka diiday ninkii!

Waxa uu u soo bandhigay in uu ka gado, sidoo kale wuu ka diiday!

Waxa uu ku yidhi badhasaabkii: "Mudane; masaladani lama xidhiidho dhaqaale, ee waxa aan leeyahay Faras Carbeed asal–dhalad ah, ee kaas qaado haddii aad doonto, laakiin dameerkan isaga maya ayaan taaganahay!"

Badhasaabkii oo la yaaban ayaa weydiiyay sababta?!

Abul Khayr waxa uu ku yidhi: "Mudane; haddii ay dameerkaas dalkoodii u qaataan, saxaafadda ayaa wax ka

qoraysa oo dadweynaha ayaa ka sheekaysanaya, waxana ay u bixinayaan dameerkii Shaamiga ahaa, waxana ay dadkoodu isla dhex marayaan hadal ah, miyaanay boqoraddu wax dameer dhaama Shaam ka soo helin?! Sidaa awgeed; uma hadyadaynayo, kamana gadayo!"

Saaxiib; jacaylka waddanku ma aha maansooyin lagu geeraaro iyo khudbado kulul oo la jeediyo midna.

Haddii aad doonayso in aad ogaato halka uu waddanku ka joogo qalbiga qofka, ha eegin waxa uu leeyahay, ee eeg waxa uu samaynayo!

Nabaadiino saaxiib.

## 118 – Waan ku salaamay saaxiib

Globes Huisinger waxa uu ahaa taliyihii taangiyada ee ciidankii Hitler, Hitler–na saaxiibo dhow ayay ahaayeen.

Laakiin sida aad og tahayba, siyaasiyiinta dan ayaa kulmisa, iyada ayaana kala kaxaysa, caadifadda iyo dareennadana dadka kale ayaa leh oo ku wada jooga ama ku kala taga!

Labadaas nin khilaaf xooggan ayaa dhex maray, markaasuu Globes qudhiisa u baqay oo uu Ingiriiska u baxsaday.

Ingiriiska ayaa si diirran oo dardar leh u soo dhoweeyay, guri baadiyaha ku yaallana way siiyeen, mushaharna way u qoreen.

Hal toddobaad markii uu xaaladdaas ku jiray, ayay sarkaalladii sirdoonka Ingiriisku u yimaaddeen oo ay ka dalbadeen in uu xog ka siiyo hubka taangiyada ee uu taliyaha ka ahaa, iyo magacyada taliyayaasha ugu waaweyn, iyo sidoo kale xidhiidhka kala dhexeeya Hitler.

Wuu ka diiday in uu haba yaraato'e wax xog ah siiyo, waxana uu ku yidhi: "waxa aad doonaysaan khaayin dalkiisa khiyaama, ee ma doonaysaan qof mucaarad siyaasadeed ku ah Hitler, aniguna suure ma aha in aan dalkayga khiyaamo!"

Markaasay jidhdil ku bilaabeen oo ay damceen in ay xogta xoog kagala baxaan.

Balse waxba way ka soo saari waayeen, jidhdilkii ayuuna u dhintay, isaga oo aan hal sir ah oo dalkiisu uu leeyahay kashifin!

Saaxiib; hoggaamiyuhu waa arrin gaar ah, dalkuna waa arrin gaar ah.

In aad hoggaamiyaha neceb tahay cudurdaar u noqon mayso in aad dalkaaga khiyaanto.

Hoggaamiyayaashu way tagaan oo kuwo kale ayaa beddela, laakiin dalku weligiiba baaqi jira oo jooga ayuu ahaanayaa!

Nabaadiino saaxiib.

## 119 – Waan ku salaamay saaxiib

Waxa aad i weydiinaysaa in ay noloshu xeerar leedahay?

Waxa aan ku leeyahay: noloshu ma timaaddo iyada oo wadata buug hage ah oo qaabkii loogu noolaan lahaa kuu tilmaamaya.

Laakiin innaga ayaa buuggaas hagaha ah samaysan karna, innaga oo ka soo dheeganaynna wixii aynnu barannay, aragnay, maqalnay, ama aynnu goobjoogga u ahayn.

Waxa aan isku deyayaa in aan hadda halkan kuugu soo uruuriyo xeerar.

Ma sheeganayo in aan kulmistay xikmaddii ummadihii guunka ahaa iyo kuwan ugub, ee dadka kale ayaan la mid ahay oo doqonniimooyinkayga iyo gefafkayga waan leeyahay.

Laakiin mid ka mid ah xeerarka nolosha ayaa ah, in aynnu wax ka baranno gefafkeenna iyo doqonniimooyinkeenna, in ka badan inta aynnu wax ka baranno dugsiyada!

Ha noqdo kaasi xeerka koowaad.

### Xeerka labaad:

Dadka wanaagsan Ilaahay qaar la mid ah ayuu u sakhiraa.

Ilaahay waa caadil saaxiib.

Noocyada caddaaladdiisana waxa ka mid ah, in had iyo jeeraale abaal marintu ay la siman tahay ficilka, ee

noqo qof wanaagsan, dad wanaagsan ayaa lagugu irsaaqayaaye!

**Xeerka saddexaad:**

Qofka Ilaahay talo saarta wuu ku filnaadaa, qofka dadka miciinka bidana iyaga ayuu faraha uga qaadaa!

Marnaba ma hilmaamayo, in Ibraahin nkh'e, markii la saaray manjaniiqa ee wax yar ka dib lagu tuurayay dabka, uu isaga oo qalbigiisu uu sugan yahay ku celcelinayay: "Ilaahay ayaa igu filan, isaga ayaana cid la wakiisho ugu mudan!"

Ilbidhiqsiyo ka dibba, nebi Ibraahin nkh'e hawada ayuu sii duulayay, waxana markaaba u yimi Jibriil oo weydiiyay, in uu wax u baahan yahay iyo in kale.

Waxa uu Ibraahin ugu jawaabay: "adiga waxba kaagama baahni. Laakiin Ilaahay isaga ayaa xaalkayga u ogaal badan!"

Markaasuu Allaha xaalkiisaas sida dhabta ah u ogi dabkii amar ku siinayaa, in uu qabow iyo badbaado u noqdo Ibraahin!

Ee qalbigaaga mar walba Ilaahay ku xidh.

**Xeerka afaraad:**

Qofka mahad naqa joogteeya, nimcooyinku way isaga danbeeyaan oo kama kala go'aan.

Ilaahay wuu jecel yahay oofinta saaxiib.

Wuu jecel yahay Ilaahay addoonkiisa mahadiyaa in uu wanaaggiisa arko.

Wuuna jecel yahay in wanaagga ay dadku isu samaynayaan uu arko oo uu maamuuso.

Ma garanaysaa sababta waalid inkaarnimadu ay denbiyada waaweyn uga mid tahay?!

Sababta oo ah; waa abaaldhac iyo wanaaggii oo lagu caasiyay.

Ma jirto cid Ilaahay ka oofin badan, kana oofin jeceli.

Haddii aad doonayso in nimcadu ay kuu waarto, wanaaji mahadinteeda, oo carrabkaaga iyo xubnahaagaba ku mahadi.

Ka dhig mahadnaqa maalka uu Ilaahay kuugu deeqay sadaqo.

Aqoonta uu Ilaahay ku siiyayna in aad dadka barto ka dhig.

Aragti samaanta uu Ilaahay kugu mannaystayna dadku marka ay wareeraan in aad kula taliso oo aad ku qumiso ka dhig.

Caafimaadka aad haysatana mid xaqa aad ugu adeegto mahad naqiisa ka dhig.

Mahadintu ma aha carrabka oo qudha, ee waa habnololeed!

**Xeerka shanaad:**

Qofka xilliga uu barwaaqaysan yabay Ilaahay garta, xilliga ay waayuhu ku adkaadaan ayuu Ilaahay gartaa isagana!

Maahmaahaha ayeeyooyinka ee wanaagsan ee tusaalaha loo soo qaato waxaa ka mid ah, in qofka aan Ilaahay si dhab ah u garanin marka ay waayuhu ku adkaadaan mooyaane inta kale, uu la mid yahay sida xamaalka marka uu rar culus qaado uun Ilaahay xasuusta!

Waa dhab in uu Ilaahay yahay cidda aynnu ku eeranno ee xaaladaha adag aynnu ammaansanno, kacaakufka nololeedna ay taagdarrideenna ina dareensiiyaan oo aynnu uga cararno dhanka Rabbiga awoodda weyn ee karaanka badan.

Balse waxa isweydiin mudan, intii aynnu barwaaqaysnayn Ilaahay ma xasuusannay?!

Ma u sii dhiibannay kayd uu xilliga adag dib i noogu soo celiyo?!

Ilaahay waxa uu yidhi markii uu ka hadlayay nebi Yoonis:

(فَلَوْلَا أَنَّهُ كَانَ مِنَ ٱلْمُسَبِّحِينَ * لَلَبِثَ فِي بَطْنِهِ إِلَى يَوْمِ يُبْعَثُونَ) الصافات ١٤٣ ـ ١٤٤.

"Haddii aanu ka mid ahaan lahayn kuwa Alle-xuska iyo tasbiixda badan * waxa uu ku negaan lahaa calooshiida (nibiriga) ilaa maalinka la isa soo saarayo (qiyaamaha)."

Xilligii uu barwaaqaysnaa ayuu cibaadada ku dedaalay, tasbiixsiga iyo xuska Ilaahayna uu xejistay, markii uu xaalku ku adkaadayna Ilaahay ayaa u oofiyay camalkiisaas.

Yaanu Ilaahay kula noqonin sida badbaadada gargaarka degdegga ah uun loo yeedho, ee aan marka ay masiibo dhacdo mooyaane mararka kale la xasuusanin.

Ilaahay agtaada mar walba ha ka joogo kaalinta koowaad ee aanay cidina ka horraynin, adiguna Ilaahay agtiisa ayaad mudnaanta koowaad ka yeelanaysaaye!

**Xeerka lixaad:**

Qofka joogteeya istiqfaarta, albaabada ka xidhan ayaa loo furaa.

Ibnu Taymiya waxa uu odhan jiray: "masalo fiqi ah ayaa albaabkeeda la iga xidhayaa oo aan keeni waayaa, markaasaan kun jeer Ilaahay u istiqfaarsanayaa, markaasaa la ii furayaa oo ay igu soo dhacaysaa!"

Saaxiib; albaabada kaa xidhan oo dhammi abuurta Ilaahay ayay ka mid yihiin, furayaashooduna isaga ayay gacantiisa ku jiraan, qaabka ugu mudan ee aad furayaashaas ku heli kartaana, waa istiqfaarta oo aad badsato.

Haddii uu arrin kugu adkaado istiqfaarta badi, ka dibna samee sababihii aad ku helaysay intii karaankaaga ah, barakada, waafajinta iyo sida uu Ilaahay arrinkaas kuugu yasirayo adiga ayaa la yaabi doona'e!

Adduunka oo dhammi Ilaahay gacantiisa ayuu ku jiraa, ee meel Ilaahay ka durugsan ha ka raadinin!

**Xeerka toddobaad:**

Adiguna naftaada qof ha ku khasbin, adiguna qof ha isku khasbin!

U daa qalbigu cidda uu gacloodo saaxiib.

Hagaaji la–dhaqanka dadka oo u madax buuxi, qof debecsanna noqo, akhlaaqda dadka maamuusan weeyaan debecsaniduye.

Laakiin ha ku odhanin qofna waan ku jecelahay, adiga oo aanay kaa dhab ahayn!

In aad qof jacayl kuu sheegtay ka diidaa waa dhaawac xanuun badan, laakiin way ka dhaawac yar

tahay in aad qof rejo geliso, adiga oo og in aanu qalbigaaga boos ku lahayn!

Go'aan yeelo, sidaas ayaa adiga iyo isagaba idiin wanaagsan'e.

Biyaha qalbigaaga ilaali, oo ha ku waraabin geed dhintay!

Jacaylka halka dhinac ahi waa dullinimo, qofka wax caashiqsanina wuu debecsan yahay, laakiin ma dullaysana, ee labadaasi yaanay iskaga kaa darsanin!

**Xeerka siddeedaad:**

Qaabka qudha ee aad jacayl ku helaysaa waa in aad bixiso adigu!

Jacaylku waa beer kuu soo go'day oo aad goosanayso saaxiib, si aad beer u goosatana, waxa mahuraan ah in aad marka hore sii beerato!

Inta aadan isweydiin nasiibka aad jacaylka ku leedahay, isweydii horta, maxaad adigu jacayl bixisay ee aad sii hormarsatay?!

Danaynta waxa aad helaysaa marka aad horta sii beerato adigu!

Badanaa dadka kale waa falcelinta waxa aynnu innagu samaynno.

Haddii aad tog madhan joogto oo aad qayliso, dhawaaqaagii oo hadalkaagii xanbaarsan ayaa kugu soo jabaq noqonaya, jacaylkuna waa sidaas oo kale!

Marka hore sii beero, ka dibna beertaas gooso, qofkii wax beerta ayuun baa wax goosta'e.

**Xeerka sagaalaad:**

Ha filanin in ay dadku ku wada jeclaadaan.

Xataa nebiyadii iyaga oo nebiyo ah, ma aanay wada jeclaanin dadku.

Waa mahuraan in ay jirto cid ku necebi!

Ibliisba waxa uu Aadan nacay intii aan ruuxdaba lagu afuufin ka hor.

Waxa wax laga xumaado ah, in dadka badigoodu ay kugu nacayaan dabciyadaada ee aanay ceebahaaga kugu nacaynin, sida Yuusufba denbiga ay walaalladii nacaybka ay u hayaan u sababeeyeen ay u ahayd qurux badnaantiisa uun!

Nacaybku waa xanuun saaxiib, ee ula dhaqan dadka wax neceb sidii dad bukaan ah, waxa ay istaahilaan in loo naxariisto, ka badan inta ay istaahilaan in la waajaho oo gaashaanka loo daruuro'e.

**Xeerka tobnaad:**

Dadku badanaa way isbedbeddelaan, in yar ayuun baana xaalkii aad markii hore ku baratay ku sii negaata!

Xataa innaga ayaa isbeddelna saaxiib.

Ma tihid hadda qofkii aad ahayd 20 sano ka hor.

Wax ayaad akhriday, waad bislaatay, waxna waad baratay.

Dadka qaar heerkoodii aad ayay kor ugaga sii kacaan, kuwo kalena aad ayay hoos ugaga sii dhacaan!

Ee qof walba kula dhaqan shakhsiyadda cusub ee uu markaas leeyahay, oo ha kula dhaqmin dabcigii aad markii isugu kiin horraysayna kala qabsatay!

**Xeerka 11aad:**

Waynnu ka siman nahay isha aynnu wax ku aragno, laakiin aragtida kama sinin.

Wax aad adigu iska dabeeci doqoni garatay ah u aragto, ayay dadka qaar waqti dheer ku qaadanaysaa in ay fahmaan.

Wax adiga fahankoodu uu waqti dheer kugu qaatayna, dadka qaar ayaa judhii u horraysayba fahmay!

Marka aynnu wax xukumaynno saaxiib, innaga ayaa isxukumaynna, innaga oo uga shidaal qaadanaynna hadba xaaladda aynnu ku jirno.

Sidaa awgeed; mawqifka aynnu qaddiyad ka haysannaa, kama tarjumayo xaqiiqada qaddiyaddaas, ee waxa uu ina tusinayaa innaga xaqiiqadeenna!

**Xeerka 12[aad]:**

Karaanka dadku wuu kala duduwan yahay.

Qaar ayaa bog dhan xifdiyaya oo aan hal masalo fahmi karin, kuwo kalena boqol masalo ayay fahmi karaan, laakiin hal sadar ma xifdiyi karaan!

Ciyaartoyda kubbadda cagtu 90 daqiiqo ayay ordi karaan, innaguna daqiiqado haddii aynnu orodno waynnu xiiqnaa.

Shinbirku wuu duulaa, kalluunkuna wuu dabbaashaa, sidaas ayaana labadoodaba loo abuuray!

Waa waqti lumis in shinbirka la baro dabbaasha, kalluunkana duulitaanka!

Dadkuna waa sidaas oo kale!

Ee cid ha isbarabar dhigin, adigana in la iskaa barbar dhigo ha yeelin!

**Xeerka 13$^{aad}$:**

Dhib kastaaba way dhammaanaysaa.

Sidii hore loogu maahmaahayna, si jirtaa sii ma jirto!

Xilliyada wanaagsani way ina dhaafayaan, xilliyada adagina sidoo kale, sugitaanka farajkuna waa cibaado!

Kufitaannada aad dhacdo iyo xaaladaha adag ee ku soo waajaha, u arag in ay yihiin marxalado ku soo maray oo aad ka gudbayso, ee aanay ahayn marinka ay noloshaada oo dhammiba raacayso.

Hakisyada ay waayuhu kugu sameeyaan u arag xaalado marla'arag ah oo aan ahayn saldhigga nolosha!

Waxna hal qaab kuma negaado saaxiib.

Boqor ayaa ka dalbaday wasiirkiisii, in uu fargalkiisa ugu qoro weedh, haddii uu akhriyo isaga oo faraxsan ka murugaysiisa, haddii uu akhriyo isaga oo murugaysanna ka farxisa!

Waxa uu ugu qoray: "xilligani wuu ku dhaafayaa!"

**Xeerka 14$^{aad}$:**

Oohintu waa samirsiis, laakiin dadka inaga baxay ma soo celiso!

Ilmada saydhi haddii aad ku nafisayso.

Oy oo isdhaafi uur–ku–taallada laabtaada ka guuxaysa.

Laakiin waa in aad ogaataa, in waxyaabaha qaar marka ay dhammaadaan aanay soo–laabasho lahayn!

**Xeerka 15$^{aad}$:**

Deeqsinimadaada xad'dhaafka ah waa la la qabsanayaa, ilaa marka danbe loo arkaba waajib in uu yahay.

Saaxiib; dabciyada dadka ee ugu xunxun waxa ka mid ah, in ay samaha aad u falayso u arkaan waajib ay xaq kuugu leeyihiin!

Ma kala saari karaan waxa aad gacal–siinayso, iyo waxa ay waajibka mahuraanka ah tahay in aad u samaysaa!

Ka digtoonow dadka noocaas ah.

Laakiin kuwa samahaaga qadderinaya, wax walba dartood u hur, oo waxna ha ka hagranin!

**Xeerka 16$^{aad}$:**

Ha iswaayin adigu, adiga oo isku deyaya in aad ilaashato dad aanu waayitaankaagu wax dhib ah ku haynin!

Ku dheg oo ilaasho dadka ku jecel.

Gacallayaashu mararka qaar ayay kuu muujinayaan in ay doonayaan in ay kaa tagaan, iyada oo wax kasta oo iyaga la xidhiidhaaba ay doonayaan in ay negaadaan, adiga oo qudhihina aad og tahay!

Balse qofka doonaya in uu kaa tago, wax kasta oo aad samaysaba ma baajisan kartid, ee karaamadaada ha waayin!

Qofka go'aansada in uu kaa tago isaga oo adiga kaa fogaanaya, xadhkaha caalamka oo dhanba haddii aad ku xidhxidho ma baajin kartid!

Laakiin gacallahaaga, xadhigga qalbiga ayaa ku filan in uu baajiyo!

**Xeerka 17aad:**

Haddii uu Ilaahay arrin doono, daraaddii qaanuunnada caalamka ayuu wax uga beddelaa!

Saaxiib; Muuse nkh'e markii uu naasnuugga ahaa ma aanu qarqoomin.

Ismaaciil nkh'e ma aanu gawracmin!

Yoonis nkh'e uma aanu noqon nibirigii cunto!

Cadraddii Maryan iyada oo aan lammaane lahayn ayay ilmo dhashay!

Saari iyada oo islaan da' weyn ah ayay uur qaadday!

**Xeerka 18aad:**

Isdhuldhiggu meesha haddii aanu ku habboonayn waa dullinimo!

Cafiskuna mar haddii aan awood wax la iskaga dhiciyo la lahayn waa taagdarro!

Ha samaynin waxyaabo xunxun, adiga oo isu haysta in aad akhlaaq suuban ku dhaqantay!

**Xeerka 19aad:**

Farxaddu way ku dhaafaysaa, murugaduna sidoo kale.

Waxa ugu adag ee qalbi soo maraa, waa in uu la saaxiibo qof baasaysi badan (dhanka xun wax ka eega) oo jawiga ka cakira!

Hore ayaa loo yidhi: "qof farxaan ah la saaxiib, waad farxaysaaye!"

**Xeerka 20aad:**

Waxyaabaha ay dadku kaa sheegaan waa aragtida ay kaa haystaan, ee ha ka dhigin waaqicaaga!

In uu qof ku yidhaahdo faashil ayaad tahay, waa uun aragti aan xaqiiqo ahayn, haddii aadan adigu gudahaaga ka aaminsanayn in aad faashil tahay!

**Xeerka 21aad:**

Waxna ha ka qoomamayn.

Maalmihii wacnaa way kaa farxiyeen.

Maalmihii xumaa way kaa murugaysiiyeen.

Waayaha adagna abaal ayaynnu u haynaa saaxiib, oo dad xooggan ayay inaga dhigaan.

Kufitaannada iyo hakadyadana sidoo kale, oo dabka la'aantii qooshka sabaayad kama dhigi karno!

Haddii aanu tumaalku dubbe ku garaacin, xadiidku albaabo iyo daaqado ma noqonayo.

Haddii aad xanuun kasta oo ku soo marayba barbar dhigto casharka aad ka baratay, waxa kuu muuqanaysa in uuba casharku ka qaalisan yahay!

**Xeerka 22aad:**

Haddii aad sugayso xilli munaasib ah oo aad wax bilawdo, imminka bilow!

Xilliyada habboon lama sugo saaxiib, ee waa la sameeyaa.

Xilli kastaana waa ku munaasib samaynta waxyaabo wanaagsan.

Sugitaankuna waxa uu dilaa hanka!

**Xeerka 23aad:**

Isu roonow oo isu naxariiso!

Qof kastaaba xilli soo maray ayuu qof xun ahaa!

Way wanaagsan tahay in aad isxisaabiso oo aad naftaada edbisaa.

Dadka maamuuska lihi way ka khajilaan khaladyada ay sameeyaan, iyo xataa waxa saxda ahaa ee aanay samayninba!

Laakiin maanka ku hay, in aynnu dhulkan ku nimi gef dhacay dartii!

Waxa aynnu nahay ubadka ninkii cunay geedkii laga xarrimay, ee jannadii laga soo saaray!

Aad ha u canaanan naftaada, ee gefafkaaga hagaaji, qoomamada ugu horraysaa waa hagaajintaas'e.

Casharna ka baro, waa dersiga ugu qiimaha badan ee aad ka helayso'e!

Hana illaawin, ugu danbaynta in aad tahay aadame bashar ah!

**Xeerka 24aad:**

Waxa jira xilli ay mahuraan tahay in aad hakato!

In aad joojiso iskudayga!

Aad joojiso tanaasulka!

Ceeb ma aha in aad dhexda kaga soo laabato jid khaldan oo aad qaadday, ee waxa xun ee ceebta ahi, waa in aad sii waraabiso geed dhintay oo aan noolayn!

Kala garo xidhiidhada dhammaaday, iyo xidhiidhada u baahan hagaajinta saaxiib!

Qofku maalin walba gacalle jecel heli maayo, qalbiyaduna si dhab ah ayay wax u caashaqaan, ee ma aha muruqyo dhiigga uun tuuraya!

Fiqigu waxa uu dhigayaa: haddii ay biyuhu bataan ma nijaasoobaan.

Ee iska cafi qofka samaha uu kuu falay uu xad'dhaafka yahay!

**Xeerka 25aad:**

Dadku hal arrin isku falcelin kama wada sameeyaan.

Dusha ayuun baynnu isaga eg nahay, laakiin gudaha waxa aynnu ka kala nahay caalamyo, qaarado iyo badweynno!

Qof ayaa kaa raalli noqonaya marka koowaad ee aad raalli gelisaba, qofna marar door ah ayaad ugu celcelinaysaa!

Ma aha in qofka hore uu cafis badan yahay, ka danbena uu xiqdi iyo nac badan yahay, ee waxa jira waxyaabo dabci ah saaxiib, oo in la dooriyaa ay adag tahay!

Baro shakhsiyadda qofka aad la dhaqmayso, intaa ka dib waxa aad kula tacaamulaysaa way kuu sahlanaanayaan'e!

**Xeerka 26aad:**

Mararka qaar, ficilka keliya ee saxda ahi waa in aadan waxba samaynin!

Waxa jira waxyaabo aan isbeddelin si kasta oo aad isugu daydaba, in aad sidoodaas u deysana ku habboon.

Waxyaabaha qaar marnaba sida aad la doonayso kuuguma toosayaan, haddii aad awood isku deydo in aad ku toosisana waad jebineysaa!

Nolosha astaanteeda ayaaba aha in ay kala dhinnaato saaxiib, ee aqbal waxyaabaha kala dhantaalan!

Raganimada sooceeda
Adigoo sagaal buuxshay
Hal ku seegay baa yaalla!

Hadraawi

Ku darso oo, adiga laftaaduna ma dhammays tirnid!

**Xeerka 27aad:**

Mararka qaar waa in aad xoogaa dib u baxdaa, mana aha jab iyo guuldarro, ee waa in mararka qaar in aad hore uun u sii socoto aadan waxba ka dheefaynin!

Bal u fiirso leebka marka qaansada la geliyo, dib ayaa aad loogu jiidaa, si uu masaafo dheer u gaadho oo uu xoog ugu baxo!

Dibugurashada qaar ayaa ku xoojiya, ee ku baraarugsanow.

**Xeerka 28aad:**

U kaadi xaaladuhu xoogaa ha kala yara degaan'e.

Wejigaaga kama dhex arki kartid biyo karkaraya, in aad qof cadhaysan xal degdeg ah la raadisaana, waa sidii in aad isku deyayso in aad joornaal ku akhrido meel ay dabayli ka dhacayso!

Marka ay dabayshaasi degto, bogagga aayar ayaad u kala rogrogi kartaa.

Laakiin haddana inta ay ku habboon tahay in ka badan ha sugin masaladaas, yaanay u sii cakirmin si aanay cidina jeclaysanayn'e!

Wax walba xilligiisa sii, oo ha ka badin, hana ka yarayn!

**Xeerka 29^aad:**

Qaddiyad la'aan ha noolaan!

Haddii aad u noolaato in aad cunto, cabto oo aad seexato uun, ogow in addoomuhuba ay waayihii addoonsiga intaas heli jireen!

Qofka naftiisa darteed u noolaadaa wuu raaxaystaa, laakiin isaga oo yar (aan saamayn lahayn) ayuu noolaadaa, isaga yarna wuu dhintaa!

Hel oo yeelo fekrad mudan in aad daraadeed u dhimato!

Saaxiib; qofka aan lahayn wax uu daraadood u dhintaa, ma laha sidoo kale wax uu daraadood u noolaado!

**Xeerka 30^aad:**

Marba haddii uu rabitaan jiro waddo loo maraana way jirtaa!

Qofka ay ka go'an tahay in uu irbad raadiyaa, wuu helayaa xataa haddii ay ku kellifto kuuska cawska ah ee ay ka dhex gashayba in uu gubo!

Qofka aanay ka go'nayn in uu helaana, iskuma kellifayo xataa in uu u soo foororsado oo uu dhulka ka qaado, xataa haddii ay addimadiisa hoos taallo!

Duruufaha qaar way adag yihiin oo waa xaqiiqo.

Laakiin ha hilmaamin, in wax kasta oo caalamkan iska beddelay, uu maalin maalmaha ka mid ah ahaa duruuf adag iyo han sida lagu gaadhaa ay dheer tahay!

**Xeerka 31$^{aad}$:**

Duufaanku ma dego isaga oo aan meeshaas dhaafin, ee adiga ayaa lagaaga baahan yahay in aad degto inta ay dabayshaasi ku dhaafayso!

Waxyaabaha hareerahaaga ka dhacayaa waxa ay ku saameeyaan hadba inta aad adigu oggolaato in ay ku saameeyaan.

Falcelintaada ayaa siisa awoodda ay kugu saamaynayaan!

**Xeerka 32$^{aad}$:**

Fiiqa sare cid walba wuu deeqayaa.

Haddii aad aaminsanayd in aadan meel sare gaadhayn adiga oo aan dadka kale hoos u daadinin, inta aadan korba u fanan ayaad adigu hoos u dhacday!

Inta aad xaasidi lahayd qofka guuleystay, ka kormar oo dhaaf, ama ugu yaraan wax ka baro!

Hore ayaa loo yidhi: "in aad seebabka[1] dadka kale jebisaa xawaaraha laashkaaga ma kordhinayso!"

**Xeerka 33$^{aad}$:**

Labalabaynta iyo dhaqaaq–joogistu waa xabaasha fursadaha!

[1] Seebab: Qoryaha laashashka lagu kexeeyo. (Turjumaanka)

Waxa jira albaabo cimrigaaga oo dhanba hal mar uun laguu furayo, haddii aadan gelinna aad noloshaadaba dibedda ku qaadanayso!

Hore ayaa loo yidhi: "haddii ay dabayshaadu soo dhacdo, ka faa'idayso!"

**Xeerka 34aad:**

Markiiba ha dhul dhicin!

Feedhtanka, ma guuleysto qofka feedhadhka badan wax ku garaacaa, ee waxa guuleysta ka feedhadhka badan sugnaanta iyo adkaysiga ku qaabila!

Noloshuna waa sidaas oo kale, si ayuun bay noloshani u tahay xayndaabkii musaaricada!

Mar walba filo in lagu feedho, oo baro sidii aad adkaysi ugu qaabili lahayd!

**Xeerka 35aad:**

Ha lumin qofka mar walba isku deyaya in uu ku raalli geliyo, mar walba qofku ma helo qof kale oo xataa naftiisa ka hormarinaya'e!

Islaan ayuu maalin weriye weydiiyay: "sidee ayuu reerkiinnu 70 sano u dhisnaa?!"

Markaasay ku tidhi: "waxa aannu ahayn fac, haddii ay wax ka xumaadaan hagaajiya ee aan tuurin!"

Dhammaanteen waynnu u qalannaa fursad labaad, ee sii dadka kale fursad ay ku hagaajiyaan wixii ay xumeeyeen!

Saaxiib; dhakhtarradu waxa ay yidhaahdaan, lafta jabani marka la kabo way ka adkaataa xataa lafaha aan jabin!

**Xeerka 36aad:**

Qof kastaba nolosha dhibaato ku filani way haysataa, ee samaan iyo fudayd ku dhaaf!

**Xeerka 37aad:**

Canaano dadka aad jeceshahay, canaantu qalbiga ayay naxli tirtaaye!

Laakiin ha hilmaamin, in aanay qofna karaamadiisu dhayal la ahayn, xataa marka uu gefsan yahayna ku dheh oo!

Oo maanka ku hay, in aynnu wax u canaananno si aynnu u hagaajinno, ee aanay ahayn si aynnu u jebinno oo aynnu uga takhalusno!

**Xeerka 38aad:**

Qofka wax jeceli dabciyada uun ma jecla, ee xataa ceebaha gacallihiisa wuu la jecel yahay!

Ee ku aqbal gacallayaashaadu sida ay yihiin!

**Xeerka 39aad:**

Xidhiidh kastaaba waxa uu leeyahay xeerar u gaar ah.

Waxa aynnu nahay aadame ee ma nihin isle'eg xisaabeed!

Tijaabooyinka aad soo martay dadka kale ha u wada malayn in ay kaa la midaysan yihiin!

Dadka kale tijaabooyinkoodana ha soo dheegan oo ha isku dabaqin!

Xidhiidh kasta waxa uu ku sii socon karaa, waa waxyaabaha isaga ku habboon ee uu ku sii socon karo!

Bukaanka oo dhammi hal dawo kuma bogsadaan, dadka fayow oo dhammina hal cunto ma jecla'e!

**Xeerka 40aad:**

Ma jiro qof yaqaanna dhammaanba xeerarka nolosha!

Waa kaas xeerka ugu muhimsan ee aan kuu sheegay!

Nabaadiino saaxiib.